# GUURE

## Hanka Soomaalida iyo Hadimada Guumeysiga



Xasan Maxamuud Qorane

# GUURE

**Madbacadda Hiil Press**

## Baahinta

**DAL IYO DIBAD**

**hiilpress6@gmail.com**

**Cairo, Egypt**

*© Dhammaan Xuquuqda Kitaabkani Way dhawrantahay. Lama Daabici karo, lama sawiri karo, islamarkaana guud ahaan iyo qayb ahaan toona looma minguurinkaro, haddii aan oggolaansho qoraal ah laga helin Qoraaga Buugga*

***Daabacaaddii 1aad 2019***

# HIBEYN

Waxa aan u hibeeyay buuggan marwadayda Xamdi Siraad Yarow, oo xuddun u ah in badan oo ka mid ah guulaha aan nolosha ka gaadhay. In kaste oo buuggani uu yahay mid aan gudi karin xaqa wayn ee ay igu leedahay, haddana waa hadiyadda ugu sarreysa ee aan heli karo, taa oo malahayga abaalgud u noqon karta adkaysigeedii badnaa xilliyadii noloshu dabinnada adag noo dhigtay, kalinimadii qurbaha iyo u dulqaadashada gafafkayga.

## MAHADNAQ

Marka koowaad waxaa ay mahad dhammaanteed u sugnaatay Eebbaha ka nasahan xumaan oo dhan, ka sareeya nusqaan oo idil. Eebbaha ii suura galiyay in aan buuggan soo saaro aniga oo caafimaad qaba bulshadaydana u adeegaya.

Marka labaad aniga oo og in mahad celinta dhammaan dadkii ka dambeeyay in buuggan uu sidan quruxda badan u soo baxo ay aad u adagtahay haddana waxa aan u mahad celinayaa qoyskayga oo garab weyn igu siiyay dhammaystirka dhiganahan aan maskaxdayda muddada dheer ku dhitaynayay.

Waxaa kale oo aan bogaadin u dirayaa dadka aan ku midownay mabda' ama aan ku kulanay qalinka iyo qoraalka oo mar walba ii ah tamar aan ku dhaqaaqo iyo muraayad saxar tirta qalinkayga. Sidoo kale waxa aan illaawi karin mahad celinta qof kaste oo gacan igu siiyay, igu dhiirigaliyay, i garab istaagay, tifaftiray, khalad saxay, aragti igu biiriyay, intii aan buuggan qorayay ama uu fikradda ahaa.

# AFEEF

Ka hor inta aadan bilaabin akhrinta buuggan; magacyada, shaqada iyo darajooyinka ciidan iyo rayid ee halkan ku xusan, intuba ma aha kuwo dhab ahaan u jira. Isu-ekaansho kaste oo kaaga muuqda buuggan; iyo magac, shakhsi, shaqo, darajo iyo goob aad garanayso waa mid aan kutalagal ahayn.

# HORDHAC

Intiii ay soomaalidu ku dhaqnayd geeska Afrikawaxa soo food saaray dhibaatooyin saameeyay toobiyaha nolosha iyo tubta dawladnimada, ugu dambayna ka dhigay shacab itaal daran oo adduunku ku wiirsado. Caqabadaha na ragaadiyaywaxa ay u qaybsamaan kuwo aan innagu isu geysanay iyo kuwoay shisheeyuhu noogeysteen. Labadubana ma aysan helin dad soo bandhiga, haddii ay jiraanna waa fara ku tiris u baahan xoojin.

Buuggan u eg Soomaalidadal iyo dadbawaxa uu xusuus qor u yahay malaayiin Soomaali ah oo ku kala nool xuduud beenaad cadowgu sameeyay kala teeddayna bulsho aan wali helin cid qorta xanuunka ay la nooshahay. Waxa uu ka taariikhaynayaa hayaanka Soomaalida, hadimada gumaysiga iyo halganka dheer ee ay ummaddeenu kula jirto awoodaha duulimaadka ku ah dalkeena. Si gaar ah waxa uuawoodda u saarayaa damaca Abasiiniyada gumaysata Soomaali Galbeed una miciyo lisanaysa Soomaali oo idil, mana illaawayo dammanidadadkeena aan arkin waxa gomodahooda ka shisheeya.

Dhiganahan aan rejaynayo in uu ka qayb qaadan doono soo noolaynta dareen wadareedka bulshadeena waxa uuifinayaa qayb ka mid ah caqabadaha ku gadaaman Soomaali-wayn, waxa uuna gundhig u yahay taxane buug ah oo xoogga saari doonta soo celinta mabaadi'dii Soomaalidu curiyeen kuwoodii ugu qiimaha badnaa ee sida ku talagalka ah loola dagaalamay.

Guure oo u qoran qaab laga yaabo in uu bulshadeena ugub ku yahay waxa uu toosh ku ifinayaa is hagrashada, hagardaamada, isu damqasho la'aanta iyo fikiradii dhaliyay dagaalka madhalayska ah ee ka dhex aloosanSoomaalida muddada dheer. Dagaalka

innagadhigay bulsho ayaan daranwaxa uu noo kala qaybiyay midabyo is maan-dhaafsan, qabaa'il ku oodan magaalooyin ay waddan u yaqaanaaniyo qaxoonti ku rafaadsan qurbe aysan u ekeyn.

Ugu dambayn waxa aan rejaynayaa in uu noqdomid sidaxog dahsoon, bulshadana u fura wacyi cusub, soo tabiya taariikh duugowday, dibadda keena halgan ku qarsoomay is baddalka waayaha, maktabadda Soomaalidana ku biiriya buug dhaxal gal ah.

***Xasan Maxamuud Qorane***

***Kismaayo, Soomaaliya.***

***April, 2019***

# DHALASHO

- Heeryada isaarani tolkay, hagartii weeyaane.

- Ninba hawshu keli bay ku noqon, haatan dabadeede.

- Nin walaalkii ii hiili yidhi, hoog Allaa badaye.

- Intii lay hoggaan bari lahaa, waan harjadayaaye.

**- *Jaamac Dayuurad*.**

Waa habeen gudcur madow ah. Waxa dad iyo duunyaba miraya roob waayadan isaga oo kale aan lagu arkin Suubaan Balal iyo deegaannada ku hareeraysan. Jabaqda ay bixinayso dhibicda roobka, qablanka habardugaag, cida xoolaha, mashxaraddaraha udabbaaldegaya roobka, oohinta dhallaanka iyo qufaca odayaasha ayaa isqabtay oo isu baddalay laxan aan laga helin meel aan ahayn dhulka Soomaalida ee udugga iyo ugbaadka kucaanbaxay.

Reerku waxa ay yaallaan Hoosweyne oo aan ka fogayn magaalada Godey, kana mid ah dooxooyinka dhanka galbeed ka kulaala webiga Shabeelle ee halbowlaha u ah beeraha iyo dalagga inbadan oo Soomaali ah. Shabeelle waxa uu gundhig uahaajiritaanka magaalooyin badan oo soomaaliyeed; lagasoo bilaabo inta ka shishaysa magaalada Iimeyillaa agagaarkaJilib ee uu ku dhammaado. Dhulkaa baaxaddaaweyn leh ee uu webigu marowaxa uu kuleeyhay saamayn dad iyo duunyaba taabata.

Si kaduwan webiyada Afrika ee caanka ah, sida; Niil, Koongo, Nayjar, Saambiisi iwm, Shabeelle iyo webiyada la midka ah ee Eebbe uu ku galladdaystay Soomaalidama aha kuwo saamayn kuleh ilbaxnimada iyo sooyaalka magaalanimo. Ilbaxnimada Soomaalidawaxa asal u ah badaha ku hareeraysan dhulkeeda, sida; Badwaynta Hindiya iyo Badda Cas oo diin, dhaqan, iyo ganacasiba noogasoo gudbeen.

Kumannaan sano ka hor soomaalidu waxa ay xidhiidh dhow oo joogto ah lalahaayeen waddamadii iyo dadyawgii ugu taagtaweynaa ee waagaa jiray, sida Beershiyiinta, Carabta, Shiinaha, Hindida iyo shucuubtii kale ee kudhaqnaabariga dhexe, bariga fog iyo waqooyiga Afrika.

Ilbaxnimadii ka unkantay xeebaha Soomaalidawaxa aysaldhig u ahayd in magaalooyinka kulaala badahasida;Xamar, Jabuuti, Kismaayo, Berbera, Marka,Saylaciyo kuwo lamid ah ay noqdaan kuwa ugu magaca dheer dalkeena.Inkaste oo ay jiraan magaalooyin kuyaalla gudaha oo aan bad lahayn haddana hormuud u ahaa sooyaalka Soomaalida saamayn laxaad lehna ku lahaa sida Harar, haddana marnaba magaalooyinka ka fog baduhu ma gaadhin maqaamka ay gaadheen kuwa ku teedsan xeebaha.

Aabbahay waxa uusafar ugu maqanyahay magaalada Godey oo markaa noqotay meel xarun u ah bulshadii ku dhaqnayd deegaanka ee aan lahayn magaalo kulmisa. Hooyadayna waxa ay kumashquulsantahay baadigoobka rati baarqab ahoo lagu magacaabo Ina Gaashaan oo reerka ka lumay. Ina Gaashaan waxa uu noo ahaa gaadiid lagu guuro marka beeshu ay u hayaanto degellada naqa leh, ama ay ka durkayso goobaha dagaalka iyo abaaruhu hadheeyeen, mar kalanawaxa uu noo ahaa gammaan aannudhaansanno oo aan kaga baxno harraadka, dhallaan iyo cirroolana uga maciina suudiga kulul ee Suubaan Balal.

Hooyadayiyada oo ka shakisan nabarrada kala fog ee gujinaya tan iyo shalay, dareensanna in fooshu xilli kaste qaban karto ayay eeddadeed Canbaro Aw Guhaad si hoose ugu sheegtay in xaajigii guriga lahaa safar jiro, awrkii reerkuna maqanyahay,iyaduna ay sid buuxsatay oo cirkan roobabbowga ah inay kahortagto ay dhibayso.

Cod xikmad iyo waaya'aragnimo leh ayay ugu sheegtay in ay qaadato agabka umulidda; sakiin ay ilmaha xuddunta kaga goyso, maro ay kuqabato iyo waliba in aanay iloobin geedaha qaar oo haddii ay dhiigbaxdo kacaawinaya in dhiiggu xinjiroobo kadibna istaago.

Ammin casar ah oo ay cadceeddu isku qarisay buuraha yar yar ee kuteedsan dhanka galbeedayay hooyaday kabaxday meeshii uu jeesku yiil. Intii ay sii haysay jidka dheer ee ay ratiga ku raadinaysay, waxa ay weheshanaysay sheeko hoose oo ay lalahayd ilmaha uurkeeda kujira. Waxa ay uqaadaysay, sida hooyooyinka soomaaliyeed caadada u ah;heeso, geeraarro, gabayo iyo tuducyo maansooyin ab kasoo gaadh ah. Waa murti gabadh kaste oo soomaaliyeed ay wax ka taqaan, meel walba oo ay ku nooshahay. Intaa waxa u dheeraa hooyaday in ay ku taamaysay in uu ilmahan Eebbe ka dhigo lab gaashaan qaad ah ka dib markii ay dhowr da'ood oo isku xiga dheddig ka noqdeen.

Soomaalidu wanaag iyo gobonimo ayay ku caan baxday. Hasayeeshee waxa jira dhaqamo gurracan oo noosoo doolay ama aan kala simannahay shucuubta nagu hareereysan gaar ahaan carabta iyo qayb ka mid ah afrikaanka.Dhaqamada aan kaga dayanayno dadyowga saamaynta nagu leh ee aan Islaam iyo sinnaanta aadamaha midna salka ku lahayn waxa kow ka ah dhalashada gabdhaha oo aan lagu farxin. Hablahu ma laha iin u gaar ah si looga cararo ama looga naxo dhalashadooda, waxase

malahayga keenayey farxad la'aantaa degelka oo ahaa meel xoog lagu joogo, ninka dab iyo rag haystana uu yahay midka arrimiya, gabya, geelana qaada, ayaa keentay in labku noqdo mid ka mug weyn dhedigga qabiilka dhexdiisa.

Hooyo Ruqiyo oo horey usii qaadatay talooyinkii Canbaro Aw Guhaad ee ku aaddanaa dhalmada ayaa dhex qaadday dhul ballaadhan oo dhibicda iyo cadceeddu ay is qabteen. Inyar markii ay socotayba waxa dhagaheeda soo gaadhayolol geel oo aan dhab ahayn, balse ka turjumaya sida ay ujeclaan lahayd inay maqasho shanqadha ratigeedii oo daaqaya meel aan iyada kafogayn, si ay durba reerka ugu laabato.

Waxa ay sii tiicdaba, waxa ay socod dheer kadib gaadhay ceel caan ka ah deegaanka oo geela lagawaraabiyo. Waxa ay isha marisay wixii geel cabbayay iyo kuwii fulayay labadaba.Sidoo kale,waxa ay isha ka buuxsatay geelii sabada taagnaa, iyada oo raadinaysa ratigii jaan iyocidhib meel uu dhigay la waayey muddo laba toddobaad ah. Markii ugu dambaysayna isaga oo ragaadsan lagu sheegay duleedka ceelka Duddun oo waayadan xoolaha iyo dhaankuba ay kuyaraayeen, kadib markii uu biyayareeyay.

Kuma aysan guulaysan in ay awrkii kadhex hesho geelii kacabbayay ceelka Hadhaawe oo ka mid ceelasha ugu caansan deegaanka SoomaaliGalbeed. Muddo markii ay socotay, dhulkuna uu dhoolla caddeyn kusoo dhaweynayo dhibicda roobka ee la wada sugayo, ayaa waxa hal mar gees ka gees isqabsaday jac, hanqadh iyo waliba saxansaxo roob mahiigaan ah hordhac u ahayd.

Waa xaamilo sidkeedgo'ay, waana kaligeed oo lugeynaysa cidla ciirsila'! Waxa jira baqdin laga qabay cutubyo ciidamadiiDergiga ah oo maalmahan lagu arkay deegaanka, kuwaas ooaan dad iyo

duunyaba badbaadin. Ragga ay helaanna horayuqafaashaan, dumarkana inta ay kufsi iyo dil isugu daraan ayay dariiqyada kutuuraan.

Fool, matag, col iyo in lamid ahba kulama tashadaane,waxa soo gujiyay nabarkii foosha. Xanuun sidiimudacii lagu mudayo jidhkeeda iyoqodobbo ka kulul dabka ayaa lagu qabtay. Dhidid aan dhammaad lahayn ayaa ka qubanaya oogadeeda oo dhan xilligaa roobku sida siman uhayo dhulka! Culayska ayubadku ku hayaan hooyada laga billaabo marka ay uur galaan illaa iyo marka ay taabba-gal noqdaan waa mid aan lasoo koobi karin,xaqa ay leedahayna waa mid aan la gudi karin. Waxase hooyada sharaf iyo karaamo ugu filan in ay diinteenna suubban ay u caddaalad samaysay daalkeediina qaddarin loogu abaal guday markii adduunka laga dhigay furaha guusha aakhirana ay tahay irrid jannada laga galo.

Dhul kaa dheer, cir kaa dheer, meel loociirsadaana majirto. Waa naftaada kutasho oo u adkayso warmaha foosha. Nus saac socod gebidhaclayn ah ay kujirtay,waxa ay si lamafilaan ah ugusoo baxday jees yar oo meel yaal, xayn adhi ah iyo labatuldood oo geel ahna xeryo ugu jiraan.

Bariidin iyo salaani majirtee,waxa ay dhagta afka usaartay qof dumar ah oo roobka da'aya xareeddiisa biyo kadhaaminaysay. Qofkii dumarka ahaa ayaa soo jalleecay hooyaday Ruqiyo, mase waa Sareedo Faaqid! Dhakafaar! Filanwaaiyo aamus ayaa hadheeyay goobta,waxa ayna illowday Ruqiyo fooshii.Waxa kusoo dhacay xusuuso kala duwan. Waxa hor maray dhacdooyin lagu kaydiyay cajal nololeed da'diisu 37 sano tahay.

Ruqiyo oo dib u milicsatay sooyaalka utunta reebay ayaa gorodda la laalaadisay xishood dartii. Sareedo oo ahayd da'afartanaad,bilic

iyo qurux dumar kamuuqatay, markaana inta ay dhaamisay haan biyo ah sii gelaysa xerada adhiga ayaa isa soo majiirtay, si halhaleel ahna ugashay guriga, iyada oo kudhawaaqaysa: hooyo waa Ruqiyo Mahad oo foolanaysa!

Naado Rashiid oo ahayd Sareedo hooyadeed oo goob joog u ahayd cutubyada foosha xun ee casharkii dhex maray labada qoys ee ab iyo ood wadaaggaba ah; waa qoyska ree Mahad ee ay hooyaday ka dhalatay iyo qoyska reer Faaqid ee Sareedo dhalaye ayaa tidhi: "Ruqiya aa?! MaMahad Cabdullaahi ruux uu dhalay ayaa gurigayga soo martiyay? Waaadduun iyo xaalkii iyo hilmaanka aadanaha durbadiiba illooba gafka uu gaysto".

Inkaste oo khilaafka dhex maray labada qoys uu noqoday mahadho muddo laga sheekeeyo, haddana hooyaday wax saamayn ah kuma aysan lahayn, mana filayso maanta in boog bogsasho ku dhow muddo dheerna ka soo wareegtay dib qolofta looga qaadi doono.

Sareedo iyo hooyo Ruqiyowaxa kadhexaysay aqoon dheer. Sareedo oo ahayd gabadh qurux iyo itaalba usidatay gabdhaha aynigeeda ah ayaa hilaaddii 1940kii, xilligii Taliyaanigu ka talinayay deegaanka Soomaali Galbeediyo inta badanGeeska Afrika,waxa ufadhiistay Aadan oo ahaa taliye xukumajabhad aan itaal badan lahayn oo ka hawlgeli jirtayaagga magaalada Godey.

Abtigay Aadanwaxa uu ahaa taliye ku dhashay, ku korey, kana hawlgala, deegaan baaxad weynooku teedsan webiga Shabeelle. Hadafkiisu waxa uu ahaa xorraynta gayigiisa uu gumaystuhu gaasiray. Waxa uu si isku mid ah col ula ahaa labada gumayste ee Talyaaniga iyo Xabashida, mana uusan lahayn waqti badan oo uu gabadh kula haasaawo, hase yeeshee, marka uu naftiisa kucanaanto in uu doobnimada kuwaynaaday, waxa uu isku

qanciyaain uu yahay AadanMahad oo ragga maanta jooga ugu badiya hanti, nasab iyo magac. Marka uu damco guurna mawaayayo gabadh geyaankiisa ah oo uu geel iyo guunyaba kabixiyo, gurina loogusoo gelbiyo.

Aadan oo doobnimada ku waynaaday markii uu damcay in uu guursado, ma jirin gabadh ka qurux badnayd Sareedo oo uu arki karayay. Muddo haddii uu sheedda kala socday qalbigiisana ay taabatay, warkeedana uu si teel teel ah uhelayay, maalinkii dambe waxa uu uhaasaawe tegay gabadhii oo qacdii horaba uu Aadan ku ashqaraaray jooggeeda, samayska sare ee oogadeeda uu Eebbe ku dhammeeyay dumarnimo, hubqaadkeeda iyo hadalkeeda kasoo baxaya afka aad mooddid in qadowga la mariyay. Hasayeesheewaa nolol adduun oo marba meel ayaa maqane, Sareedo kama aysan helin Aadan! Waxaayna u aragtay askari aan lahayn wax lagu raaco, qoodh, quruxiyo qiimo kale toona. Waxa uu ula muuqday nin aan lahayn wax soo jiidasho ah oo indhaha dumarka buuxin kara marka laga reebo qoyskiisa! Waa ayaa ku baryey ninkii isu haystay in uu yahay mid guga maanta ah aysan gabadhi ‘maya’ dhihi karin.

Waa maan Barreey iyo maan Bilaale, xaajadii waa ay gurracantay, waana la waayey tab loo dhaqaajiyo kadib markii is maandhaaf weyn uu ka dhashay dookha wiilka iyo gabadha. Tol iyo xigto ayaajirtee intaa laguma deynin xaajadiiye waxa loo diray in ay hawsha soo dhiraandhiriyaan xalna raadiyaan Xamdi Faarax oo ahayd gabadha saaxiibteed iyo Yuusuf Mahdi oo Aadan garabkiisa midig ahaa. Laba toddobaad oo ukala dabqaadid ah, Sareedo waxa ay ku adkaysatay inuusan Aadan ahayn dookheeda, hase yeeshee; abtigay oo necbaa jabka goobta dagaalka iyo golaha dumarka ayaa tolka u bandhigtay rabitaankiisii, gabadhiina u

fadhiistay isaga oo go'aan ku gaadhay in Sareedo ay nooqto ooridiisa jidkuu doona ha u maree.

Subax ayuu reerkii u raray hanti wixii uu awooday iyo wixii uu soo uruurin karayayba, wixii xeer ahaana soo dhammaystiray.Sidii uu dhaqanku ahaa nin geyaan ah oo gabadh tol usoo doontay lama celiyee waxa gabadhii lagu xidhay Aadan, sidaa ayaana lagu yagleeley guri kor ka quruxbadan hoostana ka ololaya. Guurkaa jujuubka ah gabadhii waxa uu ku noqday boog wadnaheeda ku taal. Aadanse waxa uu iska sii watay halgankiisii kadib markii uu gaadhay hadafkii uu nolosha guurka kalahaa. Waa Sareedo oo ooridiisa ah iyo ubad ay dhashee.

Waxalagu jirey gu' barwaaqo ah oo lagasoo doogay abaar dheer oo dad iyo duunyaba saamaysay. Waxa cagta iyo jabaqda dhaantadu isqabataa habeenkii inta udhexaysa Ban Tureed, Hoomey, Webiga, Laagta Gila, illaa iyo dooxadii Dhanaan.Waabarwaaqo uu sida caadiga ah magoolo jacaylku, bacrimana dareenka udhexeeya lab iyo dhedig.Waaamminta uu ililaaska guurku isqabto daan ka daan.

Sareedo oo gugaas 19jirsatay, muuqaal ahaanse lamoodo inay intaas aad uga weyntahay; marka la eego kartida, hubqaadka iyo haybadda dumarnimo ee kamuuqata, ma aysan yeelin in Aadan oo gu'ahaan iyo dookh ahaanba kafogaa ay oori u noqoto. Marnaba kuma aysan fikirin in nin qori dhegta haysta oo aarka weheshada uu yahay midkii ay muddo kutaamaysay.

Waxa aykufikiraysay in uu guursan doono Muuse Cali oo ah wiil aad looga yaqaano goobaha dhaantada iyo ciyaaraha waddaniga ah. Itaal dhaqaale iyo awood dadnimo midna kuma aysan dooranin Muuse' e waxa uu ahaa aftahanyaqaannasida loola hadlo dareenka dumarka, loona indha sarraxaadiyo iyada oo lamarayo

jidka hadalka, hawraarta san iyo maansada hilinka toosan la mariyay. Dumarna hadal macaan lagaraac!

Meherkaa aan gabadhii Sareedo ahayd waxba laga weyddiinin waxa uu ahaa mid murugo iyo farxadba xambaarsan. Aadanwaxa uu u ahaa dabbaaldeg Sareedana gabbal dumay iyo cimri khasaaray. In kasteoo Sareedo murugo iyo uurkutaalloay la daalaa dhacaysay haddanaqoyskeedu guurkaa waa ay mahadiyeen,waxa uu ahaa mid barwaaqo iyo badhaadhe uhorseeday, maaddaama gabadhoodii ishkin iyo adhiba laga bixiyay, qoys dun macaanna ay la xidideen.

Laba bilood kadibAadanwaxa uusagootiyay qoyskii Sareedo, isaga ooa ka baxay dadabgalkii, waxa uuna xaaskiisii cusbayd ee uu nasiibka u yeeshay nolosheeda qalbigeedana uu Muuse mulkiyey la'aaday xaggaa iyo Ceel Barde oo jabhaddu xoog iyo saldhigba ay ku lahayd.

Saddex sano oo buuq, qaylo iyo eedsheegasho ah kadib guurkii Aadan iyo Sareedowaxa uugaadhay jid xidhan oo aan horay looguwada socon karin. Noloshiiqoysnimowaxa aynoqotay mid gabbalkeedu dhacay, ugu danbeynna Aadan wuu furay Sareedo iyada oo wiil iyo gabadh wadata. Sida aan ugu dhiiranahay furitaanka haddii aan ugu dhiirranaan lahayn dhegaysiga dareenka dumarka iyo tixgalinta damacooda waxa aad u yaraan lahaa qalalaasaha qoyska iyo furitaanka xadhkaha goostay ee khatarta ku haya bulshadeena.

Dhacdadaas murugada kureebtay Sareedo wali ma aysan illoobin, walow lagasoo wareegay dhawr iyo labaatan dayrood. Aadan waxa uu ahaa nin dhaqashada reerka u yaqaana gogosha iyo biilka.Nolosha gurigiisa wuu kasoo bixi jiray oo waxa uu ahaa nin hanti leh, baahiyaha bini'aadannimo ee kale na wuu u gudi jiray

xaaskiisa, aragtidiisana majiro wax ka maqan Sareedo haddii ay labadaa haysato. Halka ay iyaduna doonaysay qof la hadla dareenka jidhkeeda.Qoftaabta rabitaanka wadnaheeda, nin haqabtira baahiyaha dumarnimo ee ay ugu horeeyaan la sheekaysiga iyo fahanka noloshooda. Taasna inta badan ragga Soomaalida jadwalka uguma jirto, darteed ayayna badanaa guryaheenu u burburaan, ilmaheenuna ugu koraan cuqdad kadib marka ay waayaan mid ka mid ah waalidiintooda isaga oo aan dhimanin.

Jidhkeedu wuu soohmay oo waxa saameeyay sooyaalka nolosha.Muuqaalkeeduwuu isbaddalay, dhabankeedana waxa saran diihaal, baahi iyo da' is huwan ay keeneen, guurna waa ay kasaahidday oo waxa ay korsataa ubadkeeda ay ku han weyn tahay in ay ka siibi doonaan qodxaha wakhtigu jidhkeeda ku mudey. Xagxagashada noloshu gaadhsiisay muuqaalka jidhkeeda waxa ka daran murugada ku gaddaaman qalbigeeda aan helin ruux dhegaysta.

Intii ay Aaddan wada joogeen mar kaste oo noloshu ku adkaato ama guurku uu sii xumaado Sareedo waxa ay nafteeda ku maaweelin jirtay in ay mar uun heli doonto Muuse iyo jacaylkeedii koowaad oo illowsiin doona dhibaatooyinka hadheeyay nolosheeda. Jacaylku waa ka koowaade muddo markii laga soo wareegay kala taggii Aadan iyo Sareedo ayay maalin maalmaha ka mid ah ubandhigtayjacaylkii dhallinyaranimo ee duruuftu ay maquunisay, hasayeeshee Muuse oo danyar iska ahaa,noloshana la daallaa dhacaayay gaashaanka ayuu udaruuray fikraddaas uu kutilmaamay"mid waalli ah oo aan laga fiirsanin." Laba kala bariday kala war la'e rubadda ayaa go'day gabadhii sannadihii ay oori aan faraxsanayn u ahayd Aadan niyadda kudhisan jirtay xidhiidhkii iyo jacaylkii curdinkaahaa ee ay uhaysay Muuse.

In kasteoo muddo aad u dheer ay ka soo wareegtay haddana waxaay illoobi wayday oo wali indhaheeda hortaagan dhoolla-caddayntiisii iyo gole ka gabaygiisii, kama aysan fikirin is baddalka jidhka iyo maanka ah ee Muuse iyo iyadaba ku dhacay muddadaa dheer ee ay kala maqnaayeen! Isaganuwaxa uu ugu jawaabay si qallafsan oo Sareedo kunoqotay lamafilaan. Hawraartaa kasooyeedhay Muuse, sida warankii ayay umuddey wadnaha Sareedo,waxa ayna hoosta ka xarriiqday in ragga oo dhan isku mid yihiin goor iyo goob kaste oo ay joogaan, maadaama Muuse waxba uusan kaga duwanayn Aadan.

In kasteoo marnaba aysan Sareedo ku qancin haddana Muuse waxa uu isku dayey in uu u caqli celiyo gabdha, arrintana dhinacyo badan ka tuso. Dood dheer kadib ayuu Muuse yidhi: “waa garasho dumar oo marka la joogo jacayl iyo nacayb aan aad waxba u miisaamine anigu khalad kuma lahi in aan ka cudur daarto xidhiidh aan qotto dheerayn oo tobannaan sano kahor ahaa, gaar ahaan aniga oo noqday xaasle lagu mashaqeeyay carruur badan iyo caydhnimo.”

Tagtadaa xanuunka kulul ayaa maskaxda Sareedo kusoo maaxatay markii ay aragtay hooyaday oo horteeda taagan sannado badan kadib.Qof foolli hayso ma awoodo taagniye muddo toban daqiiqo ah oo ay Sareedo daawanaysay cajalka xusuusaha maskaxdeeda kusoo dhacaya ayay hooyaday oo dareentey in ilmihii soo dhaw yahay fadhiisatay dhulka. Hal mar ayay Sareedo soo baraarugtay iyada oo lamoodo in xadhko lagasoo daayay! Isla markiiba waxa ay dhex qaadday qoysaskii,waxa aana looyeedhay Khadiijo oo ahayd umuliso khibrad dheer iyo waaya’aragnimaba u leh ummulinta. Foosha kulaylkeeda waxa ay kudhowaatay hooyaday sida ay iiga sheekaysay in ay miyir daboolanto,waxana

mar labaad asqeeyay matag, illiniyo waliba aadaarxanuunku keenay.

Haddii ay fooshu adkayd, dhalmadii ma adkaan wakhti dheerna ma qaadaninesi sahlan ayay u ummushay. Isla markii ay maqashay oohinta kamacaan wax walba ayay illowday xanuunkii hayay, mashaqadii foosha iyo guurihii habeenka madow.Cod hoose ayay kuweyddiisay: “maxaan dhalay?” “Waa wiil shindhalad ah oo halyey hubqaad ah noqon doona,Alle idankii” ayaa loogu jawaab celiyay.

Islaan waayeel ah oo guriga aan kudhashay uguweynayd ayaa tiri:“naa wiilka Guure ubixiya!” Mid kale ayaa ugu jawaabtay:“naawiilka Geeddi ubixiya.”Mid kale ayaa iyaduna docda aqalka ka dhawaaqday, iyada oo leh; “wiilka Dalmar u bixiya ama magaciisa aabbihii ayaa lalasugiye iska aammusa!” Go’aankaa dambe ee ahaa in masuuliyadda magaca wiilka aabbihii loodaayo ayaa umuuqday aragti macquul ah, shanqadh dambana mayeedhin. Markii shaahii yaalay goobta lacabbay, sheeko dumar oo meel walba taabatayna lasoo af meeray, qayb dumarkii yimid kamid ahna ay tageen, ayaa waxa dib ubilowday dooddii kusaabsanayd magac bixinta.

Sareedo ayaa hooyo wayddiisay: “Ruqiyooy, Maxamed xaggee ayuu jiraa?”“Magaalda ayuu noogu safray”,ayay cod xabeeb iyo daal leh ugu jawaabtay hooyaday.

Waxa caado jirta ah in magaca iyo wanqalkaba lalasugo ragga masuulka ka ah qoyska oo aabbuhu ugu horreeyo. Hase yeeshee, sida ay kudhacdayba, magacii habeenkaa goobta dhalashada lagaga dhawaaqay ee Guure ahaa wuu hirgalay,waxa uuna noqday magac aan illaa maantaleeyahay, lagana yaabo inuu saamayn

kulahaa nolosha guuraynta iyo geeddiga joogtada ah ee aan kujiro tan iyo waagii aan caqliyaystay.

# HANAQAAD

In kaste oo gugii aan dhashay uu ahaa barwaaqo laga nastay abaaro halakeeyay dad iyo duunyo, haddana farxaddu ma dhammaystirnayn oo waxa jiray dagaallo sokeeye oo dhib laxaad leh u geystay wada noolaanshaha qabiillada iyo is dhexgalka bulshada soomaaliyeed ee ku dhaqan agagaarka webiga Shabeelle. Sidoo kale wali waxa muuqatay saamayntii dagaalkii 1964[tii] oo shacabka soomaaliyeed geliyay han weyn, kadib markii aan aaminnay in dawladdeena curdinka ah ay ka adkaan karto gumaysiga Abasiiniya ee gaamuray, rejo in badan la dhowrayayna ay xaqiijin karto.

Dhanka kale hadal haynta jabhaddii Nasrullaah oo ku yeelatay deegaanka saamayn xoog leh ayaa ahayd mid taagan. Nasrullaah haddii ay xaqiijin waydey hadafkii madax banaanida ahaa waxa ay ku guulaysatay in ay dhisto wacyi wadareedka umadda iyada oo ka qayb qaadatay in dagaallada u dhexeeya beelaha la yareeyo, awoodahana la isugu geeyo sidii loo la dagaallami lahaa gumaystaha madow ee ku habsaday dhulka hooyo.

Qoyskanagu waxa uu u noolaa sida caadiga ah ee looga noolaa gayiga Soomaalida badhtamihii qarnigii labaatanaad. Hooyaday iyo aabbahay oo da' ahaan isu dhowaa waxa ka dhexeeyay xidhiidh jacayl oo xishood iyo dhaqan soo jireen ah huwan. Ma jiro qof dareemi kara jacaylka ka dhexeeya lammaanaha Soomaalida gaar ahaan kuwii noolaa xilliyadii hore ee addin in lagu muujiyo mooyee aan af lagu caddayn karin.

Markii aan yaraa inkaste oo aanan garanayn macnaha jacaylka haddana waxa ii muuqday in aabbahay uu seexdo meel ka duwan meesha aan seexano, cunana cunto ka tayo wanaagsan kana badan midda aan annagu cunno. Inkaste oo ay hooyaday ogayd in cuntadaa kala badhkeeda xataa uusan cuni karin aabbahay haddana waxa ay hooyaday ceeb u arki jirtay in weel badh ah ay hor dhigto saygeeda.

Ficilladooda waxa ka buuxay jacayl iyo ixtiraam aad u weyn, gaar ahaan aabbahay oo aad ugu naxariisan jiray hooyaday waligeedna aan af ama addin ku dhibin, hadaladooduna waxa ay ahaayeen kuwo aan marnaba jacaylka uurka ku jira laga dheehan karin. Waxa aan la yaabaa hadda marka aan dib u xusuusto sida uu aabbahay farxad iyo qosol ugu salaami jiray dadka oo dhan marka uu safar magaalada ah ka yimaado, marka uu hooyadeay soo gaadhana uu isu baddali jiray oo salaan afka keli ah ugu salaami jiray hooyadayna ay raali ugu ahayd sidaa, iyada oo u arkaysay in ninka xaaskiisa hadallo macaan ama gacan qaadis diiran ku qaabila bulshada dhexdeeda uu yahay nin aan sarriig lahayn oo dhaqanka baal maray!

Degelka qabiilka uu qoyskanagu ka midkayahaywaxa uu ahaa dhul baaxad weyn oo u dhexeeyay Suubaan Balal iyo Nogob.Hayaan iyo nagaanshaba waxa haga baadka iyo biyaha, colaaduhuna saamayn ayay ku lahaayeen. Noloshooda diinta ayaa udub dhexaad u ah, dhaqan suubban ayaa astaan u ah, gobonimo ayaa gun dhig u ah, waxa haga xeer iyo xeerbeegti si qoto dheer u yaqaana sooyaalka dalka iyo deegaankaba.

Mar haddii aannu nahay reer guuraa noloshoodu ku xidhan tahay dhaqashada xoolaha waxa qaali ah wax walba oo xidhiidh la leh nimcoolayda uu Eebbe nagu galladaystay. Xoolaha dartood ayaa dagaal loo galaa, dhiig loo daadiyaa,qaraabo loo gooyaa, in

bandanna looga tallaabsadaa xayndaabyada diinta iyo dhaqanka. Sababtu tahay xooluhu waa lafdhabarta nolosha, gundhigga ammaanta iyo cayda oo haddii la waayo xoolaha gaar ahaan geela aysan jirayn nolol macno u leh reer miyiga Soomaalida.

Marka aan dib u celiyo cajaladda maskaxdayda si aan u xusuusto dhaqdhaqaaqii ganacsi ee jiray dhallaanimadaydii wax badan iima muuqanayo, deegaankuna illaa maanta ma helin madax bannaani uu ku yeesho ganacsi furan, hasayeeshee dhaqdhaqaaqa ganacsi ee hadda iyo horaanba ka jira Soomaali Galbeed waxa lafdhabar u ah suuq geynta xoolaha nool iyo waxyaabaha laga dheefo, sida; caanaha, hargaha, subagga iyo wixii la mid ah. Sidoo kale waxa la suuq geeyaa fooxa, malmalka iyo noocyada kala duwan ee xabagta.

Waxbarashada keli ah ee miyiga Soomaalida muqaddaska ka ah waa barashada Qur'aanka Kariimkaah iyo culuumta la xidhiidha ee islaamiga ah.Waxbarasho kale kama jirto mana qiimeeyaan reer guuraagu oo maba dareensana in ay ka maqan tahay waxbarasho mar haddii ay diinta islaamka baranayaan ubadkoodu. Reer miyigu waxa ay leeyihiin macallin ubadka diinta u dhiga, shaqo kale na aan qabanin.Xoolo ma raaco, beer ma falo, shaqo kale na looma dirsado, xurmo gaar ah ayuu leeyahay, waxaana la siiyaa xoolo, ishiisa, uurkiisa iyo afkiisaba waa la iska ilaaliyaa. Macalinkaasu waxa uu ka tirsan yahay reerka oo dhib iyo dheefba la qaybsadaa degel kastana u raacaa.

Markii aan shan sano jirsaday waxa macallin u ahaa qoyskayaga iyo qoysaska badan ee ood iyo ab wadaagga aannu nahay macallin Garaad oo lagu naanaysi jiray "Qur'aan Ruuge" oo loola jeedo in uu ahaa nin ehlu Qur'aan ah,diin jecel, carrabkiisuna aanu ka faaruqin akhrinta Qur'aanka iyo dikriga Eebbe weyne.

Waxa uu ahaa nin awood iyo itaal Ilaahey siiyay. Gadhkiisa weyn iyo indhihiisa guduud xigeenka ah waxa ay ahaayeen calaamado uu caan ku noqday macallinka oo mararka qaar “Gadh-weyne” ama “Indhacase” lagu xaman jiray. Codkiisa onkodka u eg iyo usha aan ka bixi jirin gacantiisu waxa ay cabsi weyn ku abuuri jireen ubadka uu wax baro macallin Garaad. Aabbahay waxa uu ahaa oday dhaqameed deeqsi ah oo si joogta ah uga war haya macallinka, macallinkuna deeqda aabbahay jaceyl ayuu iigu baddali jiray.

Inta badan, dadku waa xoolo dhaqato, waxase jira dhawr qoys oo beeraley ah, marka abaari dhacdana loo baxsan jiray bakaaro ay lahaayeen oo dalag badan lagu kaydin jiray. Markaste oo abaaruhu bataanna waxa ay reer miyigu kasoo ag dhowaan jireen tuulooyinka makacdada ah iyo magaalooyinka.

Reeraha waxa ciidan iyo xoogba u ah ubadka. Sidaa darteed, si la isu waafajiyo beeraha iyo xoolaha oo ilaalin u baahan iyo barashada Qur’aanka,waxa subaxa hore, inta aysan shimbiruhu ka bixin buulkooda,ardaydu oogaan dab dheer oo dugsiyadu ku caan baxeen. Dabka waxa loo adeegsadaa diirrimaad, marna waa ilays lagu arko khadka, qalinka iyo looxa, marna waa wehel dugaagga iyo halaqyada laga weheshado.

Sanadkii koowaad ee aan dabka ka gudbayba aabbahay waxa aan ula muuqday in aan ahay wiil fahmo badan oo mudan in uu waxbarasho helo, hasayeeshee waxa isu qaban la’aa xaaladda miyiga Soomaalida ee aan lahayn waxbrasho aan ahayn midda aan soo sheegnay iyo hooyaday oo aan xoog iyo wehel labadaba iiga maarmin maaddaama aan ahay wiilka keli ah ee ay dhashay. Waxa aan ahaa madi ay dhashay minyaro tartan kula jirta xaas kale oo aabbahay qabay, taa oo dhashay koox wiilal gaashaanqaadyo ah.

Markii aan yaraa, waxa aan ahaa mid aan xasilin oo dhib badan. Dadku waxa ay ii arkayeen qalqaalli rabshadda aan ka daalin, hooyadayse waxa ay ii arkaysay halyeey xiniinyo gubayaan.“Waxa uu noqon doonaa mid aan ku nasto”ayay haweenka ugu sheekayn jirtay, casarkii marka ay sheeko haweenka ku leeyihiin gurigayaga oo ahaa meel ay dumarka iyo ragguba ku shiraan, fadhi fiican iyo shaahbana ka helaan.

Hooyaday oo aan keli ku ahaa wax wiil ah iyo afar hablood oo isku xiga oo ila dhashay waxa ay iga dhigeen boqor aan taaj xidhnayn hadalkiisana ladaba marin. Sidaa oo ay tahay, ma aan ahayn dadka jiljilicsan ee aan naftooda biimaynin,kamana mid ahayn kuwa dabeecadda qalafsan ee aan oggolayn wax wada yeelashada, wadaagidda farxadda iyo murugada dhallaanka ee aan dhaafsiisnayn ciyaaraha iyo fasaxa dugsi Qur’aanka.

Markii aan siddeed jirsaday waxa aan bilaabay inaan raaco lo’ tiro ahaan kor u dhaafaysay toddobaatan oo ahayd waxa ay hanti xoolaad qoyskayagu lahaayeen. Aabbahay waxa uu aabbihii ka dhaxlay nasab toosan, magac dheer, sumcad wanaagsan iyo xoolo yar. Intii uusan dhalan aabbahay, awoowgay waxa uu ahaa nin hanti badan gayigana caan ka ah. Hasayeeshee dabayaaqadii soddomeeyadii qarnigii labaatanaad ayuu caydhoobay. Abaaro iyo aafooyin kale oo isugu darsamay ayaa mooraduugay awoowgay oo mar ahaa nin lagu sheekaysto hantida uu tabcay.

Maalmaha qaar ee aan ka nasto raacidda lo’da, waxa aan celin jiray beer ku tiil dooxo si fiican roobku u biya dhigay. Waxa aan lo’ raacidda iyo beer celintaba ku kalaysan jirnay Geeddi Saxane oo ahaa saaxibkayga qudhah ee aan lahaa xilligii aan ku noolaa agagaarka webiga Shabeelle. Geeddi waxa uu ahaa will yar oo edeb badan, aammusan oo af gaaban. Waxa aan kaga fiicnaa af-tahannimada iyo dhexgalka bulshada, isaguna waxa uu igaga

fiicnaa orodka, geeda fuulka iyo waliba u adkaysiga harraadka, gaajada iyo usha macallinka Qur'aanka.

Sida caadada u ah wiil ay hooyo keligii dhashay,kama heli jirin raacidda xoolaha. Waxa aan aad uga baqijiray keymaha iyo duurka cidlada ah, waxa aan mar walba maanka ku hayay dugaagga ku nool deegaankaas ee libaaxu ugu weynyahay in ay i cunaan. Intaa waxa dheer baaxadda weyn ee maalin raaca xoolaha iyo harraadka mararka qaar gaadha miyirbeelka. Ma sahlana in aad xoolo ku raacdo banka Suubaan Balal ee ay cadceeddu asqayso had iyo jeer.

Waxa aan aad u jeclaa ilaalinta beerta iyo inaan dhex joogo dhawr hiktar oo teedsan annaguna aan lahayn. Sababtu waxa ay tahay, beertu waxa ay leedahay sabuul macaan oo la dubto, qare la cuno iyo biyo joogta ah, maaddaama ay ku taal hareerta webiga. Cagaarka dhulka, ubaxa saaran guudka geedaha iyo raxan raxanta midabbada kala jaadka ah leh ee ay shimbiruhu u duulaan ayaa ahaa mid aan ku illoobo maalinta dheer ee aan ku qaadan jiray beerta dhexdeeda.

Marka laga tago waajibaadka xoolaha iyo beerta carruurnimadaydii waxa aan jeclaa in aan ciyaaro golayga, legdinta, bootin-dhisadka, dab-shugaaxa iyo waliba laad looyaqaanay "Hurduf", dadka qaarkiina u yaqiineen Hurduf-qayliye. Dadka naga weyn ama da'dii hormuudka noo ahayd waxa ay aad u ciyaari jireen dhaantada, jarta, shaxda iyo ciyaaro kale oo maskaxda carruurta ka sarreysay xilligaana aan u arkaynay wax aan macno lahayn.

Ciyaaraha waa la igaga fiicnaa.Waxa aan jeclaa sheekada iyo taariikhda, waxa aan ku dadaali jiray in aan ag fadhiisto waqti dheerna laqaato Aw Daahir oo ahaa guxushaa 89 sano jir ah,

cirraduna si siman ugu siqday oogadiisa. Inkasta oo uu da'da aan sheegay jiro, haddana wali wuu is haystaa, turuqyo waayo kuusnaan jirayna waa ay kasii muuqdaan jidhkiisa.

Aw Daahir oo lugtiisii midig ku waayay dagaalladii 1964[tii] dhex maray Soomaalida iyo Xabashida, waa matxaf nool oo taariikh, halgan, dhaqan, hidde iyo suugaan ah. Waxa uu si aan halmaan iyo humaag midna ku jirin u wariyaa sooyaalka dheer ee Soomaalida, qayb uu sheeko ku maqlay iyo qayb uu shaahid u ahaaba. Waaxaqiiqo maahmaahda dhahda; mar kasta oo qof weyn oo afrikaan ahi dhinto, waxa dhimata maktabad. Sababtu waxa ay tahay, bulsho kaste oo aan waxba qorin waxa ay sooyaalkeeda dhaqameed, diin, ciyaaro, suugaan, murti iyo madadaalo ku soo gudbiyaan sheekooyinka, gabayada, halxidhaalaha iyo noocyada fanka ee kala duwan,waxaana xambaara oo da'yarta u gudbiya dadka waaweyn ee nool. Haddaba markaste oo la waayo qof weyn, waxa dhumaya taariikhda dalka iyo dadka oo ku kaydsan maskaxda cirroolaha.

Aw Daahir waxa aan ka faa'iiday aniga oo aad u yar in aan fahmo siyaasad carruurta aynigeyga ahi aysan fahansanayn. Waxauu iga caawiyay in aan garto qaabka xabashidu u qabsatay deegaanka aan ku dhashay. Waxa aan is wayddiin jiray sababta ay dadku uga cararaan ciidamada? Wa ayo dadkan aan isu egnahay midab ahaan ee haddana silloon? Dalkayga maxaa ay ka rabaan? Maxaa naga dhexeeya iyaga iyo annaga? Goorma ayay yimaaddeen dhulkayga hooyo? Maxaa ayse xabashidu deegaankan u qabsatay oo mid kale u qabsan wayday? Waxa ay ahaayeen su'aalo da'a ahaan in badan iga weyn waxaana igu dhaliyay sheekadii joogtada ahayd ee aan la lahaa Daahir. Inta badan su'aalahaa jawaabtooda waxa i siiyay Aw Daahir oo aan u aqoonsanahay macallinkaygii koowaad, si qoto dheerna u fahansanaa sida ay u socoto dabaysha

siyaasadeed ee Geeska Afrika, hadimooyinkii gumaysiga iyo waliba seetooyinkiisa na xannibay lagasoo bilaabo 1884-1885[tii], shirkii Baarliin ee lagu kala qaybsaday afrikada madow, inta kalana waxa i baray waqtiga oo ah macallinka ugu fiican ee aadanaha wax bara.

Taariikhihii uu Aw Daahir iiga sheekayn jiray in badan oo ka mid ah maan weelaynin sababta oo ah waxaan ahaa wiil aad u da' yar miyina ku noolwaxa aanse ka xusuustaa in gumaystihii reer Yurub uu Afrika iyo inta badan adduunka u qaybiyay qaab ka fog caddaaladda, isaga oo ku salleeyay qaybintiisaas aragtiyo ku qotoma dhaqaale, siyaasad iyo in wadamadaas ay weligood u baahnaadaan reer galbeedka oo ay hooskooda hadhsadaan.

Markii aan weynaaday adduunkana maray waxaa aan la yaabi jiray meesha uu odaygaa baadiyaha degan ka keenay waxaas oo xog ah isaga oo aan jaamacadna dhiganin dugsina u aadin dawladna la shaqaynin?  Waxaanse u badinayaa in sannadihii dheeraa ee uu hogaanka halganka ku jiray iyo layliyadii badnaa ee uu qaatay ay ka dhigeen aqoonyahan fahansan ciyaaraha siyaasadda ee dalkeena ka dhigay mid la daalaa dhacaya gumaysi madow oo dadkiina diley dalkiina boobay.

Sanadkii uu Aw Daahir macallinka nolosha ii noqday waxa aan ahaa sagaal jir. Maan lahayn garaad aan ku qaado dhammaan waanadii iyo hadalladii taariikhda iyo waaya'aragnimada xambaarsanaa ee uu iiga sheekayn jiray, hasayeeshee waxa jiray dhacdooyin maskaxdayda si dhab ah ugu dhegay kadibna ii furay wacyi weyn oo markii dambe ii suuragaliyay in aan dib u raaco xididdada taariikhda si aan u gaadho meesha dhibkaygu salka ku hayo.

Waa dhab odhaahda tidhaahda: "wax barashada dhallaanimadu waa sida dhagax wax lagu qorey oo kale, wax barashada weyniduna waa sida biyo dusha wax lagaga qoray", oo loola jeedo wixii dhagax lagu qoraa oo gudihiisa lagu xardhaa wuu kaydsamayaa waayuhuna si dhayal ah kuma tirtiri karaan, biyo qulqulayase waxba laguma qori karo, haddii lagu qorana qulqulka biyaha ayuu qoraalku raacayaa.

Aw Daahir waxa uu ahaa waddani wakhti badan geliyay gobonima u dirirka dhul weynaha Soomaali Galbeed xubnaha jidhkiisana waxa uu waayay isaga oo higsanaya hadaf sare. Halgankaa taxan sida silsiladdaee aan marna kala go'in ma xaqiijinin yoolkii laga lahaa, dalkeeniina wali waxa uu ku hoos jiraa heeryada cadowga.Haddii aan si dhab ah isu qiimaynana waxa aan is weyddiin karnaa sababta keentay guuldarrada nala gu' tirsatay dhowrka qarni? Umase socono in aan is qiimayno ama aan gorfayno guuldarrada'e waxa aan u af duubanahay aragtiyo isku hirdiyaya dhul dumay iyo taariikh duugowday.

Sheekooyinkii xanuunka, taariikhda iyo waaya-aragnimada xambaarsanaa ee aan ka faa'iiday dugsigi Aw Daahir waa ay kala duwanaayeen, waxa uu ahaa dugsi dhammaystiran. Waliwaan xusuustaa habeenkii aan wada qaadanay wakhtigii ugu dheeraa, waxa uu ahaa habeen caddo dharaar ah, dayuxuna afar iyo tobnaad yahay, dabaysha xagaaguna ay salaaxayso baarka sare ee geedaha ku gaddaaman ardaagii aan fadhinay. Waxa aan degganayn tuulada Garab-jabiye ee dhacda galbeedka magaalada Godey. Sanadkaas wax aan tabcanay beertii aan yaraantaydii celin jirey oo caan ku ahayd badnida dalagga kasoo go'i jirey gu' walba.

Isaga oo fadhiya ardaaga guriga ayuu waxa uu u sheekeynayay ina adeerkii Qorane Saleeye oo da'a ahaan aad uga yaraa odayga waaya'aragga ah. Inkaste oo Qorane uu ahaa farsama yaqaan dal

mareen ah oo in door ahna Jabuuti oo Faransiis gumaysto kasoo shaqeeyay, kadibna u tallaabay Sucuudiga oo uu dhowr sano ku noolaa, haddana marnaba iskuma dherarin karin rug caddaagan looga dambeeyo sooyaalka Soomaalida.

Sheekadii aan u dhag raaricinayay ee u dhexaysay ragga ilma adeerka ah waxa ay la martay meelo badan, sida; xorriyadda, xabashida, xoolaha, dumarka. beeraha, dhoofka iyo sida looga shaqaysto waddamada aysan soomaalidu deign iyo waliba cabsida deegaanka ka jirta oo sanadahaa sii laba jibaarmaysay. Sheekooyinkii kale oo idil maskaxdayda kuma aysan qormin dareenkaygana ma baddalin, waxaase dhiiggayga dhaqaajiyay xiisana aan u dhegaysanayay sheekadan aan ka helay xog aan iskuullada xataa lagu dhiganin.

Aw Daahir oo go'iisii caddaa doonyeysan ayaa gadhkiisii cirroobay asii cillaanka sida wanaagsan loo mariyay inta uu salaaxay haasaawe dheer oo illaa saqda dhexe socday la yeeshay ina adeerkii. Hadalka inta badan waxaa haystay Aw Daahir,Saleeyana waxa uu ku lahaa su'aalo dhextaal ah iyo kolba in uu aragti ku darsado, taariikh weyddiiyo, ama uu madaxa u lulo sheekada odayga oo sidan ku bilaabatay:

"Hadimooyinka aan qabno badanaa shucuubta afrikaanku waa ay nala wadaagaan, gobonimada ay heleenna waa afka baarkiisa oo waxba nama dhaamaan." Qorane oo aan sugin biya dhaca hadalka odayga ayaa si amakaag ku jiro u yidhi; "ma dalalka dawladaha leh ayaan waxba ina dhaamin?" Aw Daahir oo dhoola caddeynaya lana yaaban degdegga ina adeerkii ayaa ugu jawaabay: "Qoranoow, sheekada dhegayso kadibna ka fal celi.Waxa aan tegay ilaa afar dal oo Afrikaan ah, nin aynigeyga ah oo deegaankan ku nool uma malaynayo in uu ila ekaynayo aqoonta iyo waaya'aragnimada aan afrikaanka u leeyahay." Qorane oo

garaabay hadalka odaygana garwaaqsaday ayaa “marxabba iyo guddoon” ugu jawaabay.

Halkii ayuu Aw Daahir sheekadii kasii wadey “markii ay afrikaanku ka baxeen gacantii gumaysiga waxa lasoo gudboonaatay dhawr caqabadood oo kala duwan, waxase ugu darnaa in inta badan dadka baddalay gumasytihii saancaddaalaha ahaa ee reer Yurub ay ahaayeen dad muuqaalka uga ekaa Afrikaan gobannimodoon ah,uurkana ka ahaa gumaysi kalkaal kursiga ugu fadhiya si ay Afrika ugu sii jirto gumaysi ka duwan kii hore kase xanuun kulul. Gumaysiga il ma qabatada ah dadkuna aysan badankoodu fahmi karin waa midka aan la isticmaalaynin hub iyo rasaas oo aanay hoggaaminayn jananno gumaada dadka, dhaqaalaha dalka si muuqda u booba, siyaasadda maamula, dhaqankana baddala. Hasayeeshee intaba waxa ay qabtaan iyaga oo u muuqda kuwo innaga ina caawinaya, una soo gurmaday garab istaaggeena ha ku imaadaan qaab hay’ado ama ciidamo xarumo milatari ku leh dhulkeena.

“Aw Daahiroow seexo berri waxa aan u kalahaynaa xaajadii Ina Dhicis oo wiil ku budheeyay sabada ceelka Hadhaawee” ayaa kasoo yeedhay ardaaga guriga ku xiga midka Aw Daahir oo uu degganaa Sheekh Sahal oo deegaanka caan ka ahaa. Aniga iyo Saleeye oo la yaabban hadalka meesha dheer ka imanaya xilligan habeenka ah ayuu odaygii nagu yidhi: “waa Sahal oo xaajo iyo geed fadhi lagu imtixaanay isaga oo da’a siddeetanaad jira, awooddiisii ayaa gabaabsi ah, wax qabadkiisuna waxa uu kusoo ururay hadal iyo tilmaan.”

Uma uusan jawaabin odaygii meesha fog kasoo qaylyaye waxa uu sii watay sheekadiisii “waxa kale oo ragaadiyay dadaalladii afrikaanku ay u qaadilahaayeen xagga horumarka, dawladnimada, xukunka suubban iyo sarreynta dastuurka, caqabad illaa maanta

taagan oo ah mushkiladda xuduudaha uu gumasytihii ka tegay. Waxa nalagu mashquuliyay in aan ku jirno dagaal aan dhammaanayn ama aan la rabin in uu dhammaado.

Inkaste oo shirkii u horreeyay ee afrikaanku ku yeesheen Addis Ababa, Itoobiya lagu go'aamiyay in aan xuduudaha laga daba tegin oo loo daayo sidii uu kaga tegay gumaystihii,haddana aragtidaas oo uu hormuud u ahaa boqorkii Itoobiya, Xayle Salaase, laguna duudsiyay xuquuqo badan oo ay ugu horreyso midda shacabka Soomaalida iyo kuwo badan oo la mid ah oo ku mustaqbal beelay xuduud aan lagala tashan, waxa ay kala teedday dadka iyo taariikhdooda, dhulkii  awoowgoodna gacanta u gelisay shisheeye aanay is lahayn maalin ayuu dhulkiinna idinku xukumi doonaa.

In xuduuddii lagaga tago sidii gumaystaha reer Yurub uu u sameeyay xal ma aysan noqonnine waxa ay sii dheeraysay muddada dagaalka. Waxa ay sare u qaadday xasaradaha ka dhex aloosan dadyawga iyo dawladaha afrikaanka ah, waxa ayna Afrika dhaxalsiisay qulqulato dagaal oo aan illaa maanta laga gudbin.

Tallaabooyinkaa ay qaadeen gumaystaha iyo kuwii ku garab taagnaa ragaadinta dalalkeena waxa ay keeneen in Afrika aysan fursad u helin nabad, degganaansho iyo ku talaabsiga horumar waara, nolosha shacabkana dhanka wanaagsan u baddasha. Waxa ay cagta saartay jidkii geerida iyo afgembiyo millatari oo noqday tusbax furmay. Ilaa maanta waxa ay la daaladhacaysaa qaaradda hodanka ahi kaligoodtaliyayaal dadkii ka dhigay in qabri ku jirta, in qurbe u cararta iyo in la quudhsaday oo qab jabay.

Gumaystaha madow waxa uu noo geystay dhaawacyo aan bogsanaynin. Waxauu baabi'iyay rejooyin aan lahayn, waxa uuna nagu xukumay dil joogta ah, dhac aan xad laheyn".

Mar kaste oo sheekadu ay sii dheeraato waxa i qabanaysay hurdo ugu danbeyntiina waxa aan gam'ay Daahir oo sheekadii wada. Habeenkaa sheekada Aw Daahir wax yar ayaan ka fahmay.Waxauu ka sheekeeyay aragti ka weyn wiil sagaal jir ah oo ku nool baadiye. Afrika, xuduud, dagaal, gumayste, midna si cad iiguma qeexnayn waagaa, hasayeeshee waxa aan fahmayey sida ay sheekadu u socoto, waxaana ay ii iftiimisay jid dheer oo maalinkaa illaa maanta aan ku socdo waxbana iska baddalin.

Sheekooyinka aan Aw Daahir ka maqley aad ayay u badnaayeen, maankaygana kama go'in oo markaan yaraa iyo haddaba wali sidii ayaan u wariyaa.Sheekooyinkaaan muddo gole walba ka sheeki jiray waxa ka mid ah middii uu ii sheegay maalin aan u raacay makhaayad yar oo duleedka reeraha ku tiil: "Dhulka soomaalidu waa dhul baaxaddisu ay kor u dhaafayso hal malyan oo $km^2$, waxa uudhanka galbeed ku eg yahay buuraha Hawaas, dhanka barina xadkiisu waa Badweynta Hindiya; dhanka waqooyina buuralayda Dumeera, cidhifka koonfureedna waxa ugu danbaysa magaalada Ukaasi iyo geddiga shishe ee webiga Taana".

Waxa uu ruux walba u sheegi jiray sheekadiisana dhextaal u ahaan jiray hadalkan markii dambe badanaa dadka tuuladu ay korka ka qaybeen: "kadib madax-bannaanidii labadii gobolee ka xoroobay shantii soomaaliyeed ee uu cadowgu kala gooyay, ma aysan helin soomaalidu dawladdii baaxadda weynayd ee ay ku taamayeen, waxa rejadooda laalay quwadaha soo duulay ee diiddan in gayigeena ay ka dhalato,dawlad soo celin karta sharaftii ay soomaalidu lahayd ee gumaystaha reer Yurub kala gooyay, isaga oo duudsinaya ilbaxnimada iyo hormuudka aan u ahayn gayiga aan ku dhaqan nahay.

Waxa ay dadku si dhab ah u rumaysnaayeen in wax kaste oo midnimo ka sokeeya uusan u qalmin Soomaalida. Sannadahaa saxansaxada xorriyaddu socotay, soomaalidu waxa ay fahansanaayeen awoodda ay leeyihiin, waxa ayna ku hubaysnaayeen xamaasad iyo wacyi waddani oo dhismay lagasoo bilaabo halgankii Daraawiishta.

Sanadihii ka horeeyay iyo waliba kuwii xigay madaxbannaanidii qayb ka mid ah dhulkii Soomaalida baraaruggaa waxa hormuud u ahaa dhallinyaradii la baxday S.Y.L iyo dhaqdhaqaaqyadii kale ee ka hanaqaaday gayiga soomaaliyeed. Inkaste oo musuqmaasuqa iyo eexda qabiilka ee Soomaaliya hadheeyay ay mararka qaar hoos u ridayeen saamiga waddaniyadda ee shacabka haddana himilada bulshadu marnaba kama hoos marin dib u xorraynta dhul weynaha Soomaalida si aan u helno dawlad na matali karta soomaaliduna ay ku qanacsantahay.

Soomaalidu waxa ay ahaayeen hormuudka Bariga Afrikadhan walba marka la eego. Qawmiyadaha ay la noolaayeenna waxa ay u ahaayeen kuwo u sida maamulka, laga soo bilaabo Axmed Gurey iyo dawaladihii ka horreeyay ee islaamiga ahaa, kuwaas oo loo yiqiin "Addaraas Al-Islaami".

Ka hor iyo markii uu gumaystihii reer Yurub soo gaadhay gayiga Soomaalida qarnigii 19^aad^waxa jiray halgan dheer oo u dhexeeyay masjidka iyo kaniisadda oo ay kala matalayeen Soomaalida iyo Xabashida.Uurkutaallada loollanka ku salaysan caqiidada, hoggaanka geeska Afrika, iyo dhul balaadhsigaba waligii ma go'in, waxa se mar walba hoggaanka qabanayay mid uun labada dhinac ah, walow ay soomaalidu ahaayeen badanaa kuwo gacan sarreeya wixii ka horreeyay jabkii Daraawiishta.

Taariikhdu waxa ay qortaa in habar wacashadii xabashida ee boortaqiiska ka hor ay soomaalidii hooggaanka u ahayd muslimiinta mar walba ka gacan sarreyn jireen macatableyda lagu ooday buuraha ka fog badaha. Markii laga itaal roonaaday ayay Helena oo ahayd boqoraddii xabashida intii u dhexaysey (1507-1516kii) sidoo kale na ahayd xaaskii Zaara Yacquub (1399-1408dii) oo mar noqday boqorka xabashida farriin u dirtay boqortooyadii boortaqiiska, iyada oo ka codsanaysa in ay lasoo gaadhaan gurmad degdeg ah oo lagu samatabixinayo masiixiyadda geeska Afrika."waxa aannu nahay jasiirad masiixi ah oo ku dhex taal badweyn islaam ah, haddii aan nala soo gaadhinna, waxa na qabsanaya islaamka duullaanka ku ah deegaankayaga iyo diintayadaba" ayay tiri Helena oo dhambaal u diraysay boqortooyadii boortaqiiska oo xilligaa ahayd midda ugu tunka weyn Yurub.

Boortaqiisku waxa uu awood ku lahaa xagga badda, haddii ay noqoto awood ciidan iyo awood bad-maaxnimo labadaba. Sidoo kale waxa uu caan ku ahaa samaynta khariidadda iyo noocyada kala duwan ee doomaha u kala goosha daafaha dunida. Hadafka uu boortaqiisku ka lahaa khariidadda iyo awoodda bad-mareennimo waxa ay ahayed in uu helo jid u suura geliya in uu gaadho bariga fog oo uu doonayay in uu ku xidho Bariga Afrikaiyo Bariga Dhexe si ay lafdhabar ugu noqdaan ganacsigiisa, gaar ahaan xariirta iyo dhirta lagu udgiyo cunnada oo waagaa lahayd muhiimad u dhiganta midda uu shiidaalku maanta leeyahay.

Boortaqiiska oo xilliyada qaar ka talin jiray dhul ay maanta ku fadhiyaan 60 dowaladood sida la sheego,waxa uu si weyn ugu lug lahaa ka ganacsiga iyo addoonsiga dadka madow, budhcad-badeedka, beeridda qasabka iyo cudbiga dhulka Baraasiil iyo

sahaminta deegaannada dihin, si loo gumaysto dadka loogana macaasho dalagyada kasoo go'a. Sidaa darteed, waxa uu qarniyadii 15$^{aad}$ iyo 16$^{aad}$ boortaqiisku isku ballaadhiyay Afrika,Aasiya iyo Ameerikada Koonfureed, waxa uuna daadiyay shabaqyadiisa ganacsi dhammaan deegaannada muhiimka u ah isu socodka ganacsiga adduunka.

Boortaqiiska oo ay dabada ka riixayeen dhawr arrimood oo ay ugu waynaayeen faafinta diinta iyo boobidda hantida, markii ay soo gaadheen Geeska Afrika, waxa ay kasoo dageen xeebaha soomalida. Inkaste oo ay maamullo islaami ah ka jireen dhulka, haddana ma ahayn kuwo u babacdhigi karayay boqortooyada boortaqiiska. Sida lagu yiqiin macatableydii soo weerari jirtay dhulalka islaamka, markii ay ciidammadii boortaqiisku soo gaadheen dhulkeenna hooyo,waxa ay gubeen magaaladii taariikhiga ahayd ee Saylac, waxa ay dhaceen hantidii tiil, waxa ayna gabood fal weyn u gaysteen diinta iyo dhaqanka.

Markii ay gudaha u galeen dhulka soomalida, waxa uu halgan dheer dhex maray boortaqiiska iyo cutubyadii ciidamada Soomaalida, kuwaas oo loollan kula jiray Abasiiniya. Inkaste oo dharbaaxo kulul la gaadhsiiyay boortaqiiska, Soomaalida dhulkeedana lagu dilay hooggaamiyahoodii, haddana garab istaaggiisii waxa uu ka badbaadiyay taliskii Xabasha burbur aysan waligood kasoo waaqsan lahayn.Soomaalidii iyo islaamkii ay hoggaaminayeenna waxa soo wajahay xaalad adag, sababta oo ah;Xabasha waxa lasiiyay hub casri ah, waxa aana loo tababaray si ka duwan sidii hore, taas oo aasaas u ahayd isbaddallo ku yimid furimaha dagaalka.

Halkaa marka ay xaajdu marayso, waxa ay Muslimiintii u habar-wacdeen boqortooyadii cismanaiyiinta oo ka arrimin jirtay caalamka islaamka, intii u dhexaysay 1299$^{kii}$ ilaa 1923$^{dii}$.

Boqortooyadii cismaaniyiintu waxa ay hiil iyo hubba la garab istaagtay Soomaalida, waxa ayna siisay awood adag oo u suuragelisay in ay dib u hantaan dhulal hore ay xabashidu u qabsatay.

Soomaalida oo og damaca Boqortooyada Cismaaniyiinta ee is balaadhinaysa, waxa ay ka baqeen in ay ku dhex milmaan jidhka weyn ee boqortooyadaas. Waxa la sheegaa in Axmed Gurey uu ka codsaday in ay iska joojiyaan hiiladooda iyo hubkooda, waxa uuna u sheegay in soomaalidu isku filanyihiin kana adkaan karaan xabashida iyo quwadaha taageera.Taas waxa ay ula muuqatay booqrtooyadii cismaaniyiinta iyo Soomaali badan go'aan aan sax ahayn. Haseyeeshee, xorriyadda wax loo dhigaa ma jiraan madaxbannaanida go'aankuna waxa uu asaas u yahay aaya ka talinta bulsha walba.

Sanado badan oo dagaalkuahaa mid wajiyo badan kolbana qawmiyadi gacan sareyso awooddii uu boortaqiisku siiyay Xabasha waxa ay hor seedday in xabashidu ka awood badiso Soomaalida oo ay dib u qabsadaan dhulkii hore looga faramaroojiyay.

Mar dambe, waxa deegaanka soo gaadhay dawladihii reerYurub ee awooddoodu sare usoo kacday kadib markii boortaqiisku tabar yareeyay, Faransiiska, Ingiriiska iyo Talyaanigu waxba kama baddalin siyaasaddii caddaalad darrada ku dhisnayd ee Boortaqiisku ku dhaqmijiray.Waxa ay sii wadeen sare u qaadista awoodda xabashida, kadib markii ay maquuniyeen cududdii ay lahaayeen soomaalidu. Dhaawacii ugu weynaa ee uu gumaystuhu u geystay shacabka soomaaliyeed waxa uu ahaa in uu dhulkooda u kala qaybiyay shan qaybood. Ilaa maanta shacabkayagu waxa uu ku kala xannibanyahay dalal xoog ku haysta oo aysan wadaagin diin, dhaqan, dhiig iyo taariikh midna.

Ugu danbayn, markii awooddii Soomaalida ee la loodin waayay uu kala qaybiyay gumaystuhu waxa u suuragashay in boqortooyadii xabashida ay qabsato caasimaddii Soomaalida iyo islaamka ee Harar, sanadku markii uu ahaa 1887[dii]. Gacan ku haynta Harar iyo burburkii boqortooyada Soomaalida waxa ay na dhaxalsiiyeen niyad jab tafaraaruq iyo kala firxasho.

Taariikhdaa wixii ka danbeeyayna waxa kor usoo kacayay marba marka ka danbaysa awoodda xabashida, waxaana sii wiiqmaysay awoodda Soomaalida oo hankoodu noqday sidii ay u raadin lahaayeen xorriyad uu gumaystaha saancaddaaluhu ku laalay geed dheer.

Sida aannu ognahay, waxa taariikhda qora guulaystayaasha. Soomaalida oo ah dad laga guulaystay, dagaal dheer kadib, waxa si u la kac ah loo duudsiyay taariikhdii dheerayd ee ay ku lahaayeen Bariga Afrika. Waxa si dhib yar daah bir ah loo saaray ilbaxnimooyin geeska Afrika ka arrimin jiray kumannaan sano, sida;Bunt, Azania iyo kuwii islaamiga ahaa ee ka hanaqaaday gayiga soomaaliyeed.

Ilbaxnimo duudsiga Soomaalida ku dhacay waxa garab socday buunbuunin iyo sare u qaadis taariikho gacan ku rimis ah. Waxa si weyn loo soo dhisay ka sheekaynta qorista iyo daraasaynta ilbaxnimooyinka ood-wadaagga la ah Soomaalida, sida; ilabaxnimadii Aksuum(Axum) ee Abasiiniya.

Intii taariikhdaa ka danbaysay waxa labada bulsho dhex maray dagaalo kulul oo uu ugu dambeeyo midkan hadda ay saamayntiisu dhulka daadsantahay, dhaawac iyo qisooyin xanuun bandanna ku reebay deegaanka.Inkasteoo dagaalkii 1964[tii] uusan noo horseedin gobonimo haddana waxa uu soo nooleeyay dareenka ay shacabku ku doonayeen in ay heeryada

cadowga isaga dul qaadaan, Soomaalida kale na la qaybsadaan saxansaxada xorriyadda

Kadib markii uu gumaystihii reer Yurub dhulka Ogaadeeniya gacanta u geliyayay Abasiiniya waxa ay sii wadeen ciidamada Itoobiya gardarradii garabka ogayd ee ay kula kacayeen maatida degan goob walba oo dhulkeena ka mid ah.Waxa dhacay xasuuq iyo dhibaato aad u weyn oo aan wali helin qalin si qoto dheer u soo bandhiga. Dhaawacyada ay xabashidu u geysatay sharafta, karaamada iyo diinteena suuban, waa mid aan qoraal iyo sheeko midna lagu soo koobi karin, mararka qaarna waaba ay ka weyn tahay wax uu qalin suureyn karo afkuna ka sheekeyn karo, maankuna weelayn karo, maskaxdeenuna ay qaadi karto".

Taariikhdaa mugga leh iyo dhacdooyinkaa ku taxan waayihii kala duwanaa ee ay soomaalidu soo mareen waxa ay ahaayeen kuwo ay habeen iyo maalinba ku jalbeebtaan dadkii ka ag dhawaa Aw Daahir oo ahaa makatabad sooyaalka kaydisay.

Aniga oo wali sheekadii odayga ku mashquulsan madaxaygana ay ka guuxaan dhacdooyinkaa dhiigga dhaqaajinaya, xoolihiina raaca ayaa waxa dhacay arrin gudaha iisii gelisay su'aalihii aan iska wayddiinayay xaaladda aan ku sugnaa. Gabood falladii uu Aw Daahir ka sheekeeyay waxa ay igu ahaayeen maqal, markii ugu horreysay ee aan anigu goob joog u ahaado gabood falka uu gumaystuhu gaadhsiiyay dadkayga waxa ay igu reebtay cadho aan waligay iga bixin.

Xilliga ay dhacdadan gilgishay gayiga oo dhan waxa ii buuxsamay sanadkii sagaalaad, waxa aanan foodda la galay midkii tobnaad oo ahaa sanad saamayn weyn ku yeeshay noloshayda. Inta badan, dhul waynaha Soomaali Galbeed waxa hadheeyay cabsi iyo isu socod la'aan ka dhashay ciidamo Xabashi ah oo dadka iyo

duunyadaba aan u damqanannin, kuwaas oo wareega miyiga. Cabsida la qabay ma ahayn ciidamada xabashida keli ah ee waxa jirtay cabsi laga qabay miinooyinka oo carruur badani ku le'atay, kadib markii ciidammadda Dargigu ay miineeyeen goobaha muhiimka ah ee nolosha bulshada halbowlaha u ah, sida; jidadka, ceelasha biyaha, dhulka daaqsinka ah, dhul beereedyada iyo meelaha la midka ah.

Waa goor subax hore ah oo ay fallaadhaha qorraxdu diirinayaan dhedada ku gadaaman dhirta iyo doogga. Waxa is qabtay cida xoolaha, heesaha shimbiraha iyo sawaxanka dadka intooda badan ay kasii muuqato hurdadii xalay. Waa sanad barwaaqo ah oo xooluhu bowdka reerka ma dhaafaan, dhaankuna balli biyood duleedka jabada ku yaal ayaa lagasoo dhaamiyaa. Dareen lama qabo oo barbaartu waxa ay jabiyaan ciyaar dhaqameedka ay dhaantadu boqoradda u tahay, waxase la is wayddiinayaa Muxumed oo aan laba habeen iyo labadoodii maalmood Il la saarin jaan iyo cidhib meel uu dhigayna laga war haynin.

Muxumed waxa uu ahaa nin da' afartanaad ku jira, markaasna ku cusub guri uu yagleelay tacab iyo daal badan kadib.Guurkiisu ma ahayn mid sahlan oo noloshiisa halganka ahayd waxa ay u diidday in uu ku lado guri iyo garays haween. Sanado badan oo uu jabhad ahaa iyo agoonnimo uu ku soo karay waxa ay dhaxalsiiyeen in uu ahaado sabool aan lahayn wax hanti ah. Waayo ninka gabadhiisa u guurinaya agoon sabool ah?

Markii uu soo hanaqaaday waxa dhulka Ogaadeeniya lagu wareejiyay Xabashi, dabadeedna waxa uu ka mid noqday da'yar u kacday in ay dhulkooda ka soo dhacsadaan gumaystaha madow ee dhiigmiiradka ah. Ma uusan garanayn halka uu ka bilaabayo dagaal! Weligii ma uusan arkin hub, lama dhaqmin ciidan, mana yaqaan si looga hortago dawlad hubaysan oo waliba diyaar u ah in

ay awooddeeda u isticmaasho gumaadka rayidka, si ay u maquuniso kacdoonka shacabka u hanqal taagaya hirgelinta Soomaali-weyn oo ahayd markaa mabda'a soomaalidu inta badan u noolaayeen.Waxa uu in badan isha ku hayay dhaqdhaqaaqii dhallinyaradii soomaaliyeed ee S.Y.L iyo kuwo deegaanka uu ku noolyahay ka hanaqaaday, waxana hankiisa buuxisay midnimada Soomaali-weynoo dhan.

Muddo fikraddaasi ay ahayd aragti ka dhex guuxaysa, waxa uu go'aansaday in uu u baddalo ficil isaga oo u hayaamay in uu ku biiro dhaqdhaqaaq ciidan oo markaa curdin ahaa. Lug dheer ayuu ku gooyay dhul baaxaddiisu ay dhantahay 700km. Markiiuu goobtii gaadhayba waa la aqbalay dalabkiisii ciidannimo, waxa uuna xubin ka noqday guuto ka dagaal galaysay galbeedka dhul-weynaha Soomaali Galbeed.

Markii uu gaadhay xeryihii jabhadda,waxa uu ugu tegay jawi ka duwan midkii uu filayay.Halganku waa afka baarkiisa, dhaqanka yaal meeshana ma aha mid qofka u dhawaynaya xaqiijinta hadafka uu leeyahay. Waxa uu ka mid noqday kumannaan dhallinyaro ah oo buux dhaafiyay xeryaha ciidamada, kuwaas oo aan helin qof haga! Ma jiro qof u leexiyay awoodda da'yarta dhanka xabashida, saraakiisha halkaa joogtana waxa ay u arkayeen dhallinyaradan kuwo u baahan laylin badan, si ay u awoodaan in ay dalkooda xorreeyaan. Waa dhallinyaro oo arrimaha ma miisaamaan inta ay geed ka boodaan ayay taladana kaboodaan e. Waxuu damcay in uu goosto oo ku laabto meeshii uu ka yimid!

Markii laga war helay go'aankiisa, waxa lagu xukumay saddex bilood oo xadhig ah.Markiiuu dhammaystayna waxa uu galay dagaalladii, waxa uuna u wareegay xagga waqooyiga Soomaaliya. Waxa uu ka mid ahaa dadkii ka qayb qaatay dagaalkii taariikhda galay ee ku dhexmaray Soomaalida iyo xabashida aagga Tog

Wajaale sanadkii 1964tii, kaas oo ay xabashidu ku doonaysay in ay cagta ku mariso difaaca hore ee Soomaalida.

Saddex sano oo halgan ah kadib, waxa dhammaaday dagaalkii afar iyo lixdankii, jabhadihii waddaniga ahaana waxa ay u qaybsameen kuwo Soomaaliya gala oo qorta Xoogga Dalka Soomaaliyeed (X.D.S) oo markaa la unkayay, kuwo xeryo tababbar dib loogu celiyay iyo kuwo reerahoodii dib isaga laabtay oo hakiyay ama ka niyad jabay halganka.

Muxumed waxa uu kamid ahaa dhallinyaradii isaga tegay jawiga ciidannimo kuna noqday qoysaskoodii noloshii dabiiciga ahaydna halkii kasii watay.Dadka deegaanku waxa ay u arkayeen halyey naftiisa iyo wakhtigiisa u huray dalkiisa, shacabka agtiisana waxa uu ka ahaa halgamaa aysan ishiisu libiqsan, gaar ahaan markii ay soo gaadhay xabashidii uu wadhay banka Jigjiga iyo sida dhufaysyadooda ugu dhici jiray habeennadii dabka halganku ka baxayay dhammaan dhul waynaha Soomaali Galbeed, wararka Jabhadaha gobonima doonka ah iyo sheekooyinka jihaadkuna ay ahaayeen faallada keli ah ee guri walba laga hadal hayo.

Muxumed oo la nool xusuustii jabhadnimada waxa uu wali haystaa qorigiisii, naftiisana waxa uu u laylyaa dagaal kale oo Abasiiniya lagu qaado, kaas oo dadnimada Soomaalida soo celiya. Sidaa darteed, ma dhigo hubkiisa. Intaa waxa u dheer feejignaan,dhiifooni iyo miisaamidda xaaladaha, kala sifaynta wararka la keeno, si looqaato waxa meel marka ah buunshahana la isaga haadiyo. Dareenkaa ciidannimo iyo aqoontaa dheer ee uu u lahaa helidda xogta iyo kala shaandhaynteeda dugsi kuma uusan baranin, jaamacadna uma geline waxa uu ka bartay dugsiga waaya'aragnimada iyo nolosha baadiyaha oo ah macalin fahanka nolosha wax weyn kusoo biiriya.

Xabashidii ayaa bilowday in ay degaanka dib ugu soo laabato markii duufaantii afar iyo lixdankii istaagtay.Maalinwalba waxa lasoo sheegaa gabadh la kufsaday, wiil la dilay, geel la qaaday, adhi la dhacay, qabiillo la mooraduugay iyo halyey la laqmiyay. Hagardaamadaas waa uu u dulqaadan waayay Muxumed waxa uuna bilaabay in uu waddada ugalo kolanyada baabuurta ah ee u kala gooshaysa Godey iyo Diridhaba.

Maalin maalmaha kamid ah ayuu waxa uu rasaas ku asqeeyay gaadhi Jiib ah oo ay saarnaayeen ciidan Dargi ah oo lagasoo baddalay Qallaafe una socday saldhiggooda Jigjiga, halkaa waxa ku qudh baxay sarkaal gaashaanle dhexe ah iyo laba qof oo la socday oo aan lagaran in ay ahaayeen ciidan iyo inkale.

Dhacdadaas waxa ay dareen aarsi ah gelisay ciidamadii joogay aagga Shabeelle oo bilaabay in ay raadiyaan Muxumed. Intii ay ku guda jireen baadhista ayuu Muxumed mar kale isku dayay in uu dilo Xabashi baar khamri ku cabbaysa habeen Axad ah magaalada Dhagaxbuur oo uu geeyay xoolo iib ah.

Dhawr jeer ayay hadal hayntiisu soo laablaabatay, waxa aana ugu danbayn loo sameeyay ciidan soo qabta, nolol iyo geeri mid uun. Waxa uu ahaa halgamaa karti, dareen askari iyo danqasho waddan hoggaaminayaan, degtiisanaaan qoriga weligii ka dhigin.Waxauu diyaar u ahaa in dhibicda dhiiggiisa u danbaysa uu u shubo dalkiisa hooyo.

Oogta hore, subax Sabti ah, macallin Qur'aankiina uu dhallaanka ololka dabka ee baxaya Qur'aan ugu yeedhinayo ayay xabashidii soo weerartay qoysaskii la degganaa halgamaa Muxumed. Argagax iyo isku dhex yaac ka dib, gaaladii waxa ay la baxday Muxumed iyo xaaskiisii uu arooska ku ahaa Miski Macallin.

Laba maalmood markii la la'aa raq iyo ruux ayaa subaxii saddexaad maydkoodii laga helay meel jidka weyn ee halbowlaha u ah isu socodka dad weynaha iyo xoolahaba u jirta 300 oo mitir. Miski si xun ayaa loo kufsaday, waxaana laga jaray labada naas, labada dhegood iyo lugta bidix. Muxumedna waxa laga gooyay madaxa, si waxashinimo ahna looga bixiyay labada indhood iyo xiniinyaha. Waxa jidhkiisa lagu sawiray macatabka ay kirishtaanku xidhaan, taas oo macnaheedu yahay sarraynta kirishtaanka oo ah diin islaamka kula loollanta Bariga Afrika.

Maydadka Muxumed iyo Miski, inkaste oo saddex maalmood ay yaalleen bannaan, qabow, qorrax iyo roob, haddana isma baddalin! Ma qudhmine udug carfoon iyo karaamo ayaa ka muuqday, maaddaama naftooda ay u hibeeyeen dalkooda, diintooda iyo dadkooda.

Dhacdadaasi utun ayay ku reebtay deegaanka, waana laga gilgishay,inkaste oo aan Muxumed iyo afadiisa waxba loo qaban karin oo xaaladdu marayso “laba qaawan isma qaaddo”, haddana oohin,calaacal iyo calool xumo ayaa subaxaa daris la ahaa qoysaskii ay isla degganaayeen lammaanahaa u geeriyooday mabda' ay aaminsanaayeen. Aragtidii soomaalinimada ee ay dadka ugu baaqi jireen ayay la god galeen, halgankii loo dilayna waxa uu noqday mid si baaxad weyn uga hirgala deegaanka, mararka qaarna gaadhay xornimo iyo madax bannaani aan helin aqoonsi caalami ah.

Aragtida Soomaali-weyniyo midaynta dadka walaalaha ah ee cadowgu kala gooyay ayaa ahayd hadaf uu Muxumed in badan xambaarsanaa dadkiisana uu had iyo jeer u sheegi jiray. Bulshadii la noolayd halgamaagaa weyn ee masuuliyadda ummadda dusha u ritay, waxa ay noqdeen kuwo u adeega mabda'aa sare xabashidana ku noqday caqabad aan la dhaafi karin.

Muxumed waxa uu helay yoolkii uu raadinayay oo ah inuu shahiido isaga oo la dagaallamaya Xabashi una hiillinayana diinta iyo muqaddasaadka dalka.Dadkiideegaanka ku dhaqnaa waxa ay kala hadheen xusuus geesinimo iyo calool xumo sannado badan lagasii sheekayn jiray.

Halhayskiisu waxa uu ahaa; "Soomaali-weynwax ka soke nama deeqo!" Calanka midnimada ayuu sidan jiray muddo dheer, waxa uuna ahaa ninkii bulshada baray calanka buluugga ah ee xiddigta shan geesoodka ah dhexda kaga xardhantahay.

Falkaa argagaxa leh waxa uu sii badiyay reja beelkii laga qabay dalka, waxa uuna sare u qaaday rabitaankii dahsoonaa ee qoyskanaga ku jiray. In kasteoo inta badan qaraabada iyo dadkii ugu tunka roonaa qabiilka aan ka dhashay ay u qaxeen Soomaaliya haddana aabbahay oo ahaa dadka aadka u jecel joogista dhulka uu ku dhashay hal lug ayuu ku taagnaa waxa uuna ka dhursugayay is baddal ku dhaca deegaanka. Markii wax is baddal ahi dhici waayay xaaladdiina ay sii xumaatay waxa lagama maarmaan noqotay in aan isku shubno xeryihii qaxoontiga.

Waxa la maray jid dheer oo nacab ah. Waxa la sii socday habeenno badan oo cabsi iyo baahi ay wehel noo ahaayeen. Ma jirto murugo ka xun in aad ka tagto dhulkii Eebbe kugu beeray adiga oo jecel, waxaase kasii xun in uu kaa qixiyo qof aan dhaqan iyo dhaxal midna ku lahayn dhul aad u dheerna kasoo doolay.

Safarkii qaxoontigu waxa uu ahaa mid noloshayda laba cutub oo keli ahu kala qaybiyay; noloshii ka horeysay xeradii qaxoontiga iyo middii ka danbaysay.

Waa laba nolol oo aad u kala duwan mid walbana ay saamaynteeda ku yeelatay shakhsiyaddayda iyo aragtida aan nolosha ka aaminsanahay. Haddii aan markii hore ahaa wiil yar

oo gosha hooyadii iyo gogoshii uu ku dhashay jooga noloshiisana u madax bannaan, markan danbe waxa aan noqday ruux noloshiisa la kantaroolo. Hay'ado, dawlado iyo bulshooyin kala duwan ayaa qaaday masuuliyadda noloshayda laga soo jaangoynayay Jineefa, New York iyo meelo ka shisheeya oo uusan awoowgay weligii maqlin.Haddaba aan wada akhrino cutubka ugu xiisaha badan noloshayda.

# QAXOONTI!

Qaxoonti! Waa eray aan u roonayn dhegaha oo salka ku haya takoorid ku salaysan deegaan. Waa magac gurracan oo aadanaha ka fogaynasa xuquuqdii aas-aasiga ahayd ee uu lahaa.Qaxoontigu waa qofka aan lahayn deegaan, xaq shaqo, xaq safar, xaq siyaasadeed iyo dawlad daryeesha dushana u ridata xallinta dhibaatooyinkiisa midna. Waa ruux ka arradan inta badan karaamadii uu Eebbe ku mannaystay. Qaxoontiga waxa loo diyaariyaa sidii uu u noqon lahaa shakhsi aan dhammaystirnayn awood uu wax ku qabsadana lahayn kadib markii laga dilay hankiiuu lahaa gurigiisana lagu siiyay raashin tayadiisu kun jeer ka hoosayso midka uu beeran karo haddii xorriyad buuxda la siiyo. Gunta hadalku waa qof aan lahayn calaamad lagu garto, sharafna aan ku noolayn.

Markii aan soo gaadhnay xerada qaxoontiga bilowgii 1978dii waxa ay ahayd meel bannaan oo aan geed iyo gabbaad midna lahayn. Daleeshii cidlada ahayd waxa si habqan ah u dagay dad maati ah, teendhooyinka, sawaxanka dadka, oohinta dhallaanka iyo dhafoor-xumida dadweynaha wax aad moodaysay in la taaganyahay meel la'isku ciqaabayo, balse aysan ahayn meel laga raadinayo nabadgelyo.

Teendho aan celinaynin qorrax iyo qabow midna ayaan ka dhisannay koonaha shishe ee xerada. Hooyaday waxa ay lahayd falsafad iyada u gaar ah; waxa ay ka taxadari jirtay in dadka kale alaabtoodu noosoo doosho.Waxaay aaminsanayd in is dhex degga dadka iyo guryaha isu dhow laga qaado jiro. Waxa ay dhihi jirtay “cidhiidhigu waa cadaab, maacuunta dadka lagasoo

ergistana xanuun ayaa laga qaadaa." Magaranayo meesha ay ka keentay aragtidaa waxaanse u badinayaa baadiyihii ay ku dhalatay, ku dhaqatay iyo ka fogaanshaha bulshooyin kala duwan in ay saamayn ku lahaayeen go'aamadeeda.

Marnaba naftu raalli kuma ahayn in ay halkaa degto, nololna ku qaadato, waxaanse nafta ku maaweelinjirnay in halkani tahay goob aan dhaxsin u degnay inta Soomaali Galbeed ka xorroobayso. Is ma aan lahayn bannaankaa bacadka badan ayaa noqon doona meel marka aad ka tagto aad u hiloobi doonto, saaxiibbadii aad ku yaalatayna noloshaada ay u noqon doonaan lafdhabar dal iyo dibadba.

Maalmaha qaxoontigu waa isu egyihiin dhacdooyin- kiisuna xiiso malaha! Sheekada ugu weyn ee taalaa waa sida nolosha loo sii wadi lahaa iyo xilliga uu dalkii xorroobayo, intaa waxa dheer dadaalkii ay qoysasku bixin jireen si aysan da'a yartu u hilmaamin dhulkii ay ka soo jeedeen. Xorriyaddu waa ay noo muuqatay.Waxaaan ku kala aragti duwanayn sanadka oo qudh ah, dadka qaybtood waxa ay qabeen in sanad ama labo keli ah naga xigto madax-bannaanideena, qaar kale na waxa ay intaa ku darayeen sannado yar.Qofkaugu fog waxa uu aaminsanaa in aan la gaadhi doonin badhtamaha siddeetamaadka. Waa rabitaan dad daalan oo aan cilmi iyo miisaamidda siyaasadda midna ku dhisnayn.

Bulshadu waxa ay qiimaynaysay wixii u muuqday iyo itaaldarradii amxaaradii iska caabin wayday Soomaalida curdinka ah.Waxa dhegahooda kasii shanqadhayay heesihii guusha, gabayadii dabbaal-degga iyo farxaddii wada gaadhay guri iyo geed walba. Maskaxdooda waxa ka maqnaa saamaynta dagaalku ku yeeshay afrikada madow, xidhiidhka dawladaha iyo xeerka qaramada midoobay uga yaalla dagaalka, go'aamada golayaasha

lagu gorfeeyo siyaasadda iyo hoggaanka ee marna aan Soomaalida u oggolaanaynin in ay guulaystaan, midoobaan, asaagoodna la jaanqaadaan.

Sida caadada xeradu tahay nolosha qoyskayga iyo malaayiin qoys oo kale waxa ay ku tiirsanayd ha'yadaha caalamiga ah oo isu xil qaamay taakulaynta dadkan maatida ah ee kasoo cararay cadow nacab ah oo dhulkooda xoog ku haysta muddo dheer. Waxa arrin isweyddiin mudan ah laba wajiilaynta reer galbeedka, sidee ayay hadda ii daryeelayaan oo hablahooda iyo wiilashooda iigu soo dirayaan si ay ii quudiyaan iyaga oo dhibka i haysta ii geystay? Iyaga ayaa dalkayga siiyaya dad aan mudnayn.Iyagaayaa dalkayga u kala qaybiyay shan qaybood.Iyaga ayaa dagaalka ku jabiyay Soomaalida oo garabkooda ka baxayballan been ahna u sheegay!

Markii aan kasoo qaxnay dhulkii Ogaadeeniya waxa aan maqlayay in aan u socono qayb kamid ah dhulkeena hooyo oo aan ka helayno nabad,caddaalad, sinaan aan ka weynay meesha aan ku noolahay "waxa aan aadaynaa walaalaheen oo aan isku mid nahay, waxbana noo dhexaynin, kuwaas oo dhiig iyo maalba noo huray" ayaan ka maqlay afka aabbahay oo u sheekaynaya ina adeerkii Xarbi Salaad. Xarbi, oo xog ogaal u ahaa qaabka wax u socdo ayaa ugu jawaab celiyay "waxa ay halis galiyeen dawladnimadooda.Waxaay ka doorteen wax walba in aan innagu xor ahaano lana midowno Soomaalida kale, dadkeena ku dhaqan Jamhuuridda Soomaaliya waxa ay awood weyn geliyeen in aan mar kale dib u hanano riyadeenii gaamurtay."

Habraha gaboobay, guxushaaga cirraystay iyo gabanka yari iskumid ayay ka ahaayeen aaminidda dhabta ah ee qadiyadda soomalidu muddada dheer kula dagaalmaysay Abasiiniya iyo gumaytihii reer Yurub.Waxa si wanaagsan uga dhaadhacsan

mabda'ii qaddiimka ahaa ee dagaallada geeska Afrika intooda badan gundhigga u ahaa.

Markii aan soo galnay xerooyinka qaxoontiga noloshayadu waxa ay 100% ku tiirsanayd deeqaha ay keenaan haayadahii ka hawl gali jiray xerooyinkii noo baddalay dhulkii aan ku dhalanay.DawladdaSoomaalida oo nuglayd dhaqaale ahaan iyo maamul ahaan, ma aysan awoodin inay daboosho baahiyaha dhawrkaa milyan ee qof, ama sida ay aragtiyada qaar qabaan ma aysan rabin in ay iyadu isku hawsho. Waxa dhici kara in ay xeryahaa ahaayeen meelo dawladda Soomaaliya soo gelin jiray malaayiin Doollar oo dilaal ah.

Dad badan oo ahaa shacabkii ku noolaa deegaanadii la dejiyay qaxoontiga ayaa ka helay shaqo.Qaarkale waxa ay heleen nolol ka fiican middoodii hore, kadib markii ay ku biireen qaxoontigii, waagii danbana gobollada la naas nuujinayo ayaa laga furi jiray xeryaha, maadaama intaas oo faa'iido ah ay ku qabeen dadkii la deganaa qaxoontiga.

Qodobbadaa aan kor kusoo xusnay waxa dheeraa in ay dawladdu xeryahaa ka heshay dhallinyaro intooda badan loo qaadan jiray ciidanka si loogu qab jabiyo mucaaradka dawladda, oo sanad walba sii xoogaysanayey gaar ahaan waqooyiga iyo gobollada dhexe ee dalka.Arrintanwaxa ay ahayd waxa ugu badan ee odayaashii ku noolaa xeryaha ay ka cabsi qabeen iskana waraysan jireen hadh iyo habeen.

Hay'adihii ree glabeedka u badnaa ee ka shaqaynayey xeryihii qaxoontiga inkaste oo ay keeni jireen deeq raashin iyo daryeel daawo haddana waxa ay ku hoos wateen danahooda gaarka ah.Waxyaabihii dahsoonaa ee ay ku dhex qarinayeen jaadadka raashinka ah ee kala duwan waxa kow ka ahaa faafinta

masiixiyadda iyo dhantaalidda dhaqanka suubban ee dadkaasu leeyahay.

Xeryihii qaxoontiga waxa ay fureen wacyi iyo waa cusub. Waxa is dhex galay si hor lehna isu bartay soomaalidii degganayd Jamhuuriyadda iyo soomalidii kasoo qaxday Ogaadeeniya.Meelahaqaar waxa dhashay xasaasiyad ah in dadkan dhulka lagu beerayo si loo baddalo lahaanshaha deegaanka, taas oo aan ahayn mid sax ah ama xaqiiqo ku qotonta, sababtu tahay qof magaciisu yahay qaxoonti xerana ku oodan waxba maqaato waxbana kuma laha deegaanka.Haddii dadkaa si xor ah loo dejin lahaa magaalooyinkaSoomaalida waa laga hadli karay aragtiyaha qaar, laakiin maanta oo dadkan ay mooro ku oodanyihiin iyaga ayaa lumiyay xaq iyo xuquuq ay lahaayeen.

Bilowgii dejinta qaxoontiga ee gudaha jamhuuriyadda Soomaalida dadka deeganku wax xasaasiyad ah kama qabin, waxa kor u kacsanaa aragtida soomaalinimada, dadkuna waxa ay u badnaayeen xoolo dhaqto, beeralay.Dadka qaxoontiga ahna ma wadannin xoolo si la isugu maan dhaafo baad iyo biyo, mana ahayn dad xorriyad dhaqdhaqaaq haysta si ay dadka ugu cidhiidhyaan beeraha, hasayeeshee waxa jirtay aragtiyo badan oo dadkii ay qaateen ka dib noloshii adkayd ee qaxoontiga oo runtii toosh weyn ku ifisay soomaalinimada iyo tiirasha siyaasadeed ee ay dawladdii kacaanku ku dhisnayd.

Marka aad eegto dhaqankii yaalay qaxoontiyada wax aad is wayddiinaysaa su'aalo ay ka mid yihiin maxay ahaayeen aragtiyada loo cuskaday in goobihii bannaanaa ee aan geed iyo gabbaad toona lahayn la dejiyo dad Soomaali ah ka dibna loo bixiyo qaxoonti? Maxaa dadkii soo qaxay loo dejin waayay dhulka beeraha iyo wax soosaarka leh? Maxaase loo ooday oo loo dhihi

waayey dadkiina dhex gala noloshiinana dabbarta maadaama aad joogtaan dhulkiinii hooyo?

Runtii arrintaa aan sheegnay waa mid uu ku dahaadhanyahay mugdi badan, shakina ku furi karta aragtiyo badan oo ay dawladdii kacaanku dadka u sheegi jirtay 21sano. Hasayeeshee nin oday ah oo saamayn xagga maamulka ah ku lahaa dawladdii kacaanka oo aan la sheekaystay waxa uu iisheegay in; “siyaasadda aan qaadanay ay ahayd in dadkaas loo sameeyo xerooyin gaar ah, dadkana laga sooco, si aan u xaqiijinno laba yool: waa ka koowaade dadkan waxa ay soomareen hoog iyo halaag, waxa ay lasoo kulmeen niyad jab, dhimasho, dhaawac, burbur iyo barakac, waxa ay u baahnaayeen in meel gaar ah la dejiyo dibna loogu sameeyo soo celinta naftooda iyo kalsoonidooda si ay uga gudbaan dhaawacii soo gaadhay una noqdaan dad ka bogsaday uur kutaaladii dagaalka, kadibna la qabsada nolosha caadiga ah.

Ta labaadna waxa ay tahay: dadkan waxa ay ka yimaadeen dhul muhiim ah oo taariikh iyo dhaqaalaba leh, ummadda soomaliyeedna lafdhabar u ah, dawladdii Soomaalidana dagaalkii wa ay ku fashilantay oo waxa soo gaadhay dhabar jab aan u suura galinayn dhawaanahan in ay dagaal qaaddo, sidaa darteed dadka lafdhabrta u ah halganka aan damacsannahay waa dadka u dhashay deegaanka.Haddabahaddii lagusii dhex daayo si xor ah dalka waxa ay ku milmayaan magaalooyinka la dejiyo kadibna waxa ay iloobayaan dalkoodii asalka ahaa, halkaana waxa ku dhimanaya hankii aan lahayn, qaddiyadduna waa ay lumaysaa.

Waxad ogaataa Guuroow xabashidu lagasoo bilaabo boqorkoodii koowaad ee Soomaalida is qabteen illaa maanta waxa ay ku andacoonayaan in dalkuna Itoobiya yahay dadka deganna ay Soomaali xadka kasoo tallaabay yihiin.Haddii la dhaho dadkii soo qaxay dhexgala Soomaalida oo dega

Soomaaliya, sow wixii ay Abasiiniya sheegeysay rumoobi maayo, oo soo uma muuqanaysaan dad markii hore khalad u degganaa dhul dad kale leeyahay?"

Arrinta uu ninkaasi iisheegay waa arrin macquul ah oo caqliga geli karta, waxase jirta sida aan qabo qaabab kale oo arintaa loo maarayn karay taas oo aan dhaawacaynin soomaalinimada. Nolosha xeryaha iyo argtida gurracan ee marar badan dadka iyo dawladduba ay kula kacayeen Soomaali Galbeed waxa ay inbadan oo kamid ah dhaxalsiisay in ay dibadaha kasii aadaan oo qaxoontinimadii sii wataan, halka qaar kale na ay miciin bideen in ay dib ugu laabtaan gumaystihii Itoobiya.

Qoyskanagu waxa uu ku jiray dadkii aan marnaba u hanqal taagin safar dibad iyo deganaanshaha qaxoontigan maalinba maalinta ka dambeysa sii xumaanaya. Qaxoontigu waxa uu la socday awoodda Soomaalida iyo mabaadi'deeda guud, mar kaste oo ay soomaalinimadu hoos usii dhacdo musuqmaasuqa, eexda iyo u dhawaanshaha cadowgu ay bataan waxaa sare u kacayay dhibaatada haysata dadkii moorooyinkii bacaadka badnaa ku oodnaa.

Inkasta oo aan yaraa wacyigayguna markaa curdin ahaa aragti siyaasadeed ama qaab fikir gaar ahna aan wali yeelanin, haddana waxa aan si wacan u garanayaa xaaladda dalka iyo dadku marayeen, iyo waliba noloshii qaxoontiga ee aan ku soo koray bilowgii noloshayda.Sidoo kale waxa wali maankayga ku keydsan dhacdooyinkii foosha xumaa ee ay Abasiiniya kula kacday birmagaydii aan helin awood difaacda.

Dagaalladii waxa aan kasoo qaaday tiiraanyo, naxdin, iyo dareen masuuliyad iga weynaysay da'deyda, muddana igu qasabtay in aan yeelanin saaxiib dhow. Wakhtigaygawaxa aan ku qaadan jiray

aamusnaan fikir iyo dhegaysi. Ma jeclayn inaan hadlo, carrabkayga waxa xidhay wixii dhiig iyo xubna kala go'ay daadsanaa inta u dhexaysa Labi Dheer iyo Liq-liqato.

Dhacda kaste oo naxdin lahayd oo halgankii nagasoo gaadhay waan illoobay, laakiin waxa aan illoobi waayay falkii dhacay ammin duhur ah oo ciidamada Abasiiniya ay soo galeen goobtii aan degganayn. Waxa ay kasoo baxeen dhanka bari oo ay nagaga beegnayd buur weyn oo dadku u yaqaanaan Gudban.Buurtuwaxa ay ku gudbantahay qorraxda xilliga ay soo baxayso, waxa kale oo si hoose ay dadku u sheegaan in ay kaga gudbantahay sharka iyo wax walba oo xumaan ah.

Xabashidii soo gashay guryaha iyo xeryaha xoolaha nabadda ku waabarisanayay waxa ay bilowday xabbad aan aabbayeel lahayn.Meeshuwaa baadiye aan goobo caafimaad ka ag dhawayn.Waaduhur milicda habar adhi dhulka dhimbiilo ku garaacayso. Waaxilli colaadeed oo raggu inna ay guryohoodii ka baadeen, kuwa joogaana aysan kasoo bixin aqalladooda. Xabbaddii ayaa afarta jiho is qabsatay, oohinta dhallaanka ku le'anaya qoryaha babanka ah, cida xoolaha ay rasaastu leeftay, taaha odayaasha naftu kusii daba yartahay iyo sawaxanka haweenka anfariiray ayaa jawiga kusii kordhiyay cabsi iyo walaahoow. Maydka ayaa meel walba daadsan, hilib gogo'ay, madax ka finiinay jidhkiisii, hablo qalanjo ah oo xabashidu ay wasakheeyeen, fiigid iyo kala carar dad iyo duunyo ayaa ka bilowday goobtii.

Ma illaawo wixii maalinkaa dhacay illaa hadda hortayda ayay ka muuqdaan, waxaadna mooddaa in uu shalay dhacay.Waxa aan kasoo noqday dugsigii qur'aanka oo ku yaalay duleedka reerka.Waxaaan looxayga kusoo qoray subaxaa shan aayadood oo ka bilaabma aayadda 12aad ee suurat Al-Qasas.Macallinkuaad ayuu

u xanaqsanaa, waxa aanse markii dambe ogaaday in uu cabsanayay maskaxdana ku hayay gaaska ciidanka ah ee nagu gaydhan doona.

Tiro aan badnayn oo rag ah ayaa haysta qoryo ay geela ku raacaan ama ay qabiilada kale isaga celiyaan, raganimo iyo calool adayg Soomaali ayay u yihiin oo waa ay hayaan, laakin tababar ciidan iyo tab qori ridid midna ma laha, walow ay arrintaasi jirto haddana raggii tirada yaraa ee dagaalka kala hortagay cadowga waxa ay muujiyeen dhabar adayg iyo geesinimo Soomaalidu caan ku tahay dhayalna kuma aysan jabin, xabashidiina kuma ay san guulaysan in ay caqabad la'aan dadka laysee waxa loo gingimay rasaas maydkoodana waxa la wadhay dariiqyada iyo xeryaha xoolaha.

Cabdi Gurey oo ahaa nin aad u shiish badan kana soo jeeday qabiilada ay soomaalidu dulmiga ku faquuqaan ayaa subaxaa wacdaro ka dhigay goobta dagaalka. Cabdi inta la arkayay kow iyo toban nin oo Xabashi ah ayuu dilay, raggii Soomaalida oo dhanna isaga ayaa hagayay maganna u ahaayeen.Waxa yaab ah in marka nabadgalyadu jirto Cabdi aan waxba la wayddiinin marar bandanna golaha raggu ku haasaawo uu ka maqnaado isaga oo diidan dhegihiisa xumaanta maqlaya,marka ay colaadi jirtana uu yahay hormuud lagu daydo dagaalkana hoggaamiya!

Inkaste oo dadka aan aqoon darrada u heyb soocno ay yihiin dadka bulshooyinka kale ugu wanaagsan, ixtiraam iyo bogaadin joogta ahna la siiyo maadaama ay yihiin kuwo wax soo saar leh, kabaha tola, waramada sameeya, seefaha hagaajiya, toorida tuma, weelasha nolosheenu ku tiirsantahayna noo qora, haddana waxa aan innagu ugu abaal gudnay takoorid ka baxsan tilmaamaha islaamka, dhaqanka Soomaalida iyo xeerka binii aadamka.

Maalintaa ay cabsidu xadka dhaaftay dumarku waa ay ililaasayeen mashxaradna waa ay ka muuqatay! Mashxaraddaasi ma ahayn farxad balse waxa ay ahayd dhiiri galin, garab istaag, iyo caraabin sagaalkaa naftood hure ee ubadka iyo dumarka difaacaya loogu tala galay. Haweenka soomaaliduna xilliga cabsida iyo halganka ka bir-labsan oo ka adkaysi badan ragga.

Waxa aan gallay xaalad cidhiidhi ah oo aad u dag qof kastana naftiisa ayuu la baxsaday. Annaga oo ku gabbanayna aqal gadaashii ayaa waxa orod nagu dhaaftay gabadh sidata ilma yar oo ooyaya, hooyaday ayaa ku dhawaaqday: "kaalay walaal halkan soo fadhiiso." Haseahaatee miyirka gabdha ma joogin, meel ay u ordaysana ma garnayso, askari macatab qoorta ugu xidhan yahay ayaa gabadhi isku duubay ilmihiina markiiba ka fara maroojiyay oo intii uu dhulka ku tuuray baas xabbad ah ku jeexay! Muxuu galabsaday sabigaa yar? Maxaa loo dilayaa naftaa aan waxba bi'inin? Yaa xaq u siiyay in askarigan ka imaaday Goojaam iyo Goondhar uu gurigayga igu dilo? Waa la yaab in qof hoygiisii loogu imaaday naf iyo maalba la dhaafiyo.

Gabadhii oo muraaro dilaacsan ayaa dhulka isku garaacday baroorna afka furatay, afarta jiho ayay eegtay iyada oo sugaysa miciin iyo badbaadiye aan imanaynin. Walaalawoodleh ma joogo, nin difaacaa ka dheer, ciidan dadkeeda ah oo dabar jara Abasiiniyana waa ay wayday.Waxaay ku habar wacatay wax walba oo ay garanaysay.Maalinkaa awood maan lahayn aan gabadhaa ku badbaadiyo uguna hiiliyo.Hooyadayoo gacanta i haysay afkana gacanta ii saartay waxa ay isku dayday in ay indhayga daboosho si aan fool xumadaas u arkin, laakiin waa su'aale yaa damiirkayga dabooli kara, ama ololka iyo ciilka aan maalinkaa ka qaaday damin kara?

Gabadhii oo aan filayo in ay xis ahaan joogin ayuu gaalkii xambaartay.Waa nijaas dusha ku sita daahirnimo qurux iyo dhawrsanaan gobonimo ku dheehantahay.Markaasoo kale waa marka qof aan mudnayn nolol uu dilayo qof mudnaa in uu ugu noolaado dalkiisa si sharaf leh. Waxa uu saartay tunka waxa uuna kula dhaadhacay tog buurta Gudban ka shisheeyay, muddo yarna xabado iyo dhawaaq ayaan maqalnay. In uu kufsaday oo haddana dilay ayaan maqalay waa danbe oo aan xerada qaxoontiga walaalkeed isku aragnay.

Dhacdadaas iyo kuwo kale oo lamid ah ayaa i bisleeyay igana dhigay aniga oo kow iyo toban jir ah mid ka weyn soddon sano xagga garaadka iyo dareenka dhacdooyinka igu xeeran. Sida aan markaa islahaa waxa aan ahaa wiil gaar u go'an, kana fikir sareeya da'diisa.Waxaan lahaa gorfeyn toosan, hankayguna ma ahayn waxa ay carruurtu ku hamiyaan. Waxaaan iswayddiin jiray su'aalo badan oo aan jawaab u waayay. Muddoyar waxa aan ku diyaariyay naftayda aniga oo isu xilqaamay in aan ahay nin masuul ah.

Sanad dugsiyeedkii 1981\82[dii] aya la'igeeyay iskuul aan aad uga fogeyn guriga aan degannahay.Waasubax Isniin ah oo dhulku leeyahay qoyaan xalay roobkii da'ay awgii.Roobkaasi ma ahayn mid la sugayay sidaas darteed waxa aan maqlayey aniga oo walaashay Sowdo ay ii diyaarinayso dugsigii aan subaxdaa ku biirayay,hooyaday oo ku sheekeynaysa in roobka da'ay uu yahay naxariis uu Eebbe la doonay masaakiintan ay isu celiyeen suudiga qorraxda iyo silica xerada.

Markii aan guriga ka baxayay waxa aan sitay dhowr buug iyo qalin iyo niyad adag oo aan ku doonayo in aan aqoontayda ku kordhiyo. Waxa aan xambaarsanaa hamuunyada aqoonta go'aankayguna waxa uu ahaa mid adag oo aan is baddalaynin. Dhabayaan u aaminsanaa in waxbarashadu ay tahay waxa keli ah

ee aan dalkayga ku xorrayn karo kagana bixi karo qaxoontinimada, soomaalina aan ku midayn karo. Sidoo kale waxa aan aaminsanaa in aqoontu berri ay ka jawaabi doonto su'aalo badan oo aan naftayda waydiiyo maanta.Waxaaan ahaa dhibbane raadinaya naftiisa, dalkiisa,iyo xididka dhibaatada haysata. Waa arrin xanuun kulul qofka haddii ay ku dhacaan dhibaatooyinka haybta iyo ogaanshaha qofka uu yahay.

Maaddaama aabbahay iyo abtigayba ay guriga igu soo bareen diin iyo maaddi u badan xisaabta iyo qoridda farta Soomaaliga oo sanadahaas cusbayd soomaliduna xiisaynaysay, iskoolku iguma keenin wax caqabad ah kamana filanayn in aan la qabsan waayi doono.Sidii uu aabbahay filayay waxa la'igeeyay fasalka 4[aad]. Subixii aan fasalka fadhiistay macallin Gamadiid ayaa xiisaddii koowaad dhigayay.Macallinkawaxa ka buuxda xamaasad, dareen masuuliyad iyo daacadnimo uu dareemi karo qof kasta oo arka wejigiisa maarran iyo jidhka muuqaalka soomaalinimadu ku dhammaystiran yahay.

Waxa iskuulka ii dhigayay toddobo macalin, shan rag ah iyo laba dumar ah.Ma jirin hal macallin oo noloshayda saamayn ku yeeshay ama aragtidayda wax ka baddalay marka laga reebo Gamadiid oo ahaa halka bare ee kasoo wada baxay labada masuuliyaddood ee baridda iyo barbaarinta, intooda kale waxa ay gudanayeen waajibaadkooda iyaga oo ilaashanaya musharaadka ay qaataan dhammaadka bil walba.Kama muuqanin masuuliyad barbarian, waxa ayse ahaayeen barayaal ka adag shaqadooda. Macallin Gamadiid ka sokoow in uu jeclaa shaqadiisa, macalinnimadana uu u dhashay oo ay dhiiggiisa ku beernayd haddana waxa uu lahaa dareen edeb iyo bini'aadannimo leh oo dadka uu la dhaqmo jeclaysiiya.

Intii aan dugsigii qaxoontiga dhiganayay waxa aan aad u jeclaa maadooyinka taariikhda,juquraafiga,diinta iyo suugaanta Soomaalida oo ahaa maadooyin ii siyaadiya fikir iguna furaysu'aalo. Daareenka shacabkayga ayaan la noolaa.Sooyaalka soomaaliduna waxa uu ii ahaa muraayad aan ku dhugto wixii i dhaafay aanan ka dhowro waxa soo socda, sababtu tahay qof aan tagtada fahmin timaaddada ma garto. Waxa aan la tiiraanyaysnaa dhibka ay Imbiryaaliyadda caalamiga ahi u gaysatay dadkayga.Waxaaan is wayddiin jiray: "goorma ayay caddaaladda Eebbe weyne iman doontaa, nasrigiisuna ku soo degayaa maatidan dayacan?

Waxa aan ahaa wiil yar oo waayuhu bisleen dadkiisana jecel. Kuma aan fiicnayn ciyaaraha dhalinyaradu ay xiiseeyaane,waxa aan isu xil-qaamay in aan ahay hoggaamiye dalkiisii maqan yahay wacyigelinta shacabkiisuna tahay masuuliyad isaga dusha ka saaran sidaa darteed markii aan fasalka 11[aad] ku jiray waxa aan ahaa macallin maadada taariikhda ka dhiga iskuul gaar ah oo aan ugu tala galnay in aan dadka waawayn iyo kuwa nala da'da ah ee aan waxbarasho helin ku barno akhrinta, qoraalka iyo weliba sooyaalkeena mugga weyn ee in badan oo innaga mid ah ka dahsoon.

Waxa aan samaynay dhallinyaro isku xidhan, hankooduna yahay in ay samata bixiyaan dadkooda.Waxaaan ku fikirnay maadaama itaal aannaan lahayn in aan dadkeena ku biirino waxa aan awoodno oo ah aqoon, sidaa darteed waxa aan furnay iskuul aan ugu magac darnay "Rejo".Waxauu dib u soo celinayaa kalsoonida dadka. Waxauu ifinayaa mustaqbalka wanaagsan ee aan la damacsannahay dhammaan gayiga Soomaaliyeed, waxa uu abuurayaa rejo ah in dhibkii nasoo maray uu dhammaanayo.

Waxa halhays noo ah in loo baxayo nabad, barwaaqo iyo dib u xorraynta dhulkanagii ay xabashidu naga soo barakicisay.

Aragtiyihii aan xamaasadda weyn u qabnay dadkana bari jirnay, ku guubaabin jirnay uguna yeedhi jirnay waxa ugu muhiimsanayd "Soomaali-weyn" oo aniga iyo dhallinyaradii dugsiga Rejo ila dhigi jirtyaba noo ahayd mabda'a koowaad ee aan aaminsannahay, abuurista wacyi wadareed bulshada kulmiya ayaan ka dhigannay yool badbaadin kara bulshadeena abuurina kara jawi dadku ay ku raadsan karaan xaqooda. Waxa arrintaa nagusii dhiirri galiyay annaga oo aragnay dhaqdhaqaaqyo badan oo iska soo horjeeda mid walbana uu isku dayayo in uu dhaqo maskaxda da'a yarta kadibna uu ku shubto waxa uu aaminsanyahay ha ahaado deegaan, qabiil, iyo in kaba qaad loo noqdo cadowga ummadda.

Arrintaa waan ka dhiidhinay, waxaanan abuurnay wacyi ay in badan oo dhallinyaradii ah ku diideen wixii ka socday qaxoontiga iyo dhammaan deegaannada Soomaalida. Jidka aan ku soconaa, wuu noo caddaa.Maahayn mid mugdi nagaga jiro.Waxaan beegsanaynay xiddigaha hankanagana kor ayaan u qaadnay, waxaana baadi goob u galnay Soomaali-weyniyo in aan dadka barno waxa ay tahay.

## ARAGTIDA "SOOMAALI-WAYN"

Casharkii u horreeyay ee aan ku bartay qaxoontigii Soomaaliyawaxa uu ahaa in umadda soomaaliyeed ee lakala gooyay cadowguna qaybsaday ay yihiin hal dal, hal dad, hal dhaqan oo kala baaday qasabna ay tahay in maalin uun dib loo helo dadkayga oo midaysan iyo dalkayga oo mid ah. Sidoo kale waxa aan ogaaday in ay jirto bulsho kale oo Soomaali ah oo sidayada oo kale iyaga oo aan raalli ka ahayn la raaciyay dawlado shisheeye.

Markii uu cadowgu kala qaybinayay Soomaalida waxa ay ahaayeen beelo walaal ah, darisna ku ahaa degelladooda ay xilliba meel uga guuri jireen iyaga oo raacaya roobka iyo rabitaanka qofka soomaaliga ah ee hayaanku asalka u yahay. Waxa ay ahaayeen ood iyo isir wadaagga dhulka, afka, dhaqanka, dhiigga ka midaysan. Xagga siyaasadda oo ah meesha aan waligeenba ka liidanay ma jirin fikir siyaasadeed iyo aragti dawlad oo ay heshiis ku ahaayeen ama ay isku ogaayeen ama ay isku diidanaayeen. La yaabna ma la hayn arrintaas oo wacyiga oo aad u yaraa iyo qabaa'illada oo mid kaste meesha uu deganyahay u yaqaanay in dalkiisu yahay ayaa sabab u ahaa.

Sidaa oo ay tahay haddana - inkaste oo aan qabiillo dhaqan iyo isir wadaag ah ahayn waligeen, mararka qaarna gacani na kala gaadhi jirtay, ma jiirn wax ka sarreeyay Soomaali ama ka hooseeyay oo dadkeena kala xadayn jiray. Waxaaan isku dagaalno waxa uu ahaa baad, biyo, geel, gabdho, gammaan iyo guunyo inta badan xalkeedu kusoo dhammaan jiray xeer Soomaali dhib kasta loola noqdo oo xaliya.

Markii aan bartay sida loo akhriyo Af-Soomaaliga waxa aan ku dadaalay in aan raadiyo wax walba oo qoran oo ka sheekaynaya sooyaalka Soomaalida iyo Soomaali-wayn.Markiiaan yeeshay wacyina, waxa aan ahaa dadka faafiya aragtidaa xalaasha ah ee gobonimada, midnimada, walaalnimada kulmisatay. Ma ogi wax ka wanaagsan oo mabda' ahaan loo aamini lahaa ama bulshadeena midayn kara, haddii aan Soomaali-weyn ka tanaasulno, waxa sii kala tegaya inta yar ee hadda midaysan mar dhowna dalkeenu waxa uu u kala go'i doonaa boqollaal magaalo oo yaryar mid walbana dal gooni ah isu haysata.

Galab aniga oo fadhiya banaanka dugsigii aan dadka ku wacyi gelin jirnay ayaa wax aaan gacanta la helay wargeys dalka ku cusbaa oo si qoto dheer u lafa guray Soomaali-weyniyo dagaalka lagu hayo bulshada soomaaliyeed meel walba oo ay joogto. Qoraagii maqaalkaa ku fara yaraystay waxa uu danqiyay booga badan oo aan lahaa,waxa uuna ii gadhqaaday dhankii aan rabay illaa aan dhaafay dhibaatdii qaxoontiga gudahana u galay barwaaqada, karaamada iyo awoodda ay leedahay Soomaali oo mid ah.

Qoraalkii wargeyskaa oo dheeraa waxa uu igu dhaliyay in aan xog badan ka raadiyo makatabad aad u kooban oo uu iskuulku lahaa.Waanogaa in cilmiga yaalla xerada qaxoontiga uu aad u yaryahay marnabana uusan dabooli karin baahiyahayga aqooneed ee aan xadka lahayn. Nasiib darro sidii ayay noqotay buugtii halkaa tiillayna badankoodu kama aysan jawaabi karin doodda aan wato.Buugta taalla maktabadda intooda badan waxa ay ka sheekeynayeen waxyaabo aan xidhiidh la lahayn dhibaatada qaxoontiga.

In kasteoo wargeyskaasi uu wacyi ii furay haddana ma ahayn markii koowaad ee aan maqlayo erayga Soomaali-weynoo macno

badan u sameeya bulshada aan ka midka ahay ee dhibaatada badan u martay magacaa dartii. Qof walba oo adduunka ku nool ma illoobo mabaadi'da loo dhibo dadkiisana loo dilo, annagun waxa aan u dhimanaynaa dhul aan leenahay oo xoog lagu qabsaday, waxa aan u suxul duubaynaa hirgelinta aragtida dhahaysa soomaalidu waa mid goor iyo goob kasta "Soomaali-weyn".Sidaadarteed macnaha uu ii leeyahay eraygaasi waa mid mug weyn noloshaydana in badan baddalay.

Intii aanan kasoo hayaamin Godey gaar ahaan maalmihii xigay geridii Muxumed iyo gulufyadii colaadeed ee ka dambeeyay ayay ahaayeen markii koowaad ee aan maqlo ereyga "Soomaali-weyn" waan yaraa mana garaneynin macnihiisa. Waxaanse ka dharagsanaa in badan oo ka mid ahna aan dusha ka hayay suugaantii jaad walba lahayd ee loo tiriyay.

Dareenka ereyga Soomaali-weynuu leeyahay waxa uu sare u sii kacay sanadihii loo gogol xaadhayay jabkii saddexaad ee soomaalidu ay u geysato Abasiiniya 1977-78[dii] oo taariikhda Soomaalida baal dhab ah ka galay. Heesihii, gabayadii, riwaayadihii, guubaabadii iyo awooddii warfaafin ee ay soomaalidu lahayd waxa waagaa diiradda lagu saaray soomaalinimada iyo in ay waajib tahay in aan hal dal iyo hal dad ahaanno. Dadka Soomaaliyeedna waxa ay aamineen in aysan jirin awood Afrikaan ah oo ka haysan karta xaqooda taariikhiga ah.

Markii uu bilowday halgankii 1977[dii] ee soomaalidu ay ku raadsanaysay dhulka ka maqan, awoodda kicinaysay kumannaan ciidan iyo malaayiin shacabawaxa uu ahaa "Soomaali-weyn" oo la mideeyo, walaalihii kala maqnaa oo dib isugu soo laabta, awooddeena oo la kulmiyo iyo kheyraadka soomaalidu leedahey ee cadowgu uu ka faa'iidaysanayo oo dadkii lahaa loo soo celiyo.

Jabkii ka dambeeyay dagaalkii aan u galnay madax bannaanida gobollada maqan iyo xeryihii qaxoontigu waxa ay ahaayeen bogag cusub oo Soomaali-weyniga tusay xagal hor leh. Si fiican ayaan ugu baraarugay macnaha kelmadda iyo yoolka fog ee ay xambaarsantahay walow ay jiraan awoodo badan oo xagal daacinayay. Maalintii aan aaminay mabda'aa gobonimada ku caan baxay illaa iyo maanta oo dalalka iyo duruufuhuba is baddaleen kama aan tanaasulin aragtidaa noqotay mid aan u noolahay kuna dhiso go'aamada aan qaadanayo.

Markii aan gooyay xuduudaha fog, kana baxay xayndaabka dhulkaygii hooyo halkii ayaan kasii amba qaaday doodaha la xidhiidha aragtida Soomaali-weyn, waxa aana u galay halgan dheer sidii aan dad badan codkayga u gaadhsiin lahaa, arrintaana waxa aan kala kulmay caqabado badan, hasayeeshee isma dhiibine waxa aan wali ku adkaysanayaa mowqifkii aan qaatay aniga oo kurey ah.Mowqifkaasi waxa uu ii simay Soomaali oo idil, miyigii aan ku dhashay iyo dhammaan miyi iyo magaalooyinka Soomaalidawaxa aan u hayaa jacayl isku mid ah waxa aanan ugu ladaa si siman.

Haddaba si aad si qoto dheer ugu fahanto qaddiyadda Soomaali-weynwax aad marka hore maanka ku haysaa in dad yar oo aan tira koob galin mooyee inta badan soomaalidu ay aaminsanyihiin in dhullka soomaaliyeed ee hoos taga maamulka Kenya iyo Itoobiya ay yihiin dhul Soomaali leedahay hor iyo haddaba, wadamada ka arrimiyana ay gacanta ku dhigeen xilligii gumeysiga caddaanku dalka joogay. Jabuutina ay tahay dhul ay soomaalidu leedahay in kaste oo qowmiyado aan walaalo nahay nala degaan.

Sanadihii aan ku jiray xerada qaxoontiga Hiiraan iyo intii ka dambaysay ee aan waddamada kala duwan marayayba waxa aan ahaa mid si qoto dheer uga fikira sababaha keenay in

boorsadaydu garabka ii saarnaato, diyaaradba mid kale ii dhiibto, tareenba tareen kale igu wareejiyo, gaarina mid kale igu baddalo? Waxa aan niyadda iska dhahaa waxa keenaya waxyaabo badan oo uu ugu horreeyo magacayga oo noloshayda saameeyey, waxase iyadana jirtay in aan marna illoobin in Soomaali-weynay qayb ku leedahay noloshayda guuraynta ah.

Deegaanka aan ku dhashay waxa uu ubuc u yahay dhalashada fikradda Soomaali-weyn, waxa uu sidoo kale safka hore kaga jiraa gobolloda Soomaalida ee aragtidaa darteed u waxyeelloobay. Sidaaan wada ognahay gobollada ka maqan Soomaalida iyo kuwa gacantoodaba ku jira waxa uu gobolkan Soomaali Galbeed kaga jiraa safka hore marka la eego badka dhulka, taariikhda, hiddaha, iyo hodontinimada dad, duunyo,dalag iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah.

Dhulka Soomaali Galbeed waxa uu u yahay dhulka soomaalidu dagto halbowle isku xidha qaybihiisa kala duwan. Waa gobolka keliah ee xuduud la leh dhammaan gobollada afarta ah ee soomaaliyeed gumeystuhuna uu u bixiyay(French Somaliland, British Somaliland, Italian Somaliland, N.F.D). Itoobiya oo maanta xoog ku haysata dalkaas iyo dadkiisana ku xidha dalalkaSoomaaliya, Jabuuti, Kenya, waad garan kartaa marka muhimadda uu gobolku u leeyahay labada dawladdood iyo labada ilbaxnimo ee kumanaanka sano ku hardamayay geeska Afrika. Waailbaxnimada islaamka oo soomalidu calanka u siddo iyo ilbaxnimada masiixiyadda oo ay Abasiiniya u ahayd madax.

Intaas waxa dheer gobolka Ogaadeeniya waxa ku dhan ama wada dega dhammaan qabiilada Soomaalida.Waamatxafka qabiilada ay soomaalidu ka koobantahay, sidaa darteed maanka iyo maskaxda qof kaste oo Soomaali ah waxa ka guuxaya dib u xorreynta gobolkaa ku caanbaxay udugga dhaqanka.

Waxa kale oo gobolku xuddun u ahaa dhammaan dagaallada iyo halganka u dhexeeyay xabashida iyo Soomaalida dhowrkii boqol ee sano ee u danbeeyay.Halgankii ugu horeeyay ee Soomaalida waa kii uu Axmed Gurey (1520-1543[dii]) hoogaaminayay, waxa uu xabashida geeyay meel u dhow xadka Eritrea iyo Sudan, xukunkooduna ma soo gaadhi jirin caasimadda Addis Ababa ee maanta laga maamulo Itoobiya, lagana karkariyo siyaasadda Afrika iyo midda ku wajahan Soomaaliya.

Intaa waxa aad ku darsataa qofka bini aadamka ah shayga dartii loo dhibo, loogu geysto gabood fal wuu jeclaadaa, tusaale ahaan muslimiinta dawladdii la odhan jirayYugoslavia waxa ay ahaayeen dad aan diinta aqoonin, ku dhaqmin, qiimana ugu fadhiyin, kadib markii ay burbrutay dawladdaasi waxa ay u kala qaybsantay dhowr dawladood oo ay ka mid tahay dawladda Boosniya oo dhacda Koonfurta Yurub dadkeedunaMuslimiin u badanyihiin. Dadkii muslimiinta ahaa waxa lagu qaaday dagaal hayb sooc ah, diintii habacsanayd iyo caqiiqadii ku milantay dhaqanka bulshada reer Yurub iyo diimaha kale ayay eersadeen oo lagu dhibay.

Kadib gumaadyo badan oo uu ka mid ahaa xasuuqii Serbernisa (Srebrenica massacre1995[tii]) ee ay quwadaha adduunka ee qaramada midoobay ugu horayso ay ku lug lahaayeen ama ay ka gaabiyeen inay badbaadiyaan muslimiinta aan waxba galabsanin, waxa ay dib isu weyddiiyeen muslimiintii waa maxay waxa naloo dhibayo? Jawaabtu waa: diinta islaamka! Sidaadarteed waxa dib loo nooleeyay caqiidadii diiniga ahayd, waxaana la raacay jidkii islaamka ee muddo laga baydhay, masaajiddiina waxa ay la ciirciireen dad ku cibaadaysanaya, waxa mar kale qalbiga muslimiinta ku weynaaday islaamka suubban.

Sidoo kale falastiiniyiintu waxa ay u dhimanayaan dhulka barakeysan ee ay deganaayeen kumannaan sano iyo Quddus oo

xuddun u ah dagaalka Islaamka iyo Yuhuudda. Ha hilmaamin in Hindida Cas waa dadkii asalka u lahaa Maraykankee ay u dhinteen barwaaqada dhulkooda taalay. Inkaste oo laga adkaaday, quwadda baaruudduna ay maquunisay, haddana isma aysan dhiibinee weli waxa ay ku dhegganyihiin dhaqankoodii iyaga oo tabar yar, xeryo gaar ahna ku oodan.

Sidaa si lamid ah Soomaalida gacanta ugu jirta cadowga Itoobiya waxa lagu dhibay soomaalinimada, waxa ay magacaa dartii ku waayeen naf, maal iyo waddan. Waxa magacaa dartii loo mariyay ciqaab iyo gumaad foolxun oo ceeb ku ah dunida ka indha laabatay dabargoynta arxan darrada ah ee muddo dheer Itoobiya ay kula kacaysay shacabkaas xaq u dirirka ah.

Ma jiro qof aan halgankaa taariikhiga ah ku waayin waalid, walaal, wehel iyo wiil loo han waynaa. Ilmuhumarka uu yaryahay naaska hooyadii waxa uu ka nuugaa gobonnimada iyo nacaybka gumaystaha noocyadiisa kala duwan. Sidaa darteed waxa ay ku dhegeen aragtida xorta ah ee la midaynaysa walaalahood.Waxaagtooda qiimo ka leh soomaalinimada. Waxaana wax la'isku caayo ah ka xaglinta dalka iyo dadka iyo u hayaanka cadowga meesha uu doonaba haku noolaadee.

Waxase jira waayadan danbe dad aan lahayn aragti xor ah iyo bisayl siyaasadeed kuwaas oo aan qiimaynin timaadada kuna cibra qaadanin tagtada, balse ay hoggaamiso muuqatada iyo maanta.Waakuwo nolosha moodaya inta ay ceelka ku jiraan ama ay hashu u irmaantahay, balse aan ka fikiraynin mustaqbalka dhow ee la filayo in wax walba is baddali doono. Waxa ay moogyihiin ama ay ismoogaysiinayaan in dameer iyo xabashiba ay ruugaan oodda ugu sokeeysa.Sikaste oo aad ugu shaqayso, u bahdisho dalkaaga, u gumaaddo dadkaaga wax aan ahayn yasid,

xadhig iyo dil kala kulmi maysid Abasiiniya iyo kuwa ay ku adeegato.

Rabitaanka Soomaali-weyn waxa ay shacabka Soomaali Galbeed ku caddeeyeen dhowr waxyaabood haba ugu horreeyo halgan hubaysan oo illaa maanta aan kala go'in. Guud ahaan waxa ay shacabka ku dhaqan halkaa u arkaan in loolan uu ka dhexeeyo laba aragti: ta koowaad waa aragtida gumaystaha madow ee xabshida oo garab siinaya saan caddaalaha inta badan dadkeena kala fogeeyay. Duulka aragtidan horboodaya waxa ay rabaan in ay duudsiyaan xaqa dadku u leeyihiin doorashada masiirkooda iyo ka talinta aayahooda; ama gumaysiga doorta ama gumaad ayaa idin yaqaana ayuu ahaa hadalka iyo ficilka xabashidu.

Aragtida labaad waa midda diidan heeryada gumaysiga una heelan helidda xorriyad buuxda, argtidaas waxa lafdhabar u ah Soomaali-weynoo si dhab ah u matali karta hadafka uu nolosha ka leeyahay qofka soomaaliga ah ee damiirkiisu fayowyahay.

Aragtida Soomaali-weyniyo xamaasadda xorriyaddu kuma ekayn gudaha jamhuuriyaddii Soomaalida iyo dhulka Soomaali Galbeed, balse dabaysha xorriyadda iyo saxansaxada waxa ay si iskumid ah u gaadhay dhammaan deegaannada Soomaalida, waxa ayna halmar laabta iyo maskaxda Soomaalida ku dhibban xuduud beenaadda gadaasheeda ka buuxisay rejo iyo rabitaan ay u hayaan ka mid noqoshada dal kulmiya Soomaalida oo dhan.

Taas waxa caddayn u ah in afti laga qaaday Soomaalida ku hoos nool gumaystaha Kenya 22/11/1963[dii] ay dhammaan isku raaceen in ay ka mid noqdaan Soomaali-weyn, ayna ka go'aan Kenya oo aysan ka dhexaynin wax xidhiidh ah oo isu soo dhawayn kara ama keeni kara in ay hal dawlad ka wada tirsanaadaan.

Aftidaasi uma cuntamin gumaystihii ingiriiska, balse sidii caadada u ahayd waxa la afduubay rabitaankii shacbka, gumaystuhuna waxa uu ciyaaray ciyaartiisii caanka ahayd ee ‘qaybi oo xukun’ taas oo Afrika ka dhigtay waddamo is ku haysta xuduud, ku dagaalamaya taariikh, ku looltamaya khayraad, isku hirdinaya shacab dawlad ka maqan oo mid kale xoog ku haysato.

Sidoo kale waxa ay Soomaalida Jabuuti ku dadaaleen qaybna ka ahaayeen halgan weyn oo gayiga looga xorraynayay aragtida ku dhisan gumaysiga. Inkaste oo Jabuuti aysan degin Soomaali keliya haddana kama aysan madhnayn aragtida Soomaali-weyn oo uu hormuud u ahaa allaah ha u naxariistee Maxamuud Xarbi (1921-1961$^{gii}$) iyo dhallinyaradii la aragtida ahayd.

Maxamuud Xarbi waxa uu ku dadaalay in dib looga xoroobo kala qoqobnaanta iyo gobollaysiga ku dhisan aragtidii dawladdihii Yurub ee dadkeena qaybiyay, fikirkaa xorta ah ma ahayn mid uu meel cidlo ah la fadhiyay Xarbiye waxa uu ahaa mid uu la wadaagay soomalidii ku dhaqnayd Jabuuti.

Dareenka uu xambaarsanaa iyo u olol-olayntiisii aragtida Soomaali-weyn ayaa asal u ahayd Maxamuud in uu halgan siyaasadeed la galo Faransiiska oo sanadahaa madaxweynahoodii Shaaral Diigool (Charles de Gaulle) uu ku soo wajahnaa qaaradda Afrika gaar ahaan Jabuuti si uu u dhegaysto codka shacabka. Diigool waxa uu Jabuuti kala noqday niyad jab weyn kadib markii shacab weynuhu ay kusoo dhaweeyeen boodhadh diidmo ah iyo halqabsiyo qeexaya sida ay dadkaasi ugu jeellanyihiin xornimada.

Maxamuud kuma uusan guulaysan in uu hanto himiladiisii, cimriguna kuma simin in uu hoos hadhsado calan matala Soomaali-weyn, kadib markii ay gumaystuhu ku dileen diyaarad ku dhacday badda cad ee dhexe (The Mediterranean Sea)

Oktoobar 1961[gii] taas oo soo afjartay waayihii iyo aragtidii Soomaali-weyn ee Jabuuti. Xarbi dabadii waxa uu haaneedku u bannaanaaday hoggaankii kasoo horjeeday ama aan la dhacsanayn aragtidii uu aaminsanaa.

Inkaste oo aftidii ugu dambaysay ee laga qaaday dadka reer Jabuuti ay doorteen inay ka madaxbannaanaadaan Faransiiska ma aysan dooran in ay ku biiraan Soomaali-weyn oo markaa ku jirtay qabanqaabadii dagaalkii 1977[dii]. Sababo badan ayaa keenay in aysna dooranin ku biiridda Soomaalida, waxa ka mid ah; in cadaadis gumaystaha xagiisa ka saarnaa uu qasbayay haddii ay kusii dhegganaadaan aragtida Soomaali-weyn in ay luminayan xorriyaddooda, waxa kale oo jirta iyadana in dadka isirkoodu Soomaalida yahay laga masaafurin jiray dalka weliba iyaga oo tiro aad u badan ah si loo yareeyo tirada Soomaalida, loona saameeyo kala badnaanshaha iyo isu dheelitirnaanta qowmiyadaha.

Dadkii la masaafurin jiray qaarkood waxa loo soo daabuli jiray Soomaaliya qaar kalana waxa la geyn jiray dhulka Soomaali Galbeed gaar ahaan magaalada Diridhaba, intii soo hadhayna waxa lagu wareejiyay silig waxaana lagu xareeyey xeryo ay ugu dhammaadeen gaajo iyo cudur.

Dadka soomaaliyeed waxaa loo geystey dhibaato aan loo geysanin dadka dhiggooda ah ee ay la deegaanka yihiin. Inkaste oo dhibaato badan aan Afrikaanka la qabno haddana ma aysan dhicin in hal dad oo Afrikaan ah ay kala qaybsadaan saddex dawladdood oo caddaan ah qarnigii 19[aad] iyo waliba Boortaqiiska oo ka horreeyay duulaan gardarro ahna kusoo qaaday diinta iyo deegaankaba bilowgii qarnigii 16[aad].

Taasi waxa ay caddayn u tahay hor iyo haddaba in reer Galbeedka iyo gumaystaha Afrikaanku aysan marnaba oggolayn Soomaali

mid ah, bad qabta, isku duuban, awood dhaqaale iyo mid ciidanba leh.Waxa si joogta ah loo bahdilaa Soomaalida, waxa laga dilaa arrin ahayd mudo dheer mid samatabixisay taas oo ah: qab iyo qaddarin ay soomaalidu lahaayeen.

Mar kasta oo uu gu' ii kordho ama aan sallaanka waxbarashada kor usii fanto waxa ii muuqanayay hadimada cadowga iyo hanyarida dadkayga, waxase hanyarida ka daran xog la'aanta iyo sida ay ugu mashquulsanyihiin gorfeynta dhacdooyinka iyaga oo aan marnaba isku deyin in ay dhacdooyinka ka war hayaan kana feejignaadaan inta aysan dhicin. Aniga oo yar saboolna ah ayaan isu diyaariyay in aan booskaa buuxiyo, hubkaygu waa go'aan adag iyo wax yar oo wacyi ah oo ii noqon kara ileys ii haga dhanka xaqiiqada.

Dabayaaqadii bishii $12^{aad}$ $1983^{dii}$ waxa soo booqday dugsigii aan dhigan jirnay macallin dhigi jiray Jaamacaddii Ummadda. Dareenka waddannimo ee uu macalinkaa xambaarsanaa hore uma arkin dibna iima soo marin, waxa uu ahaa nooc gaar ah oo ka duwan Soomaalidan qabiilku u yahay Qowmiyd deegaanka reerkiisuna u yahay qaran dhamaystiran.

Haddalkiisii xikmadda iyo cadhada isugu jiray waxa aan ka xusuustaa in uu sidan ku bilaabay: "Inkaste oo ay jireen dawlado mar walba diiddan in ay midoobaan soomalidu, haddana dhaqdhaqaaqyadii gobonimo doonka iyo dawladdihii soomaalidu rayid iyo ciidanba waxa ay sare u qaadeen dareenka Soomaali-weyn iyaga oo Soomaalida tusay in wada noolaanshahoodu lagama maarmaan yahay.

Dawladdaha gaashaanka u daruuray midnimada Soomaalida waxa kow ka ahaa kuwii abuuray fikirkii siyaasiga ahaa ee biya dhaciisu ahaa in marnaba aysan dhicin in soomaalidu hal meel ku

midoobaan, hal dalna noqdaan. Waxaa caddayn u ah taas heshiisyadii badnaa ee Ingiriisku la galay Soomaalida Ogaadeeniya iyo dadkii ku dhaqnaa Hawd iyo Rasiif eeriya (Hawd &Reserve Area) kuwaas oo inbadan uu u balanqaaday in uu xorrayn doono damaca Itoobiyana uu ka caabbin doono.

Dawladdaha kale ee aragtida Soomaali-weyn la dagaalamaya waxa ka mid ahaa dawladdaha ay Soomaalida xadka wadaagaan ha ugu horreeyaan Itoobiya iyo Kenyee. Dawladdahaas oo haysta dhul soomaaliyeed oo uu saancadaalihii siiyay, waxa ay awood badan geliyeen in la duudsiyo xaqa ay soomaalidu u leedahay in ay midoobaan, aragtida Soomali-weyn na waxa laga dhigay dambi ka mid ah kuwa lagu magacaabo khayaano qaran, waxaana loo aqoonsaday in ay tahay karaamo soo celinta qofka soomaliga ah oo aan marnaba la oggolaan karin.

Dagaalkii ay soomaalidu kusoo jabtay idinkana halkan idin keenay waxa uu ka mid ahaa halganka loogu jiro Soomaali-weyn, dagaalkaa oo saameeyay nolosha iyo aragtida qofka soomaliga ah waxa uu keenay in aan gaadhno heer aan is wayddiino maxay tahay faa'iidada aan ka helnay Soomaali-weyn? Halkaa waxa kaaga muuqankara himilada soomaalidu meeshii ay joogtay dhowr sano ka hor iyo meesha ay haatan joogto! Waxaa dumay wacyigii, waxaa hoos u dhac uu ku imaaday dadnimdii, waxa aad u yaraaday hankii ay la haayeen soomalidu illaa la iswayddiiyay bad qabka qofka maanta aaminsan Soomaali-weyn iyada oo dalalka haysta gobollada maqan ay ka taliyaan degmooyin ku yaalla gudaha dalkeena soomaaliyeed ee xorta ah.

Aragtida Soomaali-weyn waxa uu gumaystuhu ka dhigay mid ka mid ah xasaradaha ka taagan geeska Afrika ee in la dabar gooyo ay waajibka tahay, waxa ayna noqotay colaad ummadda soomaaliyeed kala dhexaysa wadamada ay xuduud wadaagga

yihiin. Inkaste oo culaysyadaa aan soo sheegnay oo dhan ay jiraan haddana dhulkaa maqan marna kama bixin maskaxda Soomaalida meel walba oo ay joogaan, calanka Soomaaliya xidigta ka muuqatana waa mid lagu tilmaamay shanta xubnood ee Soomaalida ah ee aan kala maarmin.

Itaaldarrida guud ee ku habsatay Soomaali dal iyo dadba waxa ay na dhaxalsiisay dareen la'aan khatar galisay jiritaanka bulshadeena oo maalin walba kasii fogaanaysa mabaadi'dii ay ku dhisnayd dadnimadoodu. layaabna malaha oo arrintaa oo kale ugub adduunka ku cusub ma aha! Dadnimo burburtay waxa ay u baahantahay wakhti dheer oo dib loogu soo celiyo.

Dawlad duntay iyo daaro burburay waa la dhisi karaa, waxase adag in la dhiso qalbi jabay iyo qab dumay. Si kaste oo dal loo dhiso haddii aan dadka ku nool caqligooda la dhisin, wacyigooda la kobcinin waxa u dambeeya burbur iyo fool xumo. Dhisidda dhulka waxa ka horreeya dhisidda dadka.

Hadda oo laga joogo ku dhawaad labaatan sano hadalkii macallinka waxa aan is dhahaa malaha waxa uu haystay diirad uu ku eegi jiray mustaqbalka naga dahsoon! Ama waxa uu lahaa garab daar, sheekadii uu noo mariyay maalintaa qaybo badan oo ka mid ah waan la yaabanayn hasayeeshee maanta waa ay dhaceen oo wax aan magan ku nahay gudaha jamhuuriyaddii xorta ahayd.

Arrintii ahayd in dadka la dhiso inta aan daaro la dhisin waxa ay isoo xasuusinaysaa halgankii ay umadda Jarmalku u galeen sidii ay mar labaad uga mid noqon lahaayeen dunida horumartay kadib markii lagaga adkaaday dagaalkii labaad ee adduunka, dalkoodiina cagta la mariyay, waxa ay bulshadii Jarmalku isla qaateen si dhibka looga baxo dunidana loola jaan qaado in ay halhays ka dhigtaan (rejo abuur raashin ka hor).

Halhayskaa waxa uu dhiirigaliyay bulshadii niyad jabka iyo rejo beelka la noolayd, waxa uuna noqday daawo ku kaalmaysa hilmaanka dhibkii dhacay. Rejadii la beerayna waxa ay dhistay dadkii gudaha ka dumay kuwaas oo abuuray dalag lagu noolaado, warshado wax soo saara, sidoo kalana dhisay Jarmalkii dal iyo deegaanba ay ciidamadu dumiyeen mar kale na ka dhigay dawlad adduunka hormuud u ah.

Macallin Faarax waxa aaad mooddaa in hadalladiisii uu ka akhrinayay Loox Al-maxfuudka oo inta badan sidii uu sheegayay ayeey wax u dhaceen, waxa dhab ah in haddaladiisu ay kasoo burqanayeen il cilmi iyo waaya'aragnimo ku caan baxday. Sheekadii macallinka waxa ka mid ahayd: "Soomaalidu waxa ay miyirsadeen xilli ay mindi uus ku tagtay, aadna ay u kooban tahay tallaabada ay qaadi kareen, xilligii aan halganka billownay guumasytahii reer Yurub waxa uu joogay dhulkeena hooyo in kabadan 70sano oo uu si joogta ah u hirgalinayay aragtidiisa ku qotonta "qaybi oo xukun".

Markii halganka Soomaalida ay bilaabeen daraawiishtii Sayid Maxamed Cabdille Xasan oo ahaa dadkii inta la ogyahay wacyi soomaalinimo iyo islaamnimo is huwan u dirira, soomaalidii ma aysan wada raacin! Balse saldanad walba waxa ay isku dayday in ay difaacato xukunkeeda kooban, halgankaas dheeraa waxa lagu furay shaki iyo fool xumaynta hoggaankiisii sare. Dadkii ay daraawiishtu u dirirayeen in badan oo ka mid ah waxa ay tolayeen kafanta halgamayaasha. Hagardaamo af iyo adinba leh ayaa lagu qaabilay dhaqdhaqaaqii daraawiishta ee hadafkiisu ahaa soo celinta rejada umadda.

Halgankii dheeraa ee ay daraawiishta iyo Sayid Maxamed Cabdille Xasan wadeen in kabadan labaatan sano waxa uu ahaa mid xagga bisaylka siyaasadda iyo aragtida cadowga miradhal ah,

waxa uu aaminsiiyay Soomaalida in si dhib yar la isaga celin karo cadowga, loona gaysan karo dharbaaxo garwaaqsiisay in aan iska celin karno dalkeenana ka xorrayn karno.

Inkaste oo daraawiishtu aysan ku guulaysan mabda'oodii koowaad waxa ay haddana abuureen dareen waddaniyad oo isu furay qabaa'iladii kala xidhnaa, waxa ay quluubta dadka galiyeen waddan jacayl iyo in dhulka soomaalidu yahay mid lama taabtaan ah, wacyigii ay abuureen waxa uu ku dhiirrigeliyay boqortooyadii daraawiishta la dirirsanaa in ay gumaystaha diidaan markii uu ka codsaday in ay dabkooda soo wareejiyaan ciidankoodana kala diraan.

Bisaylkii siyaasadeed ee ay daraawiishtu Soomaalida gaadhsiiyeen waxa barbar socday dhaawac halis ah oo ay u gaysteen dhaqaalaha gumaystaha gaar ahaan Ingiriiska. Waxaa la sheegaa in Soomaaliya ay noqotay meesha kharashka ugu badan Ingiriisku ku bixin jiray Hindiya dabadeed, dhowr goor ayaa la baddalay maamulkii iyo saraakiishii ciidanka, illaa ugu danbayn ay Ingiriisku qaataan aragtida ah in diyaarado loo adeegsado soo af jaridda kacdoonka Soomaalida oo ciidankii lugta ahaa waxba lagaga qaadi kari waayay, sidaa ayayna soomaalidu ku noqotay dalkii ugu horreeyay ee Afrikaan ah ee loo adeegsado diyaradaha dagaalka.

Markii daraawiishta laga itaal roonaaday halgankoodiina uu kusoo gabagaboobay buufintii sunta iyo hubka bay-olojiga ah iyaga oo jooga Horoshakax waxa is dhimay u ololayntii soomaalinimada iyo hankii weynaa ee ay daraawishta iyo inta la jaalka ahba ay qabeen.

Inkaste oo dareenkaasi uu wiiqmay haddana waxa jiray dadnimo asal ah oo diidday in ay dunto, wali ma dhammaanin

sharaftii, karaamadii iyo dadnimadii ay daraawiishtu ka tagtay. Waxa goloyaasha laga akhriyaa gabayadii guubabada, canaanta, waanada, waxsheega, diinta, dhiirrigalinta i.w.m isugu jirtay ee uu lahaa Sayid Maxamed iyo af-maalladii kale ee daraawiishta.

Gabayada soomaliduna waa matxafka ugu muhiimsan ee lagu keydiyo dhaqanka, hidaha iyo hab fikirka jiilasha nolosha isu dhiiba. Gabaygu waxa uu ahaa hibada ugu wanaagsan ee Soomaali ay leedahay, gabyaaguna waa hanti qaran, af-hayeen qabiil, difaace diin, dan iyo dad, sidaa darteed illaa maanta aan noollahay gabaygu waa laf-dhabarta dhaqankeena.

Intii uu macallin Faarax sheekada waday waxa shaatiyada iyo garbasaaraha ardaydii iyo waliba gadhkii macalimiinta qoysay oohin kasoo burqanaysay qalbi ciil dilay iyo jidh darxumo la qaadhsamay. Dhowr jeer ayaa Faarax laga codsaday in uu joojiyo utunta sooyaalka hasayeeshee isaga oo is baddalay wejigiisuna madow dartii catir u ekaaday ayuu damcay in uu sheekadii sii wado, intii uusan hadalkii billaabin ayaa waxa gacanta taagay macalin ka mid ah macalimiinta iskuulka waxa uuna wayddiiyay macallin Faarax: “Sayidku haddii uu waday halgan ku wajahan gaalada muxuu dadkii Soomaalida ahaa uu u diley?” Faarax ma uusan xanaaqin mana diidin su’aashiiye waxuu ku jawaabay: “aniga oo og xaaladda burbur, dagaal, qiyam guur, fahan khalad, han jab, ee aan maanta ku sugan nahay lama yaabayo dadka dhaleeceeya ama ku tilmaama Sayid Maxamed Cabdille Xasan tilmaamo aan u suubaneyn qofkii koowaad ee halgan kala hor tegay dhammaan dawladdihii ku soo duulay gayiga Soomaaliyeed (Ingiriis, Talyaani, Xabashi, Faransiis) kuna qasbay in dhulka Soomaalida ay u aqoonsadaan dhulkii geesiyada aan gaban iyo qabrigii gumaystaha.

Daraawiishtu waxa ay u geysteen saancaddaalihii Ingiriiska iyo intii la jaalka ahaydba dharbaaxo kulul, waxaana ay u dhigeen casharo lama illaawaan ah oo reebay ma hadho illaa maanta la wariyo, sheekooyinkeeduna ay yaallaan mataaxifta iyo guryaha lagu keydiyo taariikhda dalalkii ay duubcaddii daraawiishtu daabka Seefta iyo Allaahu akbarta jihaadka ku asqeeyeen.

Inta badan goobihii ay foodda isku dareen geyshka Soomaalida iyo gumaysigii doolka ahaa ee caddaan iyo madowba lahaa kuwaas oo lagu qiyaasay 42 dagaal (Aw Jaamac Cumar Ciise) waxaa gacan sareeyay duubcaddii midigaysnayd kitaabka Qur'aanka iyo mintidnimada Soomaalida, waxaana ay soo bandhigeen adduunkana tuseen sarreyn dagaal, adeyga mabda', caddaaladda qaddiyadooda aan duugoobayn, darxumoonayn lagana tanaasulaynin.

Sayidka oo ay maalmahan isku dherariyaan duul ka indha saaban sooyaalka quruxda badan ee xataa gumaystihii la dagaalamayay uu u qiray iyo kuwo ku dhex wareeray kala qoqobnaanta dadkeena xogna aan ka haynin halgankiisii, iyo kaalinta uu ka ciyaaray in maanta soomaalidu ay xorriyad ku naaloodaan diintoodana haystaan waxa uu  ka mid yahay kumannaan halgamaa oo dunida soo maray kuwaas oo aan ku tilmaami karo in ay ahaayeen sida shumac gubanaya si uu jidka ugu iftiimiyo dad indho la' oo aan arki karin ilayska, qiimihiisana aan fahmi karin.

Aragtidii uu waagaa - dabayaaqadii qarnigii 19[aad] iyo bilowgii qarnigii labaatanaad - sayidku aaminsanaa ee uu darteed u halgamayay una god galay isaga oo ka diiday gaaladii mansab iyo maalba ku durraamanaysay, maanta –dabayaaqada qarniga 2o[aad] - badankeenu ma fahansanin. La yaabna ma lihin oo waxaan garaadsaney Soomaali oo cidhiidhi ku jirta dadyoowga la noolna ka baqda oo u ah addoon danihiisa u adeega.

Carabta ayaa ku maahmaahda "ruuxu waxa uusan garanayn cadow ayuu u noqdaa." Wax aan colaadinay Sayidka halgankiisii markii aan fahmi waynay sarreynta mowqifkiisii, fogida himilooyinkiisii, hankiisii durugsanaa, aragtidii tognayd ee uu lahaa taas oo u suurta galisay in uu qaato go'aankii ahaa in aan dal la xorrayn karin dadna la wacyi gelin karin inta ay jiraan qoys meel maamul yar ku haysta oo qaran isu haysta, wadaad gacan-saar la leh gumaysiga dhaqankiisuna la qumanyahay oo u qiil bixinaya, qabiil u dudaya Soomaali kale oo degtay ama maamushay dhul ay iyagu sheeganayaan.

Dagaaladii sokeeye ee dhax mari jiray Soomaalida ka dib iyo ka hor darwiishkii waxa ay naga dileen mabaadi'dii guud ee na midaynaysay, soomaalinimadii ayaa laga dhigay xadhig nugul oo aan isku keen hayn karin, dadkii haldoorka ahaa iyo maqaawiirtii dalkan usoo halgamay naftoodana u huray wax aan ka saarnay xusuus wadareedkeena wanaaggoodiina waxa aan u baddalnay xumaan! Dhammaantood waxa ay noqdeen qabiil gaar ah oo aan na khusaynin, waxaana na loo sheegay qofkii aan nagu hayb ahayn inuusan noo ahayn hoggaan taariikhna noo samayn karin, magaciisa dhaxalkiisa, iyo dadnimadiisana beeshiisu ay leedahay!

Meesha ummadaha kale ay karaameeyaan halyeeyadooda innaga kuweenii markii aan xaqoodii duudsinay karaamadii ay lahaayeenna aan siin waynay waxa qaatey cadowga. Waxa maamuusay gumaystihii ay shalay la dagaalamayeen.

Ninka maanta degelka uu reerkoodu dego u yaqaana dal, dhul uu isagu leeyahay oo cadow uu xoog ku haysto in uu ka hadlana ka baqayo, ama aan qiimo u arkin isaga oo ku andacoonaya: "inta aan hadda haysto ayaan waayayaa haddii aan meelo kale ka hadlo". Nin aan xamili karin in qofka Soomaaliga ah si xor ah oo aan cabsi iyo kala irdhow lahayn uu ugu noolaan karo meel kasta

oo ay Soomaali degto isaga oo oggol in shucuubta kale ay isaga ugu arrimiyaan gurigiisa.

Nin aaminsan in cadowgiisu Soomaali yahay, walaalna ay yihiin kuwa kafantiisa tolaya shalayna ka fara maroojiyay wixii uu lahaa dad, dal iyo duunyo, aqbalayna in dadyow kale uu dhulkiisa magan ugu ahaado, nin la qabsaday in uu hooseeyo noloshiisana la hago, maskaxdiisa, xiniinyihiisa iyo dalkiisana dad kale u dhiibtay miyuu fahmi karaa nin hankiisu ahaa in uu san ku neefle oo idil ka sarreeyo geeska Afrikana ka arrimiyo -Haddaan waayay calan lay nashiro tan iyo Nairobi-

Sayidka dadkii xilligii uu halgamayay kasoo horjeeday badankoodu ma aysan ahayn dad xun ama kaba qaad u wada ah cadowga, waxa ay ahaayeen dad aan garanayn dawladnimo iyo maamul. Waxaay fahmi la'aayeen aragtida siyaasiga ah ee uu xambaarsanaa Ina Cabdille Xasan taas oo gayiga soomaaliyeed ugub ku ahayd. Qayb ka mid ah dadkaas waxaa ka dhaadhici la'ayd in nin reer hebel ah oo kasoo doolay kumannaan kun oo km gadaashood uu ku maamulo dhulkii ay ku dhasheen, u dhasheen, ku dhaqdeen, dawladna ugu noqdo.Waaaragtida maanta ragaadisay Soomaalida oo u kala qoqobtay qoysas, qabiillo, ururro, kala aragti duwan iswada dilaya- dib u milicso gabayadii dhexmaray sayidka iyo dadkii kasoo hor jeeday- kuwo dadka diidan ka mid ahna waxa ay difaacanayeen sida maantaba jirta maslaxad gaar ah, maamulo yar yar oo uu cadowgu ka maamulo daaha gadaashiisa, muuqaal ahaan waxa ay ahaayeen Soomaali, siyaasad ahaanna waxa ay ahaayeen Faranji.

Labada koox ee hore aragtidayda dambi ma laha, waxa ay la qabsan waayeen fikirkan cusub ee aan laga sugayn dhulka Soomaalida illaa maantana aan hirgalin, waxa ay ku dhegganaayeen wixii ay yaqaaneen ama aragtidii tiilay dhulkii ay

ku dhaqnaayeen ee ahayd in dalka la kala leeyahay, caadaduna ay tahay qabiil mid kale ku dulee aysan ahayn qabiil mid kale wax la leh ama la maamuli kara.

Halgankii daraawiishtu wuu lahaa khaladaad sida ay halgamadii hirgalay ee bulshadii Afrika iyo islaamkuba ay isaga dulqaadayeen cadowga ay u lahaayeen gabood fallo, hasayeeshee marka loo eego wanaagga, dadaalka, mayal adaygga, soomaalinimada, mabda'ii tognaa ee ay wateen waddaninimada, islaamnimada iyo wacyigii ay abuureen khaladaadkaasi waxa ay noqonayaan dhibic badweyn wanaag ah ku dhex jirta, miyay muuqanaysaa?"

Macalinkii oo muddo hadlayay ayaa aad u xamaasooday uburna afka ka tuuray sidii rati qooqan. Waxa ay ahayd maalin lama illaawaan ah oo ka duwan maalmihii isu ekaa ee qaxoontiga.

Faarax oo biyo la siiyay codkiisuna yara dagey ayaa hadalkiisii halkaa kasii watey "intaa ayaan kaga baxayaa su'aasha macallin Cabdirashiid waxaan sii wadayaa hadalkaygii inta uu yidhi ayuu halkii uu sheekadiisii hore ku istaajiyay ka bilaabay".

Iyada oo xaalku halkaa marayo waxa dhacay dagaalkii labaad ee adduunka kaas oo dib u jeexay khariidada caalamka kadib markii laga adkaaday dawlado lahaa awood sida: Jarmalka, Talyaaniga, Jabaan iyo kuwo kale oo gacan saar la lahaa dawladahaa haystayna dhul baaxad weyn oo ku yiilay Afrika iyo Aasiya.

Waxaa adduunkii la jujuubayay ka bilowday saxansaxada xorriyada, waxa dhashay ururro u dooda madax bannaanida shucuubta Afrika, ururradaas waxa ay isugu jireen kuwo siyaasi ah iyo kuwo hubaysan, dhanka Soomaalida kobicii wacyiga waxuu soo if-bixiyay dhaqdhaqaaqii dhallinyarda soomaaliyeed ee lamagac baxay S.Y.L (1943$^{dii}$) kuwaas oo mabda'oodu ahaa xorraynta iyo isu keenidda Soomaali-weyn.

Inksta oo awoodda koowaad ee S.Y.L ay ahayd Koonfurta Soomaaliya dhallinyaradii aasaastayna ay ahaayeen dhowr qof oo isku deegaan iyo aragti wadaag ah, haddana islamarkiiba aragtidoodii tognayd waxa qaatay dad badan, waxa ayna ku fideen gayiga Soomaaliyeed dhammaantii, gaar ahaan waxa qaddiyaddaa u istaagye bulshadii gacanta gumasytaha ku jirtay ee u hanqal taagaysay in ay ku biirto Soomaaliyada la hadal hayo ee foolanaysa.

S.Y.L oo sidday calanka soomaalinimada iyo xorraynta dadka waxa ay ka duulaysay dareenka shacabka, masuuliyaddeeduna waxa ay ahayd in ay dadka u hoggaamiyaan dhanka xorriyadda, adduunkana gaadhsiiyaan rabitaanka shacabka iyo hirgalinta himiladiisa sharciga ah. Dhallinyaradii soomaaliyeed waxa ugu badan ee xisbigooda loo taageeray ma ahayn aragtiyadooda dawladnimo ama dhaqaale iyo horumar, balse Soomaalida oo waagaa hal dhag lahayd ayay u sheegeen xornimo iyo midnimo, shacabku waxa uu ku taageeray mabda'ii Soomaali-weynee lafdhabarta u ahaa xisbigooda iyo ololohooda siyaasadeed.

Dhaqdhaqaaqii gobonima doonka S.Y.L waxa uu ahaa mid ay Soomaali u hanwaynayd, kuna wadday in uu xaqiijiyo himilada malaayiin Soomali ah oo ku dayacan gudaha xuduud beenaadka u dhexeeya Soomaalida.Si taa ka duwan markii uu xisbigu gacanta ku dhigay talada soomaalidii uu Taliyaanigu gumaysanayay, una suurta gashay in uu noqday xisbi muuqda oo la gorgortama adduunka waxa uu arkay xog ka dahsoonayd taas oo la xidhiidhay siyaasadaha dawladdaha hoggaamiya adduunka.

Si ay ku imaatayba wixii ka dambeeyay doorashadii dhacday gugii 1956[dii] xisbigii S.Y.L waxa uu gaabiyay ama ka tanaasulay aragtiyo siyaasi iyo waddaniba ah oo hoggaankii xisbiga ugu muuqday in aysan suuragal ahayn in dawladnimo iyo afkaartaa la is waafajiyo

ugu yaraan xilligan kala guurka ah, arrintaa kadiska ah waxa ay sabab u ahayd in ay xubno badan oo xisbiga ka mid ahaa ay ka baxaan walibana dhalliilaan siyaasadaha xisbiga. Dadkii ka gadooday aragtida cusub ee xisbiga qaar ka mid ah waxa ay aas aaseen xisbiyo siyaasi ah oo S.Y.L kula loolamay talada dalka.

Aragtiyaha hoos loo dhigay muhiimaddooda waxa ka mid ahaa u orodka xoraynta gobolada maqan ee Soomaalida, si cad ama shaac baxsan looma odhan karin in arrintaa aysan ahayn aragtida koowaad ee xisbiga sababtu tahay waxa laga baqayay ra'yul caamka guud kaas oo u heellanaa midaynta Soomaalida, waxa ayse siyaasiyiintu markaa awoodda saareen in inta la hayo la xorreeyo kadibna la eego kuwa maqan waxa laga qaban karo ama loo qaban karo iyo sida looga qaban akro. Midho gunti ku jira Midho geed saran looma daadiyo, siyaasadduna waa kolba sida kula gudboon.

Fikirkaas uu xisbigu qaatay dad ayaa u fasirtay aragtiyo leexsan ama waddaniyad darro, laakiin anigu waxa aan qabaa mid taa kaduwan oo ah in aragti siyaasadeed ay ahayd, siyaasaduna masaalix ayay leedahaye saaxiib malaha , waxa ay u fikireen qaab maslaxadda siyaasadda ah, taas oo sax ama khalad noqon karta marka la saaro halbeegga waaqica nolosha iyo siyaasadda ee xilligaa, gaar ahaan marka aan eegno dowladaha gacanta ku haya xornimada gobollada maqan in ay yihiin isla kuwa lagala xaajoonayo xorraynta gobolada jamhuuriyadda Soomaalida.

Si kastaba ha ahaatee marna si buuxda looma qarinin aragtidii Soomaali-weyn oo ay dad badan u jibbaysnaayeen. Jiilkii noolaa xilligaa haddii ay ku adkaatay in ay xorreeyaan dhammaan gobolladii Soomaalida, waxa ay awoodeen inay nooga tagaan astaan ma guuraan ah oo mar walba na xusuusinaysa badka

dhulkeena iyo midnimada dalkeena haba ku kala maqnaadaan dawlado shisheeye iyo gacmo guumaysi"

Halkaa marka ay sheekadii macallin Faarax marayso qolkii yaraa ee aan ku jirnayna ay isugu imaadeen malaha kala badh dadkii iskuulka ardayda iyo macallimiinta ka ahaa ayuu maamulihii dugsiga ka dalbaday in uu joojiyo khudbaddiisa; "waxa la gaadhay xilligii ay ardaydu bixi lahaayeen, sallaaddii duhurna kaabiga ayay innagu soo haysaa. Waan jeclaan lahaa in aan xogtan muhiimka ah kaa reebno ardayduna ay kaa faa'iidaystaan hasayeeshee wakhtiga ayaa inahaya", ayuu maamulihii yidhi isaga oo inta uu istaagay dabada boodhka ka dhabaandhabinaya.

Anigu sheekadaa waxa ay igusii biirisey uun walaac iyo walbahaar hor leh. Marka uu sheekada meel mariyaba waxa aan is dhahayay alla markaa yaa dadka garansiiya waxa soo socda. Dhibka na gaadhay qayb libaax ayaan ku leenahay, in badan oo ka mid ahna gacmaheena ayaan ku samaysanay wacyi la'aan ha noo geyso ama garasha xumo ha na qaaddo, ama shilimaad ha na indhatiraane.

Inkaste oo macalinku sheekadaa dheer ee afarta xiisadood booskoodii la geliyay uu noosoo jeediyay xamaasad aan goobteedii jooginna nagu dhaliyay haddana ma jiro tusaale ka cad ama ka muhiimsan dagaalkii 1977$^{dii}$ oo loosoo qaadan karo si loo caddeeyo midnimada Soomaali-weyn.

## DAGAALKII 1977

Markii aan garaad yeeshay waxa aan ku jiray xero qaxoonti oo ka fog magaalooyinka saamaynta leh ee ay soomaalidu leedahay.Waxaaan ahaa mid u dhexeeya laba dal iyo laba dad. Mid la igasoo qixiyay iyo mid aan xayndaab kaga jiro oo aan meel dheer ka daawado.Waxa aan ahay Soomaali, dawladdayda soomaaliyeedna waxa ay isku hawshay oo ay mustaqbalka malaayiin shacab weynaha soomaaliyeed ah mugdi u galisay sidii loo xorrayn lahaa malaayiin ku dhibaataysan xuduud beenaadka gadaashiisa.Dadaalka ay soomaalidu galiyeen xorraynta Soomaali Galbeed waxa uu ahaa mid weyn oo aan waxba lala hadhin, tabari yeelkeed e.

Waxa aan soo galay xerada qaxoontiga aniga oo 10 jir ah, wax aanse si toos ah u garanayaa dhammaan dhibaatooyinkii aan soo marnay ha ahaadaan kuwii jidkii dheeraa, nacabkii xabashida, murugadii jabka, wiirsigii adduunkii ku faraxsanaa qaxanaga, ama gabood falkii Soomaalida iyo ka gaabintii xuquqdii aan lahayn.

Xeryihii aan ku dhex hanaqaaday waxa aan ku weynay xuquuq aan lahayn, sidoo kale waxa aan ka helnay nolol aan ka suurtagali lahayn dhulkii aan ku dhalanay ee xabashidu naga soo qixisay. Maalinwalba waxa aan iswayddiin jiray sida uu udhacay dagaalkii nasoo bara kiciyay? Waxaa maskaxdayda marnaba ka go'in saaxibbaday gaar ahaan Geeddi Saxane, Cabdi Garaad, Xasan Mustafe, Cabdullaahi Cumar iyo tobannaan dhallaan ah oo aan qaybsanay farxaddii ciyaalnimo.

Waxa aan dareemi jiray hilow mar walba oo aan xusuusto dugsi qur'aankii, celintii beeraha, habeennadii aan banka Suubaan Balal

ku ciyaari jirnay annaga oo ay naga buuxdo farxadda carruurnimo.Garaadkanagu ma dhaafsiisnayn ciyaarta iyo qosolka.Waxaaan ahayn ubad u nool si qurux badan, hawo adduun nama haynin, waxbana kama aanaan baqijirin, marka aan daalanawaxa aan isku tuuri jirnay dhabta hooyo oo ah gogosha ugu wanaagsan ee dhallaan ku gam'o.

Si joogta ah ayaan maanka ugu hayn jiray deegaankii aan ka soo qaxay, hiyikacu waxa uu igeeyaa heegada sare ee aaduunka.Waxaa anan kor ka daawadaa dhacdooyinkii aan soomaray. Siaan daawashada cajalka taariikhda ugu helo wakhti, waxa aan maalin walba ka baxaa xerada aan ku jiro, buur yar oo ciid ah ayaan dusha kaga fadhiistaa aniga oo isha la raacaya xaggaa iyo galbeedka fog ee aan ka imaaday. Waxa aan ahay shimbir xor ah oo aan marnaba oggolayn inuu shabaq ku jiro isaga oo nolol ka sugaya gacmo shisheeye oo intooda badan ahaa kuwii sida tooska ah sababta ugu noqday xaaladda cakiran ee aan ku noolahay.

Aniga oo yar, keligayna ah aqoon iyo aragti badanna aan lahayn ayaan ka fikiri jiray sidii aan uga bixi lahaa xabsigan dusha ka furan.Xogtaaan hayo aad ayay u yartahay, macnaha dhabta ah ee dagaal ma aanan garanaynin welina waxa aan dhex dabbaalanayay mowjadaha su'aalaha iyo dhallaannimada. In aan helo qof xog ogaal ah oo si dhab ah iiga warrama wixii dhacay iyo sida ay u dhaceen ayaa ii ahaa hadaf aan muddo ku taamayay.

Waxa aan raadiyaa waayo'arag, u dhuun daloola xaaladda aan ku suganahay.Waxaaan maqlaa qaxoonti ayaa tihiin! Waxa aan iswayddiiyaa sidee ayuu qof gudaha waddankiisa qaxoonti ugu noqon karaa? Maxaan ku kala duwannahay aniga iyo kan aan la degganahay ee igu sheegaya in aan ahay qof isaga ka duwan? Maxaase naloogu diiday in aan Soomaaliya dhex galno? In aan raadsano meelo annagu aan ka soo saaran karno nolol

maalmeedkanaga annaga oo aan qaxoonti ku noqonin xeryo loogu dawarsi tago qaramada midoobay iyo qaaradaha adduunka?

Muddo markii aan joogay qaxoontiga waxa aan noqday wiil bisil oo dhacdooyinka ku darsan kara aragtidiisa ama gorfeyn kara.Waxa aan aad ugu faraxsanaa isbaddalada ku dhacaya jidhkayga. Dareenka da'yarta soo mara midka ugu qiimaha badan waa ka la socda isbaddalka jidhkooda. Waxa aan qarka u saarnaa in aan qaangaadho oo waxa soo dhawaa gugii aan ku biiri lahaa dadka waajibaadka diiniga ah, iyo kuwa bulshaduba ay dabraan.Waxaanse sidayda caadiga ah u muuqday mid aad uga weyn da'daas aan sheegayo.Wacyigaygu wuu dhisnaa, waddaniyadday- duna waa ay taabba gashay, hormuudna waxa aan u ahay carruur badan oo ku dhaqan xeryaha qaxoontiga oo sii luminaya xidhiidhkii ka dhexeeyay iyaga iyo dalkii ay ka soo qaxeen.

Isbaddalka ku dhacaya maankayga iyo jirkayga ee la socda koritaanka mararka qaar waxa ay i tusaan in aan leeyahay aqoon ama khibrad qofna uusan waxba ii sheegi karin, dareenkaa sida aan filayo kali kuma aan ahayne waa mid ku ladhan marxaladaha nolosha ee aan marayno midka ugu saamaynta badan jidhkeena iyo maskaxdeenaba. Ka gudbidda carruurnimada iyo ku biiridda dadka waajibaadku saran yahay ma aha arrin sahlan.

Maalin ayaa waxa aan hilada webiga kula kulmay oday qiyaastii tiro toddobaatanaad foodda galiyay.Waxa uu ahaa oday cabudhinaya dareenno kala duwan oo naftiisa ku dhex dagaalamaya.Dhankakale waxa uu ahaa qof muuqaalkiisu kugu dhiiri gelinayo in aad u dhowaato lana wadaagto dareenka carruurnimo ee qof kaa dhegaysta aad wayday. Odayga oo oogadiisa sare ay ka muuqato guhaadda asqaysay gudihiisa ayaa u dhexeeya laba fal oo qudhah; mar intii uu eego xoolo soo guryo

noqonaya ayuu ku luuqaynayey tixo gaagaaban oo u badan u hilowga deegaankiisii iyo noloshiisii hore, marna inta uu isha la raaco dhallinyaro kubbad ciyaaraysa ayuu illin soo jiidhay xirribaha isku dayaa in uu celiyo laakiin ciilka iyo aramida haysata darteed ayay illintu amar la'aan u soo hoortaa.

Muddo yar markii aan fadhiyay ayuu odaygii tooyasho igu bilaabay. Odayaasha soomaalidu waa matxaf taariikh iyo nasab oo guuraya ee si sahlan ayuu ii gartay aniga iyo awoowgayga sagaalaadba, waa halka aan isugu imaanno odayga aan maalinkaa barkhadda leh is baranaye. Dhanka kale waa aabbahay ina abtigii saddexaad walow aysan weli is arkin muuqaal ahaan maqal mooyee. Dhallinyaranimadiisii xoolo badan ayuu lahaa, waxa uuse in badan ka raagay guurka, ilmana ilaahay masiinin markii uu guursaday gugiisii 52[aad], ayuu ilaahay u hibeeyaya wiil uu ku iloobay ilma la'aan uu la noolaa wakhti dheer.

Wiilkii qudha ee uu dhalay isaga oo madaxa geliyay tiro lixdanaad, waxa uu kusoo koriyay koolkoolin, haqab tirka dhammaan baahiyihiisiina masuuliyaddiisa koowaad ayay ahayd.Waa inta ka suura gali karta tuulo ku taalla badhtamaha Banka Turbilowgii kontomeeyadii. Noloshaas jacaylka iyo hawadintu hadhaysay waxa ay wiilkii ka dhigtay boqor aan taaj xidhnayn oo erayga uu dhaho laga daba dhihin.

Markii ay bilowdeen jabhadihii ugu horeeyay ee gobonima doonka ahaa waxa uu noqday carruurtii raacday ee ugu horeysay. Amakaag ayay ku noqotay reerkii hasayeeshee waa boqor aan lagu caano shubine waxa loo yeelay sidii uu rabay, odaygiina jacayl uu wiilka u qabo dartii kuma uusan dhiirranin in uu 'maya' yidhaado walow uu gudaha ka goconayay diidmo aan dibnaha soo mari karin.

Maxamed waxa uu noqday wiil yar oo fariid ah, fahan dheerna u leh dagaalka iyo tabaha jabhadnimo ee gaajada, rafaadka, guuraha iyo cabsida la jaalka ah. Waxa lagusoo tababaray xeryo ku yaaley Koonfurta Soomaaliya ka dibna waxa uu noqday sarkaal edeb iyo adkaysiba leh.Waxa uu galay dagaalo inta badan magac iyo guul uu ka keenay, hasayeeshee billowgii 1978[dii] ayaa lagu dilay duleedka Jigjiga isaga oo qayb ka ahaa ciidan kasoo jabay Harar oo lug dheer kusoo gooyay in ka badan 400km. Dhimashada Maxamed waxaa ay aabbihii ku reebtay tiiraanyo culus.

Muddo yar kadib barakicii garab socday jabkii dagaalka waxa farihiisa ka baxay wixii uu hanti haystay, waxa subax ku gaylamay gaas Xabashi ah oo waxa ay arkaanba cagta mariyay, isaga iyo xaaskiisa Muslimo Kaahin waxa ay kamid ahaayeen dadkii kabadbaaday xasuuqaas.Afar habeen oo dhuumaalaysi ah kadib waxa soo badbaadiyay hurin ciidanah oo katirsanayd xoogga dalka oo ahaa dabayaaqadii ciidankii jabay. Sida ciidan jabay u caado ah waxa aad ka cabsanaysaa shanqadh walba.Waxaaad iska ilaalinaysaa cadow aan kuu muuqanin, mana taqaanid yaa ah cadowgaaga.Ciidanku waxa ay wataan hub iyo rasaas ku filan waxa ayse ka arradanyihiin niyadda iyo mooraalka ciidannimo. Muddo maalin socod ah kadib waxa ay foodda isdareen ciidamo Xabashi ah oo garabsanaya cutubyo Kuubaan iyo Ruush ah. Dagaal faraha la'isaga gubtay kadib waxa loo itaal sheegtay soomaalidii oo aan markii horaba haynin niyad dagaal.

Waxa halkaa mar kale ka badbaaday geeri Axmed iyo xaaskiisii Muslimo iyaga oo dhex qaaday dhul baaxad weyn oo caan ku ah noocyada dalagga iyo macdanta kala duwan, walow uusan helin gacan danaysa iyo shacab wax kasoo saarta. Lix habeen markii ay lugaynayeen, daal, gaajo iyo oonna la rafaadsan yihiin ayay amin makhrib ah kusoo baxeen jees yar oo meel yaalla, hasayeeshee

waa ay ku hungoobeen oo waxba ma aysan ka dhadhaminin biyo iyo baad toona.Waxa ay nafta ku maaweelinayeen in aysan waayi doonin dad ay biyo ka cabbaan inta uusan habeenku si fiican usoo galin, sababtu tahay oon ku habeenkii ayuu dadka dilaa.

Dhulka waxa qariyaya doog, waxa is qabsaday dareemada iyo garrowlaha, inkaste oo dabaysha gamashigu baarka sare madoobaysay haddana ugbaadka iyo saxansaxada carafta leh ayaa meel fog kaaga hor imanasya.Xilli abbaarihii salaaddii cishe tahay lammaanuhuna ay lugaynayaan meel cidla ciirsi la'a ah ayaa waxa istaagga hal mar ka dhacday Muslimo! Haddii uu jalleecay waxa isku gadaamay jabiso weyn oo jidhkeedii oonka iyo gaajada la soohmay u badashay qori ingagan.

Waxa uu garwaaqsaday in ay ooridiisii dhimatay isaguna is badbaadiyo, naftaadu orod ayay kugu aamintaaye wuu tafaxaytay cagahana wax ka dayay, ugu danbayna dirqi ayuu ku baxsaday, waxa uuse meeshaa kaga tegay qayb ka mid ah qalbigiisa. Muslimo nolosha odayga waxa ay ku lahayd saamayn weyn oo 40 jirsatay.Intii uu Maxamed dhintay odaygana ay ku dhacday tiiraanyaduna waxa ay u ahayd dhakhtarad dawaysa. Habeenkaa waxa uu waayay qayb ka mid ah dareenkiisi dadnimo, waxaana qarsoomay macnaha nolosha iyo ruuxii addunka bilicda u yeelayay.

Wixii dhacdooyinkaa taxanaha ah ka dambeeyay Axmed waxa uu wakhtigiisa ku dhammeeyaa fikir iyo daawashada dabeecadaha quruxda badan ee dalkeena hooyo Eebbe ku mannaystay. Xusuus wanaagsan ayuu ka raadin jiray qulqulka biyaha, ciyaarta ubadka iyo qorrax dhaca kulmay ee jewiga u baddalay laxan macaan oo noloshu noogu deeqdo.

Isdhexgalkanagii ma qaadanin wakhti dheer. Waxa uu ii arkay in an ahay wiil ka duwan lodkiisa oo qaddiyad iyo xog raadini ka buuxdo maskaxdiisa. Aniguna waxa aan u arkay oday ka duwan odayaasha Soomaalida ee canaanta iyo cabudhinta kula dhaqma ubadka soo kacaya illaa ay carruurtu gaadhaan in ay ka go'aan waalidkood.

Maalintaa wixii ka danbeeyay Axmed waxa aan yeelanay xidhiidh dhow, inkaste oo uu jiro farqi weyn oo xagga da'da iyo garaadkaba ah, haddana waxa uu ii ahaa saaxiib iiga jawaaba su'aalaha dadka igu hareeraysana ay ka gows qabsan jireen jawaabahooda.

Muddo saddex bilood ahi markii ay ka soo wareegtay kulankanagii koowaad ayaan maalin ugu tegay gurigiisa. Waa ammin barqin ah.Waxa uu ka soo noqday xafiiska qaxoontiga oo uu kasoo qaatay boonadii raashinka.Waxa uu dhulka ku mudayay ul yar oo afka hore bir ku leh, shaati cad oo xariiqo madow leh ayuu xidhanyahay, indhahana dhulka kama qaadayo, saas oo ay tahay waxa agtiisa ka daaran hees waddani ah oo aan markii hore u maleeyay in ay qaadayso Dalays ama Maandeeq markii danbana aan oggaaday in ay tahay Hiba Nuura oo ku luuqaynaysa hees si xeel dheer u tibaaxaysa magaalooyinka Ogaadeeniya.

Waxa uu ii shubay shaah kulul oo qarfe iyo heyl isu miisaaman lagu kariyay. Qiimaha uu shaahaasi lahaa waxa aan ku tilmaami karaa in uu ahaa midkii dadka dega dhulka loo yaqaano Joorre ee labada dhinac kaga teedsan xuduud beenaadka u dhexaysa Kenya iyo Soomaaliya magaalana u tahay Badhaadhe ay dhihi jireen: "lix kacab ama laxowgiisu haku hayo."

Shaahii uu ii dhiibay aniga oo aan kabbanin koobkiina kor u haya ayuu inta uu fadhigiisii ku laabtay aad iisoo fiiriyay sidii isaga

oo akhrinaya waxa qalbigayga ku jira ama aan goconayo. Eegmo dheer ka dib waxa uuiwaydiiyay: "ma waxaad wadataa su'aalihii kaa weynaa? Xilligan xilli su'aal ma aha, dadku nolol maalmeedkooda ayay soo dhacsan la'yihiin murugadii qaxana weli kama aysan tirmin quluubtooda, sidaas darteed sheeko waxba kuu kordhin mayso e waxbaro." Jawaab umaan celinin e madaxa ayaan foorariyay, isaguna inta uu istaagay ayuu dameer ugu xidhnaa ardaaga guriga, bal u dhigay dabadeedna inta uu sariir isku kala bixiyay shitay sigaar aragtidiisu maalinkaa igu cusbayd.

Waa runtii oo dadka ku dhaqan xeradu ma haystaan wakhti iyo farxad ay kaga sheekeeyaan wixi ay soo mareen, ma rabaan in ay xusuustaan dhiiggii, taahii, oohintii iyo dhabar jabkii la soo maray. Waxa ay la aamusanyihiin guhaad ku waynaatay gudohooda, nolol maalmeedkooduna waxa uu ugu filanyahay mashquul iyo daal.

Ma aanan ahayn dadka hadafkooda sida sahlan uga tanaasulee, waxa aan ku celceliyay in uu iiga dhaco sheekada dagaalka 1977dii ee baddalay wax badan oo ku saabsan geeska Afrika. "Waxa aan u baahan ahay in aan fahmo macnaha dagaal, gaar ahaan midkan maanta bacadkan cidlada ah ina fadhiisiyay labadeenaba", ayaan ku idhi Axmed oo markaa haashkii uu tuuray cagta ku nabaya.

Indhihiisa waxa kasoo baxaya iftiin uu halgan ku dheehanyahay. Oogadiisa dhaawaca badani ku yaallana waa callaamad u taagan xornimo. Intii uu sariirtii kasoo kacay ayuu dhanka midig gambadh iga yaalay ku fadhaiistay, neef qoto dheerna jiiday kadibna kor u afuufay, waxa uu bilaabay hiinraag iyo hadal aan caddayn oo gogoldhig u ahaa jidhiidhico ka kacday dushiisa.

Muddo markii uu dhowrayay muuqaalkayga iyo cadhada iga haysa Abasiiniyadaa isoo qixisay iyo dacdarrada qaxoontigan aan ku xaraysanahay igu haysata, waxa uu soo baxday in gudahayga ay

ka buuxdo awood kacdoon taas oo diiddan xaaladdan cakiran ee shacabka kabadan dhowrka milyan ay ku suganyihiin. Sheekadii dheerayd ee kusaabsanayd dagaalkii $1977^{dii}$ ee nala jibaaxday meelo badan waxa uu ku bilaabay sidan soo socota:

"Dagaalkii khadhaadhaa ee dhexmaray dawladdii Soomaalida iyo taliskii xabashida $1977^{dii}$ waxa uu ahaa mid aad u kulul, oo loo adeegsaday dhammaan hubkii, taatikadii, awoodihii ciidan, dhaqaale, siyaasad, gaashaan-buur, ee markaa afrikada madoobi taqaanay.

Sida khubaro iyo tariikhyahano badani ay tibaaxeen waxa uu ahaa dagaalkii saddexaad ee addunka marka la eego baaxadda uu yeeshay, dalalka uu saameeyay, khasaaraha uu dhaliyay, waddamada ka qayb galay si toos ah iyo si dadban labadaba. Dagaalka oo ahaa mid dunida oo idili ay isha ku haysay natiijadiisana laga wada dhur sugayay dadka qaarkii waxa ay u bixiyeen dagaalkii yaraa ee dunida gilgilay.

Dagaalkuwaxa uu saameeyay afar qaaradood oo adduunka kamid ah: Afrika, Yurub, Aasiya iyo Ameerika.Waxa halkaa isku farasaaray ka sokow Soomaalida oo ahayd xaq u dirir gobonima doon ah iyo xabashida oo sidii la yaqaanay dhulbalaadhsi wadday labadii aragti ee ku loolami jiray hoggaanka adduunka xilligii dagaalka qabow, waa aragtidii Hanti-goosiga oo reer galbeedka Maraykan ugu tunka weynyahay ay aaminsanaayeen, iyo aragtidii kale ee xulufada reerr bariga USSR hoggaaminaysay ee Hanti-wadaagga.

Mar haddii dalka iyo dadka ku dhaqan Ogaadeeniya ay yihiin Soomaali si caddaaladda ka fog cadow loogu garba-duubay, dawladdii ka dhalatay midowgii labadii gobol ee Soomaalida koonfur iyo waqooyi waxa saarnayd masuuliyad akhlaaqi ah iyo

mid waddani ah, sababta oo ay tahay waxa ay masuul ka ahaayeen gayiga soomalida inta xorta ah iyo inta aan xorta ahaynba, sidaasdarteed masuuliyaddaa waxa ay qasbaysay in ay galaan halgan dheer oo lagu baadi goobayo midaynta iyo xasilinta labada gobol ee midoobay iyo xorraynta saddexda gobol ee maqan waa Ogaden, Jabuuti, iyo N.F.D.

Waddanka Itoobiya waxa ka talinayay muddo dheer qowmiyadda xabashida oo isu arkaysay in ay tahay qowmiyad ka sharaf badan itoobiyaanka intooda kale, dalkana waxa ay u xukumayeen qaabab kala duwan sida nidaam boqortooyo, mid ciidan iwm.Haddabamarkii ay saraakiishii koofiyad guduudda dargiga ee uu hoggaaminayay Xayla Maryan oo qaatay nidaamka Hanti-wadaagga qabsadeen Itoobiya dileena boqorkii caanka ahaa ee Xayle Salaase waxa ay Itoobiya gashay xaalad qalalaase siyaasadeed. Waxa jilcay is-haysahsada bulshada.Waxahoos u dhacay ilaha laga soo saaro dhaqaalaha oo markii hore ba koobnaa.Waxa wiiqmay awooddii ciidan ee ay lahayd Itoobiya.

Dargigu markii ay dalka qabsadeen waxa ay gumaad ba'an u geysteen maamulkii hore. Waxa ayna dalka ku xukumeen cabudhin, cabsi, dil, dhac, xadhig iyo gacan bir ah oo aan naxariis iyo dhimrin midna lahayn.Waxa ay ka duulayeen aragti ah in shacab tira badan oo sabool ah waxa keliya ee lagu maquunin karo uu yahay xoog iyo awood sheegasho.Muddo yar gudaheed Itoobiya waxa ay isu baddashay xabaal wadareed, xabsi weyn iyo goob colaadeed oo laga qaxo.

Ciidankii qabsaday xukunka waxa ay ku mashquuleen daminta iyo la tacaalidda kacdoonadii dalka oo dhan saameeyay ee ay dhallinyarada, ardayda, shacabka iyo shaqaaluhuba kagasoo horjeedeen laalidda xorriyadda iyo xasuuqii ba'naa ee ka socday qaybo badan oo Itoobiya ka mid ah.

Muddadii ay dawladdu ku mashquulsanayd qab jabinta shacabka iyo maquuninta awoodaha jira ee siyaasiga ah waxa xoogaystay jabhadihii halganka hubaysan kula jiray nidaamkii Abasiiniya. Waxaa sare u kacay iska caabinta ay wadaan dhaqdhaqaaqyada gobonima doonka ah ee ka hir galay gayiga oo dhan.

Gaar ahaan waxa nabar ku taagan Itoobiya noqotay jabhaddii Eretriya oo lahayd xoog shacab, tayo ciidan iyo taageero dibad. Jabhadihii Eritrea oo ay soomaalidu aadka u taageeri jirtay waxa ay qabsadeen goobaha ugu muhiimsan dalkaas.Waxa ay si joogta ah ugu duulayeen ciidamada xabashida oo ay u diideen jiif iyo joogba. Sida uu ku sheegay halgamaagii weynaa ee reer Eritriya Cismaan Saalax Sabbi buugga taariikh nololeedkiisa oo uu soo xigtay halgamaagii weynaa ee Geeska Afrika ahaana aabbaha falsafadda xorraynta iyo kaydinta halganka dheer ee shacabka Soomaali Galbeed Ibraahin Cabdullaahi Maax. Soomaalidu waxa ay si weyn isu garab taagtay jabhadihii ku kacsanaa taliskii xabashida, halgankii Eritriyana waxa ay ka taageeri jirtay dhanka tababarka, hubka, saanadda, diblumaasiyadda iyo in loo fududeeyo socodaalka, sidaas darteed waxa ay siisay dawladdii Soomaaliya 35kun oo Baasaboor jabhaddaas. Baasabooradaas oo u suuragaliyay in ay u safraan dawladdaha daneeya qadiyadda Eritria.

Dhanka kale waxa mooraal helay jabhadihii Oromada, Canfarta oo markii hore aan lahayn awood badan. Waxakale oo xabashida sii wiiqay dawladda Maraykan oo taakulayntii hubka iyo diblomaasiyadda hakisay, kadib markii xukunka ay la wareegeen niman shuuciyadda aaminsan oo uu hoggaaminayo Xayle Maryam.

Maraykanka oo taageero weyn u hayay nidamakii boqortooyada ee aaminsanaa aragtida Hanti-goosadka wuu joojiyay taageeradiisii isaga oo ku andacoonaya in nidaam xoog iyo afgembi xukunka ku gaadhay aan la taageeri karin siyaasadda maraykankana aysan ka mid ahayn in nidaamyada ku dhisan xoogga iyo xadaynta xorriyaadka guud ama gaarka ah la taageero, taas waxa uu kaga jawaabay Xayla Maryam in uu dhaleeceeyay isbahaysigii Safaari oo ay ku midaysnaayeen dawlado badan oo ay kamid ahaayeen Maraykan, Sacuudi Carabiya, Iiraan, Kenya iyo dawlado kale oo bahwadaag ku ahaa aragtida Hanti-goosadka.

Dhanka siyaasadda jabhadihii xorraynta Soomaali Galbeed iyo Soomaali Abboo waxa ay gumaystaha u gaysteen dharbaaxo kulul. Dhanka jabhadda soomaalidu waxa ay la wareegeen dhammaan gobollada uu ka koobanyahay dhul weynaha Soomaalida ay Itoobiya gumaysato marka laga reebo afar magaalo oo kala ah: Harar, Diridhaba, Jigjiga iyo Godey.Magaalooyinkaas oo taliskii Mingiste u ahaa hal-bowle waxa ay qaateen wakhti dheer in gacanta lagu dhigo, gaar ahaan magaalada Diridhaba oo noqotay meel aan si sahal ah lagu maquunin karin, walow dadka u dhuun duleela dhaqanka ciidanka ay dhahaan waxa jiray gaabin ama dhayalsi ay ku kaceen hoggaankii ciidanka ee aagga Diridhaba taas oo ka dhigtay magaalo hanjabisay ciidankii Xoogga Dalka Soomaliyeed, sarana u qaadday mooraalka xoogaggii gumaystaha madow ee Xabashida.

Maadaama jabhadihii deegaanka u dhashay oo taakulo, tababar, hub iyo saadba ka helayay jamhuriyaddii Soomaalida ay la wareegeen waddankii, shalayna ay Jabuuti oo soomaalidu quud darraynaysay in ay ku soo biirto ay ka go'day oo ay ku dhawaaqday dawlad madax bannaan, jamhuuriyaddii soomaaliduna ay aqoonsatay iyada oo ka cararaysa damaca

Itoobiya ee ahaa in Jabuuti lagu daro Xabashida maadaama deegaan ahaan iyo dad ahaanba ay aad u yartahay, waxa ay golihii sare ee kacaanka ku abuurtay walbahaar ay ka qabaan in labada gobol ee dhiman gaar ahaan Soomali Galbeed oo foolanaysa ay gooni isu taagto adduunkuna uu u aqoonsado dawlad madax bannaan halkaana lagu duugo himiladii Soomaali-weynee ka dhex guuxaysay maanka ummadda soomaliyeed.

Inkaste oo aragtida gooni isu taaga Ogaadeeniya haddii ay xorowdo aysan ahayn mid bisil oo miiska saaran, ama xaqiiqdeeda la hayo, haddana waxa ay noqotay utun ku taagan taliskii Milatariga oo markii danbe ku qasbanaaday in ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed gudaha u galo dhulka Soomaali Galbeed iyaga oo ka duulaya midnimada ummadda soomalaiyeed ee muqaddaska ah goor iyo goob kasta. Dadkii ku dhaqnaa Soomaali Galbeed waxa ay kusoo dhaweeyeen ciidamadoodii geesiyaasha ahaa farxad, waxa ayna oggaadeen in ay leeyihiin walaalo u huraya naf iyo maal

Arrimahaa aan soo sheegnay iyo kuwo kale oo dahsoon ama muuqda waxa ay ahaayeen kuwo ku dhiiri galiyay dawladdii soomalida ee curdinka ahayd in ay guluf colaadeed ku qaaddo dawladda Itoobiya, ciidan jiray 17 sanana uu cagta mariyo ciidan boqolaal sano dhisnaa. La yaab malaha waa awoodda xaqa iyo ciidda oo inta badan u hiilisa xaqlaha naftiisa u huraya dhulkiisa hooyo.

Dagaalka waxa laga qaaday dhowr aag. Wax aana markiiba cagta la mariyay difaacyadii gumaystuhu ku lahaa Soomaali Galbeed, waxa ayna ciidanku u sii ruqaansadeen gudaha Abasiiniya iyaga oo gaadhay inta badan dhulka Oromiya, Shawa, qaybo ka mid ah dhulka Canfarta iyo koonfurta Itoobiya. Ciidanka Soomaalida ee ka dagaal galay dhulkaa baaxadda weyn tiro ahaan waxa lagu

qiyaasay 35kun oo askari, sida ay qeexeen ilo ciidan oo ka ag dhawaa taliska ciidanka xoogga dalka, aniguse Axmed ahaan waxa aan u maleynayaa in ciidanku intaa ka badnaa, sababtu tahay Soomaali oo dhan waxa ay ahayd in dagaal ku jirta iyo in heegan ah."

Inta uu adeer Axmed ii wadey sheekada waxa aan galay fikir iyo xaalad ka duwan middii caadiga ahayd ee aan ku jiray, waxa aan la yaabbanaa sida uu u hayo xogta intaa la'eg iyo weliba sida uu u gorfeynayo xaaladaha dagaalka iyo isbahaysiga dawladdaha adduunka isaga oo aan jaamacadna u galin macalinna u dhigin.

Sigaar kale ayuu shitay Axmed. Aamus dheerna wuu galay! Aniga oo ka xun xaaladda aamuska ah ee uu galay kana baqaya in uu isbaddalo ayaan ku dhawaaqay: adeer sheekada hakala goynine ii wad. Inta uu indho xanaaqsan igu jalleecey ayuu yidhi: "Eegga umbaan dararayba Guuroow, goormaan kala gooyaa." halkii ayuuna kasii amba qaaday sheekadii.

"Guuroow ciidamada soomaalidu iyaga oo maskaxda ku haya deegaanka, dadka, awooddooda milatari, caddaaladda qadiyadda waxa ay qabeen aragti ah in dagaalka durba la dhammeeyo Abasiiniyana la soo afjaro, awooddeedana la tuso.

Adduunka oo dhan yaab ayay ku noqotay in soomaalidu sidaa fudud dawladdii awoodda badnayd ay u dullaystaan ugana dhigaan bisad sida uu qeexay sarkaal Soomaali ah oo ka sheekaynayay sida ay soomaalidu u ahayd awood aan la filanayn oo si qarsoon isu diyaarisay ugana soo caan baxday golayaasha lagu gorfeeyo siyaasadda iyo awoodaha militariga.

Ciidamaddii Itoobiya waxa ay noqdeen sida bakayle rabbaayad ah, halka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ay noqdeen aar cartamaya cagtana ay mariyeen wax walba oo ka hor imaada. Itoobiya oo

ubucdeeda ay fadhiyaan ciidamada xoogga dalka Somaliyeed waxa wiiqantay sharaf iyo awood wixii ay lahayd.Waxa beenoobay sheeka baraleydii ay afrikaanka ku harowsan jireen ee ahayd in ay yihiin Libaaxa Afrika.Libaaxa Afrika hal dal ayuu noqday waxa aana ku rumoobay halhayskii ahaa ilka doofaar la sahansay.

Halkaa marka ay xaajo marayso ayay Itoobiya go'aan ku gaadhay in ay si shuruud la'aan ah isugu dhiibto midowgii Waarso oo uu Ruushku hormuud u ahaa si ay hub iyo saaanadba ugasoo helaan gaashaan buurtaa calankoodu babanayay muddada dheer cid u babac dhigi kartayna ay yarayd.

Mingeste Xayla Maryam ayaaa safar degdeg ah ku tegay magaalada Moosko ee caasimaddii midoowgii Soofiyeeti isaga oo caddeeyay in dhammaan mabaadi'da hagta Itoobiya ay noqonayaan Shuuci, si buuxdana xubin uga noqonayaan waddamada ku dhaqma mabda'aa. Ruushka oo markii hore aan ku qancsanayn dhabnimada in soomaalidu ay qaadan karaan Hanti-wadaagga cilmiyaysan marka la eego diinta, dhaqanka, sooyaalka iyo shakhsiyadda qofka soomaaliga ah, waxa uu soo dhaweeyay aragtida cusub ee Itoobiya isaga oo u soo bandhigay Soomaaliya iyo Itoobiya in ay midoobaan oo ay noqdaan hal dal maadaama ay labaduba saaxiib dhow la yihiin midowga Soofiyeeti oo markaa ku dadaalayay baahinta awoodihiisa iyo soo xeragalinta dawladaha ku yaala juquraafi ahaan meelaha lafdhabarta u ah dhaqdhaqaaqa ganacsiga, siyaasadda iyo ciidanka.

Aragtida ah in Itoobiya iyo Soomaaliya ay midoobi karaan waxa gaashaanka u daruuray Soomaalida oo u arkaysay in ay tahay gabood fal loo gaysanayo hanka soomaaliyeed, kaas oo ahaa in dhamman umaddu xorriyad ku naaloodaan iyaga oo ka

faaiidaysanaya khayraadka dhulkooda hooyo. Ruushku markii uu miisaamay labada dal waxa u soo baxay in marka la eego islaamnimada, qabka weyn ee Soomaalida ku jira iyo Itoobiya oo u taagnayd waligeed difaaca masiixiyadda bariga Afrika, maanta ay munaasab tahay in Xabashida la taageero.

Soomaalidu si adag ayay u wajaheen go'aanka ruushka, waxa ayna u qabteen dadkii Soofiyeetka ahaa ee ku noolaa Soomaaliya haddii ay yihiin shacab, macallimiin, ciidan, injineerro in ay dalka kaga baxaan muddo yar oo ku siman 72 saac. Go'aankaa inta badan adduunku uu u arkayay qar iska tuurnimada, Soomaalidana farxadda geliyay waxa uu irdho iyo la yaab ku abuuray isbahaysigii Waarso oo dhoola tus ciidan ka samaysay xeebaha dhulkeena iyaga oo ka cabsanaya in aan dhibaato u geysanno raciyada Soofiyeetka.

Go'aankaas waxa talo si siyaabaha ka mid ah ugu lahaa Maraykanka oo dawladdaha Gacanka Carbeed ku yaala u soo marinayay fariimaha jarridda xidhiidhka Ruushka, iyaga oo u balanqaaday in ay buuxin doonaan booska ay bannaynayaan.Ballantiiay reer galbeedku qaadeen gaar ahaan Maraykanku ma noqonin midho dhal sababo ay kamid tahay in dawladdaha aaminsan kirishtaannimadu,Itoobiya u tahay khad cas oo lama taabtaan ah, sida ay siyaasiyiinta Itoobiya lagasoo bilaabo qarnigii 16aad ay hirgaliyeenna xabashidu waa jasiirad masiixi ah oo ku dhextaalla bad weynmuslim ah, haddii aan la garab istaaginna waxa macquul ah in biyaha badweyntu ay liqaan jasiiraddaas aan haysanin gabbaadka.

Soofiyeetka oo aad uga xanaaqsanaa tallaabadaas ay soomaalidu qaadday, waxa uu ku tala jiray sidii uu usoo ceshan lahaa karaamadiisii dhulka lagu jiidey, si aragtidaa loo hirgaliyana waxa ay garab istaageen taliska Xabashida, iyaga oo bilaabay taageero

Militari oo aan xad lahayn.Waxaay u fureen Itoobiya bog cusub, waxa ayna geeska Afrika kusoo hageen dawladdihii Shuuciga ahaa gaar ahaan Yamanta Koonfureed iyo Liibiya. Geeddi socodkii dagaalkana wuu is baddalay markii ay Kuuba keentay askar ka badan 17kun oo ay hoggaaminayaan khubaro iyo saraakiishii ugu sarreeyay midowgii Soofiyeeti. Fara gelintaa arxan darrada ah waxa ay kafaddii dagaalka u leexisay xagga xabashida.

Soomaalidu kuma aysan fashilmin dagaalkii oo qudha'e waxa ay ku fashilmeen diblumaasiyadda iyo in qadiyaddooda ay ka gadaan adduunka. Soomaalidu ma aysan helin dawladdo waaweyn oo u diyaariya masraxa diblomaasiyadda caalamka, xambaarana aragtida ay soomaalidu qabaan, arrintaasi waxa ay horseedday in Soomaalida loo aqoonsado dal duulaan ku ah dal kale oo Afrikaan ah iyo ciidan u socda dhul balaadhsi. Halkaa waxa ku galbatay aragtidayda qadiyaddii weynayd ee ka horraysay dagaalkii dhex maray labada dawladood. Qadiyaddii Ogaadeeniya iyo masiirkii shacabkuba waxa ay isu baddaleen qalalaase xuduudeed oo laba dawalad ka dhexeeya.

Dawladdaha ku yaala mandiqadda uu dagaalku saamaynta ku lahaa marka laga reebo dawlado tira yar oo Carab ah waxa ay isgarab taageen Itoobiya iyaga oo ku dheggan mabda'ii ay afrikaanku ansixiyeen ee ahaa in aan waxba laga baddalin xuduudaha uu gumaystuhu ka tegay.

Soomaalida oo shirar badan oo ay lahaayeen Afrikaanka iyo Addunkaba ka qayb galay uma suurta gelin in qadiyaddoodii ay sharxaan ama ay fahansiiyaan bulsha weynta ku dhaqan daafaha adduunka ee geeska Afrika ka fog, dawladihii fahansanaa qaddiyadda Soomaalida waxa ay si badheeh ah ama dadban u taageersanaayeen Itoobiya oo loo arkayay in duminteedu ay khalkhal gelinayso geeddi socodka iyo isu dheelli tirnaanta bariga

Afrika, gaar ahaan marka aan eegno in soomaalidu ay u miciyo lisanaysay Kenya oo ahayd dawlad tabar yar Ingiriiskuna ilaaliyo.

Waxa muuqday siinaariyoow aad ugu fool xun cadowga ummadda, Soomaalidana aad ugu quruxbadnaa. Waxa laga cabsi qabay haddii soomaalidu ku guulaystaan dagaalka Ogaadeeniya in ay ku duuli doonaan Kenya oo aan lahayn awood ay ku hor istaagto cutubyada ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed ee ku caanbaxay tababarka iyo taatikada sare ee dagaalka. Sidoo kale waxa maanka dadka gorfeeya siyaasadda ku jiray in dib u midowga Jabuuti iyo Soomaaliya ay suuragal tahay haddii dhul weynaha Soomaali Galbeed la xorreeyo.

Inkaste oo halgamaagii aaminsaa aragtida midnimada SoomaalidaMaxamuud Xarbi lagu dilay shil diyaaradeed isaga oo kasoo laabtay Faransiiska haddana haddii afartii kale la mideeyo ma adkaan lahayn in si siyaabaha ka mid ah loogu qanciyo jabuutiyaanka in ay ku biiraan Soomaalida si loo mideeyo cududda ummaddeena.

Riyadaas quruxda badan waxa ay lid ku tahay mabdi'ii boqollaal jirsatay oo gumaysataha reer galbeedku dartii u kala qaybiyay umadda soomaaliyeed. Soomaalida oo mid ah waxa ay leeyihiin xoolaha nool ee ugu badan Afrika. Waxa dhex ceegaaga gaas dabiici ah iyo batrool. Waxa mara illaa toddobo webi oo leh dooxooyin iyo dhul beereed malaayiin Hektar ah.Waxa ay leeyihiin badda ugu dheer Afrika. Waxa ku yaala gacanka Al-Mandab oo xakameeya ganacsiga shiidaalka iyo maraakiibta adduunka ee Badda Cas.Waxa ay kulaalaan Gacanka Cadmeed oo batroolka adduunku maro.Waxa ay ganacsi iyo is dhexgal la leeyihiin ummaddaha ay walaalaha yihiin ee Carabta iyo Afrikaankaba ah.

Haddaba suura gal ma aha in ay Soomaali midowdo oo dib u soo helaan taariikhdoodii la duudsiyay iyo dadnimadoodii hoos loo dhigay markii jidhkoodii loo googooyay xubin xubin, si loo yareeyo saamayntooda una sahlanaato in la maamulo iyaga oo magan u ah dawladdaha iyo qoomiyadaha ay kula nool yihiin gayiga Afrika.

Ka dib markii miisaankii dagaalku uu isbaddalay khadkana ay soo galeen ciidamo caalami ah oo dhanka kale u rogay guushii Soomaalida, waxa bilowday jab baaxad weyn oo soo gaaray ciidamadeenii, soomaalidiina waxa ay waayeen qof garab istaaga ama gacan siiyay, halyeeyadii xoogga dalkana waxa soo wajahay mugdi iyo guuldarro aysan filanaynin. Guuldarrada ciidanka waxa ka horeysay niyad jab, iyo reja beel ku dhacay shacab kor u dhaafayay afar milyan oo ku dhaqnaa Soomaali Galbeed, kuwaas oo ku taamayay in ay ka xoroobaan gumaysiga Itoobiya.

Gabbalkaa dumay ee qariyay rejadii quruxda badnayd ee umadda soomaaliyeed waxa uu si isku mid ah u saameeyay Soomaalida oo idil, shacab iyo dawladba.Waxase ugu khadhaadhaa qixii shacabka Ogaadeeniya ay ka soo qaxeen dhulkoodii iyo jabkii is dhex yaacii ku dhacay ciidamdii xoogga dalka.

Ciidan guulaystay gacantana ku dhigay in kabadan 95% hadafkii ay lahaayeen waxa uu sida caadiga ah la nool yahay mooraal iyo niyad wanaag. Waxa u baryay waa cusub oo sharaf iyo karaamo ku biiriya awooddiisa. Hasayeeshee ciidankii Soomaalida oo daadsanaa in ka badan 3000km oo ah dhul iyo shacab kala dabeecad duwan hal mar ayuu jabay isaga oo aan marin iska caabbin iyo hordhaca guul darrada midna. Arrintaasi waxa ay dhalisay in ciidankeenii guusha ku fadhiyay uu hal mar isu baddalay ciidan ay soo wajahday guuldarro middii ugu xumayd.

Taas waxa caddayn u ah habqankii iyo hantaatacii gaadhay geeshkii soomalida ee sitay billadda geesinimada.Waxa ay ahaayeen niman buuraha sare ee Soomaali Abboo ku qaada heesihii waddaniga ahaa sida: ***Talisyohow wareersani war li'idaa. Ninna kama qab weynayn. Eryaay eryaay. Dhulka sow anigu ma lihi.Ninkii dhoof ku yimid bay geeriddu dhibaysaa*** iwm.Waxa ay sanka ciidda ugu ruuqeen awooddii Abasiiniya ee jirtay boqollaaka sano.

Isbahaysigii huwanta ahaa waxa uu dagaal ba'an ku qaaday soomaalidii oo noqotay shimbir baalashu ka qoyeen. Ciidamada cirka Itoobiya iyo Raashiyaanku aad ayay u duqeeyeen saldhigyadii Soomaalida.Ciidamada lugta Kuuba iyo xabashiduna waxa ay guluf ku qaadeen ciidankii teedsanaa dhammaan gudaha Soomaali Galbeed iyo Soomali Abboo. Saraakiishii xoogga dalku isma aysan lahayn waxaaad luminaysaan dhulkii aad xorayseen.Ciidamada xabshida iyo isbahaysigooduna waxa ay idankaga daba tagi doonaan gudaha jamhuuriyadda Soomaalida!

Waxa dhintay kumannaan askari.Waxa uu dhaawac gaadhay qabkii iyo dadnimadii ciidamada xoogag dalka oo awoodi waayay in ay is difaacaan duullimaad warkii daaye. Reer galbeedkii u gacan haadinayay kama asyan helin garab, Carabna uma aysan noqon gaashaan, marka laga reebo dhowr dawladood oo u balan qaaday in haddii ay xabshidu gudaha u gasho Soomaaliya ay difaaci doonaan ama ay siin doonaan hub ay isaga celiyaan cadowgaas."

Aniga oo maskaxda ku haya wakhtiga is guraya ayaan ku idhi: "adeer Axmedoow adiga oo aad u mahadsan kana raalli ahaanaya daalka iyo murugada aan dib kuugu celiyay waxa aad iiga warrantaa saamayntii uu dagaalku yeeshay iyo sida ay soomaalidu noqdeen dagaalka dabadii, maaddaama aad xog-ogaal u tahay

qaybna aad ka ahayd jabhadihii waddanka ka dagaalamayay Ciidanka Xoogga dalkana ceelalyada usii ahaa.

Sidaas waxa aan u idhi; sida aan la socono 1977^dii ka hor iyo kadib ayaa loo kala qaadi karaa geeddi socodka Geeska Afrika iyo waliba dawladnimada Soomaalida. Ka hor iyo kadib waxa ay kala yihiin laba xilli oo uu wax walba isu baddalay si xawli ah oo cidina saadaalinaynin, weji hor lehna deegaanka u yeelay.

Waxa aan maanka ku hayay in uu iiga sheekeeyo qaabka uu wax u dhacay iyo dhaawaca gaadhay siyaasadda, dhaqaalaha, aragtida Soomaali-weyn, iyo barakacayaashii badnaa ee aan anigu ka midka ahaa ee Soomaaliya kusoo qulqulayay tan iyo wixii ka dambeeyay jabkii dacaraysnaa.

Codka daallan ee xabeebtu ku gaarantahay, indhaha meesha fog igasoo fiirinaya ee aad gadaashooda wax badan ka akhriyi karto, muuqaalka wejigiisa doorsoomay intuba waxaay ay ii sheegayeen in hadalka uu sidii caadada u ahayd ku billaabi doono xikmad iyo xog durugsan oo uu ka hayo arrimaha aan wayddiiyay kuwaas oo gundhig u ah fahanka dagaalkii ugu weynaa Geeska Afrika darwiishkii dabadii

Hadalkiisii waxa uu ku billaabay; "halkaa waa meeshii aan usoo socdaye wiiloow i dhegayso hadalkaygana dhuux, dhug iyo dhiiranaan yeelo. Magacii jire, iga dhaaf dhabqinta iyo horboodka midna ma jecliye". Waxa uu Biyo ka cabbayay ashuun dhex yaallay mundul aad u qabow, koobka uu biyaha darsanayay oo dul saarnaa miis yar oo buug, taraq, toosh iyo warqaddo badani dushiisa ku daadsanaayeen, waxaa ku xardhanaa calankii jabhaddii xorraynta Soomaali Galbeed.

"Guuroow Saamayntii uu yeeshay dagaalkii waxa ay ahayd mid baaxad weyn oo aad u qoto dheer, aragti badan ayaa isbaddashay,

kuwo kale na waa ay soo kordheen, saameyntii uu ka tegay dagaalka haddii aan ka sheekeeyo waxa aan kusoo koobi lahaa dhowr arrimood oo lagama maarmaan ah; haddii aad doonayso in aad fahanto baaxadda dhaawaca iyo dhumucda burbur ee uu u geystay Soomaalida.

Waa midda koowaade dagaalkaa xaqa ah ee ay soomaalidu ku doonayeen dhulkoodii maqnaa waa ay ku hongoobeen, waxa uuna ahaa tallaabadii koowaad ee aan u qaadnay dhanka burburka. Dawladdaha haga siyaasadda adduunka oo aan raali ka ahayn xorraynta dhulkeenii maqnaa waxa uu u noqday marmarsiiyo ay cunaqabatayn iyo caqabado badan noogu geystaan, caqabadahaas oo ay ugu darnayd in halgankii dheeraa ee u dhexeeyay Soomaalida iyo Xabashida oo waayo ka socon jiray Addis Ababa iyo inta ka shishaysa wixii ka danbeeyay 1887[diina] ku soo urursaday Harar iyo inta ka sokaysa uu halkaa ku soo af-jarmay.Dagaalkii aan ku raadsanaynaay xuquuqdeena ee u dhexeeyay laba shacab oo midna gobonima doon yahay midna gardarro garab og ay waddo waxa uuqaatay waji kale oo marnaba aysan dadkeenu ku fikiraynin.

Laga billaabo maalintii aan ku jabnay dagaalka sidoo kale na aan ku fashilannay siyaasadda iyo suuqgeynta aragtideena ku aaddan xorraynta dhulkeena, qaddiyaddeena Soomaali Galbeed waxa ay isu baddashay dagaal xuduud laba dawladood isku maandhaafeen kadibna middii dhulka lahayd adduunku garab istaagay! Waacaddaaladda dalabta leh ee reer galbeedku ku dhaqaan dunidan caddaaladdii dhimatay ee aan ku noolahay.

Aniga oo aaminsan in dawladdii Soomaalida ay ku dhisnayd in dhul weynaha Soomaalida dhammaan la xoreeyo haddana waxa jiray siyaabo badan oo dagaalka loo dhigi karay, waxa ka mid ah in la taageero sidii jirtayba jabhadihii deegaanka inta ay waddanka

la wareegayaan kadibna codayn loo qaado aaya ka talinta dadka deegaanka. Arrintaa waxa ay si dhib yar u keeni lahayd aragtidayda in Soomaaliya ay ku biiraan, sababtu tahay dabaysha midnimada ee kacsan iyo dhammaan saraakiisha halganka hoggaaminaysay oo aaminsanaa midnimada Soomaalida waxa ay gobolka u horseedi lahaayeen in uu maanta ku naalloodo xorriyad buuxda isaga oo ka mid ah dhulka hoos imaada dawladda Soomaalida.

Laakiin ciidamadii militarigu waxa ay dagaal ku galeen gudaha Soomali Galbeed iyaga oo qadiyad u hiilinaya diidanna in jabhadaha qabsaday inta badan dalka aysan noqonin sidii Jabuuti oo kale. Fikraddaa sax iyo khalad waxa ay tahay aan jiilasha soo socda u dayn doono waxa ay baddashay aragtida guud ee gobolka, dawladdii Soomaalidana waxa ay u horseedday burbur laga gaashaaman karay. Shacab weynaha Soomaali Galbeedna waxa ay u geysatay dhaawac laxaad leh oo dhan walba ka soo gaadhay.

Dhaawaca soo gaadhay dadkii wuxuu ahaa mid baaxad wayn sababtoo ah waxa bartilmaameed noqday Markii uu qarxay dagaalku qof walba oo Soomaali ah, sidoo kale xabshidu uma aabba yeelayn dad iyo duunyo midna. Intaas waxa dheer cabsida iyo uurkutaalada ay reebeen dhaqamada gurracan ee ciidanka Itoobiya.Gaboodfalkoodu waxa uu noqday mid joogto ah argagaxna ku reebay dadka, sidaa darteed waxa meesha ka baxay isu gooshidda ganacsiga iyo koboca dhaqaalaha, kuwaasina waxa ay horseedeen barakac baahsan oo ka dhaca deegaanka.

Taasi waxa ay cirka kusii shareertay dhibatadii ka jirtay gobolka oo waligii ku soo jiray halgan iyo ka gilgilashada heeryada gumaysiga. Colaad iyo baahi waa labada wax ee dadka ku khasba qaxa iyo hoos u dhaca haybaddee markii ay is biirsadeen waxa ay

keentay in malaayiin qaxoonti ah ay u hayaamaan dhanka Soomaaliya.

Jamhuuriyaddii Soomaalida oo gashay dagaalkii dabadii xilli adag oo ay cirka isku shareertay maciishaddii, ma aysan lahayn awood ay ku marti geliso malaayiin kasoo qaxay dhulkoodii. Wax waliba waxa uu gaadhay heer aan waxba laga qaban karin. Waxadhacay sicir barar xoog leh, dalkana waxa ku yaraaday lacagta adag, deynta dalka lagu leeyahayna waa ay toban jibaarrantay.

Barakacayaashii kasoo qaxay dhul ay noloshiisa u madaxbannaanaayeen waxa soo wajahday nolol adag oo ka duwan middii ay yaqaaneen. Nolol aan ku tiirsanayn xoolaha nool oo lafdhabar u ah nolosha dadka Soomaali Galbeed ayaa ka jirtay qaxoontigii ku yiillay dhulkii bannaanaa ee boodhka iyo dabaysha ku caan baxay.

Sidoo kale Jabkii lama filaanka ahaa waxa uu dhaliyay siyaasad xumo iyaduna dhalisay isbaddal guud oo ku dhacay fikirka siyaasiga ah, qaab dhaqameedka dadka iyo dawladda, koboca dhaqaalaha iyo hanaqaadka diblumaasiyadda. Dawalddii waa ay awoodi wayday in ay bixiso adeeggii ay dadku u baahnaayeen sida caafimaadka, waxbarashada, amniga i.w.m. Waxahoos u dhac weyn uu ku imaadey warshadihii dalka oo markii horaba itaal yaraa.

Lama helin dawlad buuxisa xidhiidhkii qotada dheeraa ee ka dhexeeyey Soomaaliya iyo Ruushka. Waxa soo baxday baylah weyn iyo wehel la'aan, xilli isbahaysiga siyaasiga ah uu ahaa xayndaabka keli ah ee ilaaliya dawladdaha aan lahayn awood ku filan. Ruushku waxa uu ahaa dal xidhiidhka ciidan iyo midka dhaqaale ka sokow Soomaalida u ahaa gabbaad ay ka dugsadaan

qalalaasaha siyaasadeed ama ciidan ee adduunka ka taagnaa qarnigii 20[aad].

Hoos u dhac mooyee intii ka dambaysay dagaalkii kobac laguma haynin qaybaha kala duwan ee dalka.Waxasiyaaday cabudhinta iyo cabsida lagu hayo dhammaan bulshada soomaaliyeed mid diiddan kacaanka iyo mid u heelanba. Shirkadaha iyo mashaaricda waxa gacanta loo geliyay dad daacad u ah nidaamka, lagumasoo xuli jirin karti iyo ku toosnaan, taas waxa ay noo horseedday saboolnimo, mashaariicdiina waa ay iska baaba’een ama qaab aan tayo lahayn ayay u socdeen.

Hoos u dhacaa dhaqaale iyo dhaqan waxa ay dhiiri galiyeen ciidankii oo muddo badan ahaa halka xubin ee u bad qabta Soomaalida ayna isku raacsanyihiin in uu yahay ciidan lagu kalsoonaan karo dalka iyo dadkana samatabixin kara, taasi waa midda keentay in subixii uu dhacay afgembigii milatariga 1969[kii] inta baddan shacabku sacab iyo mashxarad la garab istaagaan xoogga dalka.

Jabkii Ogaadeeniyawaxa uu hoos u dhac u geystay dhammaan qaybaha ciidamada qalabka sida oo ku dhex milmay siyaasadda aragti ahaanna u qaybsamay dhowr qaybood kuwaas oo ay kala hoggaaminayeen saraakiil u arkayey guuldarrada mid ula kac ah oo hoggaamiyaasha qaar lagu dilayay ama lagu wiiqayay. Kuwo kale ayaa habacsanaanata ciidanka fursad ka dhex arkay iyaga oo isugu sheekeeyay in ciidanka awooddiisu ay liicday suurta galnatahay maanta in xukunka laga tuuro nidaamka ka taliya Soomaaliya.

Saraakiishii qabay aragtidaa danbe waxa ay hoggaamiyeen afgembi dhicisoobay oo ku sigtay in uu guulasyto. Saraakiishii ku hungoobay isku daygoodii, gacanta ayaa lagu dhigay, waxa ayna

mutaysteen xukunno kala duwan; qaar waa la laayay, kuwana waa la xidhay inyar oo ka mid ahna waa la cafiyay. Maxkamaddii ciidanka ee nacabka ahayd iyo dilkii laga baaqsan karay haddii la xeeriyo xaalka dalku marayo waxa ay laba jibbaareen uurkutaalada loo hayo taliskii ciidamada xoogga dalka.

Inkaste oo afgembigaa uusan gaadhin heer guul ah, haddana waxa uu iftiimiyay kala qaybsanaanta ciidanka, waxa uuna muujiyay habacsanaanta laamaha ciidamada qalabka sida. Sirtanimanka abaabulayay afgaembiga lama ogaanin taas oo ahayd arrin aad uadag gaar ahaan bulsho ku caanbaxdey warbixinta iyo faafinta sirta.Waxaintaas oo dhan ka muhiimsan in uu jebiyay darbigii cabsida iyo argagaxa lahaa ee ay askartii afgembiga ku qabsatay dalka dabayaaqadii 1969[kii] ku gadaameen xukunkooda iyo naftoodaba.

Mar haddii ciidankii qaybsamay waxa jabtey haybaddii ay dowladdu ku laheyd Soomaalida dhaxdeeda, Maalinba maalinta ka danbaysa waxa sii kordhayay in si badheedh ah oo cabsi lahayn loo dhaleeceeyo hoggaanka iyo nidaamka siyaasadda ee ka jiray dalka.Waxasamaysmay jabhado hubaysan oo qaab qabiil u dhisan, walow ay badankoodu wateen magac uu ku ladhanyahay Soomaali oo gabbaad u ahaa aragtidooda gurracan iyo hadafkooda aan caddayn ama aan u qeexnayn si la fahmi karo.

Jabhadahaas oo ay midaynaysay ka shidaal qaadashada Itoobiya, iskuma aysan waafaqsanayn sida uu xaal noqon doono marka ay gaadhaan kursiga xukunka.Waxaay heshiis ku ahaayeen in awood lagu maquuniyo taliska xukuma dalka. Way adagtahay in ay dal maamulaan dagaal sokeeyana ka badbaadiyaan toban urur oo ku kala aragti duwan qaabka dagaalka, xukunka, siyaasadda, dib u heshiisiinta, aragtida siyaasadeed ee hagi doonta ummaddan lasoo daala dhacaysay xukun kaligii taliye ah oo shacabka u abaabulay

qaab kacaan isaga oo la hadlayay caadifadda soomalida oo ah dad xamaasaddu ku weyn tahay durbana la kicin karo awooddoodana loo isticmaali karo kolba dhanka la doono samaan iyo xumaanba.

Guuroow waxa aan jeclahay in aad fahmi kartid in dhalliisha aan kacaankii Oktoobar dhalliilay macneheedu ahayn in uu ahaa mid liita ama aan dalka u horseedin bog qurux badan oo taariikhda Soomaalida galay. Dawlad la sheego oo Siyaad iyo raggiisii ka horeysay ma jirin. Sagaalkii sano ee ugu horaysay xukunka askarta waxa la xaqiijiyay ama lagu talaabsaday waxyaabo soomaalidu muddo ku taamaysay oo ay adkayd in lagu xaqiijiyo muddadaa gaaban.

Waxa ololihii iskaa wax uqabso lagu dhisay ciidan noqday mid ka mid ah kuwa ugu tayada fiican Afrika, boqolaal iskuul, goobo caafimaad, garoomo diyaaradeed, waddooyin isku xidha inta badan gobollada dalka, dekado, xarumo dawladeed, mashaariic guulaystay, warshado, beero iyo biyo xidheeno loogu talagalay in ay korontada ka haqab tiraan bariga iyo badhtamaha Afrika.

Sanadihii ugu horeeyay xukunka ciidankaSoomaaliyawaxa ay xubin firfircoon ka ahayd ururrada ay ka tirsan tahay kuwa kale na waa ay ku biirtay sida Jaamacadda Carabta, ururka Islaamka.Waxaay xubin hoggaan ah ka noqdeen midowga Afrika.Waxa ay marti galiyeen shirar heer caalami ah. Waxala sameeyay iskaashatooyin iyo ururro shaqaale, urruro fan iyo hidde, kuwaas oo kor u qaaday wacyiga iyo garaadka bulshada. Fanka soomaaliguna waxa uu noqday mid ka mid ah fanka hormuudka u ah qaaradda madow iyo gayiga aan ku noolahay.

Waxa la xusay lana soo nooleeyay hadal haynta magaca dadkii dalkan dhiiggooda usoo huray sida: Sayid Maxamed Cabdille Xasan, Xaawa Taako, Axmed Gurey, Maxamuud Xarbi, Sheekh

Xasan Barsane, Suldaan Olol Diinle, dhallinyaradii SYL, i.w.m. Intaas oo jirta haddana waxa ugu wanaagsan iyo dhaxalka lagu xusuusan doono kacaankii 21kii Oktoobar waa qorista Afka Soomaaliga kaas oo mideeyay dhammaan umadda soomaliyeed maanta, haddii aanan ka midaysnayn luuqadda, diinta iyo dhaqanka waxa adkaan lahayd inaan isfahanno waxna isu sharaxno.

Inkaste oo afka laatiinka ee la doortay uu dhaliyay buuq badan, dadna ay u dhigeen in laga fogaynayay Afka Carabiga oo saamayn diimeed iyo mid dhaqanba ku leh gayiga Soomaalida, haddana qorista afku waxa uu ahaa guul ay gaadheen madaxdii Soomaalida ee hindisay meelna mariyay baahida loo qabay in la helo far qoran oo qofka soomaliga ahi uu leeyahay, fartaas oo uu wax kubaran karo, waxna ku qori karo, wax ku akhrisan karo, wax ku curin karo, ku gudbin karo dareenkiisa iyo hibooyinka uu leeyahay.

Qoristii Af Soomaaliga iyo ololihii la dagaalanka jahliga waxa uuSoomaaliya ka dhigay goob ilays aqooneed u soo baxay.Waxauu hoos u dhigay tirada dadka aan wax qorin waxna akhriyin, waxa uuna soo afjaray dooddii ahayd xarafkee ayaan qaadannaa oo aan afkeena ku qornaa? Waxa sharaf ugu filan xukuumaddii kacaanka in kadib iyo ka hor midna aysan Soomaali yeelanin dawlad wax tar leh dalkana ku soo kordhisay wax qabad la taaban karo.

Waxyaabaha uu dagaalku keenay inkasta oo ay hadda bilow tahay waxa ka mid ah in aragtidii midaynaysay ay hoos u dhacday cagtana la saaray waa sida ii muuqatee in ay Soomaalidu lumiyaan isku xidhnaantii iyo walaalnimadii soo jireenka ahayd intii ay ku dhaqnaayeen geeska Afrika.

Guuroow Muddadii dheerayd ee ay Soomaalidu ku noolaayeen gayigooda teedsan in ka badan hal malyan oo kiiloomitir oo isku wareeg ah, waxa ay ahaayeen dad dhaqda xoolaha, tabcada beeraha, baddana ka jilaabta, ganacsi ahaanna ku xidhan ilabaxnimooyinkii qadiimka ahaa. Weligood waxa ay ahaayeen dad xor ah oo u madaxbannaan noloshooda iyo go'aamada ay ka qaadanayaan wajihidda duruufaha ku xeeran.

Reer guuraanimadu waxa ay ahayd fursad ay soomaalidu in badan kaga badbaadeen mareegaha cadowga. Bulshadii afrikaanka ahayd ee beeralayda u badnaydwaxa si fudud looga takhalusay diintoodii dhaqankoodii iyo afkoodii.Waxaana lagu beeray afkaar iyo aragti cusub taas oo u adeegta danaha gumaystaha tan iyo maanta, afrikada madowna ka fogeysay nolol wanaagsan iyo nabad galiyo.

Haddaba muddo ayaa la raadinayay in Soomaalida qabka laga dilo, la buunbuuniyo aragti lagasoo minguuriyay golayaasha siyaasadda lagu gorfeeyo, gaar ahaan golayaasha diiddan midnimada umadda soomaaliyeed, waxa se muddo diiddanaa in ay aragtidaasi fusho shacabka oo baraarugsanaa ogaana tabaha cadowgu uu nala damacsanyahay.

Haddaba si dareen wadareedka ku jiraSoomaalida meesha looga saaro waa in la helaa wax ka la geynta Soomaalida ka ciyaari kara kaalin muuqata oo si sahlan u baddali kara aragtida midaysa umadda. Muddo dheer kadib waxa soo baxay in soomaalidu gol jileec leeyihiin taas oo ah qabiil.Waxa la isku raacay in la buunbuuniyo kala duwanaanshaha qabiilka, la hormariyo ku faanidda jifooyinka, waxa qabiilka loo isticmaalay in lagaga hortago midowga iyo iskuduubnida umadda soomaaliyeed.

Si qabiilka loo hirgaliyo waa in laga saaro sooyaalkooda wax walba oo mideeya. Waain si joogta ah loo suura xumeeyo halyeeyada dalka iyo hiboolayaasha ummadda.Dadkii ka dhexeeyay Soomaalida ee soo halgamay ama nolosha wax wanaagsan ku biiriyay waxa loo ekaysiiyay dad qabiil ah. Waxa la tusay Soomaalida in qof walba qabiilkiisa uu ku faano.Qof qabiil kale ahna si kaste ha u wanaagsanaadee uusan macno ugu fadhiyin. Taariikhdu waa midda jifadaadu samayso ayaa qof kaste hoos loogu sheegay.

Dabinkaa cadowgu noo dhigay ee aan sida indha la'aanta ah ugu dhacnay waxa uu hoos u dhigay isku xidhnaantii iyo taariikhdii midaysnayd ee umaddu ay lahayd, waxuuna dadka u kala qaybiyay qabiillo, jilibyo, jifooyin iyo deegaano ay ku dhisanyihiin jabhadaha dowaldda kasoo horjeeda maanta.

Qof kaste oo garaad iyo qab leh waxa uu noqday gacan ku gabbed.Waxaa laga saaray suuqa siyaasadda illaa uu ka noqday tuke cambaar leh. Waxa soo buuxiyay madalaha dawladda iyo kuraasta hore dad muuqaal ahaan noo eg, mabda'a ahaanna matala awoodaha isu bahaystay gumaynta Soomaalida.

Dhammaan awoodahaas waxa ay u adeegayaan meel marinta mabaadi'da hoosaysa.Waxaay la dagaalamayaan wax walba oo Soomaalida isu soo jiidaya. Walaaltinimo, is cafin, isu tanaasul iyo in xasaradaha la xaliyo awoodahana la mideeyo waa dambi weyn oo aan ladhaafi karin cidda gasha.

Muddo dheer kadib waxa aan luminay xukunka maskaxdeena oo isubaddashay qashin qub. Ma curinno aragtiyo badhax la' oo Soomaali leedahay, midda naloo soo dhiibana ma gorfayno oo ma turxaan bixinee waan hirgalinaa indha la'aan.Kadibwaxa si

buuxda loo qabsaday maankeena.Waxaaan noqonay dad loo hago sida iyo dhanka la doono.

Waxa aan noqonnay ummad aan lahayn dhaqan iyo mabda'a kulmiya, dad u wada shaqeeya cadow, ama dammanayaal ah oo aysan diirinin dhacdooyinka ku xeeran iyo dabinnada cadowgu daadinayo.

Waxa gayiga buuxiyay calooshood u shaqaystayaal matala dawalddaha shisheeye oo dalka ka dhigay saylad lagu kala iibsado danaha umadda soomaaliyeed, waxyaabaha ugu xun ee dadkii soomaliyeed ku dhacay ayaa waxa uu noqoday in nafta iyo sharaftu macno lahayn, waxa la qaddariyaa shilinka kadib markii aan ka talaabsanay xadhig walba oo diin iyo gobanimo ah! Taasina waxa ay noqotay mid ugub ku ah dhaqanka Soomaalida ee halhaysku u ahaa gobonimada ka raac.

Gumaystihii iyo calooshood u shaqaystayaashii gacanta ku dhigay siyaasadda iyo aaya ka talinta dalka waxa ay sababeen in maanta iskadaa gobolladii maqnaaye jamhuuriyaddii Soomaalida ee xorta ahayd ay sii kala socoto oo jabhado kala maan ah ay gacanta u gasho.

Soomaaliyada xorta ah waxa ay indho u ahayd soomalida ku hoos nool gumaytaha afrikaanka ah. Waxa ay Soomaali ka dhiman wayday iyada oo ay isu kaashadeen dhammaan quwadaha adduunka waxa uu ahaa mabd'a iyo ku dhegganida qadiyaddooda dhabta ah. Haddaba si meesha looga saaro arrintaa waxa la barbaariyay dad nooc walba leh oo ka shaqeeya foolxumaynta halganka iyo kala qaybinta ummadda.

Waxa aan joogay xilli ay soomaalinimadu macno lahayd, dadkuna ay walaalo ahaayeen, ma jiirn xuduud u dhexaysay Soomaalida, hal dad iyo hal dal ayaa la ahaa. Markiiuu dhacay dagaalkii 1977[dii]

ee aan ka soo qaxnay guryihii aan degganayn waxa naloo sheegayay in aan u socono qayb kale oo dhulka hooyo ka mid ah.

Malaayiintii ka soo qaxayay dhul weynaha Ogaadeeniya ma aysan aaminsanayn in ay kasoo tallaabeen xad, una soo gudbeen dhul kale.

Waxaaan weli dhex soconay dhaxalkii awoowe kaas oo ka weyn gumaysi iyo kala qoqobidda dadka aragtida hooseeya.Dagaalkii1977[dii]waxa uu na baray in aan ka mid nahay ummad halyeeyo ah cadowgana u dhabar adag, walaalahoodna u dhimriya.

Markii lagala dagaalamay qabkii waxa naftooda laga buuxiyay quudhsi iyo qadarin la'aan.Waxaayna noqdeen sida neef adhi ah oo meeshii loo jiido aadaya, isaga oo aan wayddiinin ruuxna, xaggeen aadayaa?Xaggeela iiwadaa?Iyo yaa tihiin midna?!

Waxa dhalan rogmay aragtiyadii.Waxaisdaba maray fahankii.Wixiishalay saxnaa ayaa maanta khaldan. Wixiishalay laga xishoon jiray ayaa maanta lagu faanaa! Muddo dheer kadib waxa meesha kabaxay soomaalinimadii.Waxa hoos u dhacay qiimaha uu lahaa erayga “Soomaali” oo noqday wax la isku caayo, la isku cambaareeyo. Waxase ugu xanuun badan in uu magacii milgaha lahaa noqday magac u taagan saboolnimo, dagaal, qax, fashil siyaasadeed iyo ismaan dhaaf jahli iyo qabiil ku dhisan.

Isbaddalka fahanka ku dhacay iyo hoos u dhaca Soomaali-weynwax aad ku garanaysaa maanta haddii la wayddiiyo dadkii u codeeyay bilowgii dawladnimada Soomaalida ku biiridda Soomaali-weyn uma malaynayo in hal qof uu u codayn lahaa soomaalinimo, sababtu tahay intii xorta ahayd ayaa is dilaysa nolol na isu diiddan.

Muddo dheer oo la barbaarinayay aragtiyo kasoo horjeeda Soomaali-weyn waxa maanta lagu guulaystay in ay noqoto aragti ay xambaarsanyihiin dad aad u yar oo aan saamayn lahayn. Arrimaha loo bahdilayo Soomaali-weyn dawladduhuna ugu diidan yihiin Soomaalida degganaansho siyaasadeed kama madhna in dadka deggan gobollada maqan ay ku dhex milmaan dawladdaha gumaysta, kuna yeeshaan hanti iyo dano kale kuwaa oo ka hor istaagaya in ay ka fikiraan ummadda soomaaliyeed oo mid ah".

Halkaas marka uu marinayo sheekada makhribkiina la gaadhay ayuu Axmed oo daalay iga dalbaday in aan u keeno koob biyo ah. Sheekadii barqinkii uu billaabay waxa ay nala jibaaxday meelo badan, waxa uuna joojiyay aniga oo weli u hamuun qaba sheekadiisa xikmadda iyo xaqiiqada xambaarsan. Waxaka muuqday wajigiisa in uu la falgalay hadalladiisa.Anigana waxa aan indhahayga ku hubaa illin qoysay jidhkayga, marka uu meelaha qaar marinayay hadalkiisa, codkiisa oo xabeeb leh waxa uu kusii darayay sheekada murugada leh dhadhan naxdin iyo utun miidhan ah.

Galabkii aan adeer Axmed maganta uga ahaa in aan fahmo noloshayda iyo ruuxa aan ahay waxa uu noqday mid aan iga hadhin. Haddalladiisii waxa ay maankayga ugu qormeen si cad oo waayuhu ay tiri waayeen. Waxa aan gurigiisa kasoo baxay aniga oo maskaxdaydu ay weelayn la'dahay dhacdooyinkaa xanuunka badan iyo tariikhdaa dheer ee uu soo taxay odayga ruugcaddaaga ah.

Malahayga waxa ay ila ahayd in aan si fiican u fahmay sababta aan qaxoonti ugu ahay xeryo ku yaala dhulkayga hooyo.Waddamada isku haya dhulkayga iyo quwadaha ku hirdamaya deegaankayga. Waxaaanse hadda garanayaa in ay ahayd bar bilow iyo xog aan

dhammaystirnayn badankeedana markii aan weynaaday fadhigayga iigu timid aniga oo aan raadinin wakhtina gelinin.

*XERADA ILAA XAMAR*

# SAFARKII KOOWAAD EE NOLOSHAYDA

Safarkii aan kaga tegay xeradii qaxoontiga ee aan ku aaday caasimadda umadda Soomaaliyeed ee Xamar waxa uu ahaa kii koowaad ee noloshayda aan safro aniga oo keligay ah, lana soconin mid ka mid ah labadayda waalid ama labadoodaba, ama ruux kale oo iga masuul ah. Sida kuu muuqan karta ma ahayn safar saamayntiisu ay ku egtahay dhowrka boqol ee kiiloomitir ee u dhexeeya Hiiraan iyo Banaadir balse waxa uu ahaa safar dheer oo qaatay malaayiin kiiloomitir iyo dhowr iyo labaatan sano oo noloshayda ka mid ah. Waxa laga yaabaa in uu ciwaan u noqon karo noloshii safarkaa ka danbaysay oo dhan.

Markii aan Banaadir aadayay ma aan ogeyn in anigu aan ka badbaadi doono dhibaato weyn oo xerada qaxoontiga ee aan ka tegay ka dhici doonta sanado yar kadib taas oo lagu gumaaday kumannaan bir ma gaydo aan waxba galabsanin ah, sidoo kale maan ogayn in aan safar joogta ah kusii jiri doono wixii hadda ka dambeeya. Magaalaba mid ayay ii dhiibtay shacab kaste na mid kale ayuu igu wareejiyay ugu danbeyntiina waxa aan arkay aniga oo dhulkaygii hooyo ka fog malaayiin meyl.

Inkaste oo aan caasimado saamayn leh ku noolaa muddaddii ka danbaysay hayaankii aan u galay hirgalinta himilooyinkayga haddana hal habeen maan illaawin xaafadihii boodhka badnaa ee aan indhaha ku kala qaadnay aniga iyo kumannaan ubad ah oo noloshoodu ka bilaabato qaxoontiyadii Soomaaliya, mana illaawin xaaladdii aan ku jirnay markii ay hooyaday go'aansatay in aan ka

diga rogto Baarka Hiiraan iyo webiga Beled-weyne una guuro badda Muqdisho iyo nolosha ilbaxnimada iyo dawladnimada barkisan.

Billowgii 1989kii ayaan dhammeeyaay fasalkii 11aadiyada oo ay jirto cabsi badan oo laga qabo burburka dawladdii Soomaalida. Sanadkaasi waxa uu kamid ahaa sanadihii marba uu dumayay lakab kamid ah lakabyada isku haya dalka.Waxa uu si kulul dagaal ugasocdaa waqooyiga jamhuuriyadda Soomaaliya. Dawladdu waxa ay iskacaabin adag kala kulmaysay jabhado hubaysan oo kasoo horjeeda.Waxa meel walba qubanaya dhiig, burbur, illin, iyo barakac xoog leh.

Waan dareemi karay dhibka uu gaysan karo dagaalka Hargaysa, Burco iyo dhammaan deeganada waqooyi kudhex marayay jabhaddii SNM iyo dawladdii Soomaaliya. Waxa aan gaadhay rejo beel ah in maanta soomalidii ay siikala socoto, dadkii qaxoontiga ku dhaqnaa ee ay xabashidu dalkoodii kasoo qixisay waxa ay ka xumaayeen in jabhad walba oo dawladda mucaaridda ay magan unoqoto Abasiinaya. Waxa ay is wayddiin jireen sababta ay u dagaalami la'yihiin iyaga oo aan loo yeedhinin waxa ay rabaan, ama qabanayaan, dabadana aan la gelin muska dawladaha cadowga ku ah umadda soomaaliyeed? Waxa kale oo ay is wayddiin jireen sababta keentay in jabhadahan ay aragtidooda ku meelmarin waayaan wada hadale ay qori iyo baaruud u badheedhaan?

Markaste oo dagaalka gudaha uu sii xoogaysto oo soomaalidu isu noqdaan cadow is gumaadaya waxa sii laalmaysay qadiyadda malaayiintan ku oodan xeryaha, sababtu tahay waxaa hoggaan u ah qadiyadda xorreynta Soomaali Galbeed dawlad midaysan oo awood leh Soomaaliyana ka curata, intase ay soomaalidu isruugayaan ajandaha lagu maamulayana Addis Ababa laga soo

minguurinayo waa jab iyo hagradaamo joogta ah oo rejadiiay barbaarinayeen soo wajahaysa.

Waxa ka bilwoday xeryaha qaxoontiga raaf iyo in askar kadagaalanta furimaha laqoro.Waxaan liqi karo ma ahayn in aan qof Soomaali ah xabbad kurido aniga oo libintaydii Amxaar lafadhiyo meel aad iigu dhow. Ma rabin in uu qof walaalkay ah idilo ama aan aniguba dilo oo aakhiro beelna igu dhaco adduunkana aan ku noolaado cidhiidhi. Yoolkaygu ma ahayn in Soomaali is dilaysa aan qayb ka noqdo'e waxa uu ahaa in la I taageero si aan gunnimada isaga dul qaado. Si aan u xorreeyo dalkayga. Si  aan usoo ceshado sharaftii aan lahaa ee ay Abasiiniya iga faramaroojisay.

Marnaba madoonaynin in aan kahortago Soomaali waxa ay doonayaan ha aaminsanadeene, waa run inaan aaminsanahay Soomaalida oo mid ah oo aan lahayn mucaarad gooni isu taag ah, hasayeeshee naftayda waxa aan uhuri karaa oo qudha qadiyad guud oo difaacaysa dalkayga iyo dadkayga soomaaliyeed meel walba ha joogaane. Aniga oo diinta iyo dalka Soomaalida difaacaya ayaan diyaar u ahaa in aan dhinto, marnabase suuragal ma ahayn in aan aqbalo wax intaa kahooseeya.

Xeryihii qaxoontiga waxa ay noqdeen meelo laga abaabulo aragtiyo badan oo kala duwan, kala dan ah, kala maan iyo maskax ah.Waxaa adkaatay in xeryihi loogu noolaado si xorriyad ah, jabhadaha kadagaalamaya gudaha Soomaaliya ee Itoobiyo dabada kariixayso saamayn ayay kuleeyihiin, jabhado cusub oo aas-aasmaya si ay halgan cusub uga bilaabaan gudaha Ogaadeeniya dardar weyn ayay wadaan, intaas waxa sii dheer raafkii oo joogta ah, dhallinyaradana laga dhigayo xaabo lagu shido dagaal aan waji lahayn danna ugu jirin.

Waa run in ay masuuliyad naga wada saarnayd in dalka Soomaalida labadbaadiyo, lagana hortago caqabad kasta oo ku imaanaysay, waxase taas hortaagnayd aragtiyaha isku hirdiyaya xukunka ama siyaasadda Soomaaliya, madaxda iyo minjahaba waxa lagasinaa in dal soomaaliyeed oo bad qaba aan la arkin haddii anigu aanaan xukumaynin! Hadafkooduna waxa uu ahaa in kursiga la gaadho jid kaste oo loo maraba.Waxa lagu wada jiray wareer ciiwaankiisu noqon karo: cadkanoow ama kucunay ama ku ciideeyay.Nin weliba waxa uu eeganayay danihiisa gaarka ah isaga oo iloobay danta guud.Waxaa caado noqday boobka iyo musuqmaasuqa.Waxa cirka isku shareeray sicir barar kudhacay dhaqaalaha, siyaasadda, diinta, ciidanka, dhaqanka, edebta iyo akhlaaqda. Waxaa guud ahaan isbaddalay mafaahiimtii hagaysay bulshada.

Halkaa markii uu xaal marayo waxa lagama maarmaan noqotay in aan ka dal doorsado deegaankii aan ku noolaa. Hooyadey Ruqiyo oo dhankeeda aan ka ahaa madi nolosheeda lafdhabar u ah ayaa iidirtay Xamar bishii $8^{aad}$ ee sanadkii $1989^{kii}$ si aan uga badbaado raafka ciidanka iyo aragtiyada isku fara saaray gudaha xeryaha qaxoontiga oo ay kabuuxeen da'yar xamaasadaysan oo u nugul in la isticmaalo. Xamar waxa degganayd gabadh ay dhashay habaryartay Caasho oo la odhan jiray Layla Sheekh oo allaah ha u naxariistee kunaf wayday dagaalladii sokeeye.

Layla waxa ay ahayd marwada Kornayl Cabdi Fataax oo ka tirsanaa Ciidanka Badda Soomaaliyeed.Waxa ay degganayd degmada Wadajir ee magaalada Muqdisho. Xamar oo ahayd magaaladii ugu horaysay ee aan arko aad ayaan ula yaabay. Waxa aan la ashqaraarey qaabka nolosha, dhismaha, fanka, dawladda iyo dhammaan wixii indhahaygu ay qabanayeen oo igu wada

cusbaa. Waxa se iigu darnaa gawaadhida badan ee sidii biyihii u qulqulaya, iyo taraafig-laydhka kala hagaya gaadiidka.

Guriga ay deggan tahay Layla waxa uu ila ahaa magaalo dhan. 21 jir miyi iyo xero qaxoonti kusoo koray waxa uu gurigu ula muuqday mid isaga oo kale aan lagu arkaynin adduunka. Musqusha muraayadaha leh ee ila ahayd dhaqan xumo in kaste oo aan sheegi karin, sariiraha moolada ah, TVga iyo qaabka lebiska Layla iyo ninkeeda oo ahaa dad casri ah noloshooduna aysan lahayn dabarro badan, waxa ay i tusiyeen in aan nolosha ka taagnahay xagal yar oo cidhiidhi ah wax bandanna ii dhimanyihiin.

Laba bilood markii aan joogay waxa aan saaxiib noqonay dhallinyaradii degganayd xaafadda oo sheeko iyo shukaansiba ibaray. Cali Gaab, Cabdi Bugle, Dhabareey, Siraad liineeto, Istaahil, Naciimo iyo Axmed Faruur waxa ay ahaayeen dhallinyaro aanan iloobi karin xusuustaydana baaqi kusii ahaan doona. Waxa ay isiiyeen jacayl walaalnimo iyo weliba furihii fahanka Xamar. Inkasta oo ay iibixiyeen magacyo igu cusbaa sida: Qowdhan, Baadiyoow, Qaldaan iyo waxyaabo kale haddana waxa ay ahaayeen walaalo nolosha qayb muhiim ah kaqaatay.Waxa ay igu marti galiyeen qalbigooda waxa ay ibareen tabta loogu noolaado magaalo, sida loogu shukaansi tago dumarka Muqdisho oo waagaa ku noolaa casrigoodii dahabiga ahaa.

Burburkii kadib ma aanan maqlin warkooda marka laga reebo Siraad Liineeto oo aan dabayaaqadii 1999$^{kii}$ si kadis ah ugu kulanay mid ka mid ah wadamada reer Galbeedka ee ay soomaalidu u qaxday. Siraad oo maalinkaa aan garan waayey sida ay isu baddashay waxa aan ku gartay fanaxdii iyo qosolkii lama ilaawaanka ahaa. Qosolka Siraad waxa uu lahaa danan gaar ah ragguna jecelyihiin, ku dhawaad labaatan sano wakhtigii aan wada

qaadanay Siraad inkaste oo uu aad u yaraa haddana waxa aan wada wayddiiyay dhammaan dadkii xaafadda degganaa oo badankooda sida ay ii sheegtay Siraad ku nool qurbaha, wax aanse aad uga murugooday geeridda Dhabareey oo ahaa wiil kaftan iyo ciyaar badan, dul iyo deeqsinimana ilaahay ku mannaystay dhallinyarada kale na iiga dhawaa.

Kulankii koowaad ee dhallinyaradii Waaberi oo aanan maanta garanaynin haybtii ay Soomaali ka ahaayeen waxa ka soo wareegay wakhti aad u badan culays iyo dhibaatana watay, haddana waxa aan xusuustaa mid walba qosolkiisii, waxa uu jeclaa, hankii uu lahaa iyo weliba gol jileeciisii. Dagaalku waxa uu kala geeyay dad is jecel, waxa uu jebiyay han badan oo aan lahayn.Waxa uu tirtiray himiladii dhallinyarada. Waxa uu abuuray jiilal Soomaali ah oo aan lahayn waddaniyad, dhaqan, fahan diin iyo adduunyo, sidoo kale na aan lahayn awood ay ku farxaan ama ay ku dhadhamiyaan quruxda dhulka iyo nolosha!

Markii koowaad ee aan Taksi raacay aniga oo u shukaansi tegaya degmada Hodan waxa ay noloshu iila muuqatay mid waji cusub igu qaabishay. Magaaladu waxa ay leedahay meelo badan oo qofku wakhtigiisa kuqaadan karo, halka qaxoontigii uu ahaa meel kooban dadkuna iswada yaqaanaan. Marwalba oo aan dhex galo nolosha dhallinyaranimada ah waxa gudahayga kadhawaaqi jiray haatuf i leh “dalkaagii waa lagumaystaa, dadkaagiina waa ay rafaadsanyihiin, kuuma gudboona ciyaar iyo dhallinyaranimo”, hasayeeshee ayaamahaygii Xamar dhawaaqaas dheg jalaq uma siin jirine waxa aan ku dadaali jiray in aan nolosha u dhadhamiyo si ka duwan sidii aan ku soo noolaa labaatankii sano ee la soo dhaafay.

Waxa aan jeclaa in aan wakhtigayga qaato una dhaqmo sida ay lodkaygu udhaqmaan, kuwaas oo aan lahayn wacyi waddani iyo garaad dhaafsan nolol maalmeedka.

Bisayl la'aantii dhallinyarada lagu maandooriyay ammaanta madaxda waxa ay keentay in dalku markii uu burburay ay noqdeen xaabada dagaalka sokeeye lagu huriyo.Dadkii ku noolaa Muqdisho waxa ay ahaayeen kuwo kafog wadaniyadda dhabta ah, waxa ayna u qaybsanaayeen dhowr qabiil, dhowr dabaqad nololeed oo kala sarreeya, waxa keli ah ee kulmin jirayna waxa uu ahaa cabsida laga qabo dawladda iyo halhayska beenta ah ee lagu raali galiyo madaxda kacaanka.

Waxa aan ahaa nin miyi ku dhashay, qaxoontina ku barbaaray, shukasnigaygu waa gabay, geeraar, maanso iyo maahmaah Murti huwan. Illeen meeshu waa magaalee waxa aan akhrinayo Reediyoow (Radio) Muqdihso in laga dhegaysto ama iskuul lagu dhigto mooyee nolol maalmeedka caadiga ah kuma jiro. Runtii waa ay igu adkayd in aan gabdh la soo hor fadhiisto haasaawe aan macno lahayn aragtidayda, waan kujeclahay oo ah eray afka kasaaran reer magaalkana waxa uu ila ahaa wax laga xishoodo, qaamuuska noloshaydana kuma jirin.

Nolosha aan aqaano waa mid ku qotonta kala sariigasho iyo qarinta dareenka qofka gaar ahaan dareenka dhex mara dumarka iyo ragga.Waxa maanta roomaantiga loobixiyay ee ah in dareen laga sheekeeyo dumarkana lagu asqeeyo hadal macaan oo aan xikmad lahayn anigu waxa uu ila ahaa wax dhalanteed ah. Roomaantigii aan anigu aqiinay waxa uu ahaa dhaqashada iyo masruufka oo laga adkaado, gabadha labadaa arrimood haysatana uma aysan baahnayn wax kale. Aragtidaas waxa dooriyayqaab nololeedkii magaalada laga aaminsanaa oo mararka qaar aysan suuragal ahayn in guri uu dhismo haddii aan la tixgelinin dhaqamo badan oo kasoo doolay dibadda gayigeenana ku cusub.

Guri walba waxa galay Filim iyo taxanayaal (Musalsal) kasheekaynaya jacaylka iyo soo bandhigidda dareenka waliba si

kafog dhaqankeena, taas waxa ay saamayn xoog leh kuyeelatay qaab fikirka dhallinyarada iyo sida ay u arkaan xidhiidhka kadhexeeya dumarka iyo ragga, haddii waagii hore gabdhaha la arki jiray inyar marka la is arkana ay gabdhuhu xishood isla galluubi jireen maanta waxa dhacda in ay gabadhu doonato ninka ay iyadu jeceshahay ama ay kahesho iyada oo ku doodaysa in ragga iyo dumarku simanyihiin xaqna ay u leedahay in ay nolosheeda sida ay iyadu rabto u maareyso.

Muddo kadib waxa aan garwaaqsaday in laqabsashada dhaqankaas lagama maarmaan tahay si aan u dhex galo bulshada, hasayeeshee la qabsashadii ma noqonin mid sahlane waxa iga soo gaadhay weji gabax iyo mawqifyo mahadho dhaliyay. Waa ka ay dhahdo Soomaalidu dhar magaalo in aad xidhato waa dhib yar tahay, dhal magaalose in aad noqato waa dhib badantahay e, dhayal kumaan fahmin Xamar.

Habeenkii degmada Hodan waxa uu ahaa taariikhi waayo badan ka go'I wayday maskaxdayda.Waxa aan u haasaawe tegay Fartuun oo aan dhowr jeer ku kulanay xaflado kala duwan. Da' ahaan waan iska ag dhoweyn hasa yeeshee waa gabadh ku dhalatay Xamar aabbaheedna wasiir ku xigeen uu ka ahaa wasaarad isha lagu wada hayn jiray xilligii kacaanka. Sheekada qoyskii aan ka dhashay iyo waxyaabaha ay ka fikiraan aad ayuu uga duwanaa haasaawaha iyo hanka yiillay hoyga Fartuun. Halka aan guriganaga afka laga qaadin, halgan, urur dagaalamaya, kaarka qaxoontiga, dhimasho, dhaawac, gabadh asay xidhan, agoon waxbarashada lagasoo eryay, xorriyad, Xabashi, waxa guriga Fartuun laga wada hadlaa Siyaasad, dan-jire, wasiir, ganacsi, markab dekad ku xidhan, dalxiis jidadka Rooma, masraxyada Viyeenna (Vienna) Haramyada Qaahira, taalooyinka New York, bangi lacag taallo, ciidan la dalacsiiyay, khudbadii madaxweynaha,

xuska Oktoobar, riwaayad cusub oo la jilayo, filim Hindi ah oo ku cusub shaneemooyinka Xamar, koofeer iyo sheeko aan fahmi karin anigu.

Meel aan iskala qaadno sheekada iyo dun isku kaana xidhi kartaa midna ma jirin. Habeenkii koowaad ee aan kulanay Fartuun waxa aan akhriyay wixii aan maahmaah iyo murti aqaanay, arar aan kadhigo ama aan shukaansi ula badheedhee, waxa aan arkay nus saac sheeko ah kadib gabadhii oo ham-hamaansanaysa doonaysana in ay kacdo, aad ayaan uga xumaaday in sheekadaydu aysan diirinin Fartuun, waxaanan u qaatay qaddarin la'aan xanaaqna waan is jiidhay.

Marna isuma aysan kay qabanin in gabadhii tiro shan jeer dad erga ah iisoo dirtay si aan ula kulmo markii koowaad ee aan is aragnay aan ka dareemi waayo wax rabitaan ah, ham-hamaansi iyo cajisna ay la kacdo muddo ka yar nus saac annaga oo aan wada fadhiyin. Markii hore ba waxa aan la yaabanaa sida ay indhaheedu u libiqsanayn oo ay indhahayga u eegayso, waxa aan aqiinay gabadh afka marada saarata, dhan isu buusta ama indhaha hoos u ridatee weligay maan arkin gabadh ragga u hor fadhiisata sida laba qof oo isku mid ah, waase dhaqan magaalo oo la yaab ma laha.

Waxa aan isu haystaa in aan ahay xiddig dumarku wada doonayaan oo aan laga daalin! Waxa aanse riyadaa katoosay markii ay gabadhii iwayddiisay "Baadiyoow, waxa aan ku wayddiinaa;ma in aad suugaan i barto ayaad iigu imaatay mise wax kale?" Aniga oo yaabban ayaan idhi: "maya, huuno waan soo hasaawe tegaye maxaa iga khaldan?" Waxa aanmaqli jirya laba kala bariday kala war la', aniguna waxa aangoobta la fadhiyaa malahayga shukaansi tayaysan kii ugu wanaagsanaa uguna qiimaha badnaa, iyaduna waxa ay kala garan la'adahay in aan

macallin suugaanta dhiga ahey iyo inuufagaare nax igu dhacay oo waxan shukaansi xumo iga tahay!

Xamareey xaalkaagu ma sahlana! Waamagaalo mug weyn, macno badan, miciyana leh.Qofkiilagu sii dhex daayana uu ku wareerayo.Sanad ka dib waxa ii suuragalay in aan dhammeeyo dugsigii sare oo muhiimad weyn ii lahaa.Waxaaan ka soo jeeday qoys aan fursad u helin waxbarashada nidaamiga ah, aqoon aan diinta islaamka ahaynna aan siinin wax mudnaan ah, inkaste oo dhaqankaa danbe uusan qoyskayga keli ku ahayneeuu ahaa mid dadkii aan isku deegaanka ahayna ay nala wadaageen, haddana ka tallaabsashada xayndaabkaa waxa ay agtayda ka ahayd horumar aan reer dhan usoo hoynayo.

Dugsiga sare markii aan dhammeeyay ee aan usoo gacan bannaanaaday in aan Xamar ka war doono, waxa aan galay jawi ka duwan midkii aan kujiray.Haddii aan xero ku oodnaa oo aan degganaa xaafad kooban oo ay ku dhaqanyihiin dad aan isku hayb qabiil, iyo deegaanba ahaynhadda waxa aan ka mid ahay malaayiin is muuq taqaana oo aan is magac garanaynin.

Magalaada waxa kunool malaayiin kala dan iyo deegaan ah, waxa subixii udareera shaqooyinka, waxbarashada, baagamuudada malaayiin dad ah, qof walba waxa uu leeyahay qiso layaab leh badhtankuuna kaga jiraa halganka nolosha, halkan majiro qof kucaawinaya ama gacanta ku qabanaya wax aad cunaysaa waxa aad shaqaysato.

Nolosha madaniga ah ayaa kahirgashay magaalada. Labiskadumarka iyo raguba kaduwan midkii aan arki jiray, waxase ladagaalama afkaartaa ka timid dibadda dhaq-dhaqaaq islaami ah oo xoog leh kaas oo ka jira magaalada Muqdisho iyo dhammaan Soomaaliya, dadku waxa ay ugu yeedhi jireen al-saxwah

(Baraarug) ama Ikhwaan, iyaga oo ula jeeda dadka diinta kudhaqankeeda kuwa laaloobay ku dheggan ama ay kamuuqato.

Mar walba oo ay dawladdu itaal darrayso waxa soo xoogaysanayay ururrada islaamiga ah ee aaminsan in shareecada islaamka lagu dhaqo Soomaalida oo ah dal muslim ah.Culimadaasiwaxa ay ku doodayeen in dalka laga hirgaliyay dhowr nidaam xukun oo aan ku dhisnayn diinta islaamka dhammaantoodna ay fashilmeen.Waxaayna maxaadirooyinkoodu u badnaayeen in aan ubaahan nahay in diinta ladhaqan geliyo si uu udhammaado dhibka nolosha iyo dawladnimada kahaysata Soomaalida.Ururrada islaamiga ah waxa ay ahaayeen dhowr kooxood oo kamidaysan in nidaam islaami ah laga hirgaliyo Soomaaliya, waxa ayse ku kala duwanaayeen jidka loomarayo, sida loo maaraynayo iyo muddada ay qaadanayso, waxa kale oo aragti ahaan aan laisku waafaqsanayn dawladda Soomaalida iyo waxa lagu tilmamai karo diin ahaan.

Aragtidaasi waxa ay xooggaysatay kadib markii dawladdii kacaankuay dil toogasha ah ku fulisay weliba meel fagaaro ah culimo soomaaliyeed oo gaashaanka u daruurtay aragtida dawladda ee dhaxalka iyo sinnaanta ragga iyo dumarka. Dawladdaha ku dhisan cabudhintu waxa ay jecelyihiin in ay helaan culimo diinta sida ay jecelyihiin u fasira,diinta la ekeysiiya danaha madaxda.Waain axkaamta islaamku u adeegtoaragtida siyaasiga ah ee xukuumadda ma aha in ay dawladdu ay raacdo aragtida diinta, lama oggola in nidaam dawladnimo oo jira qarniga labaatanaad la hoos geeyo shareeco la soo dejiyay 14 qarni ka hor. Waa aragti ay qabaan calmaaniyiinta Soomaalida ee ka dhuxul qaata aragtida reer galbeedka kuna raaca wax walba haddii uu islaamka ka hor imanayo, iyaga oo aan eegin sax iyo khalad waxa uu yahay.

Dambiga keli ah ee culimada la dilay ay galeen waxa uu ahaa in ay dhaheen fahanka uu madaxwaynuhu kaqabo qoyska iyo xeerkiisu ma aha mid la jaan qaadi kara diinteena suubban ee wax walba caddaysay.Ilaahay si ayuu axkaamta diinta ku soo dejiyay mana jiro qof wax ka baddali kara ama wax ku dari kara qur'aanka kariimka ah.

Laba sano kadib waxa aan la qabsaday Xamar aniga oo noqday Xamaraawi waa sida ay dhihi jireen qaraabadii ka iman jiray dhulkii Soomaali Galbeed ama qaxoontiga oo intooda badan caafimaad u iman jiray Muqdisho, Laylana ay ku marti gelin jirtay qalbigeeda weyn iyo gurigeedii qof walba uu ka heli jiray hoy iyo habeen dhaxiisa.

# DAGAALKII SOKEEYE

Iyada oo ay jirto hadal haynta dagaallada sokeeye ee maalinba maalinta ka danbaysa ku sii faafaya dalka ayaan subax ka soo baxay gurigii aan degganaa aniga oo damacsan inaan warqad aan ku qaadan lahaa shahaadadaydii dugsiga sare uraadsado iskuulkii aan dhammeeyay oo aan kafogayn xaafadda. Waxa aan soo qaaday laami dheer oo ahaan jiray mid aad mashquul u ah saakase cidlo iyo cabsi ay kamuuqato.Waan ogaa in ay dawladdu ligliganayso jabhadaha mucaaradka ahna ay kaabiga ku hayaan caasimaadda, dadka qaarna ay bilaabeen in ay u guuraan deegaannadii ay ka soo jeedeen,hasa ahaatee ismaan lahayn sidaa dhibka yar ayuu wax walba isu baddalayaa una dumaysaa dawaldnimo cabsi huwan oo sannado badan cabudhinaysay dadka kantaroolaysayna dhaqdhaqaaqa bulshada.

Isgoysyada halbowlaha u ah magaalada waxa taagan ciidamo ay ka muuqato cabsi. Makala garanayaan qofka ay difaacayaan iyo midka ay dilayaan. Waxa ay kuwareereen xaaladda adag ee dalku galay. Waxa isbaddalay aragtidii ciidanka, haybaddii dawladnimana meesha waa ay ka baxday. Bililiqo iyo boob ayaa ka socda wasaaradaha iyo wakaaladaha qaar, dadkuna waxa ay isla dhex marayaan in madaxweynihii uu ka baxay Muqdisho!

In madaxwayne marka hadalkiisa lasoo qaadayo afarta dhinac la iska fiiriyo si dhib yar uu uga tago magaalo uu isagu dhisiddeeda dawladnimo kaalin mug leh ka geystay aadna uu u jeclaa isaga oo ka cararaya shacab badankoodu aysan hubaysnayn waxa ay ila ahayd wax aan dhici karin. La yaabka waxaa sii laba jibaarrayay

aniga oo ahaa dhibbane maskaxdiisa lagu shubay halhaysyo qofka aadanaha ah mararka qaar gaadhsiiya derajada Eebbe.

Waxa igu dhacay anfariir aanan waxba suurayn karin. Waxa aan is idhi malaha waad riyoonaysaa oo muuqalkan dhab ma aha! Markii aan soogalay gudaha waxa aan arkay Xamar-weyne oo ay kasocoto xabbad udhexaysa dablay hubaysan iyo ciidamo bilays ah oo bar kantarool ku lahaa halkaas. Dablayda dagaalamaysa waxa ka muuqatay dhiirranaan, kalsooni iyo dhabar adayg. Waxa ay ku dagaallamayeen mabda'a ay aaminsanaayeen inkaste oo uu khalad ahaa, halka ciidamada dawladda ay ka muuqatay diihaal iyo cabsi.Waxa ay ahaayeen kuwo aan ku dagaalamaynin mabda' ay ku kalsoonyihiin, waxa ayna ahaayeen kuwo aan garanayn waxa ay difaacayaan.

Muqdisho waxa ay ahayd muraayadda Geeska Afrika, iyo magaalada ugu bilicda badan dhul weynaha Soomaalida. Dagaalkii lagalay ee aan waxba la isu reebanin waxa uu fool xumeeyay wejigeedii qoslayay, xabbaddiina waxa ay ka dhigtay magalada ugu cabsida badan dunida guudkeeda. Loolankii macna la'aanta ahaa waxa uu dhaxalsiisay shacabka Soomaalida barakac, qax, dhibaato, hablaheennii sharafta badnaa waxa ay noqdeen kuwo meel kaste kudac daraysan. Dhallinyaradii waxa ay noqdeen in uu madfac dilay, kuwo gaajo sahayatay, kuwo ku le'day badaha iyo kuwo mustaqbal la'aan lasoo gudboonatay oo garan la' dhinac ay udhaqaaqaan.

Dalkeenii ku jiray waddamada ugu awoodda badan Afrika waxa uu noqday dal fashilmay. Waxa noqonay shacab qoray qaanuun cusub oo dhanka fawdada iyo kala danbayn la'aanta ah. Waxa aan weynay walaalo nakala qabta, dunidiina waxa ay uqaybsantahay kuwa hubka isugu kaaya dhiiba, kuwo aysan oohinteenu damqaynin oo nagu wiirsada iyo kuwo aan unahay dad

madmadow oo is dilaya, wax macno ahna aan u samaynaynin. Waxa dalkeenna isku gadaamay geeri, gaajo, saboolnimo iyo jahli aan ka gaashaaman karnay.Ummaddii midaysnayd waxa ay ukala jabtay qabiilo, jabhaddo iyo jifooyin iswada haysta oo calool dooxato ah.Waxa aan halkaa ku duminay wax walba oo aan soo dhisaynay sanadihii aan dawladda ahayn iyo kuwii ka horeeyay ee aan ahayn shacab walaalo ah oo meel wada deggan.

Xabbaddii Xamar gilgishay waxa ay shaki weyn galisay qadiyaddihii iyo gobolladii maqnaa, mar haddii maskaxdii Soomaali-weyn hawl gab noqotay,waxa halkaa kacad in jirka intiisa kale na uu si tartiibtartiib ah udhiman doono. Inkaste oo cabsidaasi jirtay haddana walwalka ugu badan ee soo wajahay Soomaali-weyn waxa uu ahaa mugdi in lageliyay jiritaanka iyo midnimada soomalida oo dhan, kadib markii uu xukunka dalku gacanta ugalay manaxayaal ku naaxa dhiigga dadka, kana ganacsada oohinta agoonta, muusanowga gablanka iyo baroorta afooyinkii waayay seygii ay jeclaayeen.

Odayaashii iyo saraakiishii kasoo jeeday dhulka Ogaadeeniya ee kusugnaa gudaha dalka Soomaaliya ee sugayay inay dalkooda xorreeyaan iyaga oo gacan ka helaya dawladda waxa ay iswayddiin kareen su'aalo fara badan oo ku saabsan joogtada iyo timaadada. Waxa ku baryey waa aan qurux badnayn.Waxa garabkooda kabaxay awooddii ugu weynayd ee dhanka afka iyo addinkaba ka taageeraysay. Waxa ay noqdeen agoon labadoodii waalid waayay.

Inkaste oo qaab maamulka dawladdii ciidanku hoggaaminayay marar badan lagu qanacsanayn, haddana waxa ay ahayd mid dhidibbada udhigtay sarreynta qadiyadda gobollada maqan ee soomaalidu leedahay, waxa lasameeyay kumannaan heesood, waxa laqoray buuggaag ka sheekaynaysa taariikhdaa aan duugoobin ee gobollada dalku ay leeyihiin gaar ahaan Soomaali

Galbeed. Waxaa dadka laga wacyi galiyay dhanka maskaxda, waxa la isku xidhay jiritaanka dawladnimada Soomaaliya iyo xorraynta dhulka kamaqan Soomaalida.

Xabbaddii Xamar gilgishay waxa ay dilaacisay xudduntii dalka,waxana meesha kabaxay hoggaankii midaynayay dadka. Inkaste oo wixii kadanbeeyay heshiiskii Jabuuti ee Soomaalida iyo Itoobiya ay isla gaadheen jabhadihii gudaha Soomaali Galbeed kadagaalamayay lagusoo rogay cadaadis adag iyo daba socod lagu ogaanayo dhaqdhaqaaqooda iyo sida ay uwadaan halganka hubaysan, haddana dhibaatada soo wajahday Soomaali-weyn waxa ay ahayd mid ruux walba taabatay.

Intaa wixii ka dambeeyay Muqdisho ka darid mooyee ka soo rayn laguma heyn.Wax walba oo qurxinayay Soomaalinimada ayaa noqday wax ina kala qaybiya, noloshii Xamarna waxa ay noqotay mid aan la xamili karin. Gorfayn dheer kadib badhtamihii sannadkii 1991 waxa noosoo baxay in aan Muqdisho lagu noolaan karin.Aniga iyo gabdhii aan lajoogay waxa aan bilownay in aan udiyaar garawno guuritaan iyo in aan uqaxno halka ugu dhow ee aan ku magan gali karno, hayb ahaanna aan ku badbaadi karno, maadaama oo dagaalku ku dhisanyahay qabiil iyo hayb dirir.

# GEERI NAXDIN LEH!

Intii aan isu diyaarinaynay geeddiga ayaa waxa dhacday mid kamid ah qisooyinkii ugu xanuunka badnaa noloshayda, marka aan dib u eego sida ay u dhacdayna wax aan is dhahaa naxariista Eebbe ayaad ku nooshahaye mar hore ayaad ka mid noqon lahayd dadkii god galay iyaga oo aan garanayn waxa loo diley. Sida aan uga soo badbaaday dilkaas waxa uu ahaa qaab cajiib ah, dadka marka aan uga sheekeeyana soo xusuusiya filimada lagu jilo Hollywood-ka maraykanka. Intooda badan ma rumaystaan kuwana dhabanka iyo gacanta ayaa isku dhega dhakafaar dartii, hasayeeshee ilaahay dilaa dhinta.

Qisooyinka murugada leh ee ka dhacay dhulkeena waxa laga qori karaa malaayiin buug. Waxa laga warin karaa kumannaan sheeko. Tanina waa mid kamid ah kuwii foosha xumaa ee aan usoo joogay muddadii yarayd ee u dhexaysay bilowgii dagaalka iyo bishii lixaad oo aan Xamar ka tegay. Maalintaa ka hor weli Soomaalida rejo ayaan ka qabay, waxa aanan islahaa dadku waa ay garaadsan doonaan dhibkana waxa wadda xamaasadda bilowga ah. Waan ka daalaynaa in aan is dilno oo nabad ayaan uga baxaynaa dhibaatada, ayaan Layla oo aad u niyad jabtay ku dhihi jiray.

Waa Makhrib. Cirka waxa weli ka muuqda daruuro ay kuxardhanyihiin falaadhaha qorraxda sii dhacaysa. Gogol rag waa nabade waxa lawaaayay nabaddii iyo kalsoonidii. Waxa la'isku garaacaya noocyada kala duwan ee hubka, wax dhaqaaqaya majiraan dad iyo duunyo.Waxaa jidhka iyo naftaba buuxiyay cabsi, argagax, qof kaste na waxa uu sugayaa xilliga ay tiisu u

iman doonto, lama garanayo maxaa la isu dilayaa ama la isu dagaalayaa.

Waxa aan soo dhex qaaday maleeshiyaad iswada gaadaya.Waxaa kamuuqda diihaal.Waxa ay wada xidhanyihiin macawiso dhammaad ah. Waxa ay takhsiinsanyihiin jaad. Indhahoodu waa dhiig. Dhafoorkoodu waa naar. Hadalkoodu waa waabay.Aragoodu waa il-fashaq. Waxa ay dilayaan qof walba oo jidkaa soomara carruur iyo cirroolaba!

Cabdi Fataax oo Mataan lagu naanaysi jiray ahaana Layla Sheekh ninkeeda ayaa waxa uu ka war doonay gabadh walaashii ah oo ka qaxday Madiina taas oo uu qabay nin janan ah oo ka hawlgalayey gobolka Togdheer ee waqooyiga Soomaaliya. Gabadhu waxa ay iyada iyo 4 ilmood oo ka ugu weyni uu 11 jir yahay, ka ugu yarina sanad jiro ku go'doomeen xaafadda Shiirkoole oo ay usoo qaxeen.

Waxa uusoomaray jid xidhan oo markaa ay ka istaagtay xabbad udhexaysay laba maleeshiyo beeleed.Waxa la isku dagaalayaa gacan kuhaynta isgoys aan muhiim ahayn.Waxa la isu adeegsanayaa wax alla wixii yaalay ee hub ahaa, kaas oo laga fara maroojiyay dawladdii dhexe oo bilo yar kahor burburtay. Hubkii dalka iyo dadka lagu difaacayay ayaa maanta lagu dabar goynayaa maatida.

Waxa uu damcay in uu jidka dhanka midig ugooyo. Marka uu marayo badhtamaha ayaa waxaa ku dhacday xabbad jebisay labada bowdyo.Waxa soo gaadhay dhaawac culus oo uu la miyir beelay.Majiro qof arkayay ama badbaadin kara xilligaa habeenka ah. Markii la gaadhay wakhtigii uu iman jiray asii lawaayey ayay gabadhii walaashay ahayd igutidhi: "walaal bal kac oo Mataan raadi, waxa aan kabaqayaa in ay dhib soo gaadhee." Quluubta is

jecel is oge, malaha marka ay sidaa leedahay Layla, Mataan waxa kusii daba yar nafta oo waxa uu ladaalaa dhacayaa sakaraadka geerida. Maxaa dad aan wax dambi ah gelin ku go'ay gudaha dalkeena hooyo!

Gurigii ayaan kasoo baxay aniga oo walbahaar kaqaba nolosha Mataan, taydana aan kawalwal la'ayn. Markii aan soo gaadhay aaggii uu ku sakaraadayay waxa iqabtay kuwo kamid ah ciidamadii dagaalmayay, islamarkiiba waxa la iwayddiiyay qabiilkayga anna waan usheegay aniga oo ay cabsi igu jirto. Nimankii meesha taagnaa iyaga oo aan su'aal igusoo celinin ayay iwayddiiyeen meesha aan deganahay? Kadib markii aan utilmaamay ayay damceen inay iraacaan iyaga oo iga dalbaday in aan hor socdo.

Waan kuqasbanaa in aan uhoggaamiyo hoyga aan deganahay.Waxa aan gacanta ugu jiraa tuugo aan nixin. Intii aan hor socday mooryaanta waxa aan iswaayddiinayay su'aalo badan kuwaas oo aan u waayey jawaabo aan kuqanco! Maxay ka rabaan guriga? Haddii aad gaysid waxa suurtagal ah in walaashaa ay dilaan ama fara xumeeyaan, waxa kale oo suurtagal ah in ay carruurta wax yeeleeyaan, iyo su'aalo kale oo kasoo burqanayay naf cabsanaysa. Waxa aan isku dhiirrigaliyay geesinimo in aad ku dhimato waa sharaf, geeri iyo fulaynimose waa laba geeriyood.

Muddo markii aan socday ayaa wax aan diiday in aan hore usocdo! Waxa aan ku andacooday in aan deegaanka ku cusubahay gurigana aan garanayn maaddaama ay habeentahay. Qoriga baadkiisa inta uu si xun mid iigu garaacay ayuu dib iiceliyay aniga oo dhiig tufaya nabarro culusna indhaha iyo feedhahaba iga gaadheen. In aan dhinto ayaan kadoor biday in aan mooryaantan dhex geeyo masaakiin aan dambi galin.

Waxa ay iigeeyeen laba wiil iyo gabadh lagu dhex hayo guri aad uburbursan.Waxaa muuqaalka guriga baddalay madaafiic lagu asqeeyay, gabadha oo aan da'a ahaan kuqiyaasay dhawr iyo labaatan jir waxa kamuuqda jidh dil, iyo tacadiyo badan oo loo gaystey oogada jidhkeeda. Ma hubo in waraabayaashaa muuqaalka bini'aadamka leh ay kula kaceen wax sharafteeda dilaya, hablaha soomaaliduna dhayal uma sheegaan wixii kusaabsan sharaftooda, inkaste oo uusan jiirn sharaf dhac kaweyn in gabadh lasoo qafaasho gacantana ay ugasho koox argagixiso ah, si aan sharci ahaynna loogu hayo goob aan lagaranaynin. Waan ka xumaa dhibaatada haysata gabadhaa midabkeedu isoo xusuusinayo walaashay Sowdo oo aan arkin wixii ka dambeeyay markii aan soo galay Xamar.

Gabadhu wax dhar ah maqabto marka laga reebo dirac baati ah oo meelo badan kadilaacsan oo waxa uu asturayo iska yar tahay. Timaheeda oo dhiig iyo carro ku malaasanyihiin ma saarna wax maro ah. Dacdarrada kamuuqata, wejiga daalan, indhaha oohintu qarisay, dibnaha qadda madoow ah ee qalalan iyo timaha is dhex yaacsan waxa ay kadhigeen sida sawir farshaxan ah oo fanaan kuxeeldheer sawirka uu ku fara yaraystay.

Hab abuurka iyo quruxda uu Eebbe ku galaday gabadhaa waxa ay ku soo xusuusinayaan heestii Maxamed Nuur Giriig ee ahayd:

***Timahaaga dheeree***

***Dhabarkaaga joogee***

***Ilaahay dhammeeyiyo***

***Ilkahaaga dhuuxiyo***

***Dibnahaagadhuxushaan***

*Dhakafaar kaqaadee.*

Waa layaab in adiga oo goob cabsi ah jooga aad xusuusato qurux, fan iyo suugaan, laakiin quruxdu waxa ay leedahay awood ay kugu illowsiin karto cabsi kaste oo jirta. Waa wax laga xumaado in hablaheenii sharafta lahaa dhurwaaga loo logo.Ciilweynaa oo tabar darniyaa habeenkaas maan ciil udilaaco.

Gabadha bishinta kore dilaac weyn ayaa kaga yaallay, labada jilibna waa ay mudhuxsanaayeen oo dhiig ayaa ka daadanayay, wajigana dakharro dhowr ah ayaa kaga yaalay, tabardarri bandanna waa ay kamuuqatay. Jidhkeeda giigsan ee hilibku buuxiyay iyo adkaysi ay u dhasheen hablaha soomaaliyeed ayaa dhaawac badan qarinayay, waxaanse hubaa in dhaawaca nafta ka gaadhay uu boqol jeer ka xanuun badnaa midka oogadeeda gaadhay.

Labada wiil mid kamid ah waxba maqabo marka laga reebo argagax iyo naxdin uu kaqaaday sida loo sooqabtay iyo dadka lookeenay. Midka kale na waxa dhabarka kaga taalla xabbad aan wax weyn gaadhsiinin, hasa yeeshee dhiig bax iyo xanaano la'aan ayuu la noqday qof indhaha keli ah kanool oo aan hadal iyo dhaqaaq midna kujirin.

Habeenkii koowaad ee aan u hoyday gurigii madoobaa maan seexanin, waxa aan kafikirayay sida ay kudanbayn doonto noloshanada. Waxa layaab ah dadkan nagu ciyaaraya ee dhibkaas noogaystay ma aha kuwo nayaqaana, wax dhib ah u maan gaysanin, magaranayaan waxa ay noo dilayaan, keli ah nasiibkanaga ayaa sidaa noqday! Waxa aan iskudayay in aan lahadlo mid kamid ah dhallinyarada nasoo qafaalatay oo intii uu khamri iyo qaad isku daray kaadida iyo saxarrada aan ceshan

karin. Khamradu waa ay ku cusbayd in tankiisa kabadanna wuu cabbay. Waxa uu ahaa sida warqad kolba dabayshu ay dhan uqaadayso.

Aniga oo ka faa'iidaysanaya xaaladda uu kujiro ayaan wayddiiyay sababta naloosoo xidhay? Waxa aan intaa sii raaciyay yaa tihiin idinku? Hasayeeshee ma ahayn qof wax sheegi kara, carrabka ayaa weynaaday, hadalkiina gabay, waxa uuna lumiyay isu dheelitirnaanta jidhkiisa oo kolba dhan ayuu udhacayaa. Aniga ayaa islayaabay qofka aan wax wayddiinayo waa ruux samada sare ee daroogada dhex heehaabaya, laakiin layaab malihi oo waa ta ay Soomaalidu kumaahmaahdo: nin daad qaaday xumbo cuskaye, wax walba oo aan is dhaho waad ku badbaadi kartaa ayaan diyaar u ahaa in aan sameeyo la sheekaysiga nin sirqaansanna ha ahaatee.Waxa aan niyadda iskalahaa armuu wax uun kuufaa'iideeyaa ama aad kaheshaa sheeko kurbada kaa feydda oo kudhaafisa xaaladdan adag ee aad kujirto.

Saddex habeen iyo laba maalmod kadib waxa noo yimid nin itaal dhexaad ah oo midab furan kana duwan mooryaanta nahaysata. Waxa uu nawayddiiyay saddex su'aalod oo keli ah: magacaa? Kumaatahay? Iyo maxaad filanaysaa? Layaab ayay nagu noqotay arrintaasi, jawaabtanaduse waxa ay ahayd mid sahlan oo diyaarsan: manaqaano waxa aan filanayno oo idinka ayaa go'aan kagaadhaya noloshanada inkaste oo ay tahay dulmi in qof aadan garanayn wax dhib ahna kuu gaysanin masiirkiisu gacantaada soo galo waliba adiga oo gardarro iyo maan-gaabnimo ku sugan! Waxa aan ahay Guure oo wakhtigiisa ku qaatay geedi iyo guhaad, go'aanna aan weligii ka gaadhin noloshiisa! Maalinkii aan dhashay illaa maanta waxa noloshayda xakameeya dawlado iyo shucuub aan igala tashanin magaca aan qaadanayo iyo sida aan unoolaanayo. Waxa ay gardarro ku qaateen dhulkaygii. Waxa ay

lawareegeen taariikhdaydii. Waxa ay suura xumeeyeen sooyaalkii dhaqan,diin, halgan ee aan lahaa.Waxa aan noqday qaxoonti; aniga oo leh dhulka ugu barwaaqaysan bariga Afrika.Wax aan filanaayo ma aqaano; sababtu tahay ma ogi wax aan geystay, mana garanayo waxa aad tihiin si aan ugarto waxa aan idinka filan karo!

Inta aan hadalka waday qoriga afkiisa ayuu kugujinayay dhulka sigaar Royal ahna wuu cabbayay, marmarna waxa uu hagaajisanayay koofiyad nooca kaabooyga ameerikaanka ah oo madaxiisa aad uga weyn oo uu xidhnaa. Muuqaal ahaan aad ayuu uga duwanaa ragga na haya, maskax ahaanse wuu la sinaa oo waxa uu ahaa mooryaan muuqaal dad leh. Hal mar ayuu iskudaray madaxa oo uu kor uqaaday iyo xabbad uu kudhuftay ninkii dhaawaca ahaa ee qolka dhex yiil.

Waan argagaxay.Gabadhiiayaa anfariirtay. Dhammaantayo waxa aan isku darnay qaylo iyo sawaxan.Waxa aan si kadis ah u idhi maxaad udhaawac tiraysaa miskiinka? Maxaad ugeyn wayday goob uu kahelo daryeel caafimaad?

Xabbad ayuu igu dhuftay anigana isaga oo aan sugin biya dhaca hadalkayga! Garabka midig ayay igaga dhacday.Waxa markiiba cirka isku shareeray dhiig, waxa aanan kudhacay geeska midig ee qolkii mugdiga ahaa; “waar dila oo maydkiisa dabaqa katuura, waa nin kibirsane, maxaa kagalay qofka aan dhaawac tirayo?  Yuu ismooday marka uu go’aankayga ka hadlayo?”ayuu yidhi isaga oo qolkii dibadda uga sii baxaya!

Maan sugin hadalkiisa kamana baqin dheerida dabaqa aan saarnaaye, waxa aan kabooday daaqaddii iigu dhawayd. Dhulka ayaan kudhacay aniga oo hoos marsaday gacantii dhaawaca ahayd, dhaawacii waxa iigu darsamey jabitaan. Aah!  Xanuun

kululaa oo xeelad yariyaa. Waxa ay igusoo harqiyeen wixii ay xabbad haysteen, hasayeeshee wax igu dhacay malahayn, illeen geerida ilaahay ayaa haya oo dadka adduunka oo dhan haddii ay kuuheshiiyaan in ay kudilaan Eebbana uusan kuu qorin kuma dili karaan, haddii ay damcaan in ay ku nooleeyaan Eebbana uu kuu qoro geeri kuma noolayn karaan.

Igama aysan soo daba degin, anigana anoo dhaawac ah ayaan dhex galay xaafado isku raran ah oo luuq iyo darbi badan. Waxa aan galay guri ay hortaagnayd hooyo soomaaliyeed. Muuqaalkeeda ayaa iila ekaaday hooyaday oo qaxii ka dib aanay jirin meel aan ku og ahay.Waan baahanahay, arradnahay, oomanahay, cabsanayaa, dhaawacna waan ahay, majirto wax intaa kaweyn oo qof nool qabsan lahaa.

Maaddaama aan dhaawac ahay daryeelna ubaahanahay qof walba waxa uu iila ekaanayay hooyaday macaan oo aan dhabteeda ku illoobi jiray dhib iyo dhaawacba. Wanaagsanaa hooyadu oo naxariis badanaa! Hooyadu waa lama huraan, hooyadu waa waddan, waa farxad, waa naxariis nool oo muuqaal dad leh, waa midda aan dhabteeda ku illowno dhibaato walba, waana qofka keliya ee aan tabayno marxalad kaste oo cimrigeena kamid ah, iyo xilli walba oo aan nool nahay, hooyo isku si ayaan ugu baahanahay maalinka gaban yar aan nahay, maalinta aan guxushaa cirraystay noqonno iyo maalinta sabi caana nuug ah aan nahay.

Waxa la iga furay irridda guri gaaban oo cariish ah. Sidaaan umalaynayana kuyaalay degmada Waaberi. Markii aan arkay muuqaalka dad soomaaliyeed oo qoslaya si caadi ahna u nool iyo hooyo dartay la ilmaynaysa, ammaan ayaan dareemay, dibna waxa aan ugusoolaabtay noloshii dabiiciga ahayd. Markaas ayaa waxa I xanuunay meel walba oo dhib iga gaadhay, kadibna waan miyir daboolmay!  Waxa aan soo miyirsaday aniga oo gacanta ka

kashakaalan dharkiina la iga baddalay faleenbana igu xidhantahay, adduunku layaab badanaa! Dad aan garanayn ayaa rabay in ay idilaan iyaga oo aan waxba igu haysanin, haddana waxa ibadbaadinaya oo idawaynaya kuwo kale oo aan garanayn haybtayda iyo waxa aan ahay.

Muddo la i baxnaaninayay kadib xaaladdaydii caafimaad ayaa aad u wanaagsanaatay. Qoyskii i badbaadiyay waxa ay I tuseen in si walba oo dhibaato u dhacdo shacabkeenu yahay gob. Dhaawacyadii igasoo gaadhay oogada jidhka dhammaantood waa ay bogsadeen, waxase bogsan waayey dhibaatadii iga soo gaadhay damiirka oo cagta marisay mabaadi'dii aan aaminsanaa.

Weligay ismaan dhihin Soomaali ayaa naftaada goynaya isaga oo ku raaxaysanaya xanuunkaaga! Naftu waxa ay dareemaysaa culays iyo cadaadis ay kaga tageen habeennadii madoobaa ee aan soomaray, nabarrada muuqda durba waa ay bogsanayaan, laakiin nabarrada qarsoon ee nafta soo gaadha dhayal uma bogsadaan.

Saddex bilood iyo laba iyo toban habeen markii aan ku dhuumaalaysanayay gurigii hooyo Caasho ama Iisho waasidii loogu yeedhi jiraye, waxa aan dib uyeeshay awood aan go'aan ku gaadhi karo. Waxa aan bilaabay in aan ka fikiro noloshayda iyo waxa aan ku danbaynayo. Waxa aan aad uga walbahaarsanaa gabadhii walaashay ahayd iyo carruurteedii oo aan muddo kadib ogaaday in ay dhinteen iyaga oo isku dayaya in ay naftooda labaxsadaan, maxaa loo dilayaa ubadkeenii ahaa ubaxa dalka? Maxaa ay galabsatay oo god loogu hooyay gabadh qalbigeedu Soomaali oo dhan qaadayay, dul iyo deeqbana lahayd, qof walbana wanaag la jeclayd? Waa daroogada qabiilka iyo dhibaatada uu dagaalkii sokeeye na baday oo marka ay ku indha tiraan aad gaadhayso meel ay xayawaanada wax dila adiga kaa cabsadaan ama ay kaxishoodaan falalka aad samaynayso,

bini'aadam bahaloobay oo baylah kugu helay; waa balaayo wax kaa badbaadin kara jirin ilaahay mooyee.

Markii aan go'aansaday in aan ka tago Muqdisho waxa igu adkaatay sidii aan u macasalaamayn lahaa reer wax walba ii huray noloshaydana badbaadiyay.Waxa aan ahaa bilo ka hor qof aan la aqoon oo tabaryar, maanta waxa aan ahay qof ka mid ah qoyska hooyo Iiisho oo talo iyo tusaalaba hormuud ah. Hooyo Caasho waxa ay i dhashay mar labaad, waxa ay masuul ka tahay ilaahay ka sokow in aad maanta akhridaan qoraalkan kadib markii ay hoy isiisay aniga oo cabsanaya, i daawaysay aniga oo buka, ibaxnaanisay aniga oo tabar yar, jacayl hooyanimo isiisay aniga oo qalbi jabay.

Sidoo kale ma illaawi karo baxnaanadii walaashay Khadro oo ahayd dhakhtarad sanadkii 4[aad] ee jaamacadda dhiganaysay markii uu dalku burburay. Khadro waxa ay qayb weyn ka qaadatay in aan dadka soo dhex galo, qosolkii iyo sheekadana dib ugu laabto kadib markii uu dilkii iyo dhiiggii daadsanaa qolkii aan ku xidhnaa carrabkayga xidhay.Waxa ay gacan igu siisay in aan ka gudbo xanuunkii tiiraanyada, maallinna isma ay wayddiinin haybtayda ama yaan ahay, waxa ay isiisay jacayl walaalnimo oo aan u hayn doono gabadh walba oo Soomaali ah inta aan noolahay.

Sidaas oo ay tahay waxa laga ma maarmaan ahayd in aan ka tago magaaladan bahalla galeenka noqotay.Ugu danbayntiina waxa aan guriga ka tegay hooyo Caasho oo qalbigana ka jecel in aan joogo afkana dhoola caddayn sagootin ah i tusaysa. Walaashay Khadra oo dhakhtaraddayda ahaydna waan ku dhiirran waayay iyada oo joogta in aan baxo! Waxa aan guriga kasoo tegay iyada oo addeeg ku maqan. Inkaste oo markaa aan xal u arkayay in aan tago aniga oo aan sugin oohinta iyo qalbi jabka Khadra haddana arrintaa waa utun illaa maanta igu taagan mar dambana aan garwaaqsaday

weynida khaladkii aan galay. Garaadka aan hadda leeyahay haddii aan lahaan lahaana waan sugi lahaa si aan markii u dambaysay u arko gabadhii jacaylka walaalnimo ee aan xadka lahayn iga haqabtirtay.

Inta aan Xamar kabixin, waxa aan go'aansaday in aan raadiyo reerkanagii oo la iigu sheegay in ay ka qaxeen xeradii ay kujireen kadib markii dawladdii dhacday.Nabadgalyo la'aantii la socotay burburkii dawladda waxa ay keentay in tobbannaan kun oo qof lagu dilay meel aan ka fogayn xeryihii qaxoontiga sida ay xaqiijiyeen dadkii ka badbaaday gumaadkaa foosha xun, dadkii Soomaalida ahaa ee walaalaha ahaa ayaa waxa ay isu noqdeen cadow, qofkii soomaaliga ahaa ee lagu yaqaanay walaalnimada, deeqda, dusha iyo marti soorka ayaa noqday qof dhiigya cab ah oo aan uturaynin carruur iyo ciroole midna, waa xaajo ugub ah.

Soomaalidu waa ay taqaanay in qabiil iyo beelo la isu laayo.Hasayeeshee waxa jiray dad la odhan jiray bir magaydo, kuwaas oo kasareeyay qawaaniinta dagaalka, dadkaas waxa kamid ah carruurta, dumarka, culimada, hoggaanka bulshada, dadka da'da ah iyo qof kaste oo aan ahayn gaashaan qaad, waxa jiray xeer aan qornayn oo Soomaalidu ay taqaanay ixtiraamina jirtay, hadal iyo gunaanadkii waa la gobanimo diriri jiray, dagaallada hadda socdase waxba mareebaan sida ayaxii, waxna ma xeeriyaan sida dugaaggii.

Waxa ay noqotay arrin aan hore loo arkin in bulsho dhan wada bahalowdo.In codka samadoonka ah uu noqdo mid aan lamaqlaynin kuna dhex baaba'a buuqa dagaalka.Waxa aan ku tabaalaysanahay Muqdisho dhexdeeda. Mahaysto meel aan ku dareemo nabad, hayb sooc, dan sooc, hadal sooc, hidda sooc iyo wax walba sooc ayaa ka dilaacay gayiga Soomaalida oo isu

baddalay goob laga qaybiyo isnacaybka, dilka iyo xadgudubyada mamnuuca ka aha aadanaha.

Qoyskayga oo uqaxaya Soomaali Galbeed waxa loo loogay gudurida waxa ayna qado u noqdeen haadda. Waxa ay la kulmeen gaboodfalyo maanka qofka soomaaliga ah aan galaynin. Goobtaas gunnimada leh waxa aan kuwaayay hooyaday Ruqiyo Mahad oo maleeshiyaad hubaysan ay iyada iyo walaasheed ku dileen meel aan ka durugsanayn xeradii qaxoontiga aadna ugu dhow webiga Shabeelle. Labadaa hooyo ee waayeelka ah waxa ay udhinteen magac iyo hayb aysan iyagu dooranin waxbana ka ogayn markii laga dhigayay.Waxa waajiba h in aan qofka lagu soocin ama lagu nicin wax uusan isagu dooranin, sida: midabka, qabiilka, qaab samayska jidhkiisa, deegaankiisa iyo diintiisa, haddii uusan xad gudbin.

Qoyskayagu waxa uu dhimanayaa isaga oo usocda dhanka galbeed iyo waddan iyagu ay leeyihiin oo xoog lagu haysto, anna waxa aan cabsanayaa aniga oo u degdegaya dhanka koonfereed halkaas oo aan rabo in aan ka helo, dal iyo dad ila hayb ah kadib markii ay soomaalidu ukala qaybsameen jifo iyo jilibyo iskumid ah isna dilaya, kuwaas oo uhamuunyo qaba daadinta dhiigga iyo xasuuqa walaalohood.

Xamar oo mar ahayd meel iskadaa soomaalidee ay Afrikaanku ka helaan nabad, caddaalad iyo cod dheer oo udooda xuquuqdooda uu duudsiyay gumaystuhu ayuu xaalkeedii sii xumaaday, magaalo ahayd xilliyada qaar mid looga doodo xorraynta Zambia, Muzambique, Angola, Zimbabwe Koonfur Afrika iyo inta dunta madow idilkood ayaa maanta noqotay meel lagu qasho qofkii soomaaliga aha, iskadaa dadkii kalee.

Magaaladii Mingiste, Ian Smith iyo rag lamid ah looga hanjabayay ayaan kunoolaan la'ahay aniga oo Soomaali ah!Dadkii soomaaliyeedee muunadda lahaawaxa ay ufirxadeen afarta jiho. Waxaay galeen goob kaste oo ay miciin bideen. Hasayeeshee waxa ayin badan oo dawladdihii iyo shucuubtii ay maganta u ahaayeen kamid ah kalakulmeenay dil, dhac iyo quudhsi,maadaama aysan jirin dawlad looga haybaysto.

# JIDKII GEERIDA

Waxa aan subax Talaada ah u jihaystay xagga jidka dheer ee koonfur uga baxa magaalada Muqdisho. Waxa aan afka saaray dhulka Waamo.Waxa aan dhexda iska raacnay tiro dablay ah oo dagaal ka dhacay agagaarka lambar konton ka ambaday kuwaas oo wata hubkoodii iyo dirayskii ciidanka ay katirsanaayeen, aniga oo aan ka aamin qabin ayaan iswaraysanay waxa ay umuuqaal egyihiin kuwii ijidh dilay, waxaanse nahay iksu qabiil. Mar haddii aan isku beel nahay anigu waxaan hasytaa rejo ah in aan noolaanayo, waxaase layaab ah inay iyaguna qabiil dartii u dilayaan dad kale oo aan waxba galabsanin oo Soomaali ah.

Dablaydaa waxaa kujiray wiil magaciisa iigu sheegay Cabdullahi Warsame, waxa uu ahaa Kabtan da' yar oo aad ucabsanaya, walwal iyo walaacna ay kuhayso derajada ciidannimo ee uu sito. Ma uusan garanin in uu dirayska iskabaddalo. Malahayga waxa katan badisay cabsida, marka talo faraha kabaxdo naftuna imaato dhuunta waxa dhumaya aragtida saxda ah, waxaana yaraanaya fikradda toosan, waxaana hoggaamiya dareen inta badan aan xaqiiqo kudhisnayn kaas oo lagayaabo in uu noo horseedo geeri aan ka baaqsan karnay.

Waxa layaab ah wax walba oo aan uhanqal taagno, dhib iyo dhidid aan umarno ugu danbeyntana aan kuguulaysano haddii aan si wanaagsan loo adeegsanin waxa uu isu baddalaa xumaato, waxa laga yaabaa in Cabdullaahi uu sannado badan kubixiyay in uu gaadho derajada kabtannimada, sidoo kale waxa dhici karta in uu garab iyo gaashaan qabiil adeegsaday,ama karti uu isagu leeyahay kugaadhay derajadaas, labadaas xaalaba kii uu doono

hakutagee wuu kufaraxsanaa maalintii loo xidhay xidigahaas oo uu iigu sheegay bishii saddexaad ee 1989[kii], "waxa aan lasoo dhex maray jidadka waaweyn ee Xamar. Waxa aan tegay meelaha la isugu imaado sida baarasha, hoteelada, xerooyinka ciidanka iyo guryaha saraakiisha aniga oo raba in la ogaado derajada aan gaadhay" ayuu yidhi Cabdullaahi oo si niyad jab ah iigu warramayay mar aan kabaxnay Kuunya Barrow annaga oo baahan, cabsanayna qof kastana cadow noo yahay.Xiddigaha garbihiisa saran ma aysan lahayn wax maamuus ah, waxa ay la midyihiin dhagaxaanta yaryarka ah ee ku daadsan laamiga labadiisa dhinac.

Dhulku waa cagaar, cirkuna waa nadiif oo wax daruur ah malaha, labada dhinac ee waddadana waxa is haya biyaha laga soo leexiyay webiga Shabeelle oo nolosha malaayiin Soomaaliya lafdhabar u ah, dalagga noocyadiisa kala duwan ee baxaya ayaa is qabtay tan iyo meesha ishaadu kudhammaato.

Cabsidu waxa ay dishaa wax walba oo qurux badan, dhulka sidaa uqurux badan waxa hadheeyay gaajo iyo oon, mar haddii maanka laga daalo maskaxdana laga baahanyahay biyo iyo baad walba oo dusha sare ee dhulka ceegaaga waxba kuuma tarayaan, waxa aan sii maraynay kolba boqolaal qoys oo qax ah, waxa jidka kadhacay iyo qisooyinka aan kasoomaray waa lama ilaawaan, waa dhacdooyin argagax leh taariikhduna ay ku kaydin doonto bogaggeeda madow.

Dhacdooyinkii dhiiggu ku dahaadhnaa, murugaduna ku saabnayd waxa ay igu reebeen caloolxumo aan waayo kasoo waaqsan waayey, mitir walba waxa yaala meyd, ama dhaawac, ama kufsi, ama qiso ku xanuujisa.Waxa aan iskudayay in aanan raadinin sheekooyinka madoow ee daadsan jidka geerida, laakiin Soomaalida oo raasamaalkeedu yahay iska warran iyo maxaa

lasheegay? Waxa ay qasab kugu oggaysiinayaan waxa dhacay, waxa dhacaya iyo waxa dhici doona malahooda. Soomaalidu waa dad karti iyo firfircooni ilaahay siiyay, waxa ay kuwanaagsan yihiin sheegista warka, xifdinta, maskaxdooda oo aad usarraysa awgeed waxa ay awood uyeesheen in ay sheekada kadhigaan maktabad kaydisa sooyaalkooda, suugaanta iyo sheekadu waa warbaahin ay kusoo gudbiyaan dhaqan, hiddo, taariikh, halgan iyo dhammaan waxa ay noloshoodu soomartay.

Nacabsanaa safarku oo dheeraa jidku marka colaad, walbahaar iyo baahi kugu gadaamanyihiin.Waxa aan maalmo fara badan kusii jirno jidkii geeridaba waxa aan gaadhnay ugu danbayn magaalada Kismaayo oo markaa ay kasii muuqdaan dabayaaqadii dawlad awood lahayd gayiguna ka haybaysan jiray, waxa magaalada kajira is uruursi qabiil oo xoog leh, waxa loo diyaar garoobayaa gacan kuhaynta magaalada istiraatiijiga ah ee kulmisatay nimcoolayda oo idil waa beertii, webigii, xoolihii iyo baaddiiyihii. Khayraadkaa uu illaahay siiyay Kismaayo waxa ay kadhigeen magaalo ayaan daran dhiigguna uu ku daato had iyo goor.

Waxaaan nahay ummad kudul ooman dhul ay maraan webiyo aan gudhin. Waxa aan nahay ummad u le'ata raashin la'aan innaga oo haysana malaayiin heektar oo ku habboon dhammaan noocyada kala duwan ee dalagga.Waxa aan haysanaa boqollaal nicmoolay ah. Waana ka aradannahay, xooluhu iyaga ayaa na leh innagu malihin, dhulkana cidi ma laha oo waa baylah, sababtu tahay qofna dhulkiisa gacantiisa kuma dumiyo, dadkeeniina waxa ay noqdeen in dhooftay, in dhimatay iyo in nolol aan tayo lahayn ku nool una hanqal taagaysa in ay dhoofaan.

Xumaanta qabiilka waxa kamid ah, in uu yahay fool xumo aan bar dhammaad lahayn.Dadka maanta Kismaayo isku hor fadhiya

ee isu hub uruursanaya haddii wax yar magaalada laga baxo waxa ay noqonayaan dad isku hayb ah oo isku khaanad kujira. Qabiilku waa qudhun aan adduun iyo aakhiro waxba kutaraynin.

Waxaa qabiil adeegsada nin dadnimadu ka dhimatay.Nin kartidiisa ku meel mari waayay.Qofjid walba kaxidhmay oo jidka qabiilka ka dhigtay faras uu ku dul noolaado.

# KISMAAYO IYO KISTAADA

Waxa aan guluf colaadeed sii dhex jiidhaba waxa aan hadda joogaa magaalada Kismaayo oo u eg haweenay goblan ah. Iyada oo markii hore ba aan helin daryeel dhab ah, si wacanna loogu hagar baxin ayay haddana goblantay. Waa magaalada ugu ayaanka daran gayiga Soomaalida, illaa ay dadka qaar ku matalaan garoob dhaban leh oo galab walba nin usoo cilaamata, taas oo macnaheedu yahay; waxa ay noqotay sida gabadh guurku ka xumaaday oo kolba calafkeeda tijaabisa.

Waxa aan soogalay magaalada Kismaayo oo gacan ku haynteeda ay isaga dambeeyeen qabiillo iyo kooxo kala duwan. Maalintii aan soo galay laba maalin ka hor waxa ka dhacay dagaal khadhaadh oo faraha la isaga gubtay. Waxa ay magaaladu la ciirciraysaa ciidamo farabadan oo kala afkaar iyo aragti ah. Waxba laguma midaysna, haddana waxba laguma kala duwana. Dadku waa isu muuqaal egyahay haddana wuu kala maan duwan yahay. Waxaa halkan ceegagata qabyaalad. Dadku waa wada geeri suge, sicirbarar xunna wuu kudhuftay magaalada.

Aqoonta aan u leeyahay magaalada ma ahayn mid durugsan.Waxaanse ogaa in nin aan ilma adeer nahay uu degganyahay xaafadda Farjano, waxa aan gaadhiga kaga degay agagaarka madaxtooyada, dabadeedna waxa aan bilaabay in aan haybsado qofkii aan usocday.Dhibku waxa uu kataaganyahay; waxa aan kabaqayaa qof kaste oo iga hor imaada! Magaalo ay degganyihiin dhowr qabiil oo is dirirsan, way adagtahay in qof qariib ku ah uu ku dhex dareemo nabad iyo naxariis.

Diihaal fara badan kadib waxa aan tegay gurigii aan usocday oo aan ka fogayn warshada hilibka.Warshaddaas oo uu sameeyay midowgii Soofiyeeti waxa ay ahayd mid dhoofisa kumanaan tan oo hilib ah, waxa ay dalka iyo dawladaha qaarba kahaqab tiri jirtay baahida hilibka xoolaha, maantana waa meel dunsan oo biraheeda la iibinayo, wax aad mooddaa in dalka uu lahaa hal qof oo isaga laga aargoosanayo.

Siddeedii bilood ee aan joogay magaalada Kismaayo waxa dhacay falal foolxun, magaaladana toddobo jeer ayaa lagu dhax dagaalamey, dagaalladaasi waxa ay ahaayeen kuwo sii dilaya rejada yar ee laga qabo dawladnimo. Waxaa maalinba maalinta kadanbaysa sii fogaanayay yididiiladii laga qabay in dagaalku uu dhammaado. Waxa geed dheer lagu laalay midnimadii soomaaliyeed, taas oo ahayd waxa keli ah ee dadku haysteen xilligii ay kuhoos noolaayeen xukunkii milatariga ee isku darsaday dhammaan awoodihii dawladnimo, kadibna kalasooci waayay farqiga udhexeeya hoggaanka iyo dalka. Hoggaanku waa adeegaha shacabka. Ilaaliyaha sharciga. Waa mid joogaya muddo yar.Dalkuna waa hooyo.Waa mid waaraya inta adduunku jiro.Waa midka jiilasha soo socda ee soomaaliyeed ay ku noolaan lahaayeen barwaaqadiisa.

Saraakiishii hoggaanka u ahaa Xisbiga Hanti-wadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waxa ay moodeen in xisbigu u dhigmo dadka soomaaliyeed, madaxdiisuna tahay dalkii, halkaa waxa ku dhumay sharaftii dalka iyo xuquuqdii dadka oo ciidanka iyo inta ladanta ah ay kanoqdeen kuwo masuul ka ah.

Waxa soo kordhaysay maalinba maalinta kadanbaysa kala irdhowga, kala aargoosiga, isu turid la'aanta kajirta dalka. Waxaa maalin walba ladilayaa dad maata ah.Waxaa agoon noqda maxas. Waxaa la goblamiyaa hooyooyin. Waxaa lagaadhay xilli qofna

uusan ku noolaan karin Kismaayo. Xeebihii quruxda badnaa waxa ay isu baddaleen dhiig, mashaariicdii larabay in Soomaalida iyo Afrikaba ay deeqaan sida, mashruucii bariiska Mugaamboow, mashruucii korontada ee Faanoole, warshaddii hilibka, tii harkaha, warshaddii kalluunka, warshaddii sonkorta Mareerey oo aan dhihi jirnay waa warshadda labaad ee Afrika ugu weyn ee soo saarta sonkorta marka laga reebo midda Kinaana ee dalka Suudaan, waxa ay noqdeen digo iyo dambas, waxa ayna ku hareen xusuusta dadka oo keli ah. Maanta waa taariikh laga sheekeeyo.

Nin adduunka joogoow maxaa aragti kuulaaban! Dooxooyinkii Jubba iyo beerihii kuteedsanaa jiinka webiga waa abaar boodhku kugu dilayo. Muddo yar oo kooban waxa istaagay dhammaan wax walba oo dalkan sharaftiisa iyo karaamadiisa dhisayay.Waxaa kala baxay dadkii, ummadihii laga tirada badnaa sida Hindida, Bakistaaniyiinta, Carabta waa ay kahaajireen xaafadahoodii. Waxaaan soo dhex maray Calanleey oo ahayd xaafadda ay degganyihiin dadka aan soo sheegnay waxa ay ahayd cidla. Waxa ay uqaxeen dalalka dariska ah. Waxa ay ganacsigoodii iyo khibradahoodii uwareejiyeen xeebaha Kenya gaar ahaan Laamo iyo Mombasa, qaarkoodna Kenya waa ay dhaafeen oo waxa ay sii dhex galeen bariga fog ee qaaradda Afrika, ilaa ay gaadheen Tansaaniya iyo Musaambiig.

Muddo markii aan ka baaraan degayay noloshayda waxa iisoobaxday in aanan halkan ku noolaan karin. Kismaayada wejigan leh uma qalanto meel lagu noolaado hasayeeshee ma aqaano meel iyo si looga baxo. Eebboow dal ma aqaan itaalna ma lihiye i tabantaabi ayaan xaajo kusoo gooyay.

Dhibaatooyinka mid mid uma imaadaane aniga oo ladaalaa dhacaya murugada ayaa waxa isoo ridatay duumo ay dhakhaatiirtu

kusheegeen mid kulul, dadkana madaxa kudhufata, waxa la i dhigay isbitaalka guud ee magaalada Kismaayo, oo aan markaa lahayn dawo iyo daryeel caafimaad midna, hayeeshee waxa uu dhaamaa wax la'aanta iyo guri iska dhex jiifka. Waxa aan ku qarwi jiray erayo kayaabiyay dadkii ila joogay, waxaana igasoo burqanayaya afkaarta aan aaminsanahay ee dadkii xilligaa ula muuqday waalli iyo waxba kamajiraan qandhadu iga keentay.

Laba toddobaad oo dhakhaatiirtu ila tacaalayeen kadib waxa aan kasoo baxay isbitaalkii aniga oo si dhab ah ugo'aansaday in aan gabbal danbe iigu dhicin magaaladan.Waan tabar dar nahay. Waan jeeb madhan ahay.Xanaaq dartiina dibnaha ayaan ruugayaa, aniga oo diiddan sida wadcigu yahay.Waxa aan utegay nin aan saaxibnay muddadii aan joogay magaalada Kismaayo oo Xasan la odhan jiray. Xasan waxa uu dukaan kulahaa laamiga Aargada. Waxa uu ahaa nin af gaaban, dun macaan, dadnimana leh oo dabeecad kulul marka uu xanaaqo. Waxa aan dukaankiisa dhigan jiray, wixii aan soo helo ee shilimaad ah.

Intii aan magaalada Kismaayo joogay waxa aan lashaqeeyay dhowr haayadood oo waddamada carabta ka socday iyo kuwo reer galbeed ahaa, kuwaas oo gargaar bini'aadannimo kaqaybin jiray magaalada iyo nawaaxigeeda.

Maalin maalmaha kamid ah aniga oo fadhiya biibito kutaala isgoyska Soomali Istaar ayaa waxa aan lasheekaystay oday rara doomaha u safra Raaskaambooni iyo magaalooyinka ka shisheeya ee ay Mombasa ugu danbayso. Muriiddi oo degganaa agagaarka Suuq-weyne waxa uu ii sheegay in ay jirto si fudud oo lootago Kenya, markaan sii toydayna waxa uu tibaaxay in badda lamaro lacag yarna la iska bixiyo; "doontan Mombasa ayay si nabad ah kugu geynaysaa haddii uu Eebbe idmo, kadibna adiga ayaa aadaya

meesha aad rabtid", ayuu yidhi isaga oo igu dhiirigalinaya in aan tijaabiyo safarka badda oo ahaa mid igu cusub.

Waagaa oo ahayd bilowgii dagaalada sokeeye ma dhib badnayn gelitaanka Kenya bad iyo barriba. Waxaana sabab u ahaa Soomaalida oo aan laga qabin arigtida maanta laga qab iyo iyada oo ay Keenyaanku aaminsanaayeen inay soomaalidu lacago wataan. Intaa waxa dheeraa dawladda Kenya oo qaadatay siyaasad ah in ay dhibaatada Soomaalida kamacaashto, kadib markii ay ufurtay xeryo waaweyn oo Soomaalida lagu xareeyo waxa addunka looga soo dawarsadana wax yar laga siiyo.

Waxa aan raacay doontii dheeraynaysay aniga oo layaaban sida ay usocoto, inkaste oo webi dushii aan ku dhashay dabbaashana aan is leeyahay kalluunka keli ah ayaa kaa yaqaana haddana in aan bad kusafro oo aan doon gabi dhaclaynaysa raaco waxa ay ahayd xaajo ugub ah. Inyar markii ay doontii socatay ayaa waxa I qabtay matag, oohin iyo wareer. Safarka baddu aad ayuu u adag yahay haddii gaadiidka la raacayo uu yahay doomo shiraac ah oo aan iska caabbin karin hirarka, dabaylaha iyo badka fog ee badda.

Waxa ay doontii nala sii liicdaba, waxa aan gaadhnay magaalada Mombasa ee taariikhiga ah. Waa magaalo fac weyn oo ahayd irridda bari ee lagasoo galo Afrika. Waxa isaga danbeeyay xukunkeeda dhowr dawladood sida Carab (Cumaan, Yaman) Boortaqiis, Ingiriis, illaa ay gacanta u gashay dawladda Kenya madax bannaanidii ka dib.

Kenya ma ahayn magac jiray ama dal la yaqiinay gumaystihii Ingiriiska ka hor. 1920[kii] markii uu Ingiriisku sameeyay maxmiyaddii Bariga Afrika ee Imbiryaaliga ahayd waxa uu qabiilladii afrikaanka ee ood wadaagga ahaa u mideeyay si uu umaamulo. Majiirn magac layidhaahdo Kenya oo dadku ku

midaysanaayeen, balse waxa jiray qabiillo Afrikaan ah oo isbarbar degganaa kuwaas oo aysan midaynin diin, dhaqan, af iyo hiddo midna, Ingiriiskuna uu u arkay inay dantiisu ku jirto midayntooda si uu u maamulo.

Wax yaab lehna ma aha in gumaystuhu Soomaalida oo wax walba kamidaysan uu kala gooyay, qowmiyado iyo shucuub kala duwanna uu isku tolo. Gumaystuhu mar walba waxa uu kaduulayaa dantiisa, haddii uu kala geynta dan u arko wuu kala goynayaa, haddii ay dantiisu ku jirto midaynta wuu midaynayaa.

Keenyaanku waxa ay ka xoroobeen Ingiriiska 1963[dii] waa sida ku qoran dastuurkee, sida aan ognahayse Kenya tan iyo maanta kama aysan xoroobin dhinacyo badan, ha ugu horeeyo maamulka, dhaqaalaha, afka, taariikhda iyo kudayashada saan caddaalaha oo ay dad badan oo Keenyaan ah aaminsanyihiin illaa maanta in caddaanku yahay dad iyaga kasareeya oo ay ku daydaan.

Waxaa isbaddalay -waa sida badanaa Afrika tahaye- waa laba ruux, mid caddaan ah ayaa waxa baddalay mid madow oo muuqaalkaAfrikaan uga eg maankana caddaan ka kashabaha. Waxba isma baddalin waxa aan wada taagan nahay meesheenii oo wali waxa aan kuwareegaynaa jidka faqriga iyo isfahanwaaga siyaasadeed ee kudhisan amar kutaaglaynta.

Markii Kenya sanadihii hore ee xukunka waxba iska baddali waayay welina uu jiro dhaqankii ahaa dawlad dharagsan iyo shacab baahan ayuu halgamaagii reer Kenya Odinga qoray buuggii lamagac baxay "Not yet Uhuru" wali maanaan xorroobin! Buuggaas waxa uu ku dhaliilayay siyaasadda iyo geeddi socodka guud ee Kenya oo haysay jidkii uu gumaystuhu u jeexay. Jidkaa

waa mid suuragalinaya in weli dhaqaalaha dalku gacanta ugu jiro dawlado shisheeye siyaasaddiisana la hago.

Markii aan gaadhay magaalada Mombasa waxa aan markiiba isu diyaariyay safar maadaama uusan yoolkaygu ahayn in aan sii joogo magaalada. Waxa aan niyadda ku hayay in aan usii gudbo Nairobi oo Soomaali badanna ku nooshahay, xagga shaqadana ka wanaagsan Mombasa oo dadkii u dhashay shaqa la'aantu ay ku qasabtay daroogo, argagixiso iyo budhcadnimo. Mar haddii go'aankaygu yahay ka tegidda magaaladan waxa aan raadiyaaba waa uun gaadiidkii ii qaadi lahaa Nairobi.

# NAIROBI

Nairobi marka la koolkoolinayo waxa lagu naanaysaa London-tii Afrika, oo loola jeedo magaalo qurux badan oo soo jiidasho leh, magacaas waxa ay kuqaadatay xidhiidhka ka dhexeeya iyada iyo London oo ah caasimadda dalka Ingiriiska.Sida dadka yaqaan ay sheegaan labada magaalo waxa ay isaga egyihiin meelo badan, oo ay ugu horayso qaab maamulka oo uu Ingiriisku dejiyay iyo saxmadda gaadhiyada. Waxa sidoo kale naanaystaa aad ka dheehan kartaa gumaysi dahsoon. Gumaystuhu waxa uu u arkaa ilbaxnimadiisa mid xuddun iyo halbeeg u ah ilbaxnimooyinka shucuubta adduunka ku dhaqan, sidaa darteed magaalooyinkiisuna waxa ay hormuud u yihiin magaalooyinka dunida oo idil. Haddaba si aan u dhahno magaaladaa waxa ay leedahay qiimo weyn waa in aan la barbar dhignaa mid reer galbeedku leeyahay! Tusaale ahaan Asmara waa caasimadda Eritrea waxaa lagu naanaysaa Roomadii yarayd ama magaaladii Taliyaaniga ee ku taalay bariga Afrika.

Nairobi waa eray Af masaay ah oo macnihiisuna yahay “Meeshii biyaha qaboobayd” $1889^{kii}$ ka hor waxa ay ahayd dhul keymo ah oo ay degaan qabiilka Masaayda oo ah mid ka mid ah qabiilada ugu ilaalinta badan dhaqanka iyo hiddaha. Masaayda iyo soomaalidii hore meelo badan ayay isaga egyihiin ha ugu horeyso muuqaalka soohan, xoola dhaqashada iyo u kala qaybsanaanta dhowr dawladood oo bariga Afrika ku yaala.

Waxa ay caan baxday Nairobi markii uu gumaystihii Ingiriiska ka dhigay caasimaadda mustacmaraddiisii bariga qaarada madow. Maanta waa mid kamid ah caasimadaha ugu saamaynta

badanAfrika. Waxaana ku yaalla xafiisyada ugu waawayn ee ha'yadaha caalamiga ah.

Burburkii dalka kadib, Nairobi waxa uguuray ganacsigii iyo siyaasaddii Soomaalida.Waxa ayna si dhab ah u noqotay magaalo laga maamulo dalka iyo dadka. Waxa halkan lagu karkariyaa qaabka loo hagayo dadkeena dagaalku mashaqeeyay, inta badan arrintaa waxa majaraha u haya dawladaha dariska ah kuwaas oo dano gaar ah ka leh Soomaalida.

"The Green City in the Sun" magaalada cagaaran ee qorraxda ku hoos taala waxa ay marti gelisaa ha'yado caalami ah iyo ururro saamayn ku leh Soomaaliya oo wixii ka dambeeyay 1991$^{dii}$ Nairobi looga arrimiyo.

Magaalada Nairobi waa adagtahay in uu laqabsado qof nolosha magaaladu ku cusubtahay, gaar ahaan xilligaa hore ee ahayd billowgii sagaashameeyadii qarnigii 20$^{aad}$.Waxa aan dhex galay mowjado hirdamaya.Waxa aan ahaa nin dhallinyaro ah dalkana aan garanayn. Waxa aan dhex galay badweyn dad ah aniga oo aan sidanin wax ka badan awood dhallinyaranimo, rejo iyo hal adayg aan aaminsanahay in aan ku meel gaadhi karo.

Magaranaynin Af Sawaaxiliga oo lagama maarmaan u ah qofka doonaya in uu Kenya fahmo ama ku noolaado. Furaha nolol maalmeedka, xidhiidhka dadka, fahanka deegaanka, lasocoshada isbaddallada iyo dhaqdhaqaaqa kajira Kenya oo idil waxa ay ku xidhanyihiin fahanka sawaaxilliga.Waxa soo raaca Ingiriiska oo ah isaguna luuqad lagama maarmaan ah mar walba oo aad Kenya iyo bariga Afrika sii dhex mushaaxdo.

Muddo ayaan isku dayay in aan dhex galo Nairobi oo igu soo dhowaysay qabow iyo gaajo.In badan ayaan shaqo raadiyay nooc ay doonto ha ahaatee, waanse ku guul darraystay oo magaalada

oo loo kala degganyahay qabiil iyo ururro shaqadana la isku siiyo weji garad, maan helin qof i caawiya ama i garab istaaga. Bil markii aan sidaa ahaa waxa sii xooggaystay isfahan la'aanta dhex taal Nairobi iyo Guure.

Caqabadaha magaaladu intaa oo qudha may ahayn e waxa isoo food saaray dhowr arrimood oo ay ugu darnayd middii caafimaadka, kadib markii aan la qabsan waayey magaalada iyo qabowgeeda. Waxa aan kudhashay dhul ugbaad ah, saxansaxadiisuna sambabada kabuuxiso hawo dihin oo aan ku wasakhoobin qiiqa warshadaha iyo bullaacadaha dhex gingima Islii, halkan waxa isa saaran qaboow, kuleyl, dhiiqo iyo wasakh. Xaafadda soomaalidu waa mid kamid ah xaafadaha ugu wasakhda badan magaalada Nairobi.

Gurigii aan xaafadda Islii ka degganaa waxa uu kaabiga ku hayay jidka 3[aad] (Third Street) oo tan iyo waa dhow ahaan jiray meelaha gu halista badan xaafadda.Galab ayaan guriga kasoo baxay si aan u arko nin aan ku balansanayn makhaayad ku taalay jidka siddeedaad, maqaaxidaas waxa isugu imaan jiray dhallinyarada ka soo jeeda qaxoontiyadii Hiiraan. Waxa aan halkaa ka heli jirnay xog ku saabsan dalkii iyo dadkii aan kasoo tagnay.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaan salaadda makhrib kutukaday masjidka Abuubakar Al-saddiq ee kuyaala jidka lixaad ee xaafadda Islii. Masjidkan waa midka ugu weyn Islii.Waxa aan kutaxnaa casharro diini ah oo masjidka ay ka akhriyaan culimada ugu saamaynta badan geeska Afrika. Waa masjid nooleeyay xalaqaadka diinteena suubban, adeegga uu muslimiinta uhayaana waa mid aad u weyn, intaas waxa dheer faafinta diinta oo si xowli ah ugu dhex fidaysa bulshada Keenyaanka ah ee aan muslimka ahayn.

Islaamku waa diin kudhisan caddaalad, sinaan iyo walaalnimo, halka diimaha dhalan rogmay ama ay dadku sameeyeen ay kudhisanyihiin kalasarayn iyo is dhexgal la'aan, gaar ahaan dadka madow ee diimaha kale oo dhan lagu liido waxa ay ka heleen diinta islaamka sinaan iyo wada noolaansho kudhisan ixtiraam.

Salaaddii ayaan tukaday dibedda ayaanan u soo baxey.Waxa da'aya roob dhulkuna waa mugdi.Markii aan kasoo baxay masjidka cabbaarna aan socday ayaa waxa meel dhow igaga soo baxay laba nin oo dhar ciidan xidhan. Ma dareemin wax cabsi ah maadaama aan watay sharci ku meel gaadh ah. Waxaa gacanta iqabtay nin dheer oo xoog badan.

"Keen sharcigaaga" ayuu si halhaleel ah ii wayddiiyay? Markii aan tusay sharcigan kujoogo Kenyana waxa uu iisheegay inuu yahay wax aan jiirn oo been ah "waxaaad mudantahay in lagu xidho saddex sano iyo kabadan."Ayuu noqday hadalkii ugu horeeyay ee dibnihiisa kasoo baxa! Hadalkaas amakaag iyo af kala qaad ayuu igu noqday, waxa la igu jeebbeeyay katiinad, sidaas ayaanan ku waayey xorriyaddii aan lahaa ee aan ku dhashay. Waxa aan noqday qof afduuban oo aan garanayn meesha loo wado!

Lix saacadood oo wareeg iyo daal ah kadib waxa la i geeyay saldhig boolis oo aan umalaynayo in uu ahaa Bangaani. Xabsiga dhexdiisa waxa aan kula kulmay nooc walba oo ciqaab iyo liiditaan ah aniga oo wax dambi ah aan lahayn. Waxa aan ku xidhnaa rabitaan askari tuug ah gabbaadna uu u yahay sharciga isaga difaacaya qofka aan dalka u dhalanin gaar ahaan soomaaligana ka dhigaya tuke cambaar leh oo aan mudnayn ixtiraam sharciguu doono ha watee.

Markii aan xabsigaa ku jiray laba isbuuc, waxa isoo damiintay oday aan qaraabo nahay. Qaraabada Soomaalidu ma dhammaato

waa silsilad taxan ababahaa illaa awoowgaaga ugu danbeeya. Wanaagga qabiilka ee Soomaalida dhexdeeda waxa kamid ah in meesha aad tagtaba qofka abtir ahaan kuugu dhow uu masuuliyaddaada qaadayo. Weligaa qof aadan maqlin arkin, ayaa walaal kuu noqonaya wax walbana dusha uridanaya si uu uguto waajibka qabiilka ee saran.Taasi waa mid kamid ah waxyaabaha wanaagsan ee qabiilku uu leeyahay.Waxa fiicnaan lahayd in adeegsiga qabiilka lagu daayo arrimaha bulshada ee nolosha noo fududeeya, oo laga fogeeyo arrimaha maamulka, siyaasadda iyo wada noolaanshaha dadka.

Markii aan kasoo baxay xabsigii kutaanta iyo kaneecada badnaa, waxa aan go'aan kugaadhay in aan sii wado safarka qaxoontinimada ee aan soo bilaabey lix iyo toban sano ka hor. Nolosha qaxoontiga anigu ma dooranin balse iyada ayaa i doortay.Waxa ila kowsaday maalinkii aan dhashay cabsi, qax iyo hayaan. Waxa aan waayay in aan dalkayga ugu noolaado sida aan rabo, waxa ay noloshaydu gacanta ugashay shisheeye u dhigay sida ay jecelyihiin.

Intii aan la daalaa dhacayay dhibaatada Nairobi, waxa aan ishelnay Cabdiqaadir oo isagana kasoo qaxay dagaallada kasocda dhulka Soomaalida. Cabdiqaadir oo lagu naanayso Indha-Maraq waxa uu kasoo jeedaa qoys magac iyo maamuusba ku lahaa degmada Qoryooley ee gobolka Shabeelada Hoose. Waxa ay lahaayeen aseendooyin, xoolo nool iyo hanti maguurto ah.Walaalkii ka weynaa waxa uu ahaa ganacsade caan ka ahaa Shabeelada Hoose iyo Xamar.Saldhigga ganacsigiisuna waxa uu ahaa magaalada Marka ee taariikhiga ah.

Dagaalladii waxa ay badeen Cabdiqaadir iyo qoyskiisa dhibaato. Waxa lagala wareegay wixii ay hanti lahaayeen.Dadkii magaca iyo muunadda lahaa waxa ay halmar isu baddaleen dad sabool ah oo

gacantoodu dhulka taalo! Foolxumaa dagaalku waxa uu dhaawacaa magaca, waxa uu dhimaa sharafta, waxa uu dhalan rogaa dhaqanka, waxa uu dheellisiiyaa nolosha.

Dagaalkii ugu horeeyay ee ay taariikhdu qorto illaa iyo kan maanta aan kasheekaynayno ee dalkeenii ragaadiyay waxa ay caan ku yihiin in dadka bilaabay aysan kudhimanin badanaa, waxa uu galaaftaa masaakiinta dan yarta ah. Dagaalka waxa keena fikir si khalad ah udhacay, ama maslaxad wada xaajood lagu xallin waayey. Waxa ooga dagaalka koox danteedu ku jirto burburka, waxaana xaabo unoqoda dadka tabarta yar, sidoo kale dagaalka waa layaqaanaa qofka bilaaba, mase garan karno qofka ololkiisa damin doona iyo inta uuqaadan doono.

Ma aha geesi midka bilaaba dagaalka, midka agoomeeya dhallaanka, midka aseyda u saara gabdhaha.Geesigu waa midka keena nabadda. Waa midka baajiya geerida. Waa midka ladagaalama caddaalad darrada. Waa midka fidiya farxadda iyo wada noolaanshaha.Dadkeena la isku dilay falka foosha xun ee ay samaynayaan ma aha mid subax qudha dhashaye waa dhacdooyin tobannaan sano soo jiitamayay oo aan xilligii haboonaa aan laxalinin kadibna isu baddaly qarax iyo dab qof walba uu ku gubtay.

Cabdiqaadir qooyskiisii badnaa qofna kama hayo maleeshiyaadkii qabsaday dhulka markii ay dawladdu dhacday. Waxa ay kuhor dileen saddex walaaladii ah iyo hooyadii, afar kale iyo aabbihii oo waayeel ahna jaan iyo cidhib meel ay dhigeen waa lala'yahay illaa maanta. Dhacdooyinkaas foosha xun waxa ay ugeysteen Indha-Maraq gocosho aan dhammaanayn.Waxaa qalbigiisa buuxiyay nacayb, aargoosi iyo udiyaar garow in mar uun uu dhadhansiiyo ciqaab kulul dadkii sidaa u galay, hasayeeshee dadkaasi wa'ayo? Xaggee ayay ka imaadeen? Sidee ayuu uheli karaa? Intaba waxa ay

ahaayeen su'aalo adag oo ka maqan maanka Daadir; waasida uu jecelyahay in loogu yeedhee.

Waxa aan isku af garanay aniga iyo Daadir in aan kabaxno magaaladan baaga muundadu nagu baabi'isay.Go'aankanagu waa in aan aadno xerooyinka qaxoontiga ee Soomaalida lagu xareeyay.Aniga oo hadalka qaatay ayaa talo ahaan usoo jeediyay: "dhadhaab waa ay naga fogtahay hadda ayaana la bilaabay dejinta dadka, milic kulayl iyo manfac xumana waa lagasoo sheegayaa."Aniga oo aan hadalka dhammaynin ayuu Daadir boobay oo uu yidh: "intaa waxa dheer in ay kutaalo xuduud beenaadka u dhexaysa dalkeena iyo Kenya, dadkana waa laqabqabanayaa oo danbi la'aan ayaa laxidhaa, aniguna hadda ayaan kasoo baxay xabsi, markaas waxa aan ka baqayaa in labadeenuba aan af libaax ku dhacno, annaga oo raadinayna nolol karaama la'aan ah. Waxa ila quman in aan aadno Kaakuma oo lagasoo sheegayo nolol middan dhaanta soomaaliduna ay aad ugu yartahay." Aniga oo aan hadalkiisa sugin ayaan ku idhi: "weliba toddobaadkan dhaxdiisa ayaan baxaynaa."

Daadir oo aamusnaa inta aan hadalka waday aad mooddana in uu aragtidiisii hore wax ka baddalay ayaa yidhi: "iyaduna waa meel foolxun oo qaxoonti laga keenay Koonfurta Sudan u badanyihiin, hasayeeshee waa ay dhaantaa midda aan hadda kasheekaysanaynay, waa sida aan annagu aaminsanahaye" Cabdiqaadir ma ahayn nooca macangagga ah ee wax walba diida, sidoo kale na ma ahayn nooca hindisaha badan ee habeen walba fikrad hor leh gabalku ugu dhaco, mid cusubna waagu ugu baryo, balse waxa uu ahaa qof dabeecad macaan, aad uga fikira talaabada uu qaadanayo, dadkana siiya kalsooni buuxda, inkaste oo dhaawacyada wakhtigu ay saamayn ku yeesheen naftiisa iyo aragtidiisa kusaabsan nolosha.

Ugu danbayn waxa aan isku af garanay in aan aadno xerada Kaakuma oo jid loo maro iyo jiho ay naga xigto midna aanaan garanayn.Waxa aan bilownay in aan tilmaansano, dadkana aan wayddiino meesha loo maro goobta aan rabno in aan gaabbaad ka dhigano inta noloshu noo saamaxayso helidda goob dhaanta. Sidii markii aan qaxoontiga Hiiraan joognay aan u aaminsanayn in muddo yar kadib aan dhulkii Soomaali Galbeed dib ugu laaban doono ayuu labadanadaba shaki nagaga jirin in dhowr sano ka dib dalkanagu hagaagi doono dibna aan ugu laaban doono noloshii aan kunoolayn. Mararka qaar ayuu Indha-Maraq idhihi jiray: "Guuroow nolosha dadka ayaa qurxiya, haddii iyaga la waayana noloshu macno ma samayso, kadib markii aan waayay qoyskaygii oo dhan, Qoryooley waxa ay noqotay xusuus aanan jeclayn in aan ku laabto!"

Noloshu waa boosteejooyin isku xig xiga, mid walbana waxa aan u baahannahay in aan ka raacno gaadiidka saxda ah ee na geynaya meesha aan rabno xilliga aan rabno iyo sida aan u rabno. Sidaas haddii ay tahay waxa aan ubaahnay in aan dib usoo abaabulno noloshanada macna la'aanta kusii siqaysa. Waxa aan hoosta ka xariiqnay go'aano masiiri ah.Waxaa kamid ahaa: tallaabada aan qaadnay waa mid kumeel gaadh ahe, ma aha mid aan isugu dhiibnay in aan Keenyaati iyo saan caddaale midna aan magan u ahaano. Waxa aan leenahay dal iyo awood dhallinyaranimo oo aan ku meel mari karno.Waxa aan kasoo jeednaa dad wanaagsan oo maanta u afduuban hamuunyada aargoosiga, duminta, dilka. Waxaa indha tiray nacayb kufaafay dhammaan oogada dalka iyo quluubta dadka.

Safarkii aan Kaakuma ku tagnay sahal naguma ahayn, diyaar garowgiisuna waxa uu ahaa cadaab aanan jeclayn in aan dib u xusuusto. Afar isbuuc iyo badh ayay nagu qaadatay in aan helno

tigidh aan ku aadno xerada qaxoontiga. Saaxiibkay Cabdiqaadir si uu u helo lacag ku filan oo geyn karta xerada Kaakuma laba jeer ayuu masjid ka istaagay salaadda jumcada kadib, labadaas jumce ee uu ka istaagay laba masjid oo kala duwan labadaba waxa uu sheegay in uu dun macaan iyo dad gob ah kasoo jeedo hayeeshee dani waa seeto oo kaa xoog weyn, hadalkiisu waxa uu ahaa mid xishood ku dheehan yahay baahina ku ladhan tahay; “waxa aan ahay nin dhallinyaro ah oo noloshu kula caaridday magaaladan aan arxanka lahayn.Waxa aan u baahanahay lacag aan ku gaadho xeryaha qaxoontiga.” Intaas ayuu ku celcelinayay isaga oo indhaha hoos u raaricinaya korna aan eegi karin.

Go’ aduunoow maxaan galabba meel joogay! Ma maanta ayuu Cabdiqaadir masjid ka taagan yahay isaga oo dawarsanaya gacantiisuna dhulka taalo, waji gabaxna dhammaystay? Ma wixii uu hanti lahaa wax walba oo uu damcana helayay ayuu maanta mixraab fadhiyaa isaga oo shilimaad dad laga soo ururiyay doonaya in uu ku aado xero aanu ogahay waxa yaala?

Haddii uu Daadir gaadhi raaciisa kasoo dhaliyay dawarsi aniguna kamaan fiicnayn saaxibkaye waxa isoo gaadhay bahdil iyo karaamo darri waayo aanan illaawin. Markii aan tashanay waxa iisoo baxay aniga, in aanan masjid ka istaagi karin, taas waxa iidhaama in aan tago Hoteelkii cuntada ee kuyaalay jidka toddobaad ee xaafadda Islii kaas oo dhowr mar oo hore aan ka shaqeeyay aniga oo suxuunta iyo digsiyada dhaqa, kadibna kahela nolol maalmeedkayga.

In kaste oo aan garanaynin sida ay shaqo ceeb ku noqonayso mujtamac la daalaa dhacaya shaqa la’aan, haddana dhaqanka Soomaalida iyo hiddaheeda kasoo gaadhka ah waa ceeb in qof ka shaqeeyo hotel cunto! Shaqadu ceeb ma aha ee waxa ceeb ah in aad shaxaad kunoolaato nooca uu doonaaba ha noqodee.Shaqo

waa karaamo. Waxase iila yaab badan in dadka la dhaco oo la noqodo xaaraan ku naaxayaal wax la la yaabo ma ah bulshadeena dhexdeeda.

Markii aan Hoteelkii tagay waxa aan qaabilay Hodan oo ahayd gabdh uu dhalay Maxamuud oo caan ka ahaa Soomaalida Nairobi. Hodan waxa ay ahayd gabdh qurux badan, qab, quudhsi iyo dabeecad kulaylna isku darsatay. Malahayga xaggaa ugudba weligeed lama odhan! Isla weyni ayay cirka maraysaa.Ragga aad ayay u bahdishaa.Qof cusub haddii uu kusoo biiro Hoteelka waxa ay gaadhsiisaa heer ama shaqada uu katago ama kabaha uu uqaado.

Mushkiladdaydu waxa ay tahay in aan rabo in aan shaqaysto aniga oo labadaa midna noqonin. Markii koowaad ee aan Hodan isla shaqayno ma aha. Waxa aan is gafnay laba mar oo hore. Darteed ayaan uga tegay shaqo aan ubaahnaa.Waa ay igu adkayd in aan katago Hoteelka sababtu tahay waxa aan ku haystay cunto saddexda wakhti ah, magaalo joogayga, mararka qaarna waaban seexan jiray; waa haddii aan waayo meel aan kuhoydo.

Hasayeeshee Hodan oo jecel in ay ragga cadaadiso waan is fahmi waynay.Waxa aan usheegay in aanan la mid ahayn kuwan ay ku raaxaysanayso dhibkooda sida dameerihiina ay ugu shaqaynayso. Iyada oo labada lugood isu dul saran yihiin ayay si ay ku jirto liidid ii eegtay. Aniga oo aad u yaaban ayaan bannaanka u baxay. Anigu waxa aan ahay nin kusoo koray dhaqan adag. Waxa aan ka soo jeedaa deegaan dumarka la ixtiraamo hasayeeshee ay leeyihiin shaqooyin aysan kamid ahayn in ay ragga amraan ama ay udhaqmaan sidii iyaga oo ragga ka sarreeya.

“Sabool qaxoonti ah ayaan ahay, hasayeeshee ma aqbali karo in aan dareemo in aan kahooseeyo gabdh jecel amar kutaaglaynta

iyo dullaynta ragga", ayaan dhowr mar oo hore ku idhi. Mar hadalku naga xumaadayna waxa ay igu shubtay qashin farxal iyo caleenta shaaha oo garaafe ku jiray.Waxa aan ku sigtay in aan u gacan qaado, haddana waxa i celiyey seetooyinka dhaqanka iyo diinta oo aan ka tallaabsan waayey. Weli waan xusuustaa maalinkii ay qashinka igu shubtay.Waxa aan kusoo labistay laba shaati oo aan lahaa midkii aan jeclaa. Shaatigii kale wuu iga wasakhaysan yahay oo waan uwaayey saabuun aan kudhaqdo ama lacag aan doobi ku geysto, halkii aan xidhnaana waxa ay kushubtay biyo wasakh ah oo uraya.

Illeen ciil uma dhimatid cadhana lama dilaacdid.Waa gabadh 20 jir ah oo kunool aabbaheed hoostiisa. Waxa ay sanadkii hore ka qalin jabisay dugsiga sare.Waxa isu dulsaaran nolosheeda. Waxa aan hoosta kaidhi: "aniguba waayo ayaan sidaada oo kale la ii hawadin jiray, adduun ayaan se isku hallayn lahayn oo waa hadhka labadiisa gelin.

Adduunku waa giraan wareegaysa, waxaadse oggaataa in aan marna madaxayga hoostaada keenin.Waxa aan dhimanayaa aniga oo madaxaygu kor u taagan yahay. Gumaysi iyo caga juglayn waxa aan ka diiday dawlado.Waxa aan gaashaanka udaruuray ururro jeclaa in aan sidooda oo kale mareegta gumaysiga u hogaansamo, marka maanta gabadh foodley ah mahoos imaanayo." ayan hadal ugusoo koobay.

Hodan oo u aragta maqaaxidaas yar boqortooyo ay maamusho ayaa laba jeer oo hore iga caydhisay shaqada, iyada oo weliba lacago aan shaqaystay ii diiday.Waa dumar oo haddii aad caydo waa xaal, haddii aad cadhooto waa ceeb, haddii aad ugacan qaadana waa eed. Haddii aad ka aar goosatana waa godob. Waan isaga samray oo dantayda ayaan ka raacdaay, markii ugu

danbaysay ee aan ka tegayay shaqada ismaan lahayn dib ayaad ugu soo laaban doontaa goobtan.

Dani kaa adage maantana waxa ay i baddey in aan mar saddexaad Hodan magan u ahaado aniga oo shaqo doon ah. Markii aan soo hor istaagay, waxa aan ku arkay si ka duwan sidii hore. Indhahaygu weli maqabanin Ina Maxamuud oo nin u naxaysa ama soo dhawaynaysa, markii koowaad ayaan arkay iyada oo dhoola caddaynaysa oo umuuqata qof dareemi kara dhibka i haysta iyo ololka gudahayga ka holcaya.

"Guurow soo dhawoow", ayay utiri si qosol dabacsan kuladhanyahay, dibneheeda ku jaan go'an ilkeheeda, midabkeeda dhiinka guduudan ah iyo codka halaasiga ah ee sida danankii ugasoo baxaya ayaa ka dhigay Araweellada Nairobi. Dumarku waxa ay leeyihiin hub dabiici ah oo wax gumaada waxa aana ugu horreeya Dhoolla caddaynta.

Aniga oo yaaban ayaan ugu jawaab celiyay: "waan dhawahay walaal Hodan." Waxa aan uga warbixiyay waxa aan doonayo iyo sida aan u doonayo. Waa ay aqbali wayday in ninkii bil kahor ay dagaalka kukala tageen maanta uushaqo doon yahay! Si cadho kulul ku jirto ayay ii wayddiisay; "sooma ogid in aad tahay ninka keli ah ee weligii isku dayay in uu dhabankayga aan dhaqaale iyo daryeelba geliyay dharbaaxo?" Aniga oo hoos fiirinaya jidhkuna i xanuunayo ayaan idhi: "waxa tahay gabdh aan xurmaynayo, dumarna weligay uma gacan qaadin, shaqadana adiga ayaa iska leh, haddana marabo in aan kula doodo, ama aan dib uxusuusano wixii tegay, waxa aan ahay shaqo doon keli ah, go'aankana adiga ayaa iska leh."

Mar kale ayay Hodan jawaabtaydii u aragtay meel kadhac iyo yasitaan hor leh oo aysan liqi karin. Waxa ay uyeedhay haweenay

Keenyaati ah oo dhulka nadiifinaysay, markii ay imaatay ayay ku tidhi: “udhiib baaldiga, xaaqinka, maryaha iyo qalabka dhulka lagu nadiifiyo.”Waxa ay rabtaa in aan kashaqeeyo nadaafadda dhulka iyo kuraasta si qof walba oo soogala maqaaxida uu ii arko indhahana aan isugu dhufano. Dhaqidda digsiyada iyo alaabta wax lagu cuno, waa wax dhib badan hayeeshe waxa lagu dhaqaa meel asturan oo indhaha ka fog.

Waxa aan galay aflibaax. Laba daran mid dooro, in aan ka dhiidhiyo magac xumada diidana in Guure oo ah nin dhallinyro ah uu miisaska tirtiro, hambada ragga qayrkii ahna ka uruuriyo miisaska, golayaashana lagaga sheekaysto iyo in hadafka aan leeyahay ee ah tegidda qaxoontiga aan hir galiyo oo shaqo walba oo la ii dhiibo aan qabto.

Aniga oo aan weli go’aan qaadanin ayaa waxa soo baxay adeer Maxamuud waa gabadha aabbaheede. Dadku kala aragti dheere wuu gartay waxa i gubaya iyo waxa aan goconayo. Waxa uu si gaar ah ula hadlay gabdhiisii. Ma aanan maqlaynin hadalkooda iyo waxa ay is dhaafsadeen waxase ii muuqday in ay si xanaaqsan ugarramayso kolbana ay gacmaha igusoo taageyso iyada oo iga eed sheeganaysa.

Kadib adeer Maxamuud ayaa ii imaaday, aniga oo eegaya gomodahayga. Waxa aan jiidjiidayay timo yar oo gadhkayga ku yiillay. Si mug leh ayuu indhaha iiga buuxsaday waxa uuna i yidhi: “iskadaa shaqadan ay kuu sheegtay gabdhaydu, waxa aad kashaqayn kartaa shaqadii hore ee ahayd nadiifinta weelasha wax lagu cuno iyo kuwa lagu kariyo.”Aad ayaan u farxay.Waxa aad mooddaa in uu ii magacaabay shaqo laqabto middii ugu sarreysay. Karaamadayda ayaa taagnayd meel halis ah, waa sida aan aaminsanaa waagaa oo da’ iyo garaadba aan ahaa qof kujira xilligii koboca.

Shaqadii ayaan galay Hoddan na intaa igagama hadhine waxa ay bilowday in dhammaan waxa yaala weel maqaaxida ay ii keento si aan udhaqo.Jees jees, dhega hadal, cay, aflagaado waan dhammaystay, waxase ii caddaa hadaf ah kaqaado halkan shilimaad yar oo aad ku gaadho dantaada. Maqaaxidan haba lahaato dhega hadal iyo dhayalsiye waa meesha keli ah ee aan kaheli karo lacag sahay ah iyo raashin aan kusii noolaado.

Waxa aan dhammaystay laba isbuuc oo bahdil iyo quudhsi miidhan ah. Dhanka kale na waxa aan gacanta ku dhigay waxoogaa shilimaad ah oo aan ku aadi karo Kaakuma, waxa aan macasalaameey ayadeer Maxamuud si waalid mudanyahayna waan u karaameeyay, ka dib ayaan soo ag maray Istaahil oo is galluubaysa.Waxa aan ka codsaday in ay isiiso xaqaygii si aan u baxo.Waxa aan filayay in ay i meermeeriso oo ay idhahdo berri soo laabo sidii caadada u ahayd, taas anigana waxa aan kaxigaa dhimasho iyo dagaal.

Istaahil oo dhoollacadaynaysa ayaa isiisay lacagtii aan sugayay mid laba jeer kabadan! Aniga oo yaaban ayaan eegay waxa aan kala baxay intii aan shaqaystay, intii kale na waxa aan saaray miiska, kadib ayaan ku idhi gabadhii: “lacagtan anigu malihi walaal.” Waxa aan sii raaciyay “waan garanayaa waxa aad ka waddo.Waxa aad rabtaa in aad dhahdid waa tuug lacag xaday marka qof kale kuday anigu fahmaye.”

Gabadhii madaxa adkayd ee bahdilka ragga kuraaxaysan jirtay ayaa il naxariis leh kugusoo fiirin masoo dhiganin meesha, qof ku mar uunbuu dareemaa bini aadamnimada, damiirkuna mar ayuu toosaa si kaste oo uu ugu raaxaysto dhibista noolaha.

“Maya Guure, anaa kuugu talagalay.Waxa aad tahay wiil hawlkar ah oo edeb iyo haybadba leh”, ayay tiri Hodan! Waa markii

koowaad ee aan maqlo hadal macquul ah, goobta shaqada waxa aan dhexdeeda si joogta ah ugu dareemayay sharaf dhac iyo amar ku taaglayn. Waxa ay sii raacisay iyada oo xaggayga usoo dhaqaaqaysa: “walaal wax aad usoctaa Kaakuma oo aad nooga fog, Soomaali kaama horreyso, tigidhkeedana waala qaaliyeeyay, lacagta aad shaqaysateyna kuguma filna, aniguna si gaar ah kuuma necbiye waxa aan jeclaa in aad sida ragga maqaaxida kashaqeeya aad noqotid mid rabbaayadaysan oo sida aan rabo ka yeelan karo, markii aad taa kasantaagtayna macno kale ayaad ii samaysay oo waxa aan kula galay tartan aniga oo moodaya in aan kaa gulaysanayo, hasayeeshee waad guulaysatay anna waan guuldarraystay”.

Lacagtii ayay jeebka surwaalka iigalisay waxa aanan dareemay markaa in dhammaan dumarka Soomaalidu da’dii ay dooni ha jiraane ay hooyo yihiin, daryeeka ku wanaagsan yihiin.Ma aanan eegin xaggeeda, hore ayaan u dhaqaaqay.Markii aan jidka gooyay ayaan dib usoo jalleecay iyada oo gacanta taagaysa si ay ii sagootido, wajigeeduna doorsoomay.Waxa aan weli aaminsan ahay in ay igu ciyaarayso oo ay damacsantahay in ay dhan kale igasoo gasho, hayeeshee qofka akhrin kara dareenka dumarka maalintaas wax kale ayaa ugasoo bixi lahaa wajiga Hodan oo isu baddaley buug furan oo laga akhrisan karo dareen dumarnimo, iyo rabitaan lagaran waayay meel loomaro iyo si loocabbiro.

Dareenkaas ah in Hodan ay aniga i jeclayd,waxa uu ahaa mid aan kukalsoon ahay, hayeeshee markii aan uga sheekeeyay Daadir aad ayuu iilayaabay,waxa uuna igu tilmaamay mid aan waxba aqoonin, gabadh kaste oo soo eegtana u malaynaya in ay jeceshahay. Cabdiqaadir oo guuxa gaadhiga kadheeraynaya xaga codka ayaa yidhi: “caashaq digaagga iska dhaaf, gabadh kaste oo kusoo fiirisa kuma jecla, inan kaste oo kuuqososhana kaama aysan helin,

noloshu jacayl iyo caashaq waa ay ka gudaweyntahay." Aad ayaan ula yaabay dooddiisaa maan-galka ah. Waxa aan u arkayay ilma yar oo caana nuug ah marnaba xagga khibraddana aan u dhigmin ninkan soogubtay ee khasaare kasoo daalka ah.

# KAAKUMA

Fiid ay fallaaraha mugdigu si fiican u wada gaadheen dhulka ayaan ka baxnay Nairobi aniga iyo saaxiibkay Cabdiqaadir oo weli ka doodayna xaaladdii na dhex martey aniga iyo Hodan. Waxa aan anigu weli ku adkaysanayay in ay i jeclayd oo si ay iigu sheegato weyday kadibna jacaylkii cadaadis isu baddalay, isaguna marna wuu igu qoslaa marna si jeesjees ah ayuu ii dhahaa 'haa waa ay ku jeclayd e ku noqo Nairobi, oo wakhti la qaado.'

Allow dhul ma naqaan dadna garan maynee jidka san na waafaji ayaan ku ducasanay annaga oo ku celcelinay: "rabbi talo ku filan."Mar walba oo aan kasii fogaano Nairobi waxa aan sii dhex galaynay dhul iyo qaab nololeed nagu cusub. Ma naqaano waxa naga horreeya iyo sida uu u egyahay, mana jirin Soomaali naga horaysay oo aan ognahay, waxa aanse hubnay in aan leenahay hadaf, kaas oo ah in aan noloshanada ku samaysano gacantanada. In aan helno meel noosuuragalinkarta dib ufikir iyo dib uhelidda naftdanada ku dhex dayacantay dagaallada iyo dhibaatada hadhaysay gayiga Soomaalida.

Waxa aan daaqadda gaadhiga kadaalacanayay dhir ubax dhowr jaad ah bixisay, buuro dhaadheer oo doog heegada sare kuleh. Biyo wadhan balliyada iyo laagaha dhexdooda, duurjoog kala duwan oo kuraaxaysanaysa dabeecadda quruxda badan ee dhulka.Waxa aan sii dhex mushaaxno dhulka illaahay uubalaadhiyay, waxa aan kusoo dhawaanay Kaakuma.

Waxa aan maqli jiray aniga oo yar markii dhulkaygii Ogaadeeniya aan kunoolaa gaalo qaawan oo loola jeeday dadyowga ku nool Itoobiya ee aan xidhanin dhar kuwaas oo qayb ka ahaa awoodihii

ay boqrtooyadii Abasiiniya ku maquunisay Soomaalida. Inkaste oo gaalo qaawan aanan arkin maqal mooyee, haddana markii aan maanta si dhab ah u arkay dad aan wax dhar ah xidhnayn marka laga reebo karimo yar yar oo xubnaha taranka ku gedaaman lamana yaabin oo waxa aan kadaawan jiray shaneemooyinkii qaaxoontigii Hiiraan iyo markii aan soogalay Xamar, Cali beystayn ayaa ladhihi jiray. Inkaste oo Cali baystaynkaas caddaan ahaayeen kuwanna madow yihiin haddana qaawanida iyo uheelanaanta dagaalka ayaa ka dhexeeya.

Sida filimku usocdo waxaa dadkii aan annagu ula baxnay Cali baystaynka laga dhigi jiray dad cawaan ah oo diin iyo dhaqan midna lahayn, sida duur-joogtana u dhaqma, taasi waa arrin waxba kama jiraan ah, oo markii aan weynaadey aan oggaaday in ay ahayd dacaayadda caddaanka kasoo duulay badaha gadaashooda uu ku qabsaday waddan aya dad degganaayeen.

dadkii aan filimada Maraykanka kadaawan jirnay iyaga oo ah dugaag kasoo horjeeda ilbaxnimada waxa ay ahaayeen xaq udirir badbaadinaya naftooda iyo dhulkii awoowgood. Waxa ay ahaayeen dadkii asal iskalahaa dhulka maanta Maraykan loo yaqaano, ilbaxnimadan baaxadda weynee maanta Maraykanka kadhigtay waddanka ugu awoodda badan xagga ciidanka, uguna tunka weyn xagga dhaqaalaha waxa uu soo gumaaday malaayiin shacab ah oo dambiga keli ah ee loo dilayo uu ahaa in ay leeyihiin dhul weyn oo khayraad badan iyaga oo tabar yar.

Waxa aan gudaha usii galay dhaqamadii kala duwanaa. Adduunkan qofba qof ayuu layaabban yahay.Aragtiba aragti ayay dhaliilaysaa.Waxaaad adigu utaqaano biya kama dhibcaan dad ayaa uyaqaana wax aan macno lahayn.Taas waxa aan ku xaqiiqsaday gabadha gashaantida ah ee qaawan waxa ay

layaabbantahay gabadha jidhkeeda qarisay ee asturan gaar ahaan Soomaalida.

Xilli cadceeddu ku qotonto beerka samada ayaan soo galay magaalada Kaakuma oo inta badan ay degganaayeen qaxoonti kasoo qaxaay dagaallada ka socda koonfurta dalka Suudaan. Magaalo marka aan leeyahay waxa aan sasabayaa naftayda oo aan usawirayaa in meel walba oo aad tagtid laga dhigan karo sida aad jeceshahay ama maankaaga kujiree, Kaakuma waxa ay ahayd tuulo aan lahayn adeegga nolosha iyo kaabayaasha bini'aadamku u baahanyahay. Waxa aan ku qasbanayn in aan la qabsano qaabka looga noolyahay xerada, si ay noogu suurtagasho degganaan nabad geliyo leh, kadibna u raadsano nolol noo qalanta

Mundulleyaal duugoobay, kartoomo caddaaday, aqallo dulduleela, balbalooyin dhis ka samaysan iyo nolol bilow ah ayaan ku arkay Kaakuma oo ay soomaalidu kusoo qulqulaysay kadib markii ay dumiyeen dalkoodii, gacmahoodana isaga dhigeen dad itaal yar, oo meel walba lagu liido lana dareensiiyo sharafta iyo karaamada ay leedahay qof in uu dalkiisa kunoolaado.Waxa aan galay xaafadda 1$^{aad}$ oo markaa bilow ahayd.Waxa aan wada soconaa saaxiibkay oo durba ka niyad jabay waxa uu arkay iyo nolosha adag ee ka muuqata xerada qaxoontiga.

# DIB U DEJIN

Inkaste oo dan igu qabatay kalgacaylna aan u haynin haddana nolosha qaxoontigu ma ahayn mid igu cusub.Waxa ay ahayd mid aan la qabsaday oo aan si wanaagsan ugaranayo.Waayo kala duwan ayaan ku soo qaatay qaxoonti aan kujiray inta badan noloshayda marka laga soo bilaabo intii aan garaad yeeshay.

Qaxoontigii aan kujiray ee Hiiraan waxa aan kuhaysanay nolol wanaagsan, marka loo eego soomaalidii xilligaa deegaanka nagula noolayd, hasa yeeshee waxa uu ahaa xabsi kor kafuran, markii aan joognay Soomaali Galbeed ka hor intii aan soogelin xeryihii qaxoontiga ee ku yaalay jamhuuriyaddii Soomaalida waxa aan ahayn dad ku naalooda nolol ay yaqaanaan, waxa aan kasoo qaxnay dhul iyo xoolo aan leenahay, noloshanadu waxa ay ahayd mid ku xidhan xoogga naga, iyo xoolaha nool ee uu Eebbe noogu deeqay.

Markii aan xad beenaadka ka sootalownay waxa aan soogalnay xero qaxoonti oo qof walba uu u tirsanyahay waddan, hay'ado iyo horjoogayaal kasocda dawladdii Soomaalida; lama kala hanti badnayne waa lakala dad iyo kaarar badnaa.Dadku waa wada sabool. Waxa aan baranay giraam garaac iyo in qofku kunoolaado raashin uusan tacbin. Dadkaaan lanoolahay ee kudhaqan deegaanka ku hareereysan qaxoontiyada waxa ay noo arkayeen dad la naas nuujinayo. Dad nolol ahaan ka wanaagsan iyaga. Dhanka kale na waa ay nagu caayi jireen oo qaxoontinimadu waxa ay ahayd sumad aan yeelanay la yaabna nagu noqotay?

Muddo yar gudaheed Kaakuma waxa ay noo noqotay deegaan, dib u dejinna waa naloo sameeyay. Durba waxa aan noqday nin

laga yaqaano xerada. Waxaa i caawiyay luuqadaha oo aan kabartay school Xamar aan ka dhigan jiray muddadii aan ahaa arday dhigta dugsiga sare. Yaraantaydii waxa aan aad isugu hawli jiray barashada luuqadaha gaar ahaan English-ka oo aan u arkaayay in uu yahay furaha fahanka addunka maanta. Dalku weli waxa uu ahaa mid taliyaanigu awood ku leeyahay xagga afka, hasayeeshee waa ay caddayd in maalmaha Taliyaaniga ee dalka uu iska kooban yahay, oo luuqadda ingiriisku noqon doonto midda Soomaalida u ah afka labaad.

Soomaalidii soo qaxday ee sida habaqa ah ugusoo daadatay xeryaha qaxoontiga iyaga oo aan garanayn af iyo dhaqanka dalka la imaaday midna waxa ay ii noqotay aniga fursad.Waxa aan helay shaqo leh mushahar fiican xilli qofka soomaaliga ah in uu shaqo helo ay aad u adkayd. Waxa aan furay xarun dadka lagu baro luuqadda ingiriisida oo aad loo xiisaynayay. Waxa aan qaatay go’aan geesinimo leh hasayeeshee ismaan lahayn dugsiga aad furatay wuu bulaali doonaa. Si malahaygii ka duwan Shabeelle Private School waxa uu noqday mid hela magac dheer iyo aqoon dadku ay ku tilmaamaan mid tayo leh marka loofiiriyo xaaladda adag ee aan ku noolnahay.Hadafkaygu ma ahayn in aan lacag ka sameeyo ama aan magac kuyeesho oo keli ah, waxa yool fog ii ahaa samata bixinta dadkayga soomaaliyeed iyo in ay la qabsadaan dalkan ay ku noolyihiin.Waxa aan dusha u ritay in aan ka kaalmeeyo fahanka luuqadda lagaga hadlo dalka ay kunoolyihiin.

Muddo sanad gudihiis ah waxa aan xerada qaxoontiga kafuray laba laamood oo uu leeyahay iskuulka luqadaha ee Shabeelle.Waxa aan caan ka noqday xeryaha iyo teendhooyinka isdaba daadsan ee dadku uyaqaanaan qaxoonti, annaguna aan dhahno waddan.Waxa aan ahaa wiil noloshu uhor leedahay oo aad u firfircoon, dadkuna ay ku naanaysaan “ma daale.”

Iskuulku waxa uu furnaan jiray inta u dhexaysa duhurkii iyo fiidkii. Waxa u badnaa oo dhigan jirayna waxa ay ahaayeen dumar aad ugu heelanaa barashada luuqadaha iyo kasbashada aqoonta.Hadafka gabdhihii quruxda badnaa ee dhigan jiray dugsiga Shabeelle ma ahayn wax barasho keli ah, waxaa u dheeraa xiisaynta haasawaha iyo barashada geyaankooda.

Barbaarta iyo gashaantimaha ku kulmaya fasallada iskuulka waa fursad abuuri karta jawi haasaawe kalgacayl isu baddali kara. Jacaylna waxa ugu macaan midka kadhasha meelaha aan laga filaynin, gogol cabsi, guri colaadeed, gole cashar iyo geeri go'an safar. Iskuulkii waxa uu noqday goob ka weyn waxbarasho. Waxa uu saldhig u noqday da' yarta oo xog iyo sheekaba ku kala qaadan jiray. Gashaantimaha iyo barbaartu casarkii marka ay soo galaan wax aad moodaysaa in uu isu baddalay meel lagu soo bandhigo quruxda.Gabdho labisan oo wada qalanjo ah.Wiilal diyaarsan oo wada taabbagal ah. Iyo jawi kugu qasbaya in aad unuglaato jacayl. Waxa aan is wayddiin jiray dadka sidan ugu qurux badan qaxoonti, dalkooda sidee ayay ku noqon lahaayeen? Dadka ku dhaqan Kaakuma xoolo malaha, dhaqaalana ma haystaan, itaalna ma jiro. Waxaa lagu wada tiirsan yahay kaalmada haayadaha addunka, sidaas darteed qofna qofka kale kuma xidho dhaqaale haddii uu imaado guur iyo guri in la yagleelo.

Taasi waxa ay keentay in aroosku uu ahaado mid joogta ah. Gaafka iyo ciyaartuna isqabtaan toddobaad walba.Maadaama badanaa dumarku kaga wanaagsanyihiin ragga barashada afafka waxa iskuulka aan aasaasaha iyo macalinkaba ka ahay ubadan gabdho markaa soo kacaya oo gashaantinimo iyo quruxi buuxisay jidhkooda, asalnimada Soomaalida, midabka mas-ciideedka ah, waa mid lagu yaqaano hablahayaga, maarriin dhalaalku waa astaan ay sidato gabadh walba oo Soomaali ah, waana midabka maanta

dadku raadiyaan. Caddaanku waxa ay usoo dalxiis tagaan meelaha qorraxda kulul leh iyaga oo jidhkooda udhigaya cadceedda si jidhkooda ay u huwiyaan midab maarriin ah. Haddaba gabadhyahay soomaaliyeed dadkaas waxa ay kharash iyo wakhtiba u hureen in ay yeeshaan midabkaaga dabiiciga ah ee ilaahay kugu mannaystay adigana waxa aad ku doorinaysaa kiimiko si aad u noqotid qof aan u ekayn dhulka uu ku dhaqanyahay.

Gabdhahaa dhigta dugsiga Shabeelle waxa kamid ahayd qalanjo haddii aan qalinka uqaado sida uu Eebbe u abuuray in aan sharraxo ay adkaanayso.Samsam waxa ay ahayd 22 jir ka soo jeedda qoys aad looqaddariyo dhaqan ahaan Soomaalida dhexdeeda, kuwaas oo faafinta diinta iyo maamuuska Islaamnimo utaagnaa muddo badan, illaa ay Soomaalidu u aqoonsato in ay yihiin dad xayndaab u ah diinta Islaamka ee kufaaftay gayiga Soomaalida inta aysan gaarin Madiina Al-Munawarah.

Inkaste oo aan iskuulka Shabeelle lagu dhigin diinta islaamka, haddana waxa aannu nahay dad diintooda ku dheggan oo xurmeeyo dadka diinta u adeega, sidaas darteed ayaan xurmo gaar ah u hayey qoyska ay kadhalatay Samsam oo qoyskooda ka sokow iyaduna ahayd qof edeb iyo aamusnaan ilaahay kumannaystay. Inbadan oo gabdhaha xaafadda kamid ah waxa ay u iman jireen iskuulka si ay ula haasaawaan gayaankooda ladhigta iskuulka, iyaduse waxa ay lahayd yool in ay xaqiijisana ay usocotay. Yoolkeedu waxa uu ahaa in ay ka midha dhaliso waxbarashada si ay nafteeda iyo midda ehelkeedaba u anfacdo.

Waxaa intaa sii dheer waxa la isu wada diyaarinayaa dhoof iyo in loo hayaamo reer galbeed, halkaana laga bilaabo nolol hor leh oo dhaanta midda teendhooyinka. Lama oga in nolosha soo socota ay ka wanaagsantahay midda aan hadda haysano, laakin waxa nahay banii aadam oo mar walba waxa noo wanaagsan waxa naga

maqan.Waxa aan liidnaa waxa aan haysano.Waxa aan uhanqal taagnaa waxa qofka kale uu haytso.Sidaas darteed ayay diintu noogu boorisay in aan kuqanacsanaano waxa aan haysano, waxa aan nahay iyo sida aan u egnahay ama aan unoollahay.

Samsam waa ay iiga duwanayd dhammaan hablihii dhigan jiray iskuulka.Aragtidii koowaadba waxa ihelay warankii jacaylka. Waxa aan maqli jiray jacaylku kulama tashado iyo wuu indho la'yahay, hasayeeshee aniga arintaa dhex dabbaashay.Waa markii koowaad ee aan noloshayda dareemayo in aan helay degganaansho naf iyo damac jacayl.

Waxa ihaya boholyow awood badan oo aan sheegan karin. Waxa aan ahay macallin caan ka ah xerada qaxoontiga.Waxa aan leeyahay sumcad wanaagsan oo dadku igu jeclaadeen. Haddaba xaajo marka ay halkaa taagantahay sidee ayaan udhihi karaa gabadh ardayda ah waan ku jeclahay? Waa su'aal mugweyn! Waxa aan waayay irrid aan kagalo qalbiga Samsam. Nolosheeda waxa gundhig u ah qoyskeeda, waxbarashada iyo iibinta sandaqad yar oo bur, bajiye, saambuus, sisin, sonkor, milix, saabuun, nacnac, buskut, kashaato iyo dhowr faynuus ay yaaleen.

Sanad badhkii ayay igu qaadatay in aan dareensiiyo Samsam sida ay iigu dhowdahay ee ay qalbigayga u sudhantahay.Waa arrin adag in aad gabadh dhigata iskuulkaaga aad usheegato in xidhiidhka idinka dhexeeya dhaafsiisan yahay midka ka dhexeeya macallin iyo ardaygiisa oo keli ah.Waxaa igu horgudban boqollaal nooc oo ay sheekadan udhammaan karto haddii aan xilligan sheego. Waxa igu yaraada adduunka marka aan sawirto dhammaadka madow ee argagaxa leh.

Waa xaal adduunoo waxa aan kacabsanno inta badan ma dhaco! Waxa aan isugu sheekaynaa waxyaabo aan jirin.Waxa qalbigeena

kabuuxa cabsi, gaar ahaan Soomaali haddii aan nahay wax walba waan ka baqnaa.Maanta aan joogno waxa aan kabaqaynaa dawladnimada.Waxa aan kabaqaynaa nolosha.Waxa aan kabaqaynaa qofka kale ee Soomaaliga ah. Waxa aan kabaqnaa beesha caalamka.Waxa aan kabaqaynaa dawladaha dariska ah.Waxa aan ka baqaynaa qofka khaldan in aan dhahno waad khaldantahay. Waxa aan kabaqaynaa tuugga musuqmaasuqa caadaystay ee uusan jeebkiisu buuxsamaynin, in aan gacanta qabano. Waxa aan kabaqaynaa in aan qofka garta daran aan dhahno waad gardarantahay.

Cabsidii ihaysay halkaa sano iyo caloolyowgii jacaylka ee aan la gabi dhaclaynayay waxa uu hal mar isu baddalay farxad iyo qosol, markii aan arrintayda u bandhigtay Samsam ee iyaduna ay i tidhi: "in badan ayaan kugu fikiray oo aan naftayda ugu sheekeeyay in aad tahay ninkii aan ku riyoon jiray, hasayeeshee xishood dumar iyo ka carar xanaf ayaan kaaga aamusay."

"Wax aad tahay macallin wanaagsan iyo mucaashaq xun, sida aad cashirka usharrixi kartid uma caddayn kartid dareenkaaga iyo waxa aad doonayso", ayay i tidhi Samsam oo sii laafyoonaysa.Waxa aan gacmaha geliyay labadayda jeeb ee surwaalka.Waxa aan il naxariis leh kufiiriyay Samsam oo kusii xaragoonaysa jidhkeeda labada qaar ukala go'an.Markii aan isha ka buuxsaday laafyeheeda aniga oo iska ilaalinaya dadka ayaa waxa aan soo xususutay hees uu qaaday Beer Dilaacshe AHUN taas oo aan jeclaa waagii aan Xamar dugsiga sare ka dhigan jiray, hablaha qaarna aan ku ammaani jiray aniga oo laga yaabo inaan wax hadaf ah kalahayn.

***Labadaada qaar iyo***

***Dhexda qabashadeeda***

***Geenyo qayrabah oo***

***Loo qaaday heensaha***

***Qotonkeeda leedee.***

Galabtaas waxa aan bilaabmay bog cusub oo noloshayda ka mid ah.Subixii danbana waxa uu waagu ii baryay aniga oo niyadda kuhaya in aan askumo qoys lagu badhaadho oo kamid noqda qoysaska soomaaliyeed ee deggan xeradan qaxoontiga.Waxa aan niyadda ku hayay in aan si dhakhso ah uga baxo nolosha iskaabulanimada ah.Marka aan xusuusto xaafad iyo qoys waxa aan uhiloobaa hooyaday iyo raashinkii macaanaa ee ay karin jirtay. Hooyaday inkaste oo ay miyi ku dhalatay kuna dhaqantay haddana waxa ay ahayd qof ilaahay hibo usiiyay karinta tobannaan cunto oo kala duwan macaankoodana aan afka laga qaadi karin.Guriganagu waxa uu ahaa mid marti badan oo kildhiga shaahu uusan dabka ka degin. Ma illoobo xertii, gashaantimihii, cirroolihii, carruurtii, dhallinyaradii iyaga oo wada faraxsan katagi jiray guriga. Danyar ayaan ahayn ku nool farxad iyo ixtiraam shaahii hooyadayna qof karin karaa ma jiro.

Niyadayda marna kama bixin in aan aas-aaso guri baddala kii hooyaday Eebbe ha u naxariistee oo dadka oo dhan ay kusoo hirtaan.Waa wax adag in qof dabeecaddii iyo kartidii uu lahaa sideedii loo helo. Waxase fudud in aad ku dayato noloshaadana aad u ekaysiiso midda qofka aad jeceshahay.

Sagaal bilood oo haasaawe iyo wadaag caashaq ah waxa aan jacaylkanagii ku gardaadinay daacadnimo.Waxa aan geedkii jacaylka siinay rejo hor leh.Waxa aan u adkaynay xididdada. Waxa

aan go'aan ku gaadhnay in aan isguursano sanad kadib oo markaa kubeegnaa badhtamihii sagaashameeyadii.

Galabkii aan gaadhnay go'aankii kama danbaysta ahaa waan xusuustaa.Waxa uu ahaa galab Khamiis ah oo aan fadhino jirdiin ku yaalay xaafaddii aan degganayn. Xerada waxa ka jiray qalalaaso kadib markii ay Suudaaniyiin iyo Koongooliis wada degganaa ay islaayeen dhowr qofna iska dileen.Waxa aan isu diyaarinayay in aan aado iskuulkii waxaanse kabaqay in dhibaatooyinka ka taagan xaafadaha kaamka ay i saameeyaan.

Kadib si aan isu maaweeliyo waxa aan billaabay daawashada xusuustaydii hore oo maskaxdayda usoo maraysa sida shimbiro uhayaamaya hoygooda. Waxaa muuqata in ay i hayso "Nostalgic" u hilowga tagtada.Waxa aan saarnahay tareen usocda dib. Waxa aan sii dhex jibaaxayaa waayihii aan dhallaanka ahaa.Noloshii Suubaan Balal. Waxa aan arkaa hooyaday oo faraxsan iyo aabbahay oo guurtida beesha u ah hormuud.Waxa ii sawiran dagaalkii iyo diyaaradihii Abasiiniya ee duqaynayay magaalooyinka Soomaalida. Waxa aan sheedda ka arkaa kolanyadii gawaadhida ahayd ee raashinka keeni jirtay xeradii qaxoontiga.Sawirradii Xamar ee qoslaaayay ka hor dagaal aan ku wada khasaarnay.Ma iloobin Kismaayo iyo qabiiladii is wada gaadayay. Dib ayaan usoo celiyay khiyaalkayga fogaaday, saa waxa aan soo dhex istaagay Kaakuma.Waxa aan magan u ahay dad aan kukala duwan nahay dhaqanka, diinta iyo dabeecadba. Waxa ii muuqanaya in noloshaydu ay tahay silsilad taxan oo halgan iyo hayaan ah.

Aniga oo ay imaansheeyeen mawjadaha xusuusta ayaa waxa aan maqlay cod dabacsan oo aad mooddo laxankii heesaha Cumar Dhuulle xagga macaanka oo I magac dhabaya.Uma malaynayo maalinkaas cod aan ahayn ka Samsam ee xabeebta yari ku

dahaadhantahay in uu isoo baraarujin lahaa.Madaxaan kor uqaaday, waan daalanaa,waxa aan kasoo laabtay safar 27sano ah. Wajigeeda ayaan eegay, waxa ku gaaran qurux.Waxa kabuuxa dumarnimo.Waxa ku daabacan dareen jacayl.Waxaa kasokeeya xishood uu kujiro jilitaan dumar.

Waan soo hinqaday haddana waan is celiyay.Malaha waxa aan damcay in aan usalaamo Samsam sidii qof safar dheer kayimid.Safarka maanku wuu kadaal badanyahay midka jidhka mararka qaar.Waxa ay iisoo taagtay warqad bashqad kujirta.Waagaas majirin taleefan gacan.Baraha bulshada (Social Media) oo nolosheena samaan iyo xumaanba u saameeyayna warkooda daa. Sida keli ah ee loo wada xidhiidhi karo,waa in aad gabdhaha ku sugtid iskuulka, ceel jigjiglaha Biyaha laga dhaamiyo, makiinadda cajiinka iyo jidadka xaafadaha oo indhuhu buuxaan. Dadku mashaqa tagaan, sidaa darteed waxa badan is aragga oo yaraynaysa in dadka isjecel isu helaan fursad ay kuwadaagaan caasahqa.

Warqaddii ay iidhiibtay Samsam galabkaas waxa kuqornaa dhambaal xambaarsan fariin mug weyn. Waxa ay isu dhiibtay hirarka caashaqa.Waxaa dhammaan waaxyaha jidhkeeda ku saaqay jidhiidhyacada jacaylka.Waxa ay la ildarnayd qandhada uu leeyahay jacayl ugub ah.Waxa ay ahayd maalin kamid ah maalmaha ugu quruxda badan ee aan xusuusto.Naftaydu raali ayay ka ahayd qaabka noloshu iisoo qaabishay muddo dheer oo aan latacaalayay hagardaamada nolosha kadib.

Wax aad mooddaa in sidii hore si ka gedisan aan ufikirayo waxna u arkayo. Waxa aan kujiraa safar dheer oo aan ku raadinayo in aan karaamadayda helo. Dadnimadayda dib usoo celiyo. In aan jiilasha iga dambeeya u abuuro nolol kaduwan midda aan anigu maray. Waxa aan ku hamiyaa in aan kahortago adduun badankiisu

ku midaysanyahay in aan noloshayda waxba lagabaddalin, oo aan kusii dhex jiro mugdiga gumaysiga, kutagrifalka awoodaha iyo barakicinta shacabka maatida ah.

Waxa aan waayay waddan aan xor ugu noolaado.Inta badan dawladaha geeska Afrika waxa aan kala kulmay barakicin, xabsi iyo qaxoontinimo! Samsam waxa ay i siisay qalbi ii noqday waddan.Waxa ay iihibaysay dugsi jacayl oo aan ku illoobay dhaxantii aan soo maray.Booska ugu weyn ee ninku dego waa wadnaha dumarka.Waxa aan yeeshay qof iga fikira farxadaydana kashaqeeya.Waxa aan go'aansaday farxaddaas in aan joogteeyo Samsamna noqoto mid ila qaybsata midabyada nolosha ee faraha badan.

Dabayaqadii sanadkii 1996[dii] waxa aan yagleelnay aqal. Waxa aan qoysaska soomaaliyeed kusoo kordhinay guri marti iyo mudane leh.Waxa aan ku taamayay in gurigaygu noqdo saldhigga dadka u halgamaya midnimada karaamada iyo dib u xoraynta Soomaalida.Halaga xoreeyo qabyaaladda iyo kala qaybsanaanta. Ama ha laga xoreeyo gumaystaha saanta madow ee kuhabsaday dhulalkooda.

Muddo yar gudaheed aqalkangii waxa uu noqday mid lagu daydo.Bulshadii hanaqaaday sanadihii ugu horeeyay ee qaxoontiga illaa dabayaaqadii shagaashameeyadii,waxa aan u ahayn tusaale wanaagsan oo kudayasho mudnaa.Gabdhuhu marka ay tilmaamayaan qaabka ay rabaan in ay unoolaadaan, waxa ay dhihi jireen sida Samsam iyo Guure unoolyihiin oo kale ayaan rabnaa in ay noloshanadu ahaato. Guriganagu kuwa kale kama weyneyn, kama wacnayn xagga hantida iyo deegaanka, waxa uuse kaga duwanaa wadaagista waayaha nolosha, is tix galinta, ku qanacsanaanata qaabka aan unool nahay, iyo isu huritaanka naf iyo maalba.

Samsam qoyskeedu waxa ay ahaayeen reer dun macaan.Maydhax wanaagsan.Hooyo Batuulo waxa ay noqotay hooyaday maadaama aan ahaa keligay. Aabbo Cabdi wahaab na waxa uu ii noqday aabbahay rumaad oo kale.Waxa uu ahaa nin furfuran, dhaqan yaqaan ah, aftahan gole kahadal ah, hiddaha isirka iyo qabiilada Soomaalidana si qoto dheer uyaqaanay.

Si ka duwan Soomaalida aniga iyo soddogay waxa aan ahayn laba qof oo saaxiibbo ah.Waxa uu ii noqday jaamacad aan ka helay xog, aqoon iyo aragti dheeri ah.Waxa uu lahaa falanqayn cajiib ah. Dareenkiisa iyo malihiisuna badanaa wuu rumoobi jiray.Waxa uu aad unecbaa beenta, isdaba marinta iyo in laga runsheegi waayo xaqiiqada iyo waaqica dhabta ah ee jira.

Marka uu cadhoodo wuu dabeecad kulul yahay.Hadalkiisa cad iyo qalbigiisa nadiifta ah marar badan waxa ay usoo jiidaan dhacdooyin xanuun kulul oo illaa maanta qoyska laga hadal hayo. Waxa uu lahaa dul iyo deeq uu dadka kaga soocnaa.

Inkaste oo aniga iyo Samsam aan kuwada jalbeebanay macaanka jacaylka, haddana noloshu ma dhammaystirantee arrimo naga maqan ayaan goconaynay.Dhan waxa aan ku oodan nahay xero qaxoonti oo aad u kooban, dhanka kale waxa muddo laba sano ah qaatay in Eebe nagu irsaaqo ubad qurxiya nolosha guriga. Soomaalidu waa dad dhib badan, su'aalaha ku saabsan qoyskuna waxa ay ka mid yihiin nolol maalmeedkooda.Waxa ay kugu mashquulinayaan marka hore ma guursatay? Marka xigana xaaskii uur mayeelatay? Marka ay uur yeelatana maxay dhashay? Marka ay dhashana waxa ay ku wayddiinayaan ma lab baa mise waa dhedig?

Waa su'aalo taxane ah oo midba mid kuu sii dhiibayso. Waxa Samsam niyad jab kunoqoday 24 bilood in laga joogo guurkanagii

welina aysan haysan midhihii jacaylka. Waxa ay hoos ka gocataba maalintii danbe ayay itidhi: “waxa aan rabaa in aan si uun u aadno Nairobi si aan uhelno dhakhtar aan iska baadhno!”

Waan fahmi karaa qof dumar ah oo aan ilma haysanin laba sano kadib arooskeedii, hasayeeshee su’aashaasi waxa ay ahayd mid aan layaabay! Waxa aan ku niyadweynaa in carruur iman doonto caafimaadkeenuna taam yahay qadarkuna laabanyahay. “uma baahnin xabiibtii in aan dhakhtar aadno, waxa aan ubaahan nahay in aan sii xoojino jacaylkeena”, ayaan ku idhi aniga oo casho ay ii keentay Samsam cunaya.

Samsam oo ka xun jawaabtayda ayaa si khadhaadh u liqday rabitaankeedii, hadalkaygiina qaadatay.Waxa ay ahayd Samsam gabadh ilaahay ku xidhan, diinta kuwanaagsan, masaakiintana daryeesha.Qof walba oo yaqaanaa wuu jeclaa.Waa loo ducayn jiray.Jacaylka ay dadku wanaagga la jecelyihiin gaar ahaan ubad ayaa kaqayb qaatay in maskaxdeeda dhalmo iyo dhallaan aysan ka bixin.

Waxa aan marnay dhowr derajo oo qaxoontinimo ah.Mar walba sida hay’adaha hawshanada gacanta kuhaya sheegaan waxa soo dhawaanaysay in aan helno fursad aan dibadda ku aadno, oo aan meel halkan dhaanta, nolol ka aas-aasno. Anigu maan ahayn qof uxamaasadaysan in aan dibad aado, laakiin Samsam oo hiyi kacsanayd darteed waxa aan mar walba ugu ducayn jiray in ay hesho waxa ay jeceshahay ee ubadku ugu horreeyo. Ilmo la’aanta waxa aan ugu baddali jiray jacayl, koolkoolin, gacan iyo qalbi furan. Waxa aan ahayn qoys ku faraxsan nolosha.

## DAAQADAHA REJADA

Bilowgii sanadkii saddexaad ee noloshanada waxa uu ahaa mid ka gedisan kuwii hore.Waxa noo furmay daaqadaha rejada.Waxa aan galnay irrid weyn oo yididiilo ah. Kadib markii subax hore ay nasoo wacday hay'addii qaabilsanayd qaxoontiga, kadibna nagu war gelisay in aan Maraykan ka helnay dib u dejin muddo bil ah kaliyana aan sii joogi doono xeradan qaxoontiga.

Waxa aan galnay diyaar garowga safarka. Macasalaamynta asxaabta iyo qaraabada. Aad ayay u adkayd in aan macasalaamayno magaalo aan ka helay wax walba oo aan jeclaa. Qoys wanaagsan. Xaas qurux badan. Asxaab qiimo leh. Nolosha qaxoontiga waagii hore wax qaab daran ayay ila ahayd, hadda se waan jeclaaday.Waa dabeecadda dadka, oo waxa marka uu tago ayaan dareenaa qiimaha uu leeyahay.

Bishii aan diyaar garowga kujirnay Samsam waxa ay u ahayd walaac iyo calool xumo. Hooyadeed Batuulo, aabbaheed Cabdiwahaab iyo sagaal carruur ah oo la dhashay ayay kategaysaa. In akste oo ay qabto rejo ah in sanad gudihii ay ka daba iman doonaan. Qoyskeedu waxa uu ku jiraa geedigii dhoofka oo weliba gabagaba ah.

Waxa aan marnay caafimaadkii. Waxaa na la siiyay tilmaamo ku saabsan sida loogu noolyahay Maraykanka. Qaabka nolosha wadamada islaamka ah iyo afrikaba waa ay ka duwantahay qaabka Maraykan looga nool yahay.Dhaqan furan, bulsho aan lahayn xad celiya qofku xorriyaddiisa kunoolyahay ayaa loo socdaa sidaass daraaddeed wax lala yaabi karo ma jiro, wax aan dhici karina ma jiro.

Galab ayaan gurigii Samsam qoyskooda tegay aniga oo soo macasalamaynaya.Waxa aan ceshan waayay ilmada kadib markii ay hooyo Batuulo igudul barooratay.Waxa aan moodayin aan geeri iyo dhul dagaal usocdo, sida xaafadda muuqaalkeedu ahaa.Oohinta hooyo Batuulo waxa ay isoo xusuusisay oohintii hooyo Caasho oo gurigeeda igu baxnaanisay aniga oo dhaawac ah noloshaydana badbaadisay.

Jacaylka dhabta ah lama helo, mana gadan kartid, ilaahay ayaana bixiya.Waxa aan nasiib ulahaa in aan inta badan helo jacaylka dadka aan ladhaqmo ama aan is naqaano, Eebbana waxa uu iigu deeqay hooyooyin badan oo noloshayda saamayn ku leh tan iyo maanta, taasina ma aha mid aan xoog ama xeelad ku keenaye waa mid ilaahay ii geliyay qaluubta dadka gaar ahaan hooyooyinka oo mid walba oo noloshu ii geysay ay iga dhigatay wiilkeeda oo kale.

Saacado badan oo sheeko iyo shaah ah kadib waxa aan kasoo carraabay casar gaaban guriga hooyo Batuulo iyo aabbo Cabdiwahaab oo aan si wanaagsan usoo dardaarannay. In aan isu dulqaadano, nolosha qurbaha ee adagna aan wada maarayno, xaalad walba oo aan kusugan nahayna aan iskasoo warbixino ayay nagula dardaarmeen. Markii aan soo dhaqaaqayay ayuu igasoo daba tuuray hadalkan hoose aabbo Cabdiwahaab:

“Dumar nin aan udulqadanin ma dhaqee, waxa aan kaa rabaa ragganima buuxda. Ragganimaduna waa dul iyo deeq. Ilaahay garabkiina ha galo noqdana kuwo farxadda qaybsada.”

Markii aan kasoo tegay gurigii soddohday waxa aan aaday xaafadda saaxiibkay Daadir oo isagana saddex bilood kadib u dhoofi doona magaalada Melbourne ee dalka Australia.Waxa aan isku deynay in aan isku meel aadno hasayeeshe waan ku guul darraysanay. Galabkii iigu danbaysay Cabdiqaadir uma malaynayo

galab ka murugo badnaa in uu sanadkaa isoo maray.Waxa aan meel cidlo ah kaga tegay saaxiib aan waayaha nolosha isla soo qaybsanay.Rafiiq aan isla qariibnay in badanna ii ahaa walaal iyo wheel. Adduunoow wajiyo badne, subax walba bog hor leh ayaad furaysaa oo aadan garanayn waxa uu ku dhammaan doono.

In kaste oo Daadir isaguna lahaa xaas laba gabdhood u haysa, haddana booska waalidnimo iyo walaalnimo ee aan ugu jiray qof u buuxin karayey ma jirin.Waxa aan ahaa saaxiibkiisa koowaad ee nolosha ka caawiya in bandanna talooyinkaygii ayuu ku meel maray.

War iyo dhamaantii Cabdiqaadir waxa aan kasoo tegay isaga oo wajigiisu la madoobaaday murugo.Waxaanse illaawaynin Cawo oo ahayd gabadhiisa weyn afar sanana jirtay sidii ay ii macasalaamaysay. Inta ay macawis aan qabay qabsatay ayay tidhi: “adeer keligayo miyaad halkan nagaga tegaysaa?” Su’aashaas dhegahayga ka sii dhawaaqaysaa illaa maanta kama aanan jawaabin, mana garanayo meel iyo si uu Cabdiqaadir u nool yahay. Cawo oo hadda gashaanti weyn ah ma garanayo in aan weli nolosheeda muhiim u ahay ama ay i xusuusan karto, waase xaal adduun oo qof meesha uu ka baxo mid kale ayaa buuxiya. Waanan hubaa maanta Cawo iyo Cabdiqaadir ba waxa ay haystaan dad aad ugu dhow noloshoodana saamayn ku leh.

Gurigii ayaan imaaday aniga oo doorsoon tiiraanyana kasoo qaaday Daadir iyo hooyo Batuulo.Waxa iimuuqata Samsam oo udiyaar garowday in ay soo dhawayso jacaylkeeda. Marka aad qabtid xaas aad is jeceshihiin guurka waxa kaweyn jacaylka. Jacaylku waxa uu ku ilowsiinayaa marar badan nolosha isu eg ee aan lahayn wax lagu madadaasho.Waxa uu yaraynayaa farqiga xagga fikirka, aragtida iyo dabeecadda ah ee u dhexeeya lammaanaha.

Waxa aan wada fadhiisanay miis yar oo aan ku cashayn jirnay habeenkii.Waxaaan bilownay haasawihii iyo kaftankii kalgacaylka watay ee caadada noo ahaa.

Waxaaanka sheekaysanay waxyaabo dadka noo imaada ay u arkaan wax aan mudnayn in lagu qoslo ama laga sheekaysto.Noloshanadawaxa buuxiyay farxad. Sir aan ogaaday ayaa jirta oo dumarka lagu hanto! Sirtu waxa ay tahay: dumarka u oggoloow in ay hadlaan inta ay doonaan. Sii dhegahaaga waxa ay kusiinayaan qalbigooda.Sii hankaaga iyo dareenkaaga waxa ay kusiinaysaa nolol dhammaystiran.Kadhig sheekadeeda mid ka macaan wax walba oo ay dhegahaagu maqlaan, gurigaaga waxa ay kadhigaysaa mid ka qurux badan guri walba oo aad aragtay.

Waan cashaynay. Sheekoiyo shah kadib, waxa aan aaday musqusha si aan u qubaysto. Waxa aan isu diyaarinaya in aan seexdo si aan ugu diyaar garoobo safarka Maraykanka oo 24 saac keliya naga xigto. Markii aan bilaabay qubayska ayaan maqlay shanqadh qof dhulka ku dhacay!, Samsam! Samsam! Ayaan laba jeer kuceliyay qofna ilamahadlin. Si boobsiis ah ayaan udhammaystay qubayskaygii, waana soobaxay mise waa Samsam oo miyir daboolan dhulkana taalla! Ilaahii! Maxaa kudhacay Samsam?

Waxa aan ula orday xagga goob caafimaad oo aan tayo badnayn taas oo ahayd meesha keli ah ee xeradu leedahay.Waxa noo imaatay hooyo Batuulo, gudaha ayaana lageliyay Samsam. 25 daqiiqo oo aan bannaanka fadhiyay aniga oo sugaya jawaabta waxa ay ila ahayd 25sano. Sugitaankuw aa nooc kamid ah addoonsiga. Waxa lagaa qaadayaa xorriyadda. Waxa aan iswayddiiyaa boqollaal su’aalood; maxay noqon doontaa? Maxaa kudhacay? Ma keligaa ayaa Maraykan aadi doona tolow?

Aniga oo murugo ihadhaysay ayaa waxa soobaxday hooyo Batuulo oo dhoollacaddaynaysa.Waa yaab aniguna waan murugaysanahay, Batuulo aw Cabdina waa ay qoslaysaa! Kaalay Guuroow inta ay i tiri, ayay gacanta iqabatay xagga Samsamna ila aadday.Waxa aan ugalay gacalisadayda oo dangiigta muuqaalkeeduna qurux badan yahay. Waxa iiga muuqda farxad. Illin ayaa indheheeda ka daadanaysa.Dareenka aadanuhu waxa uu u baahan yahay in aad loo daraaseeyo: waxa uu kulmistaa oohin iyo qosol, murugo iyo farxad. Waan fahmi waayay, wax aan kumacneeyo illintaa dheer ee dhabankeeda ka degaysa ee qoynaysa dhabteeda.

Agteeda ayaan fadhiistay.Waxa aanan kadhunkaday sujuudda aniga oo urejaynaya caafimaad taam ah. Malaha waxa aan galay khalad oo waxa aan katalaabsaday dhaqankii suubbanaa kadib markii aan udhawaaday oo aan dhunkaday xaaskayga iyada oo hor fadhida hooyadeed. Ma garanayo sax iyo khalad waxa uu ahaa. Waxa aanse garanayaa in Samsam intii ay hooyadeed eegtay qososhay. Qalbigayga ayaan raacay ma aan adeegsanin caqligayga daqiiqaddaas iyada ah, waana sida loo baahanyahay.

Waxaa dibadda ubaxday hooyo Batuulo. Samsam intii ay afka iisoo dhawaysay ayay dhunkusho dareen cusub oo weli isoo marin xambaarsan i dhunkatay.Waxa ayna si farxad leh iigu tidhi: "uur ayaan leeyahay! Wax aad mar dhow noqon doontaa aabbo haddii uu Eebbe idmo. Waan xaqiijinay hadafkeenii nolosha. Waxa aan qaybsanaynaa midhaha jacaylka shan gu'jirsaday."

Waxa aan galnay daqiiqado farxad iyo shaf isgalin ay ku dheehan tahay.Waxa aan u wada dabaal degnay caddaynta jacaylkanagii ahaa mid lagu daydo, dadkuna ay ku cawaysimayaan.Waxa aan isbitaalkii kasoo baxnay subixii danbe annaga oo rejo hor leh xambaarsan noloshana ku fiirinayna il ka duwan middii hore.

Waxaa nagusoo kordhay ilmo mar dhow dhalan doona, haddii uu Eebbe idmo oo ubaahan in loo diyaariyo daryeel iyo jacayl waalid, kaas oo inta badan ubadka soomaalidu ay ka qatanyihiin.

Uurkii yaraa ee ay Samsam lahayd waxa uu noqday arrinta keli ah ee caqabad nagu noqotay, muddana aan ka fikiraynay, marna qarka noo saartay in aan ka tanaasullo safarka Maraykanka. Dhammaan dumarkii qoyska reer Cabdiwahaab iyo kuwii qaraabada iyo dariska ahaaba waxa ay isku raaceen in dib loo dhigo safarka annaga oo la kaashanayna hay'adaha uu khuseeyo dhoofitaanku. Samsam in kaste oo ay dhoofka jeclayd haddana ilmaha ay muddo dheer sugaysey ayaa ugu muhiimsanaa.

Walaac iyo walbahaar ayaan galnay ugu danbayn na waxa ay xaajo ku naaso beeshay in aan safarno ilaahayna tala saarano, intaas ka horna dhakhaatiir wixii aan heli karno aan la tashano.

# TALLAHASSEE, FLORIDA

Waxa uu waqtigu jiitamaba waxa aan gaadhnay xilligii ay balantu ahayd in aan hayaan iyo halgan hor leh ugalno Maraykan ama dhulka fursadaha iyo rumaynta riyooyinka waa sida ay dhahaane. Ma sahlana qofku in uu ka hayaamo dhulkiisii uu kudhashay kuna dhaqmay, hayeeshee nalama siinin fursad aan ahayn in aan naftanada labaxsano. Anigu waan ogaa in nolosha Maraykan taallaa ay tahay mid aan sahlanayn. Meeshaaan u socono waa dal hanti iyo magac waxa uu leeyahay ka tabcay shaqo aan nasasho lahayn.

Waxa kale oo aan ka akhriyay wargeys in dadka maalqabeenka ah ee adduunka ku dhaqan badankoodu ay kunoolyihiin Maraykanka. Hantidoodana waxa sameeyay xoogsato uxamaali taga shirkadahooda.Shaqaalaha danyarta ah waxa ay bixiyaan caafimaadkooda, farxaddooda iyo waqtigooda qaaliga ah, waxa aanay faa'iidaan shilimaad yar, halka maalqabeenku iska raaxaysto lacag baddanna faa'iido.

Waan kasoo tagnay Kaakuma, waxaana nalagu xareeyay xero la keeno dadka dhoofka loo diyaarinayo. Ugu danbayntiina waxa aan ka baxnay subax hore garoonka diyaaradaha Jomo Kenyata ee magaalada Nairobi annaga oo ku wajahan magaalada Tallahassee ee gobolka Florida. Tallahassee, waxa ay ahayd magaalo Soomaalida ku cusub, aniga Guure ahaanna maqalkeedu markii aan tagnay ayuu ii ahaa.

Intaa annaan tagin magaalada waxa aan sii marnay dhowr garoon oo aan kakala raacnay diyaarado kala duwan illaa aan ugu danbayn tagnay magaaladii aan usoconay.

Jumco 17kii Julay 1997$^{dii}$ waxa ay ahayd maalin lama illaawaan ah.Waxa aan markii u horaysay cagaha dhigay ciidda Maraykanka, annaga iyo toddobo qoys oo Soomaali ah oo aan ku kulanay garoonka Nairobi. Sida caadiga ah Tallahassee lama keeni jirin Soomaalida qaxootiga ah, waxaana la geyn jiray gobollo kale.

Florida oo ah eray isbaanish ah, macnihiisuna yahay dhulkii ubaxa, waa gobol kuyaala bariga Maraykanka caasimaddiisuna tahay Tallahassee. Inkasta oo magalaada Jacksonville ay tahay midda ugu weyn uguna magaca dheer gobolkaas caanka ku ah xeebaha Miyaami ee dalxiiska iyo tamashlaynta loo tago, haddana magaalada nala geeyay ayaa ah wadnaha gobolka.

Dib u dejin ayaa loo sameeyay dhammaan qoysaskii Soomaalida ahaa ee soo degay magaalada. Marka uu qofku tago dal cusub waxa ugu badan ee uu u baahanyahay waa fahanka dadka iyo deegaanka. U hoggaansanka shuruucda iyo qawaaniinta dalka u yaala. Fahan la'aanta Soomaalida ka haysata dhex galka bulshada waxa ay keentaa in ay wajahaan dhibaatooyin badan oo mararka qaar khatar geliya noloshooda, mararka qaarna khalkhal geliya wada noolaanshaha qoyska iyo isasii haysashadiisa.

Aniga iyo Samsam waxa aan bilownay nolol cusub.Waxa aan ku dadaalnay in aan si wanaagsan oo qurux badan u matalno shacabkanaga soomaaliyeed ee aan danjiraha u nahay.Waxa aan tagnay gobol iyo magaalo aan Soomaali laga aqoonin.Markii aan tegaynay magalaada dadka deggan ma aysan weligood maqlin wax Soomaali la dhaho.Waxa aan ahayn dad ladaawado oo ku cusub dadka.Waxa lala yaabbanaa xijaabka ay gabdhahanagu xidhan

yihiin iyo qaab nololeedkanaga kudhisan buuqa, sawaxanka iyo u wada noolaanshaha si farxad leh.

## NOLOL MICIYO LEH

Waxa aan isku daynay in aan kudadaalno abuurista jawi aan ku fahmi karno Maraykanka. Nololfarxad lehna ugu diyaarin karno ilmahanaga koowaad ee jidka kusoo jira.Anigu waxa aan aqaanay afka Ingiriiska oo wax badan ii fududeeyay.Hasayeeshee Samsam ma aysan garanayn luuqaddaas.Waxa ay noqotay qof dhagool ah oo loo midaaro. Nolosha maraykanku masuurto galinayso in Samsam sidii hore oo kale ay ahaato guri joogto ilmaheeda kafikirta. Noloshu waxa ay leedahay miciyo.Waa ay ku qallacaysaa haddii aadan taxadarin isuna diyaarinin sidii aad uga dabbaalan lahayd hirarka is fahan waaga, laqabsan waaga, hilowga iyo bayhoofka kugu dhacaya ayaamahaaga hore ee dhulka maraykanka.

Samsam waxa ay tagtay iskuul lagu barto luuqadda. Dhanka kale na waxa ay bilowday shaqo xarun lagu sameeyo buuggaagta iyo warqadaha noocyadooda kala duwan. Saacadaha shaqadu ma badnayn hasayeeshee waxa ay ahayd shaqo istaag ah oo qofku lix saacadood taagnaanayo. Saddex isbuuc markii ay isqasbaysay iyada oo xaamila ah ayay usuurtagali wayday inay siiwaddo shaqadii.

Waxa ay kusoo laabatay guriga iyada oo kaniyad jabsan maraykanka iyo qaab nololeedkiisa adag ee aan lahayn dabacsanaanta iyo daryeelkii Afrika lagu haystay.Waa run Maraykan hanti iyo horumar nolol waa laga helaa, laakiin waa mid ku jirta af libaax. Bulshada dhaqaalaha leh waa in yar oo si

dadban ugumaysta shacabka. Hantidataalla Maraykan waxa iska leh dad ka yar 1% qiyaas ahaan, kuwaas oo kutamashleeya dhiigga xamaalatada danyarta ah ee noloshooda ladaalaa dhacaya.

Majiro wax ka wanaagsan in aad dalkaaga ku hesho nolol tayo leh.Nabad gelyo iyo ixtiraam. Qurbuhu waa geeri dadban. Waa gunnimo joogta ah. Waxa aad kafogaanaysaa dadkaaga, dalkaaga iyo dhaqankaaga.Noloshaadu waxa ay kumeeraysanaysaa ladaalaa dhaca biilka xaafadda oo yasmo kuu dheer tahay. Waxa aan dhihi karaa qurbuhu waa cadaab yar oo qofka soomara uu fahmi karo. Si kaste oo aan usharraxana ma sheegi karo xanuunka ay leedahay in aad dadkaagii kadheeraato ummaddo kale oo wax walba kaaga duwanna aad magan u ahaato.

Waxa aan ladaalo dhaco nolosha oo aan kashaqeeyo waxyaabo badan oo markii aan Afrika joogay aan u arkayay ceeb, waxa aan helay nolol aan aniga iyo xaaskaygu kuwada noolaan karno. Mararka qaar ee aan ka shaqeeyo hoteello, musqullo, dukaamo iyo xammaali ayaan dib u xusuustaa yaraantaydii maalinkii aan Kakuma u socday ee aan diiday in aan masjidka ka istago sidoo kale na ay ceeb ila ahayd in aan makhaayad cuntada lagu kariyo ka shaqeeyo!  Waxa aan ahaa wiil kibirsan oo wali dadkiisii dhex jooga.

23kii bishii 4aad ee 1998$^{dii}$ waxa noo dhashay wiilkii curad ka oo aan ubixiyay Maxamed aniga oo kusaminaya nabigeennii suubbanaa Maxamed NNKH.Wiilkaas yar waxa uu noloshanada kubiiriyay farxad. Hooyadii waxa uu u noqday wheel. Waxa ay kabaxday noloshii cajiska ahayd. Waxa ay gashay halgan adag oo ilma korin ah.Mardhar laga babdalo. Mar laseexiyo. Mar caano lasiiyo iyo mar loo heeso oo laciyaarsiiyo ayuu waqtigeedii kusoo ururay.

Anigu waan dallacay xaga shaqada, agaasime waaxeed ayaan ka noqday xafiiskii aan ka shaqaynayay, hasayeeshee waxa isqaban waayay nolosha mgalaada Tallahassee iyo Samsam. Dumarku waa ay kadabeecad baddalan yihiin ragga. Sidaay ubadanyihiinna waa ay ka qaraabo xidhiidhis badan yihiin. Samsam waxa ucuntami wayday iyada oo qooyskoodii la soo dejiyay Minneapolis in ay joogto magaaladan aan lahayn wax nolosha farxad galiya!

Gorfayn dheer kadib waxa aan xaal dhaafin weynay in aan kaguurno Falorida oo aan u guurno gobol waagii hore ladhihi jiray gobolka Xiddigta Waqooyi ama dhulkii tobanka kun ee Haro, haddana malahayga loo bixin doono haddii uu xaalku sidan kusii socdo gobolkii Soomaalida; kadib markii Soomaalida uu u noqday saldhig ubaddala dalkooda gubanaya.Inkaste oo aysan sahlanayn in qofku katago magaalo noqotay irriddii uu ka galay maraykanka haddana farxadda Samsam ayaa ahayd mid aan waxba lagu baddalan karin.

Waxa aan aaminsanaa haddii aan dib ula midoobo qoyska Samsam in aan noqonayo inan layaal xididkiisa barkisan.Waxa aan jeclaa in aan billaabo nolol cusub oo kafog ku dulnoolaanshaha qaraabada. Taasi iima suurtagalin oo markale ayaan magan unoqday reer I jecel, i qaddariya oo u arkayay in aan ahay fursad wanaagsan oo ilaahay usoodiray, aniguna aan u arkayay reer macaan, dun fiican.Si kastaba ha ahaatee aniga oo kaduulaya dhaqankii aan kusoo barbaaray waxa aan niyadda kuhayay in kala fogaanshaha xagga deegaanka ah ee xididku wanaagsantahay.

11ki bishii 5aad ee 2000 ayaan ka guurnay magaaladii aan degganayn. Bilaan ahaa inan layaal kadib waxa aan shaqo ka helay meel udhow Burnsville, oo aan u guuray ugu danbayntii.Waxa ay ahayd magaalo aan waxba dhaamin meeshii aan kasoo hayaamay

ee hore. Dad yar ayaa degganaa oo in badan oo kamid ah ay Soomaali yihiin, mana dareemin kala duwanaansho dhaqan iyo diin.Waxa aan kamid noqonay boqolaal kudhaqan magaalada.

Waxa aan ku qaatay Maraykan sannado badan.Waxa aan ku dhalay ubad daweeyay boogihii nolosha. Faadumo oo ah da'dii labaad waxa ay noqotay ubaxa guriga iyo udub dhexaadka farxadda noloshayda. Markii ay guriga kusoo biirtay waxa aan iska illoobay in aan wakhtigayga siiyo ruux aan iyada ahayn.Waxa aan ka dheeraaday in aan ku daaho lacawaynta asxaabta ama ubixitaanka magaalada iyo meelaha la isugu imaado, saacadihii badnaa ee shaqadana waan yareeyay.

Faadumo waxa ay leedahay indho waa weyn oo hurda iyo sanqaroor in la saaray aad moodayso.Farxadda ka muuqata waxa ay isoo xusuusisaa waagii aan dhallaanka ahaa gosha hooyadayna aan kuciyaari jiray, inkaste oo aanan xilligaa qiyaasi karin haddana waxa aan filayaa in aan Faadumo oo kale ahaa. Awlaad jacayl dhalay udgoonkaad ku garataaye jidhka Faadumo ee lamoodo in miski lagu shubay waxa uu igu beeraa rayn-rayn.Waxa uu iiyahay dawo aan kaga hortago tiiraanyada dahsoon ee gashay guri walba oo qurbaha ah.

Marka aan dib u fiiriyo noloshii adkayd ee aan soogooyay 13^kii sano ee aan kunoolaa Maraykan, waxa ii muuqanaya daalaadhac, diihaal, higsi, horumar, guul iyo fashil badan oo noloshaydu soomartay.

Noloshu waxa ay igu dhufatay dharbaaxooyin mararka qaar iga kicinayay hurdo iyo dhalanteed aan dhab u haystay. In badan ayuu sokeeye iyo shihseeyaba ka shaqeeyay in aan caqabadaha nolosha isu dhiibo gacmahana taago, taas waan diiday waxa aanan ku adkaystay in aan halganka wado, hormuudna u ahaado jiilal

badan oo kudhex dayacmey dagaal iyo gaajo dhexdood.

# GUNAANAD

Guyaal badan ayaa kazoo wareegay maalintii aan kusoo biiray ifka aniga oo ooyaya, tabar yar, cidna aan u tirsanayn, maanta waxa aan ahay lug ku garaadle dhul badan maray dhaqamo kala duwanna lasoo noolaaday.Safarrada badan ee noloshayda saameeyay waxa iidheer waayo'aragnimo.Waxa aan tabcay tacliin iyo hanti.Hasayeeshee ma arkin meel ka wanaagsan dhulkeena hooyo. Diirimaadka qabow iyo kulayl midna lahayn. Saxansaxada ugbaadka ah ee aan ku wasakhoobin qiiqa warshadaha, dhulka cosobka ah waa nimco ilaahay nagu galladdaystay hasayeeshee aan garan la'nahay weli.

Waxa aan ku mashquulsannahay in aan isdabar jarno, isdaba mareyno, caqabad aan isu wada noqono, taas waxa ay nadhaxalsiisay in aan dhulkeenii ugu noollahay sida addoomada laleeyahay oo kale! Dhulkeenu wuu na deeqaa. Khayraadka dhex ceegaagaana waxa uu toban jeer ka badanyahay tirada Soomaali oo idil. Haddaba waxa aan ubaahan nahay in aan helno caqligii iyo aragtidii hagi lahayd ee nagu hanuunin lahayd wax wada yeelashada, wax wada qabsiga iyo wax isu quudhidda. Waa in aan oggaano in aan isku qasbannahay, suurta galna ma aha in midkeen uu badhaadho midka kale na uu baahnaado.

Waxa aan haysanaa maanta laba jid. Meesha aan taagannahayna waa halis u baahan fikir iyo garasho dheeraad ah.Ama waxa aan wada noolaanaynaa innaga oo walaalo is jecel ah, ama waxa aan wada dhimanaynaa innaga oo cadow is neceb ah oo shisheeyuhu nagu wiirsado. Waxa aan badinaynaa xabaalaha. waxa

noqonaynaa shacab dadku ku maadsadaan oo ladhaho waa hore waxajiri jiray dad Soomaali la dhihi jiray geeska Afrikana degi jiray.

Inkaste oo sanado badan aan noolaa, wadammo baddanna aan tegay wali waxba iskama kay baddalin.Waxa aan ahay ilmihii yaraa ee baadiyaha ku dhashay. Cunugii xerada qaxoontiga indhaha ku kala qaaday.Waxa aan ahay wiilkii faylka dheer gali jiray si uu uhelo raashin uu cuno. Weli waxa aan sugayaa Ogadeeniya oo xorowda iyo Soomaaliya oo dowlad adag oo caadil ah hesha. Kama aan tanaasulin aragtidii xorta ahayd ee Soomaali-weyn oo aan u arko hadaf loo noolaan karo naftana loo huri karo.

Cabsidiiaan soomaray iyo noloshii miciyaha lahayd waxa ay igu reebtay abaayeel la'aan anigu aan u aqaanno is daad raacin, dadkuna u yaqaanaan dantii mooge. Marka aan milicsado magaalooyinkii aan kusoo noolaa waxa aan arkaa iyaga oo weli dhallinyaro ah, qoslaaya, waxbana iska baddalin, xitaa kuwa lagu dagaalamay weli waxa ka muuqata rejo in ay dib u xuubsiiban karaan, halka anigu aan weynaaday, timihii ay i caddaadeen, tabartii dhallinyaranimana wax yar ay kasii muuqato.

Waxa aan sooqaatay wakhti, noloshu ay marna ii dhoola caddaynaysay, marna ay I dhirbaaxaysay.Intii aan saarnaa toobiyaha nolosha wax badan ayaa iska kay baddalay oo muuqaalka jidhkaygu ugu horeeyo.Sanadaha iyo dhacdooyinka badan ee aan soo maray gadaashooda waxa iiga muuqda cunug dhashay xilli aan la filaynin. Wiil dhallinyaro ah oo faraxsan adduunkana u han weyn.Waxa aan ahaa qof noloshu u hor leedahay oo damacsan in uu noloshiisa iyo midda dadkiisaba wax ka baddalo. Waxa weli idamqanaya boogihii waayuhu ii geysteen.Waxa aan dareemayaa sidii uu wadnuhu ii garaacmay maalinkii koowaad ee ay Samsam ii qososhay.Waxa aan arkaa

ciyaalkii aan kubadda iskula ciyaari jirnay dariiqyadii boodhka badnaa ee qaxoontiyada kala duwanaa.

Markii aan dib u eego jidkii dheeraa ee aan soo maray waxa aan dhahaa Guuroow safarkaagu waa mid dheer oo la yaqaano bar bilowgiisa, balse aan la garanaynin bar dhammaadkiisa.

# Dhammaad